

ismailpages.wordpress.com

KIMISTRI DUGSIGA SARE FASALKA SEDDEXAAD

HABAYNTII : ISMAIL AWCABDI HAJI ALI



# **KIMISTRI**

---

**FASALKA**

**SADDEXAAD**

**3**

**DUGSIGA SARE**

Ismail digital library  
ismailpages.wordpress.com

**Wasaaradda Waxbarashada iye-Barbaarinta  
Xafiiska Manaahijta**

45

4/14/86

# T U S M O

1. Raadka uu Danabku ku leeyahay alaabta	Bog.	1
2. Dhismaha Maatarka	"	13
3. Ogsidhayn iyo yarayn	"	81
4. Horsiimada taxa firfircoonaanta	"	99
5. Danab-soocid	"	110
6. Asiidho iyo beysyo	"	143
7. Falgallada kimikada ah : Dhaqsahooda iyo isbeddelka tamarta	"	176
8. Dheellitiranka falgallada kimikada ah	"	206

# HORDHAC

Buuggan waxaa loogu tala galay fasalka saddexaad ee Dugsiyada Sare, waxaanu ka kooban yahay siddeed qaybood : Raadka uu danabku ku leeyahay alaabta, Dhismaha maatarka, Ogsidhayn-yarayn, Horsiiimada taxa firfircoonaanta, Danab-soocid, Asiidho iyo Ebeysyo, Falgallada kimikaad iyo Dheellitiranka salgallada.

Iyagoo dhammaan qaybahaasi isku xidhan intooda ba. dani, haddana, khasab ma aha in macallinku uu u raaco sida ay u kala horreeyaan ee sida ay isaga la noqoto ayuu u kala horreysiin karaa.

Waxaa buuggan qoray iskuna soo dubbariday Cabdi Ibraahim Yoonis, iyo Xuseen Saciid. Waxaa Xafiiska Manaahijtu u mahad.naqayaa dhammaan dadkii garaacay buuggan. Waxa kale oo iyana mahad gaar ah mudan Madbacadda Qaranka oo suurtigelisay sidii buuggani si dhakhso ah ugu soo bixi lahaa.

Cabdiraxmaan Timir Cali


Maamulaha Xafiiska Manaahijta

## BAABKA KOWAAD

### RAADKA UU DANABKU KU LEEYAHAY ALAABTA


Si aynu u heli karro raadka uu danabku kú leeyahay alaabta, bal hadda aynu sameyno dhawr tijaabo oo kala gaar ah, waxa innooga soo baxana u fiirsanno.

Tijaabo 1.1; Bakeeri ku shub milan kubram salfeyt oo rib ah. Labada qotin oo kaarboon ahna ku qotomi milanka, dabee-tana qotinnada beytari 6 foolt ah ku xidh. (Lixda foolt waxa aad ka heli kartaa haddii aad 4 dhagax isku xidho). Muddo 5 - 10 daqiqo ah daar danabka, dabadeedna u fiirso waxa ka dhaca labada qotin.



Mid ahaan qotinnada kaarboonka ah oogaadiisa xunbo ayuu danabku ka dhaliyey, ka kalana maar ayaa dulfuusahy. Maartu waa curiye bir ah, danabkaana ka soo saaray milankii kubram salfeytka ah. Haddii aan danab la dhexmarin milanka, maari ma soo baxayso. Sidaa awgeed, waa danabka waxa ugu wacan in maari duluufsho qotinka. Kubram salfeyt waa iskudhis, danabkaana kala bixiyey. oo ugu wacan in biri ka soo baxdo. Iskudhisyada danabku wuu kala bixin karaa sida kul-kuba uu u galo.

Danabku wuxuu keeni karaa isbeddel kimika ah.



Tijaabo 1.2; Dhuun-u ah ku shub milan naatriyam koloraydha oo rib ah. (Eeg jaantuska 1.2). Laba qotin oo kaarboon ahna midba dacal ku qotomi, dabadeena qotinnada beytari 6-foot ah iyo daare ku xidh.

Litmas ku casee milanka, muddo 5 - 10 daqiqo ahna danabka daar, una fiirso midab isbeddelka milanka iyo wixii kale ee soo baxaba.


Labada qotin mid walba oogadiisa wuxuu danabkii ka soo saaray neef, xunbo soo baxaysana waa la arkayaa. Wax bir oo qotinnada dulfuulayna ma jiro. Markaa ma jiro daliil hawayar oo lagu garan karo in kala bax dhacay. Hase yeeshii, midahaan cidhifyada dhuunta litmaskii casaa ee ku jiray, buluug ayuu isu rogay, ka kalana wuu midab beelay. Midab isbeddelkaasi wuxuu tusayaa in isbeddel kimika thi dhacay waxyaalo cusubina samaysmeen.

Labada tijaabo ee aynu kor ku soo sheegnay waxa ay ina tusayaan in danabku uu keeno isbeddel kimikaad, iskudhisaya-da qaarkoodna uu kala bixin karo. Marka danabka sidaas loc isticmaalo waxa la yidhaa danabsoocid. Tijaabada 1.1; maar ayaa qotinka kaarboonka ah dulfuushay, isbeddel kimika ihina wuu dhacay, markii milanka kubram salfeytka ah la danabsoocay. Tijaabada 1.2; lafteeda isbeddel kimika ah ayaa dhacay, markii milanka naatriyam koloraydhka ah la danabsoocay.

### **Walxaha oo dhammi miyey gudbiyaan danabka ?**

Laba tijaabo ayaynu soo aragnay. Tijaabada hore ku-nram salfeytka ayaa labada qotin ee kaarboonka ah danabka isaga gudbiyey. Haddaba, walxaha oo dhammi miyey gudbi-yaan danabka?

Dhawrka tijaabo ee soo socda ayaa weydiiska ka jawaa-bi doona



Tijaabo 1.3:


b) U meerar mareegga danabka sida jaantuska 1.3 tu-saayo. Labada cidhil ee B iyo T way kala go'an yihiin, si ay mareegtu u furnaato. Labada cidhil taar maar ah, isugu xidh Markaa dabadeed guluubka ayaa ifaya, taas oo ku tusaysa in mareegtu xidhan tahay, taarka maarta ihina uu gudbiya wa-naagsan yahay. Ku celi tijaabada adigoo isticmaalaya walxaha soo socda halkii taarka maarta ah, warqad yar, taar xadiid ah, xadhig yar, taar braas ah.

t) Iisticmaal mareeg danab oo tii hore oo kala ah (eeg jaantuska 1.3;) si aad u hubiso kartida danab-gudbinta ee ad-keyasha, isticmaalna adkayaasha soo socda: salfar, qori, biro, shamac, iwm.

**Gudbiye iyo Magudbiye**

Walxaha danabka gudbiya waxa la yidhaa gudbiyeyaal, walxaha aan danabka gudbinna waxa la yidhaa ma-gudbiyeyaal. Adkayaasha oo dhan, biraha ayaa gudbiyeyaal ka ah, adkayaasha kale oo dhammina waa ma-gudbiyeyaal. Salfar waa curiye bir-ma-ahe ah oo adke ah, waana magudbiye. Hawada lafteeedu waa ma-gudbiso, waayo, danab ma qulqulo marka ay hawo joogto labada cdhil dheddooda.

**Gudbiy-milme iyo Ma-gudbiye-milme**



Hoor waliba iyo milan waliba miyuu danabka gudbiyaa? Haddii uu sidaa yeelana miyuu danabku kala bixiyaa? Tijaa-booyinka soo socda ayaa arrintaa wax innooga sheegi.

**Tijaabo 1.4;**

b) U meerar saabaanka siqaa jaantuska 1 4; tusayo. Ba-keeriga waxa ku jira milan naatriyam koloraydh ah. Guluub-ka ifayaa wuxuu tusayaa in milanku danabkii gudbiyey. Isla markaana xubno neef ah ayaa ku samaysmaysa qotinnida kaar-boonka ah oogadooda, taasina waxay inna tusaysaa in kalabar-kimika ihi dhacay.

t) Isticmaal saabaankii hore, laakiin markan biyo xareed ah ku shub bakeeriga. Biyihii ma gudbiyeen danabkii? Salfiyuurik asiidh dhobic-dhobic ugu dar. Milankii ma gudbiyey danabkii?

j) Mar kale bilow tijaabadii, adigoo isticmaalaya biyo xareed ah. Woxooggaa yar oo naatriyam koloraydh ah ku dar-dabadeedna milanka qas. Maxaa ka soo baxay? Waa maxay natiijadu ?


Waxyaalaha tijaabada ka soo baxay aad ayay qiimo u leeyihiin. Biyo sooc ihi danabka ma gudbiyaan, laakiin marka salfiyuurik asiidh ama naatriyam koloraydh lagu daro, danabka way gudbiyaan. Milan wuxuu danab u gudbiyaana waa mii-maha ku milmay awgiis. Hadda bal aan u fiirsanno milann iyo milayaal kalena.

**Tijaabo 1.5:** Isticmaal saabaankii tijaabadii hore, da-badeedna hubi in milannada iyo horarka soo socdaa ay danabka gudbiyaan.


b) Badhax salfiyuurik asiidh ah

- t) Badhax naatriyam haydrogsaydh ah  
j) Kaaliyam koloraydh (x) alkahool  
kh; Asitoon (d) bensiin (r) keerosiin  
s) Milan sonkor ah.


Gudub... Beytari



Milan  
Haydarokdoorik  
Asiidh ah



Milan  
Sonkor ah



Isbiirta


Magudbiye-milmeyaal

JT. 1.5

Waxyaalaha tijaabada ka soo baxay waxay tusayaan in milannada qaarkood ay danabka gudbiyaan. Tijaabadii 1.4; waxa aynu ku soo aragnay in sababta uu milan danabka u gudbiyaay tahay milmaha ku milmay awgeed. Milmaha danabka gudbiya waxa la yidhaa gudbiye-milme, milmaha aan danabka gudbinna waxa la yidhaa ma-gudbiye-milme. Sonkortu waa ma-gudbiye-milme. Salfiyuurik asiidh, haydrokolorik asiidh iyo walxo kale oo ay ka mid yihiinna waa gudbiye-milmeyaal. Marka danab la dhixmariyo milan gudbiye-milme ah kalabax kimika ah ayaa dhaca, hase yeeshi, marka danab la dhixmariyo gudbiye, wax isbeddel kimika ah lama arko. Tijabadii waxa kale oo ay inna tusaysaa, in gudbiye-milmeyaaiku ay yihiin saddex nooc: asiidho, beysyo, iyo cusbooyin.

Ilaa hadda waxa aynu u fiirsanayney milmeyaal mialn.  
Hadda bal aynu u fiirsanno iyakoo dhalaashan.

Tijaabo 1.6 Gudbiye-milme dhalaashan.



**JT. 1.6**

b) U meerar saabaanka sida jaantuska 1.6 tusayo. Istimmaal dhuun-hubsasho oo qarsho adag ah Labada taar ee xadiidka ahna furka ka dhex dusi. Furka dhinac ka dalooli si wixii neefo ihi uga baxaan. Balambam boromaydh ku shub dhuunta-hubsashada, dabeetana mareegta danabka xidh. Huubi danab-gudbintiisa isaga oo qabow (adke ah), dabadeedna isaga oo dhalaashan.

t) Ku celi tijaabada adiga oo istimmaalaya balambam aayodhaydh.

j) Ku celi tijaabada adigoo istimmaalaya

(i) Shamac (ii) salfar (iii) naftaliin (dawada camadhka).

Adkayaalka balambam aayodhaydh iyo balambam boromaydh danabka way gudbiyaan marka ay dhalaashan yihiiin,

laakiin, ma gudbiyaan danabka marka ay qabow yihiin. Balambam aayodhaydh waa gudbiye-milme, waayo milankiisu danabka wuu gudbiyaa, isla markaana wuu kala baxaa. Balambam aayodhaydh marka uu dhalaashan yahay lafteeda danabka wuu gudbiyaa. Sidaa awgeed gudbiye-milmuhu danabka wuu gudbiyaa marka uu milan ku jiro iyo marka uu dhalaashan yahayba. Salfarka, shamaca iyo naaftaliinta midna danabka ma gudbiyo haddii ay dhalaashan yihiin iyo haddii ay adke yihiin toona, waana ma-gudbiye-milmeyaal.

Walxaha waxa lagu kala qaybin karaa hadba raadka cuu danabku ku leeyahay. Qaybintaa waxa aad ku arki kartaa jaantuska soo socda.

### Kela duwanaanta gudbiyaha iyo gudbiye-milmaha


Nooca walaxda	Gudbini-danab	Isbeddel kimiko
Gudbiye (Adke)	danab-gudbiye	ma dhaco
Gudbiye milme	marka uu milan yahay iyo marka uu dhalaashan yahayba waa, gudbiye	wuu dhacaa
ma-gudbiye milme	ma-gudbiye	ma dhaco.

### Kaydka danabka iyo danabsoocidda milannada

Beytariga lagu isticmaalo raadiyaha waxa uu soo saari karaa  $1\frac{1}{2}$  foolt oo danab ah. Laba kuwaasi ah ayaana siratudi

kara guluubo ? foolt ah. Haddii beytari keliya la isticmaala a guluubku ma ifayc. waayo kaydhka danabka ee uu soo saaray avaan ku filayn. Arrintaas oo keli ah ayaanad ku arkaysaa danabsoocidda mularnada.

Tijaabo 1.7: Kaydka danabka iyo danabsoocidda:



Xidh mareegta danabka sida aad jaantuska 1.8 ku arag tid. Caabiyaha qaybqaybsan ayaa innoo suurtagelinaya in ay nu kayd kala laxaad duwan ku isticmaalo milanka. Wawa ay nu isticmaalaynaa milan sulfiyuurik asiidha oo badhax ah; iyo laba qutin oo kaarboon ah. Ku bilow kayd ibir ah. Hadba yar kordhi kaydka ilaa uu ambiyeerbeeggu ku tuso in danab dhexmarayo milanka. dabeetana akhri fooltbeegga.

Tijaabadani waxa ay inna tusaysaa in uu jiro kayd danab ah oo loo baahan yahay in la gaadho si walaxda la danabsoocayaa ay u kala baxdo. Kaydkaa loo baahan yahay inti

walaxda kala bixiyaana waxa la yidhaa kaydka kala baxa (an a danabsoocidda). Haddii kaydka danabka la isticmaalaya uu ka yar yahay kaydka kala baxa, maayad danab ihi ma dhexmarayso milanka, wax kala bax ihina ma dhacayo. Sida walxaha gubtaaba ay ugu baahan yihiin in la gaadhisiyo heerkul shidid oo ay ku gubtaan, ayaa walxaha la danabsoocayaana ay u baahan yihiin in la dhexmariyo kayd danab ah oo kala bixin kara. Haddaba kaydka danabka ah ee loo baahan yahay marka walxaha kala duwan la danabsoocayo ma isku wada midabaa? Taasi oo macnaheedu yahay gudbiye-milmeyaalku ma isku wada si ayay u gudbiyaan danabka? Weydiiskaax waxa ka jawaabi tijaabada soo socota.

**Tijaabo 1.8 Gudbiye-milmeyaalka daciifka ah iyo kuwa xooggan.** Iisticmaal saabaankii tijaabadii 1.7, hase yeeshi, hai-kii ambiyeerbeegga waxa aad ku beddeshaa guluub.  $75\text{ sm}^3$  oo salfiyuurik asiidh badhaxa ah ku shub bakeeriga. Ku bilow kayd ibir ah, dabeetana hadba yar kordhi kaydka ilaa uu guluubku ifo. Marka uu guluubku ifo akhri footbbeegga.

Ku celi tijaabada adiga oo isticmaalaya marba  $75\text{ sm}^3$  oo mid ka mid ah milannada soo socda ah : (i) naytarik asiidh badhax ah, (ii) kaalsiyam haydrogsaydh, (iii) milan naatriyam koloraydh ah (iv) milan ammoniya ah oo badhax ah, (v) ase-tik asiidh badhax ah.

Haddii aad u fiirsato tijaabada 1.8 waxa aad arkaysaa in gudbiye-milmeyaalku ay u kala baxayaan laba qaybood. Salfiyuurik asiidha badhaxa ah iyo milanka ammoniyada ah ee isna badhaxa ah ayaa labadaa qaybood si fiican innoogu muujinaya. Marka ay salfiyuurik asiidhu bakeeriga ku jirto kayd

danab ah oo aad u yar ayaa guluubka siraaday, marka uu milanka ammooniyada ihi bakeeriga ku jirana, kayd aad u badan ayaa loo baahan yahay in uu guluubka siraado. Wuxa kale oo aynu odhan karnaa, wey hawl badan tahay in dahabka la dhexmariyo milanka ammooniyada ah, marka loo eego salfiyuurika asiidha oo ay hawl yar tahay in danabka la dhexmariyo. Taa-sina macnaheedu waxa ay tahay, salfiyuurik asiidha ayaa danabka ka gudbin og milanka ammooniyada ah. Milannada si hawl yar u gudbiya danabka waxa la yidhaa waxa ku jira gudbiye-milmeyaal xooggan, milannada aan si hawl yar u gudbinna waxa la yidhaa waxa ku jira gudbiye-milmeyaal daciif ah. Sidaa awgeed, salfiyuurik asiidh waa gudbiye-milme xooggan, milanka ammooniyada ihina waa gudbiye-milme daciif ah. Gudbiye-milmaha xooggan iyo ka daciifka ahba, danabku wuu kala bixiyaa, haddii mid waliba u helo kaydka danabka ah ee danabsooci kara.

### L A Y L I :

1. Qecx ereyada soo socda.
  - b) Gudbiye (t) Gudbiye-milme (j) Magudbiye-milme
2. Maxay gudbiyaha iyo gudbiye-milmuhu ku kala duwan yihiiin, marka maayad danab ~~an~~ la dhexmariyo ?
3. Walxaha soo socda, ka soe saar kuwa gudbiye-milmeyasha ah.
  - b) Taar xadiid ah (t) salfiyuurik asiidh (j) biyo (x) naatriyam haydarogsaydh (d) alkhoole
4. In yar oo litmas cas ah ayaa lagu daray milan kaaliyani koloraydh ah, isku-jirkaasna, waxa lagu shubay-dhuun-u.

Labada dacal ee dhuuntana waxa lagu kala qotomiyeey qotinno kaarboon ah. Labada qotin ee kaarboonka ahna waxa lagu xidhay beytari iyo daare. Markii maayad danab ah la dhixmariyey milanka, mid ahaan dacallada dhuunta midabkii milanku waxa uu isu rogay buluug, ka kalana wuu midab beelay. Sawir saabaanka inta aanad danabka dhixmariin horteed iyo marka aad dhixma riso dabadeedba, waxa aad aragtana sharaax.

5. Laba qotin oo kaarboon ah ku dhix rid milan sink salfeyi ah. Qotinnada waxa lagu xidhay (b) ~~beytari~~ hal dhagax ah (t). Beytari laba dhagax ah iyo (j) Beytari saddex dhagax ah. Beytarigii halka dhagax ahaa waxa uu soo saarayaa 1.5 focl, kii saddex dhagax ahaana 4.5 foolt. Markii qotinnada lagu xidhay hal dhagax oo keliya, wax falgal ah oo la arkay ma jiro. Markii laba ama saddex dhagax lagu xidhayna, xunbcoyin neef ah ayaa labada qotinta ka soo baxaya. Sidee ayaad u sharxi kartaa arrintaas ?

## **BAABKA LABAAD**

### **DHISMAHA MAATARTA**

Daalton wuxuu soo jeediyey in maatarku ay ka samaysan tahay saxarro aan sii qaybqaybsamayn, aad iyo aadna u yaryar. Saxarradaana waxa uu u bixiyey atammo. Waxa uu Daalton sharxay sida ay atammada curiyeyaalku isugu darsamaan ee ay u soo saaraan molikiyuullo. Wuxaan yidhi, tirooyin yaryar oo idil oo atammo curiyeyaal kala duwan ah ayaa isu taga ama isku darsama, oo dabeetona soo saara molikiyuullada iskudhisyada kala duwan. Hase yeeshi, Daalton ma uu muujin asalka isutaggaa, iyo astaamaha kala geddisan ee ay leeyihin iskudhisyadaasi. Baabkan waxa aynu ku falanqayn doonaa atammada, waxa ay ka samaysan yihiin, sida ay isugu tagaan iyo astaamaha iskudhisyada kala duwan ee ka dhasha isutagga atammada kala duwan.

### **MAATARKA IYO DANABKA**


Marka caag lagu xoqo suuf waxa ka dhasha danab togaane ah. Haddii-qarsho lagu xoqo xariirna waxa ka soo baxa danab tabane ah. Danabyadaa kala duwan ee ay yeeshien caaga iyo qarshadu waxa ay ka yiniaadeen maatar. Tijaabo : Qasabadda biyaha fur oo dabeetana hagaaji ilaa aad biyaha ka imanaya ka dhigtid liid aad u dhuiiban. Liidkaa biyaha ah u dhowey shanlo aad ku feedhatay, dabeetana u fiirso waxa hal-kaa ka dhaca.

Natiijada tijaabadaasi waxa ay inna tusysaa in danab-ka shanlaata iyo ka biyuhu ay wax isu geystaan.

Isla sidaas oo kale ayaa waxa la arkay in marka danab la dhexmariyo hoorar badan in qotinnada hareerahooda uu isbeddel kimikaad ka dhaco. Inta badanna waxa la arkay in gudbiye-milmuhu uu u kala baxo curiyeyaalka uu ka samaysan yahay. waxana ~~ku~~ mid ah marka biyaha la danabsooco, oo ay u kala baxaan haydarojiin iyo ogsoojiin. Sidaa awgeed danabsooci waxa uu tusayaa in atammada iyo danabku ay isla falgaleen.

**Tijaabooyinka taariikhiga ah ee ku saabsan dhismaha Atamka.** Tusaalooyinka aynu kor ku soo sheegnay, waxa ay ku hoggaamiyeen culimada sayniska in ay baadhaan dhismaha atamka iyo waxa uu ka kooban yahay. Baadhistaasi waxa sal u ahaa tijaabooyin dhawr ah oo qaataay taariikhdi (1890-1911).

Tijaabadii ugu horreysay waxa ay ku saabsanayd helitaanka elektaroonka, taasi oo kasoo dhexbaxday markii la dersaayey danab-furana. Qaklabkii lagu dersaayey danab-furankuna waa ka uu jaantuska 1.1 tuusayo.




Laba qotin oo bir ah oo ku jira dhuun qaruurad ah ayaa lagu xidhay kayd danab ah oo sare, dabadeetana waxa la arkay, marka uu cadaadisku caadiga yahay, in aalu danabku dhexmarayn hawada dhuunta ku jirta. Hase yeeshi, markii hawaada inteedii badnayd laga saaray dhuunta (madhan ku dhowaad), iyada oo la adeegsanayo madhiye, waxa la arkay in danabku soconayo, isla markaasna waxa muuqday ilays midabb-

kiisu buluug yahay oo ka soo faafaya qotinka taban, una jeeda qotinka togan. Ilayskaasi waxa uu u ekaa sidii fallaadho ka imanaya qotinka tabar oo u jeeda qotinka togan.

Markii fallaadhaas lagu fiirihey dhowr tijaabo, waxa la arkay waxyalaha soo socda :


- 1) Markii ay fallaadhuu ku dhaceen qaruuradda ay dhuittu ka samaysan tahay, if midabkiisu cagaar yahay ayaa la arkay.
- 2) Markii sixini lagu dheehay sink salfaydh (Zns waa isku dhis iftiima marka uu ilays ku dhaco) la dhex dhigay labada qotin, waxa la arkay in uu saxnigu iftiimayo, iftiinkaasina aad mooddo inuu ka koobnaa walac isdabajog ah oo ilays ah sidii oo ay saxarro kala googo'ani ku dha-cayaan sixniga. Isla markiana waxa la arkay in wala-caha ilayska ah uu jimidhkooda iyo ilayska ay bixinayaan uu isle'eg yahay sidii oo ay saxarrada, saxarradaasi waxa ay doonaanba ha ahaadeen ee, jimidhkoodu isle'eg yahay.
- 3) Markii la dhex dhigay labada qotin shay ilays-magudbiye ah, hadh ayaa ka muuqday dhinaca qotinka togan. Taa-

### *Ilays-magudbiye*




sina waxa ay tusaysaa in saxarrada ay fallaadhuhu ka kooban yihin ay marayaan xarriiqo toosan oo ka bilaahmaya qotinka taban, kuna dhàmmaanaya qotinka togan.

- 4) Markii dhuunta laga madhiyey hawadii danabkii wuu joogsaday, taas oo ay inna tusayso iftiinkii oo baaba'ay. Taasina waxa ay daliil u tahay inay hawada dhuunta ku jirtaa ay sabab u tahay in uu iftiin dhasho.
- 5) Markii birlab cidhifkeeda woqooyi loo dhoweeyey dhuunta dhinaceeda, fallaadhuhu waxa ay u soo qalloocsameen dhinaca birlabta (eeg jaantuska 2.3).




**JT.2.3**

Cidhiska koonfureed ee birlabta markii loo soo dhoweeyey dhuunta, fallaadhuhu way ka janjeedhsamayaan birlabta cidhifkeeda, dhinaceedana u soo qalloocsamimayaan (eeg jaantuska 2.4). Jihooinka qalloocsankaasi waxa uu tusayaa in saxarrada fallaadhuhu ay sidaan danaab tabaan.



**JT.2** - 16 -

- 6) Markii dhuunta korkeeda iyo hoosteeda la dhigay sixniyo danabaysan, fallaadhuu waxa ay u janjeedhsamayaan dhinaca sixniga togan.




### JT. 2.5

Qailoocaasi ay fallaadhuu u soo qalloocsamayaan dhinaca sixniga togan, wuxuu isna daliil kale u yahay saxar-rada fallaadhuu ay sidaan danab taban.

- 7) Markii birta ay qotinnadu ka samaysan yihiin biro kale lagu beddelay, waxba iskama beddelin astaamihii fallaadhabha.

Natiijooyinka kor ku qoran (1-7) waxa ay tusayaan in fallaadhabhaa tabani ay ka samaysan yihiin saxarro danab leh Saxarradaasina waxa loo yaqaan ELEKTARONNO. Isla mar-kaas waxa aynu aragnay in elektaroonnadaasi ay ka imanayaan qotinkka taban, sidaa awgeedna ay elektaroonnadu ku jiraan atammada maatarka oo idil.

Tijaabooyin uu markii ugu horraysay sameeyey Gooldistayn (Goldstein) 1886kii ayaa waxa ay tuseen in saxarro togani-na ay ka dhashaan tijaabooyinkii danabfuranka. Qalabkii uu Gooldistayn isticmaalayna waa ka uu jaantuska 2.6 tusayo.




### JT.2.6

Qotinka xagga midigta xigaa waa qotin togan, ka xagga bidixda xigaana waa taban yahay, waxanu ka kooban yahay waslad bir ah oo dhexda dalool ku leh. Gooldistayn waxa uu in dheeha sinka salfaydhka ( $ZnS$ ) ah ee midigta ka xiga qotinka tabani ayaa qotinka tabani soo jiidanayaa. Elektaroonnadaasi kaas waxa uu arkay in liidka ilayska ah ay birlabtu u qalloocii nayso dhinac lid ku ah kii ay u qalloocisay fallaadhiihi ka imaa. nayay qotinka taban ee tijaabadii hore. Arrintaa waxa lagala soo dhex bixi karaa in ay fallaadho togani ku dhacayaan bidixda qotinka taban. Sida ay u dhasheen fallaadhaasina waxa loo sharxi karaa sidatan: Elektaroonnada uu bixiyo qotinka tabani ayaa qotinka togani soo jiidanayaa. Elektaroonnadaasi ayaa dabadeed hirdiya atammada neefta dhuunta ku jirta. Haddii ay elektaroonnadaasi tamar ku filan leeyihii, elektaroonno kale ayay ka tuuri karaan atammada neefta ku jirta. Elektroonnadaa laga tuuray atammadii dhexdexaadka ahaa ee aan danabka lahayni, waxa ay la imanaysa in saxarro togani ay dhashaan. Halkaas oo ay intooda badani ka helaan elektaroonno oo ay dib ugu noqdaaa atammo. Hase yeeshi, waxa kale oo dhacda in saxarrada togan qaarkood ay daloolka qotinka taban ka dusaan oo ay dhaliyaan fallaadho saxarro togan ah oo ku dhacaya dheeha sink salfaydhka ah.

War tafaftiran oo ku saabsan fallaadhaa togan iyo ku-

wa taban waxa la helay markii si fiican loo dersay inta ay fal-laadhahaasi qalloocsamaan marka ay marayaan badad birlabeed iyo mid danabeed. Cabbiraaddii ugu horraysay ee noocaas ahaydna waxa sameeyey J.J. Toomsan (J.J. Toomsoon) markii uu sannadku ahaa 1897. Jaantuska 2.7 ayaana-la isticmaali karaa si arrintaasi loo fahmo.



JT. 2.7

Elektaroonno ayuu qotinka tabani bixinayaa. Elektaroon-nadaasir.a waxa ay u soconayaan dhinaca midigta waayo wa-xa soo jiidianaya qotinka taban. Qaar ka mid ah elektaroonndaasi ayaa dhexmaraya daloolka ku yaalla qotinka togan, wa-xana ay samaynayaan fallaadho, kuwaasi oo ku dhacaya dhee-ha sink salfaydhka ah. Marka birlab loo soo dhoweeyo fallaa-dhaasi, birlabtu waxa ay ku kallifaysaa fallaadhaha in ay qal-loocsamaan. hase yeeshie, saxniyada danabaysan ayaa loo da-nabaynayaa si ay ugu qallooci karaan fallaadhaa, dhinac lid


ku ah kii ay birlabtu u qailoocisay ilaa ay fallaadhuu maraan dafiq toosan sida aad jaantuska 2.7 ku aragtid. Marka ay tal-laadhuu maraan dariiq toosan. laxaadka xoogga ay birlabtu ku qalloocinayso fallaadhaa iyo ka uu danabku ku qalloocina-ku qalloocinayso fallaadhaa iyo ka uu danabku ku qalloocina-yaaya waa isku mid. Xoogaggaasi isle'eg ee ay birlabta iyo danabku ku kala qalloocinayaan fallaadhaa ayaa dabadeed la cabbiray. Markii la isu geeyey warkaa iyo qiyaashii la helay markii la cabbiray inta ay tahay ama aanay sixinyadu danabaynayn, waxa suurtagalay in la xisaabiyo saamiga ay isu yihiin xaddiga danabka ah ee uu sido elektaroonku. iyo cufkiisu, e/m, (e waxa ay u taagan tahay xaddiga danabka ee uu qaadi karo elektaroonku waxana lagu cabbiraa kuuloomyo, m na wa-xa ay u taagan tahay cufka elektaroonka waxana lagu cabbiraa kiiloogaraammo ama garaammo).

Tijaabooyin badan oo la sameeyey oo ay ka mid tahay ta aynu kor kaga soo hadallay ayaa waxa ay tuseen in saamiga ay isu yihiin xaddiga danabka ah ee elektaroonka saaran iyo iyo cufkiisu ay la mid tahay  $\sim 1.76 \times 10^8$  kuuloom garaamkiiba ( $\sim 1.76 \times 10^8$  c/g) Waxa kale oo la arkay in uu saamigaasi madoorsoome yahay birta uu doonaba ha ka samaysnaado qotinka tabane ee. Calaamada taaban ee saamiga waxa ay tusay-saa in elektaroonku uu yahay saxar danab taban leh.

Sidaas oo kale ayaa loo dersi karaa fallaadha ka samaysan saxarrada togaanna, haddii woxoogaa yar laga beddolo sida uu isugu xidhan yahay saabaanka jaantuska 2.7. J. J. Toomsan ayaa markii ugu horreysay arrintaa si tafiftiran u dersey. Necfta dhuunta ku jirtay ee uu Toomsan isticmaalayna waxa ay ahayd neefta la yidhaa niyoon. Markii qotinnada lagu xidhay kayd danab ah oo aad u sarreeca, fallaadho togan ayaa ka dha-shay atammadii niyoonka markii ay lumiyeen elektaroonno. Fallaadhaasi ayaa dabadeed dhexmaray qotinka taban. Mar-kii ay dhixmaren badda birlabta iyo ta danabkana waxa ay

ku dhaceen dheeha sink salfaydhka ah. Hase yeeshee, halkii laga filayey inay fallaadhaasi wada maraan hal xrriiq oo keli ah waxa la arkay in ay kala marayaan saddex xrriiqood oo kala duwan, saddex iftiim, oo laba aad u xooggan yihiin midna uu daciif yahayna, ay ka soo baxayaan saddexdii meelood ee ay kaga kala dhecean dheeha sink salfaydhka ah. Isla markaas waxa la arkay inay saxarrada togani ka culus yihiin saxarrada taban waayo markii labadaba lagu isticmaalay isla birlab keli ah iyo kayd danab ah oo isku mid ah, waxa la arkay in inta ay saxarrada togani soo qalloocsamyaan ay ka yar tahay inta ay saxarrada tabani soo qalloocsamayaan, saamiga ay isu yihiin xaddiga danabka ah ee saxarka togan iyo cufkiisuna (oo ah ugu dhowaan 10<sup>5</sup> kuuloom garamkiiba ama in ka yar) ay iyana ka yar tahay saamiga ay isu yihiin xaddiga danabka ee elektaroonka iyo cufkiisu.

Saamiga ay isu yihiin xaddiga danabka ee saxarrada danabaysan iyo cufkoodu run ahaantii waxba innoogama sheegeso xaddiga danabka ah ee saxarka danabaysan saaran iyo cufka saxarka toona. Hase yeeshee, haddii labadaa xaddi miikood uun la helo, ka kalena waa la xisaabin karaa. Tijaabadii uu Toomsan sameeyey waxa laga helay qiimaha saamiga ay isu yihiin xaddiga danabka ah ee elektaroonka saaran iyo cufka elektaroonku. Caalin kale oo la odhan jiray Roobert A. Millikan (Robert A. Millikan) ayaa 1909kii cabbiray xaddiga danabka ah ee uu sido elektaroonku. Jaantuska 2.8 ayaana tusaya qalabkii uu isticmaalay.



JT.2.8 Tijaabadii Millikan

Dhibco saliid ah ayaa lagu buufiyey labada sixin ee danabaysan dhexdooda. Cufjiidashada dhulka ayaa dhibcahaas hoos u soo dejinaya, hase yeeshee, haddii danab taban la siin karo dhibcahaasi. waxa lagu qasbi karaa inay kor u kacaan waa-yo waxa soo jiidanaya saxniga taban ee xagga sare ku xiga. (Danab togan waxa dhibcahaas lagu siin karaa iyada oo la dhex mariyo fallaadaha — X. Fallaadaha — X elektaroonno ayey ka tuuri karaan atammada sidii ay fallaadhii ka imaanayey qotinka taban ee tijaabadii Gooldistaynba uga tuureen elektaroon-nada atammadii neefta dhuunta ku jirtay. Mid ama in ka badan oo elektaroonnadaas ah ayey dhibicdii saliidda ahayd qaadan kartaa, taas ayaana siin karta danab taban). Iyada oo lagu eegayo teliskooob ayaa waxa markii hore la xisaabiyyey dha-qashada uu cufjiidadka dhulku ku soo dejinayo dhibic ka mid ah dhibcahaa saliidda ah. Dhaqsahaa ay ku soo degeyso ayaa dabadeedna laga xisaabiyyey cufkeeda. Markii ay dhibicdaa saliidda ihi qaadatay danab taban kor ayay-u kacday. Markii ay isle'ekaadeen xoogga uu cufjiidadka dhulku ku soo dejinayo iyo xoogga danabka kor u wadaya dhibicda saliidda ihi, dhibicda saliidda ihi way joogsanaysaa. Halkaas ayaa dabadeed laga xisaabiyyey xaddiga danabka ah ee dhibic kasta saaran. Inkasta oo xaddiga danabka ah ee dhibcaha kala duwan saarani uu kalla duwan yahay, haddana waxa la arkay in xaddiga danabka ah ee dhibic kasta saarani uu had iyo jeer yahay tiro yar oo idil oo ah dhufsanaha —  $1.6 \times 10^{-9}$  kuuloom. Taas macnaheedu waxa weeye xaddiga danabka ah ee dhibic kasta saarani had iyo jeer waa —  $1.60 \times 10^{-10}^\circ\text{C}$ , ama  $2 \times -1.6 \times 10^{-10}^\circ\text{C}$ , ama  $3 \times -1.60 \times 10^{-10}^\circ\text{C}$ , iwm. Sidaa awgeed xaddiga ugu yar ee danabka ah ee ay dhibic kastaa qaadan kartaa waa —  $-1.6 \times 10^{-10}^\circ\text{C}$ , xaddiga ayaana loo qaataay in uu yahay xaddiga danabka ah ee uu elektaroonku sido, waayo dhibic qudh ihina ma qaadan kartto hal elektaroon wax ka yar. Sidaas ayaana lagu helay xaddiga danabka ah ee uu elektaroonku sido. Markii taa la ogaa-dayna wax suurtagashay in la xisaabiyo cufka elektaroonku

$$\frac{e^-}{m} = -1.76 \times 10^8 \text{ c/g}$$

$$\text{laakiin } e^- = -1.60 \times 10^{-19} \text{ C}$$

$$\frac{-1.60 \times 10^{-19} \text{ C}}{m} = -1.76 \times 10^8 \text{ c/g}$$

$$m = \frac{-1.6 \times 10^{-19} \text{ C}}{-1.76 \times 10^8 \text{ c/g}} = 9.1 \times 10^{-28} \text{ g}$$

Sidaas oo kale ayaa loo xisaabin karaa cufka saxarrada toganna. Saxarrada togani waxa ay dhashaan marka elektroonno laga qaado atammada dhexdhedaadka ah ee aan danabka lahayn. Sidaa awgeed haddii hal elektaroon laga qaado atam dhexdhedaad ah, saxarka togaan ee soo hadhaa waa in uu yeeshaa xaddi danab ah oo laxaadkiisu le'eg yahay laakiin lid ku ah oo ay calaamaddiisu ka duwan tahay ka uu elektaroonku sido. Tusaale ahaan haddii hal elektaroon laga qaado atam haydarojiin ah oo dhexdhedaad ah, saxarka togaan ee soo baxa, oo la yidhaa **borotoon, xaddiga danabka ah ee uu sidaa waa**  
 $+ 1.6 \times 10^{-19}$  kuuloom, cufkiisua waa la xisaabin karaa:

$$\frac{e^+}{m} = 10^8 \text{ c/g}$$

$$\text{laakiin } e^+ = +1.6 \times 10^{-19} \text{ C}$$

$$\frac{+1.6 \times 10^{-19} \text{ C}}{m} = 10^8 \text{ c/g}$$

$$1.6 \times 10^{-19} \text{ c}$$

$$m = \frac{1.67 \times 10^{-24} \text{ g}}{10^3 \text{ c/g}}$$

— Haddii aad u fiirsato cufka elektaroonka iyo ka borotooka waxa aad arkaysaa in borotoonku uu ugu dhowaan 1,840 jeer ka culus yahay elektaroonka? Haddii laba elektaroon laaga qaado atam dhexdhexaad ah oo heliyam ah, saxarka togan ee soo baxa oo la yidhaa alfa, xaddiga danabka ah ee saarani waa +  $3.2 \times 10^{-19}$  kuuloom cufkiisuna waa  $6.6 \times 10^{-21}$  g.


Haddii aynu wax yar dib ugu noqonno, tijaabadii Toomsan ee ku saabsanayd saxarrada togan, waxa aynu aragnay in markii uu isticmaalay neefta niyoona, in saddex fallaadhhood oo kala duwani ay ku dhaceen dheeha sink salfaydhka ah. Markii fallaadh kastaba gooni ahaanteed loo xisaabihey saamiga ay isu yihiin xaddiga danabka ah ee saxarka togan iyo cufkiisu, waxa la arkay in qiimaha saami kastaa uu ka duwan yahay qiimaha saamiyada kale. Saddexda saamina waxa ay kala noodeen +  $4.81 \times 10^4$ ,  $9.62 \times 10^7$  iyo  $4.33 \times 10^7$  c/g.

Haddii aad u fiirsato qiimahaas, waxa aad arkaysaa in qiimaha labaad uu ka hore laban laabkiisa, oo go'an yahay, waxana loo qaadan karaa in ay taasi ka timid atammada qaarkood oo laba elektaroon lumihey. Hase yeeshii, xidhiidh caynkaas oo kale ihi kama dhexeeyo qiimaha saddexaad iyo kuwa kale sidaa awgeedna laguma sharxi karo, loomana qaadan karo in elektaroonno lumeen? Taasina waxa ay inna tusaysaa in fallaadhaa kala duwan ay ku jiraan saxarro uu cufkoodu kala duwan yahay. Sidaa awgeedna aanay atamnada niyoonta ee meesha ku jiraa isku wada cuf ahayn.

Atammadaa isla hal curiye ah ee uu cufkoodu kala duwan yahay waxa loo bixiyey ISKUGOD. Markii la saafay saddexda fallaadhhood ee ay niyoontu bixiso, waxa la arkay in cuf-

atammada saxarrada labada fallaadhood ee xooggan ay kala yihiin 19.99 iyo 21.99, ka saxarrada fallaadaha dacifka ihina inay tahay 20.18. Hase yeeshi, cuf-atamka (culays-atamka) niyoona waa 20.18. Sidaa awgeed halkaa waxa ka muuqata in cuf-atammada (culays-atammada) curiyeyaalku in ay yihiin celceliska cufafka atammada kala duwan leh curiyaha.

Inkasta oo tijaabadii Toomsan ay tustay in ay iskugod-yada niyoona ay wax jira yihiin, haddana qalabkii uu wax ku cabbiraayay sida la rabo wax uma sheegeyn. Sidaa awgeed waxa laga fikiray qalab kaa Toomsan ka hufan, oo si fiican loogu cabbiri karo saamiga ay isu yihiin xaddiga danabka ee saxarrada togan iyo cufafkoodu. Qalabkaasi waxa loo yaqaan cufjeegan-beeg, waana ka hoos ku sawiran.



### JT.2.9 Cuf-jeegaan-beeg

Saxarrada togan ee ka dhasha marka atammada dhex-dhexaadka ah ee aan danabka lahayn lagu garaaco elektaroom-

no ayaa dabadeed dhixmara doloolka hore oo ku yaalla qotinka taban. Badad birlabbeed oo aan ku muujisnayn sawirka ayaa dabadeed soo qalloocisa saxarrada togan ilaa ay ku dhacaan six-niga sawirka. Sida ay saxarradaasi u kala culus yihiin ayaa-nay ku xidhan tahay inta ay soo qalloocsamayaan, iyo meesha ay ku dhacayaan. Halkaas ayaana laga xisaabiyyaa saxar kasta saamiga ay isu yihiin xaddiga danabka ah ee saaran iyo cuf-kiisu. Marka taas la helana waxa suurtagasha in la helo inta is-kugod ee uu curiyahaasi leeyahay. Celceliska cufafka iskugod-yada curiyaha ayaana laga soo saaraa culays-atamka curiyaha. Sidaa awgeed cuf-jeeganbeegga waxa lagu isticmaalaa si loo soo saaro cuf-atammada curiyeyaasha.

Tijaabooyinkaasi aynu ilaa hadda soo aragnay waxa ka muuqata in laba fikradood oo ku jiray aragtidii atammada ee Daalton aanay dhab ahayn. Daalton waxa uu qabay in atammada aan la sii kala qaybin karin iyo in ay curiye kasta atam-madiisu isku culays yihiin. Hase yeeshi, tijaabooyinkii aynu baabkan ku soo sheegnay waxa ay muujinayaan in atammada loo sii kala qaybqaybin karo saxarro yaryar oo danabaysan iyo inay atammada curiyuhu kala culays duwanaan karaan.

**Kaahfalidda :** Fikraddaa ah in atammada loo sii kala jajabin karo saxarro yaryar oo danabaysan, waxa iyana sii xoo-jinaya kaahfalidda curiyeyaasha qaarkood. Curiyeyaal badan oo ay ka mid tahay yuureniyantu ayaan waxa ay bixiyaan kaah. Markii la saafay kaahaa ay bixiyaanna waxa la arkay in uu ugu dhowaan isugu jiro afar nooc, waxaana ay kala yihiin :

Alfa ( ), beta togan ( + ), beta taban ( - ) iyo gaama ( ). Markii la baadhay astaamaha kaahyadaas-na, waxa la arkay in kaah alfuuhu uu ka kooban yahay saxarro togan oo xaddiga danabka ah ee uu saxar kastaa sidaa ay tahay  $+ 3.20 \times 10^{-19}$  kuuloom, cufkiisuna uu yahay  $6.6 \times 10^{-24}$  g Halkaasna waxa ka muuqata inay saxarradaasi la mid yihiin

saxarrada soo hadha marka atamimada heliyamta ah mid kastaba laga qaado laba elektaroon.


Fallaadhaha betada ihi waxa ay ka kooban yihiiin saxarro uu mid kastaba xaddiga danabka ah ee uu sidaa ay tahay  $9.1 \times 10^{-2}$  g. Halqaasna waxa ka muuqata in saxarradaasi ay la mid yihiiin elektaroonka. Fallaadhaha betada togan ihi waxa ay ka kooban yihiiin saxarro uu mid kastaba cufkiisu yahay  $9.1 \times 10^{-28}$  g, xaddiga danabka ah ee uu sidaana ay tahay  $+ 1.6 \times 10^{-19}$  kuuloom. Sidaa awgeedna waxa marmarka qarkood loo yaqaan elektaroonno taban ama bositaroon.

Fallaadhaha gaama wax dañab ah oo ay leeyihiiin ma jirto cufna ma laha, waxaanay aad ugu eg yihiiin fallaadhaha-X.

### BU'DA ATAMKA

Sidii aynu casharkii hore ku soo sheegnay, haddii ay atammadu ka kooban yihiiin saxarro yar oo danabaysan, su'aasha isweydiinta lihi waxay tahay, sidee ayay saxarradaasi isugu ratiban yihiiin. J.J. Toomsan waxa uu 1898 soo jeediyey in atamku uu ka kooban yahay kubbad danab taban leh oo ay elektaroonnaduna ku dhex filiqsan yihiiin. Waxa jirta in saxarrada togan ee atamku ay aad iyo aad uga culus yihiiin saxarrada taban, sidaa awgeedna ugu dhowaan cufka atamka oo dhammi waxa uu ka imaanayaa cufka saxarrada togan. 1911kii ayaa Radarfoord (Rutherford) sameeyey tijaabo uu ku hubinayay fikraddii Toomsan ee ku saabsanayd dhismaha atamka. Qalabkii uu Radarfoord isticmaalayna waa ka uu jaantuska 2.10 ku tusayo.

Radarfoord waxa uu u haystay in mar haddii saxarrada alfaha ( $\text{He}^{2+}$ ) ihi ay leeyihiiin tamar aad u sarraysa ay ka dhexdusi karaan bac bir ah. Isaga oo taa maskaxda ku haysta ayuu dabadeed isticmaalay saxarro alfa ah oo ka imanayey waslad




### JT.2.10 Tijaabadii Radarfoord

yar oo raadiyam ah (raadiyam waa curiye' kaahfale ah). Sa-xarrada alfaha ah inta daloolka saxniga balambamta ah ku yaalla dhexmarta mooyee inta kale waxa nuugaya balambanita. Saxarrada alfaha ah ee daloolka ka dusay waxa ay dhaliyeen fallaadho. Dariiqa ay fallaadhaasi marayaanna waxa ku beegnaa bac dahab ah. Fallaadhaasi intooda badani way ka dhexduseen bacda dahabka ah, iftiin ayaanay ka dhaliyeen daaha uu ku dheehnaa sink salfaydhku. Hase yeeshiee, fallaadha qaarkood ayaaxaglo aad u weyn u qalloocsamay, qaarna dib ayaabay u soo noqdeen.

Haddii ay fikraddii Toomsan hagaagsanayd marnaba ma ay dhici karteen in saxarrada alfaha ihi qalloocsamaan ama ay dhib u soo noqdaanba. Sidaa awgeed Radarfoord waxa uu soo jeediyeey in sida keli ah ee arrintaa lagu sharxi karaa ay tahay iyada oo loo qaato in saxarrada togan ee atamka oo cufka atamka oo dhammi uu ku xidhan yahay, ay ku urursan yihiin xudunta atamka. Xudduntaas atamka ee ay saxarrada togan iyo cufka oo dhammiba ay ku urursan yihiinna waxa uu u bixley bu'da (nucleus) atamka.

Radarfoord waxa uu fikraddaa ku keenay waxa ay ahayd, mar haddii ay saxarrada uu danabku isku nooca yahay ay kala didaan, saxarrada alfaha ah ee dib u soo laabtaa waxa ay sidaa

yeeli karaan marka ay is-hirdiyaan bu'da atamka dahabka oo ay is-ku danab yihiin oo ay soo kala didayaan iyo bu'da atamka dahabka oo aad u culus oo aanay riixi karayn. Jaantuska 2.11 ayaana muujinaya fikraddii Radarfoord.



### JT. 2.11

Waxa kale oo uu Radarfoord soo jeediyey in mar haddii uu cuska atamku ku urursan yahay bu'da atamka, ay mugga atamka intiisa badani ka kooban tahay elektaroonnada oo ku wareegaya bu'da atamka, sida ay meerayaalku ugu wareegaan qorraxda oo kale.

Ataw kasta oo qibexidhexaa si xaqibbaas si yf  
tspks ee si elektaroonnadaan siqaaan, waxa laasdaava xaqibbaas qib  
uspsks si ee togsu ee pu,ds stawks. Siids too og yashay ti uu q  
ogessabsy lii pu,ds stawks si kuu liitaa saxsito kaa je oo aan q  
qususpsks tafsi kaa imanshaa potloodoonusads kuu liits pu,ds staw  
ks. Potloodoonusads kaa sorkow 1935kii sann-jaaqimwirk (Cjaqimwirk)  
ogessabsy lii pu,ds stawks si kuu liitaa saxsito kaa je oo aan q  
uspsks tafsi kaa imanshaa potloodoonusads kaa cutiks-potloodoonus  
saxsitaasasi waxa loo pixiyey ilyaanustatuumo, oo si wacsu  
heeedu tafsi qibexidhexaa.

Haddii aynu is nidhaahno soo gabagabeeya wixii aynu ilaa hadda soo aragnay, waxa aynu arkaynaa in atamku uu ka kooban yahay elektaroonno, niyuutaroonno iyo borootoonno. Is-la markaasna uu ugu dhowaan mugga atamka oo idili ka bax-

san yahay bu'da, kana kooban yahay elektaroonnada. Bu'da atamka oo ugu dhowaan uu cufka atamka idili ku urursan yahyna, waxa ku jira borotoonnada iyo niyuutaroonnada. Si xisaabtu innoogu hawl yaraato, xaddiga danabka ah ee uu elektarocnku sido oo ah  $- 1.6 \times 10^{-19}$  kuuloom waxa loo qaataa — 1, ta borotoonkana + 1, ta niyuutaroonkana 0. Mar haddii xaddiga danabka ah ee uu borotoon kastaa sidaa ay tahay '+ 1; xaddiga danabka ah ee bu'du waxa uu la mid yahay tirada borotoonnada ku jira bu'da. Tusaale ah'aan, haddii ay 8 borotoon ku jiraan bu' (sida bu'da atamka ogsoojiinta), xaddiga danabka ee bu'daasi, waxa uu noqonaya + 8, tirada niyuutaroonnda bu'daa ku jira intay doonaanba ha ahaadeen ee. Tirada borotoonnada ee bu'da ku jira waxa la yidhaa TIRO-ATAMKA, waxana sida caadiga ah loo taagaa xarafka Z. Atam kasta oo dhex-lhexaad ah, mar haddii la doonayo in aanu danab yeelan, waa in tirada elektaroonnadu ay la mid noqotaa tirada borotoonnada, sidaa awgeed Z waxa ay isla marka u taagnaan kartaa tirada elektaroonnada.

Tirada borotoonnada oo loo geeyey tirada niyuutaroonnda waxa la isku yidhaa TIRADA CUFKA, waxana tusta xarafka A. Sidaa awgeed tirada niyuutaroonnadu waxa ay had iyo jeer la mid tahay A-Z. Haddii la rabo in la muujiyo bu'da atammade waxa habboon in la isticmaalo summad sida  $11Na^{23}$  oo kale ah. Hoosgalaha 11 waa Z oo ah tirada borotoonnada, korgalaha 23 waa A oo ah tirada borotoonnada iyo tirada niyuutaroonnda oo halka kan ah  $23 - 11 = 12$ .

Iskugodyada (isotopes), Jiritaanka iskugodyada waxa u sabab ah faraqa u dhexeeya bu'aha atammada isla curiyaha ah. Curiye kasta tirada elektaroonnada ee atammadiisa oo dhammina ay isu le'eg yihiin. Hase yeeshie, waxa dhici kartaa in tirada niyuutaroonnda ee ku jira atammada curiyaha uu faraq u dhexeeyo, sidaas awgeedna uu cufkoodu kala duwanaado. Hase yeeshie, mar haddii tiraabo elektaroonnada ee atamma-

da curiyuhu ay isle'eg yihii, wax faraq ihi u dhexeyn maayo astaamaha kimikaad ee atammada isla curiyaha ah. Iskugod-yada wixa loo qeexi karaa, atammada isla curiyaha ah ee astaamahooda kimikaad ay isku midka yihii, laakiin uu cufkoodu kala duwan yahay. Wixa ka'e oo loo qeexi karaa iskugod-yada, atammada isla curiyaha ah, ee uu tiro-atamkoodu isku mid yahay laakiin ay tirada niyuutaroonnada ee bu'ahooda ku jiraa ay kala duwan yihii. Tusaale ahaan koloriin wixa ay leedahay, laba iskugod  $17\text{Cl}^{\text{m}}$  iyo  $17\text{C}^{\text{m}}$ . Iskugodka hore wixa uu leeyahay 17 borotoon iyo 18 niyuutaroon, ka labaadna wixa uu leeyahay 17 borotoon iyo 20 niyuutaroon.

Wixa tijaabo ahaan lagu caddeeyey in cuf-atamka (culays-atamka) curiyuhu uu yahay celceliska cufafka iskugod-yada kala duwan oo la miisaamay. Tusaale ahaan koloriinta adduunka jirta 75.77% ayaa ah nooca culus, 24.23% hadhayna waa nooca fudud. 1000 atam oo koloriin ah wixa ay u badan tahay inay isugu jiraan 758 atam oo nooca uu tiro-atamku yahay 35 iyo 242 atam oo ah nooca uu tiro-atamku yahay, 37. Sidaa awgeed cuf-atamka koloriin wixa uu noqonaya

$$\begin{array}{r} 758 \times 35 + 242 \times 37 \\ \hline 1000 & = 35.484 \end{array}$$

Hase yeeshet, cuf-atamka koloriin ee dhabta ihi waa 35.453. Faraqaa yar ee u dhexeeyaa cuf-atamka aynu iskugod-yada ka xisaabinay oo ah 35.484 iyo kan dhabta ah oo ah 35.453 wixa u sabab ah woxoogaa yar oo cuf ah oo tamar isu beddela marka borotoonnada iyo niyuutaroonnada la isugu keeno bu'da.

### **Xeerka Kalgalka ee Curiyeyaasha**

Haddii astaamaha curiyeyaasha si habboon loo derso wixa suurtagal ah in si intii hore ka qoto dheer wax looga

ogaado dhismaha atammada. Wuxa la arkay in haddii curiye-yaasha loo ratibo habsiimo ku xidhan sida ay u kala tiro-atam badan yihin ay kalgal ahaan u yimaaddaan curiyeyaasha ay astaamahooda kimikaad isku midka yihin. Soo noqnoqodkaa ay astaamaha curiyeyaashu kalgal ahaan u soo noqnoqona-yaan marka curiyeyaasha loo ratibo habsiimo ku xidhan sida ay u kala tiro-atam badan yihin, ayaa loo yaqaan XEERKA KALGALKA ee curiyeyaasha. Nin Jarmal ah oo la odhan jiray Lodar Meeyar (Lothar Meyar) iyo nin Ruusha oo la odhan jiray Mendeleef (Mendlef) ayaa markii ugu horraysay uu mid waliiba gooni ahaantii u soo jeediyeen xeerka kalgalka.

Haddii aynu u fiirsanno curiyeyaasha heliyam; niyoos, argon, kiribtoon, siinoon iyo raydon ee ay tiro-atammadoodu kala yihin 2, 10, 18, 36, iyo 54 sida ay u kala horreeyaan, waxa aynu arkaynaa in giddigood ay neefo wahsadayaal (inert) ah yihin oo aanay curiyeyaasha kale la falgelin. Curiyeyaasha daba yimaadda neefaha wahsada oo ah litiyam, naatriyam, kaaliyam, rubidiyam, siisiyam iyo faraansiyam ee ay tiro-atamya-doodu kala yihin, 11, 19, 37, 55, iyo 87 sida ay u kala horreeyaan, waxa aynu arkaynaa inay giddigood biro yihin, kulka iyo danabkana ay si fiican u gudbiyaan, urur ahaanna waxa la isku yidhaa biraha alkaliyada. Isla markaas biraha alkaliyadu wa-xa ay leeyihin astaam kimikaad oo aad isugu dhow. Tusaale ahaan giddigood si xooggan ayay biyaha ula falgalaan hayda-rojiin baanay ka saaraan milanka soo baxaana waa beys. Milan-nadaa beyska ah haddii haydarokolorik asiidh lagu fasaqo oo dabateena biyaha laga uumibixiyo, mar walba waxa soo baxa cusbo uu midabkeedu caddaan yahay. Isla markaasi cusbooyinkaasi aad ayay isugu dhow yihin. Tusaale ahaan marka cusbooyinkaas biyaha lagu milo, milanka soo baxa si fiican ayuu danabka u gudbiya; (waa gudbiye-milmeyaal). Wuxa kale oo jirta in biraha alkaliyadu ay toos ula falgalaan kolo-riinta; cusbooyinka kor ku yaallaana ay soo baxaan. Iskudhis-yada haydarosiga ah ee biraha alkaliyadu (tusaale ahaan NaOH) giddigood waa beysyo.


Curiyeyaasha ka horreeya neefaha wahsada oo ah folo-riin, koloriin, boromiin, aayodhiin 'yo astatiin ee ay tiro-atam-madoodu kala yihiin 9, 17, 35, 53 iyo 85 sida ay u kala horree-yaan, aad ayay iyana astamatoodu isugu dhaw yihiin, urur-ahaanna waxa la isku yidhaa halojiinnada. 'Ialojiinnadu waa bir-ma-aheyaal; kulka iyo danabkana si fiiican una gudbiyaan. Marka ay xaaladuhu iska caadiga yihiin, foloriin iyo koloriin waq neefo, boromiinna waa hoor, aayodhiin iyo astatiinna waa adkeyaal. Dhammaan halojiinnadu way la falgalaan haydar-jiinta. Tusaale ahaan,



Iskudhisyada soo baxa marka ay halojiinhadu haydar-jiinta la falgalaanna, dhammaan biyaha way ku milmaan, mi-lanka soo baxaana waa asiidh. Tusaale ahaan,



Haddii milannada asiidhka ah lagu fasaqo naatriyam haydrogsaydh oo dabeetona biyaha laga uumibixiyo, waxa soo baxa cusbooyinka naatriyam oo uu midabkoodu caddaan yahay. Tusaale ahaan,



Waxa kale oo cusbooyinkaa loo diyaarin karaa iyada oo naatriyam iyo halojiinnadu toos la isugu daro. Marka laga reebo foloriin, halojiinnadu dhammaatood waxa ay leeyihiin iskudhisyo haydarogi ah, oo giddigood asiidh ah. Tusaale fii-can oo iskudhisyadaa ka mid ihina waa HOCl (haybokoloras asiidh).

Curiyéyaalka u dhexeeya bir alkali ah iyo halojiinka ugu soo xiga astaamahoodu heerheer ayay isu beddelaan iyaka oo ka beddelmaya astaamo bireed una beddelmaya astaamo bir-ma-ahe. Haddii aad u fiirsato curiyeyaasha u dhexeeya naatriyam iyo koloriin oo ah magniisiyam (12), aluuminam (13), silikon (14), fosfoor (15), iyo salfar (16), waxa aad arkaysaa in : Magniisiyam iyo aluuminam ay biro yihiin, fosfoor iyo salfarna ay bir-ma-aheyaal yihiin, silikoonna uu bir-u-eke yahay.

Isla markaasna ay iskudhisyada haydarogsiga ah ee curiyeyaashaasi ay ka beddelmayaan iskudhisyo beys ah una beddelmayaan kuwo asiidh ah. Tusaale ahaan iskudhiska haydarogsiga ah ee magniisiyam oo ah magniisiyam haydarogsaydh, Mg (OH)<sub>2</sub>, waa beys. Iskudhisyada haydarogsiga ah ee salfar iyo fosfoor oo kala ah salfiyuurik asiidh, H<sub>2</sub>SO<sub>4</sub>, ama (HO)<sub>2</sub>SO<sub>4</sub>, iyo fosfoorik asiidhna H<sub>3</sub>PO<sub>4</sub>, ama (HO)<sub>3</sub>PO<sub>4</sub>, waa asiidho. Iskudhisyada haydarogsiga ah ee silikon iyo aluuminamna labadaas ayay u dhexeyaan.

Si hagaag loogu arki karo soo noqnoqodkaa ay astaama-ha curiyeyaalku kalgal ahaan u soo noqnoqonayaan, waxa habboonaatay in curiyeyaasha loo sameeyo tuse gaar ah oo arrintaa si fiican u muujin kara. Tusahaa gaarka ahna waxa loo yaqaan TUSAHA KALGALKA CURIYEYAASHA, qaabkiisuna waa ka uu jaantuska 2.12 tusayo. Tirada summadda curiye kasta ku hoos qorani, waxa ay tilmaamaysaa tiro-atamka curiyahaas. Xiddigta iyo labada xiddigoodna waxa ay kala tusayaan mee-sha ay gelayaan curiyevaasha hoos ku taxan.

URUR	I	II		III	IV	V	VI	VII
KAL	H							
1	Li	B <sub>e</sub>						
2	Be	Li						
3	Na	Mg						
	Al	Si						
4	K	Ca	Sc	T <sub>r</sub>	V	C <sub>r</sub>	Mn	F <sub>e</sub>
19	20	21	22	23	24	25	26	27
21	22	23	24	25	26	27	28	29
22	23	24	25	26	27	28	29	30
23	24	25	26	27	28	29	30	31
24	25	26	27	28	29	30	31	32
25	26	27	28	29	30	31	32	33
26	27	28	29	30	31	32	33	34
27	28	29	30	31	32	33	34	35
28	29	30	31	32	33	34	35	36
29	30	31	32	33	34	35	36	
30	31	32	33	34	35	36		
31	32	33	34	35	36			
32	33	34	35	36				
33	34	35	36					
34	35	36						
35	36							
36								
37								
38								
39								
40								
41								
42								
43								
44								
45								
46								
47								
48								
49								
50								
51								
52								
53								
54								
55								
56								
57								
58								
59								
60								
61								
62								
63								
64								
65								
66								
67								
68								
69								
70								
71								
72								
73								
74								
75								
76								
77								
78								
79								
80								
81								
82								
83								
84								
85								
86								
87								
88								
89								
90								
91								
92								
93								
94								
95								
96								
97								
98								
99								
100								
101								
102								
103								

*	L	a	c	P	r	N	Pm	G	Eu	Gd	Tb	Dy	Ho	Er	Tm	Yb	Lu
57	58	59	60	61	62	63	64	65	66	67	68	69	70	71			
58	59	60	61	62	63	64	65	66	67	68	69	70	71				

**	A	c	T	n	P	u	M	P	A	m	C	m	B	K	C	E	S
89	90	91	92	93	94	95	96	97	98	99	99	100	101	102	103		
90	91	92	93	94	95	96	97	98	99	99	100	101	102	103			

JT. 2.12. Tusha Kalgalta Curiyayaasha

Haddii aal u fiirsato tusaha kalgalka curiyeyaalka, waxa aad arkaysaa in curiyeyaasha loo ratibay habsiimo ku xidhan sida ay u kala tiro-atam badan yihiiin, iyada oo curiyeyaasha ay astaamahoodu isu eg yihiiin, oo la yidhaahdo urur, joogto ahaan la isu lihos dhigay. Tusaha kalgalka curiyeyaasha ee ku muujisan jaantuska 2.12 wuxuu leeyahay siddeed urur oo waaweyn, waxaa kala muujinaya tirooyinkä I, II, III, IV, V, VI, VII, iyo O. Ururka Iaad waa biraha alkaliyada, ururka VIIaadna waa halojiinnada. Ururka O oo ka kooban neefaha wahsada. tusayaasha qaarkood, ayaa ku magacaaba ururka VIIIaad. Curiyeyaalka dhex yiinaadda ururka IIaad iyo ka IIIaad wuxa loo yaqaan curiyeyaasha kala-guurka. Joogtax wal oo curiyeyaal ah oo ka mid ah curiyeyaasha kalaguurkana wuxa loo yaqaan urur yar, waxana loogu magac daraa, magaca curiyaha ugu horreya. Tusaale ahaan Cu, Ag iyo Au waa ururka yar ee kubram.

Curiyeyaasha ku yaalla tusaha kalgalka curiyeyaasha ee isku jiiftaxa ah wuxa la yidhaa kal, toddoba kal oo is-hoos yaal ayaanu tusuhu ka kooban yahay. Saddexda kal ee ugu horree yaa way gaagaaban yihiiin marka kuwa kale loo eego. Kalka ugu horreeca wuxa ku jira 2 curiye oo keliya (H iyo He), ka labaad iyo ka saddexaadna wuxa ku jira mid walba 8 curiye, ka afaraad iyo ka shanaad mid kastaba wuxa ku jira 18 curiye, ka lixaad wuxa ku jira 32 curiye, ka toddobaadna ma dhamma.

Labada tax ee hoosta ku qoran ee ay kala muujinayaan xiddigta keliya iyo labada xiddigood wuxa ay ka kala tirsan yihiiin kalka lixaad iyo ka toddobaad, sida ay u kala horreyaan, waxana la kala yidhaa curiyeyaasha laantanaydhka iyo kuwa aktinaydhka.

Tusaha kalgalka curiyeyaashu wuxa uu wax weyn ku tarraa sidii si hufan la isugu soo uruurin lahaa kimistariga curiyeyaasha. Isla markaas ratikaadhaa curiyeyaasha la isugu soo


uruurin karo tuse caynkaas ihi, waxa ay inna dareensiinayaan in xidhiichii ka dhexeeyo dhismaha atammada iyo astaamaha curiyeysaasha ee kalgalka ahaan u imaanaya.

### HEERTAMARAH

Sawirkii uu Radarfoord innaga siiyey dhismaha atamka. waxa uu ahaa bu' danab togan leh oo ay elektaroonno danab taban lihi ku wareegayaan. Dhismahaasi gal dalollo weyn ayuu yeeshay mid waaran ma aha, waayo mar haddii ay danahya-da isku lidka ihi issa soo jiitaan, bu'da ayaa elektaroonnada soo jiidanaysa aakhirkana way isu imanayaan. Haddaba, si aanay arrintaasi u dhicin waa in ay nu u qaadannaa in elektaroonnadu ay xoog u soconayaan iyaka oo bu'da ku wareegaya, xoogga socodkaas ka dhashaanaa uu ka horjeedo xoogga ay bu'da isku soo jiidanayaan. Hase yeeshie, haddii elektaroonnadu soconayaan waa inay tamar bixiyaan waayo waxa la ogyahay in saxar kasta oo danabaysani uu tamar bixiyo haddii uu xoog u socdo isaga oo uu xoog kale soo jiidanayo. Taasina waxa ay la imanaysaa in dhaqsaha uu elektaroonku ku soconayaan ay hoos u dhacdo, tamar-socodkiisuna ay kolba sii yaraato. Haddii ay taasi dhacdana, elektaroonku iskama xejinayo xoogga ay bu'du ku soc jiidanayso, aakhrikana waxa dhacaysa in elektaroonku uu ku soo dhaco bu'da, dhismaha atamkuna uu dumo. Hase yeeshie, atammadu waa wax jira dhisinahooduna ma dumo, sidaa awgeed, waa in fikraddaa Radarfoord ay meel ka qaldan tahay.


Si goldaloolladaa uu yeeshay dhismaha atamka ee Radarfoord loo kaabi karo, dhibaatadaa ka timidna loo surfuri karo bal hadda ay nu u fiirsanno jeegaanta ka dhalata ilaysyada ay bixiyaan atammada curiyeysaashu marka la kululeeyo. Waxa ay nu ognahay in ilaysku ka kooban yahay midabbo kala jaad ah. Haddii ilayskaa la dhexmariyo salaxleno uu u kala baxo midabbada uu ka kooban yahay. Tusaale ahaan haddii ilaysku uu bixiyo guluub ifayaa la dhexmariyo salaxle, waxa ka dhasha

JEEGAAN IS-HAYSTA oo midabbo ah sida uu tustayo daaha ku muujisan jaantuska 2.13. Jeegaantaa is-haystaa waxa ay ka kooban tahay toddoba midab, midab kastaana waxa uu u taagan yahay ilays tamar gaar ah leh. Marka ay salaxlahaa ka soo baxaan, ilayska ugu tamarta badan leh, oo faylotka ah, ayaa inta uu qalloocsamayaa ay ugu weyn tahay, ilayska ugu tamarta yar leh, oo ah casaanka, ayaanay inta uu qalloocsamayaa ugu var tahay.



#### JT.2.13 Jeegaan is-haysata

Tijaabada kor ku taalla haddii lagu celiyo iyada oo la is-ticmaalayo ilayska ka soo baxa marka la kululeeyo cusbooyinka naatriyam ama kubram ama cusbooyinka curiyeyaal kale oo badanba, jeegaanta soo baxdaa ma aha mid is-haysata. Sida uu tusayo jaantuska 2.14 ee hoos ku yaallana, daaha waxa ku dhacaya jeegaan xarriijimo ah, oo ka kooban dhawr xarriiji-mood on midabbo ah oo dhuudhuuban.



#### JT.2.14 Jeegaan Xarriijimo ah

Mar haddii ay xarriijin waliba u taagan tahay ilays tamar gaar ah leh, jiritaanka jeegaanta xarriijimaha ihi waxa ay inna dareensilnaysaa in atammadu ay tamaro gaar ah uun bixin karaan. Taas macnaheedu waxa weeye, atammadu ma bixiyaan tamar kasta, ee waxa uun ay bixin karaan xaddi go'an oo tamar ah oo qiinio go'an leh.

Markii iskudhisyada curiyeyaa kala duwan lagu isticmaalay tijaabada kor ku taalla, ee jeegaanta uu mid kastaaba bixiyona loo fiirsaday, waxa la arkay in curiye kastaaba uu lee-yahay jeegaan xarriijimo ah oo u gaar ah.


Niilis (Neils Bohor) oo ahaa fisikisyaaqaañ Dhaynish (Danish) ah ayaa 1913kii soo jeediyey aragtii uu ku sharxaayey jiritaanka jeegaanta xarriijimaha ah, iyo waxa ay atammadu u dumi waayeen inkasta oo ay ka kooban yihiin saxarro uu danab koodu isku lid yahay. Boor waxa uu soo jeediyey in tamarta guud (oo ah tamar-socodka iyo tamar kaydka oo la isu geeyey) ee elektaroonka atamku ay qaadan kartoo qiimayaal go'an oo keli ah. Taas macnaheedu waxa weeye, marka uu elektaroonku atam ku jiro, tamar kasta ma yeelan karo, ee waxa uu yeelan karaa oo keli ah tamarc qiimo go'an leh. Sida keliya ee uu elektaroonku ku beddeli karo tamartiisana waa isaga oo ka guura heer-tamar gaar ah oo u guura heer-tamar kale. Guurista uu ka guurayo heer-tamar gaar ah ee uu u guurayo heer-tamar kahlena tartiib-tartiib uma dhacayso, ee waa in uu mar keli ah ti-boodaa heer-tamarta uu u guurayo Haddii aanay jirin heertamar hoos oo uu elektaroonku u guurana, wax tamar ah bixin maayo elektaroonku, Taas ayaana u sabab ah waxa ay atammadu u dumi waayeen.

Haddii la heli karayo heertamar hoose, elektaroonku waxa uu bixin karaa tamar, laakiin tamartaasi waxa ay yeelan kartaa uun xaddi go'an. Xaddigaa go'an ee tamarta ihina waa in uu la mid noqdaa faraqa u dihexeeyaa labada heertamarood.

Marka ay soo baxayso jeegaanta xarriijimaha ihi; kulka ayaa marka hore elektaroonnada geynaya heertamaro sarena. Marka ay dabadeed dib ugu soo dhacaan heertamaro hoosena waxa ay bixiyaan ilays tamar gaar ah leh.

Haddii aynu soo gabagabeynno fikradihii Boor iyo kuwii ka dameeyeyba, waxa aynu arkaynaa in elektaroonnada 'atam. mada ay suurtagal u tahay in ay heertamaro gaar ah uun galaan. Heertamarahaasina waxa la siiyey tirooyin, iyada oo heertamarta ugu hoosaysa laga bilaabay, lana siinayo tirada 1, heertamarta ku xigta ee ka sarraysana 2, ta ka sii sarraysana 3. iwm. Heertamarta waxa badanaa loo taagaa xarafka n. Sidaa awgeed heertamaraha ka sarreeyaa waxa ay kala noqonayaan  $n = 1, n = 2, n = 3, n = 4$  iwm. Waxa kale oo xisaab ahaan lagu soo saaray in tirada elektaroonnada ah ee ay heertamar kastaa qaadi kartaa ay tahay  $2n^2$ . marka ay  $n$  u taagan tahay heertamartaa laga hadlayo. Taas macnaheedu waxa weeye, heertamarta ugu hoosaysa ( $n = 1$ ) tirada elektaroonnada ah ee ugu badan ee ay qaadi kartaa waa  $2(1)^2$  ama 2 elektaroon. Heertamarta labaadna ( $n = 2$ ) tirada elektaroonnada ah ee ugu badan ee ay qaadi kartaa waa  $2(2)^2$  ama 8 elektaroon. Sidaas oo kale ayaa loo xisaabin karaa tirada ugu badan ee elektaroonnada ah ee ay qaadi karaan heertamaraha kafena.

Arrintaas aynu kor ku soo sheegnay waxa aynu ku tusi karnaa jaantuska 2.15. Xarriiqda ugu hoosaysa ee (a) ama goo.



JT. 2.15 Heertamaraha elektaroonnada ee atamka

bada ugu hoosaysa ee (b) waxa ay u taagan tahay heertamarta ugu hoosaysa, taas oo ah heertamarta ay ugu badan tahay tamarta loo baahan yahay si elektaroon looga qaado atamka. Tirada heertamaraha jiri karaa xad ma laha, hase yeeshee, waxa aynu u baahan nahay toddobada ugu horreeya oo keliya. Sida uu jaantuska 2.15 tusayo waxa aad arkaysaa in faraqa tamarta ah ee u dhexeeya heertamaraha hoose uu ka badan yahay ka u dhexeeya heertamaraha sare. Sidii aynu horeba u soo sheegnayna elektaroonnadu waxa ay ku jiri karaan oo keliya heertamaro, mana jiro elektaroon yeelan kara tamar u dhexey-sa laba heertamarood. Buugaagta qaarkood waxa ay isticmaalaan xarfaha K, L, M, N,....., halka heertamaraha  $n = 1, 2, 3, 4, \dots$

#### Heertamaraha iyo Tusaha Kalgalka Curiyeyaasha :

Waxa aynu soo sheegnay in heertamar kastaa ay qaadi karto tiro u go'an oo elektaroonno ah ( $2n^2$ ). Arrintaa iyada ah ayaana la isticmaali karaa si loo sharxo waxa ay astaamaha curiyeyaashu kalgal ahaan ugu soo noqnoqdaan, haddii aynu u qaadanno in astaamaha atammada curiyeyaashu ay ku xidha yihin inta elektaroon ee ku jira heertamarta ugu sarraysa. Bal waxa aad ka fikirtaa in aad atam dhistro adiga oo elektaroonnda u geynaya bu'da atam aad tiro-atamkiisa taqaanno. Elektaroon waliba wax uu gelaya heertamarta ugu hoosaysa ee uu heli karo. Haddii atamka aad rabto in aad dhistaa uu yahay haydarojiin ( $Z = 1$ ), elektaroonkiisa qudh ihi waxa uu gelaya heertamarta ugu hoosaysa ee  $n = 1$ .

Haddii uu yahay heliyam oo ay bu'diisa ku jiraan laba borooton, labada elektaroonba waxa ay gelayaan heertamarta ugu hooseeyaa ee  $n = 1$ . Haddii uu yahay litiyamna oo ay  $Z = 2$ , elektaroonka saddexaad waa in uu galaa heertamarta labaad ee  $n = 2$ , waayo heertamarta kowaad waxa ay qaadi kartaa laba elektaroon oo keli ah. Jaantuska 2.16 waxa ku qoran 18ka curiye ee ugu horreeya tusaha kalgalka curiyeyaasha, waxana ay u soo kala horreeyaan sida ay u kala tiro-atam yar yihin.

Tiro-atawaa cuu nige	H	He	Li	B <sub>3</sub>	B	C	N	O	F	Ne	Na	Mg	Al	Si	P	S	Cl	Ar
Ti mida elektroon ada																		
$n=1$	1	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2
$n=2$		1	2	3	4	5	6	7	8	8	8	8	8	8	8	8	8	8
$n=3$										1	2	3	4	5	6	7	8	8

## Fr. 2.16. Radibaada elektaroonada.

Mar haddii ay heertamarta ugu hoosaysa ee  $n = 1$  aanay qaadi karin 2 elektaroon wax ka badan, waxa ay ku buuxsamsaaya neefta wahsata ah ee heliyam. Marka heliyam la dhaafso, waxa bilaabmaysaa heertamarta labaad ee  $n = 2$ , waxana ay ku bilaabmaysaa litiyam oo uu hal elektaroon ku jiro heertamarta  $n = 2$ , waxana ay ku buuxsamsaaya niyoona oo ay siddeed elektaroon ku jiraan heertamarta  $n = 2$ . Waxa aad arkaysaa in heliyam iya niyoona ay wax ka dhexeeyaan. Labadoodaba heertamarahooda ugu sarreeyaa way buuxaan, isla markaasna labadooduba waa neefo wahsadayaal ah. Halkaa waxa ka muuqata in marka aynu kal siddeed atam ah soo wareegnaba ay astaantaa wahsadka ihi soo noqonayso. Marka laga tago niyoona, siddeedda curiye ee ku xiga, elektaroonnada soo biiraa waxa ay gelayaan heertamarta saddexaad ee  $n = 3$ , iyada oo uu kolba hal elektaroon soo gelayo, ilaa ay siddeed elektaroon soo galaan. Curiyahaa 18aad oo ah argon, lama filayo in uu noqdo mid wahsade ah, waayo heertamarta saddexaad, siddeeddaa elektaroon ee aynu ku ridnay mooyee, waxa ay qaadi kartaa 10

elektaroon oo kale. Inkasta oo ay taasi jirto, haddana waxa la arkay in argon ay tahay neef wahsato ah.

Sidaa awgeed waxa muuqata in heertamarta saddexaad ay u dhaqanto sidii heertamar buuxda marka ay siddeed elektaroon ku jiraan. Casharrada dambe ayaynu si tafaitiran ugu falanqayn doonaa arrintaas.

In ay astaamaha atammada curiyeyaashu ku xidhan yihiin inta elektaroon ee ku jira heertamarta ugu sarraysa, waxa innoo sii muujinaya tusaaleyaasha soo socda. Haddii aad u fiirsato atamka litiyam, waxa aad arkaysaa in uu hal elektaroon ku jiro heertamarta ugu sarraysa. Isla sidaas oo kale ayuu atamka naatriyamna hal elektaroon ugu jiraa heertamarta ugu sarraysa ee  $n = 3$ . Waxana aynu hore u soo aragnay astaamaha kimikaad ee litiyam iyo kuwa naatriyam ay isku mid yihiin. Sidaas oo kale ayaa foloriin iyo koloriinna ay labaduba mid waliiba 7 elektaroon ku leedahay heertamarteeda ugu sarraysa, astaamahooda kimikaadna ay isugu mid yihiin. Häddii aad u fiirsato tusaha kalgalka curiyeyaashana waxa aad arkaysaa in curiyeyaasha ay astaamahooda kimikaad isku midka yihiin ay ku xidhan tahay tirada elektaroonnada ee heertamarta ugu sarraysa ku jira. Isla markaana ay joogto ahaan isu hoos yaal-liin curiyeyaasha ay tirada elektaroonnada ee heertamarahooda ugu sarreeya ku jiraa isle'eg yihiin.


Haddii aynu wax yar dib ugu laabanno tusaha kalgalka ee curiyeyaasha, waxa aad arkaysaa in laba curiye oo keli ihi ay ku jiraan kalka ugu horreeya. Taasina ay waafaqsan tahay heertamarta ugu sarraysa oo laba elektaroon oo keliya qaadi karta. Kalka labaad waxa ku jira 8 curiye oo keliya (Li, Be, B, C, N, O, F, iyo Ne). Taasina waxa ay waafaqsan tahay heertatta labaad oo ku buuxsanta 8 elektaroon. Mar haddii siddeed-daa curiyeyaba ay heertamarta labaad tahay ta ugu sarraysa, isla markaana ay tirada elektaroonnada ah ee ku jiraa kordhayso marka aad kalka sii raacdaba, waxa dhacaysa in astaama .

kimiaad ee curiyeyaashaa isku kalka ihi ay aad u kala duwa-naadaan.

Kalka saddexaad oo ka kooban curiyeyaasha naatriyam ilaa argon, iyo heertamarta saddexaad ( $n = 3$ ) way adag tahay sidii xidhiidh looga dhexaysiin lahaa. Haddii aynu astaamaha curiyeyaasha ka dhiganno sal, waxa la arkay in Kalka saddexaad uu ka kooban yahay 8 curiye oo keliya, halkii aynu ka filaynay in uu ka koobnaado 18 curiye mar haddii ay heertamarta saddexaad qaadi karto 18 elektaroon. (Sababta ay taasi ku dhacday waxa loo nisbeeyaa, iyada oo marka ay 8 elektaroon galaan heertamarta saddexaad ee  $n = 3$  ay dabadeed labada elektaroon ec ku xigaa ay galaan heertamarta afaraad ee  $n = 4$  inkasta oo aanay heertamarta saddexaad weli buuxsamin). Haddii aad u fiirsato tusaha kalgalka ee curiyeyaasha, waxa aad arkaysaa in ururka laad ay naatriyam oo hal elektaroon oo qudha ku leh heertamarteeda ugu sarraysaa ay hoos imanayso liiyam, ururka II Aadna uu magniisiyam hoos imanaayo beriliyam; ururka III Aadna ay aluminam hoos imanayso booron, ururka IV Aadna uii silikon hoos imanaayo kaarboon, ururka Vaadna ay foosfoor hoos imanayso naytarojiin, ururka VI Aadna ay salfar hoos imanayso ogsoojiin, ururka VII Aadna ay kolorin hoos imanayso foloriin, ururka Ona ay argon hoos imanayso niyoon. Curiyeyasha aynu kor ku soo sheegnay, labadii curiye ee aynu is raacinayba waxa ay leeyihii astaamo kimikaad oo isku mid ah. Taasina waxa ugu wacan iyada oo tirada elektaroonnada ee ku jira heertamaraha ugu sarreeya ee labada curiye ee aynu is raacinayba ay isle'eg yihiin.

Sidii xidhiidh looga dhaxaysiin lahaa tirada curiyeyasha ee uu ka kooban yahay kalka afaraad iyo tirada elektaroonnada ee ay heertamarta afaraad qaaci karto aad ayay iyada laf-teeeduna u adag tahay. Dhibaataaduna way ka sii badan tahay tii aynu kala kulannay kalkii saddexaad. Sida aad tusaha kalgalka ku aragtid 18 curiye ayaa ku jira kalka afaraad, kuwaas

oo ka bilaabmaya curiyaha uu tiro-atamkiisu yahay 19 ilaa ka uu tiro-atamkiisu yahay 36. Labada curiye ee ugu horreeya oo ah K iyo Ca elektaroonnada soo biiraa waxa ay gelayaan heertamarta afaraad ee  $n = 4$ , iyada oo weli ay siddeed elektaroon oo keli ihi ku jiraan heertamarta saddexaad. Eeg jaantuska 2.17 oo tusaya ratibaadda elektaroonnada ee kaaliyam. Marka ay laba elektaroon galaan heertamarta afaraad ayay dabadeed bilaabmaysaa in heertamarta saddexaad ay sii buuxsanto ilaa ay galaan tobankii elektaroon ee ka dhinnaa. Toobanka curiye



$$K = 19$$

### JT. 2.17 Ratibaadda elektaroonnada ee kaaliyam

ee ka dambeeyaa kaaliyam oo kala ah Sc, Ti, V, Cr, Mn, Fe, Co, Ni, Cu iyo Zn waxa uu mid waliba laba elektaroon ku leeyahay heertamarta ugu sarraysa ee  $n = 4$ , marka laga reebo Cr iyo Cu oo uu mid waliba hal elektaroon ku leeyahay heertamarta ugu sarraysa ee  $n = 4$  mooyee. Toobanka curiye waxa la isku yidhaa TAXA KOWAAD EE CURIYEYAASHA KALAGUURKA. Dib u dhaccaa uu buuxsanka heertamarta saddexaad dib u dhacaayo

ilaa ay laba elektaroon galaan heertamarta saddexaad oo kale ayaad ku arkaysaa kalka shanaad iyo ka lixaadba. Taas ayaana keenta **TAXA LABAAD IYO KA SADDEXAAD** ee curiyeyasha kalaguurka.


Ratibaadda elektarocnnada curiyeyaasha kalalka hadhay aad ayay u kakan tahay. Hase yeeshi, inta aynaan taa u gelin waxa habboon in aynu jawaab u hello su'aal hore innoo soo martay. Wuxuu aynu kalka saddexaad ku aragnay in ay siddeed curiye ku jiraan. Marka aynu u fiirsanno tirada elektaroonnada ah ee ay heertamarta saddexaad qaadi kartana waxa aynu filaynay in 18 curiye ay gäläan kalka saddexaad. Sidaa awgeed waxa halkaa ka muuqata in loo baahan yahay in wax laga beddelo sawirka heertamaraha ee aanu jaantuskii 2.15 ku soo aragnay.

Waxa aynu hore u soo nidhi tamarta elektaroonnada isku heertamar ku jiraa waa isku mid. Hase yeeshi, arrintaasi dhab ma wada aha. Baadhis aad ah oo lagu sameeyey jeégaamaha ay curiyeyaasha kala duwani bixiyaan, waxa ay tusaysaa in heertamar kastaa ay run ahaantii ka kooban tahay dhown heertamarood oo aad isugu dhow. Haddii aynu taas sii faahfaahinona waxa aynu odhan karraa, heertamar kastaa waxa ay ka kooban tahay hal ama in ka badan oo heertamaraha yaryar ah.

Tirada heertamaraha yaryar ee heertamar ku jiraans, waxa ay la mid tahay qiimaha n ee heertamartaa. Sidaa awgeed heertamarta kowaad ee  $n = 1$ , waxa ay ka kooban tahay hal heertamar oo qudha. Heertamarta labaadna ( $n = 2$ ) waxa ay ka kooban tahay laba heertamarood oo yaryar. Halkaasina waxa ka muuqata in elektaroonnada heertamarta labaad ku jira oo dhammi, aanay isku wada tamar ahayn. Qayb ka mid ah elektaroonnada ayaanay tamartoodu woxoogay ka duwan tahay tamarta saddexaadna ( $n = 3$ ) uga kooban tahay saddex heertamarood oo yaryar, heertamarta afaraadna ( $n = 4$ ) uga koo-

ban tahay afar heertamarood oo yaryar. Tirada heertamaraha yaryar ee ku jira heertamaraha hadhayna sidaas oo kale ayaa loo soo saari karaa. Heertamarta yar ee ugu hoosaysa heertamar kasta waxa la yidhaa s, ta ku xigtana p, ta taa ka sii sarraysanà d, ta xigtana f.


Si aynu u fahmi karro heertamaraha yaryar, bal hadda aynu u fiirsanno elektaroonnada heertamarta saddexaad ee  $n = 3$ . Elektaroonnadaasi waxa ay kala raacayaan saddex kooxood oo kala tamar ah. Heertamarta yar ee s ee heertamarta saddexaad oo loo qoro 3s, woxoogay yar ayay tamarteedu ka hoosaysaa tamarta heertamarta yar ee p ee heertamarta saddexaad oo loo qoro 3p, oo iyana ay tamarteedu ka hoosayso tamarta heertamarta saddexaad oo loo qoro 3d. Sidaa awgeed halkii aynu xarriiqda qudha ku muujin jiray heertamarta saddexaad waa in aynu hadda isticmaalaa saddex xarriiqood oo isku dhow, sida uu jaantuska 2.18 tusayo.



#### JT.2.18 Heertamaraha yaryar ee heertamarta saddexaad

Haddia waa inaynu sawirkii heertamarta ee jaantuskii 2.15 isna dib u sawirnaa. Sida uu u ekaanayana waxa tusaya jaantuska 2.19. Xarriijimaha kaa googo'an dhinacooda midigtaan waxa ku muujisan heertamaraha yaryar ee heertamar kastaa ka kooban tahay.

Haddii aad u fiirsato jaantuska waxyaabaha la yaabka



### JT.2.19 Afarta heertamarood ee ugu horreeya iyo heertamarahooda yaryar

leh ee aad ku arkayso waxa ugu weyn heertamaraha yaryar ee heertamar sare qaarkood oo ka tamar hooseeya heertamaraha yaryar ee heertamarta ka hoosaysa qaarkood. Tusaale ahaan heertamarta yar ee s ee heertamarta afaraad (4s) ayaa ka tamar hoosaysa heertamarta yar ee d ee heertamarta saddexaad (3d).

Sida ay tirada elektaroonnada ah, ee ugu badan, ee geli kara heertamar kastaa ay ugu kooban yihiin  $2n^2$  elektaroon, ayaa tirada elektaroonnada ah ee heertamar yar oo kasta geii karaana ay u kooban yihiin. Heertamarta yar ee s waxa ay qaadi kartaa 2 elektaroon, heertamarta yar ee pna 6 elektaroon,

heertamarta yar d na 10 elektaroon, heertamarta yar ee f na 14 elektaroon. Jaantuska 2.19, tirooyinka salkallada ku jiraa waxa ay tusayaan inta elektaroon ee ugu badan ee ay heertamar kasta iyo heertamar yar oo kastaa ay qaadi karto.

Haddaba, su'aasha isweydiinta lehi waxa ay tahay sidee ayay jiritaanka heertamara yaryari u saameeyaan dhismaha atammada laga dhisayo elektaroonno iyo bu'o? 18ka curiye ee ugu horreeya, tirada elektaroonnada ah ee heertamartii kasta gelayaa waa sidii aynu hore u soo sheegnay. Sida uu jaantuska 2.20 tusayana, curiyaha 18naad oo ah argon, laba elektaroon aaya

CURIYE	TIRO-ATAM RATIBAADDA ELEKTAROONNADA									
	1s	2s	2p	3s	3p	3d	4s	4p	4d	4f
Argon	18	2	2	6	2	6				
Kaaliyam	19	2	2	6	2	6			1	
Kaalsiyam	20	2	2	6	2	6			2	
Iskaandiyam	21	2	2	6	2	6	1	2		
Titaaniyam	22	2	2	6	2	6	2	2		

#### J.T. 2.20 Ratibaadda Elektaroonnada

ku jira heertamarta yar ee 1s, 2 elektaroonno 3s, 6 elektaroonna 2p, 2 elektaroonna 3s, 6 elektaroonna 3p. Heertamarta yar ee ku soo xigta 3p da oo ay tamarteedu aad uga sarrayso ta 3p da awgeed, argon waxa ay u dhaqantaa curiye wahsade ah. Sid-

deed elektaroon ayaanay heertamarteeda ugu sarraysa ku leeda-hay. Sidaa awgeed, waxa aad mooddaa inay degganaan gaar ihi la xidhiidho 8 elektaroon oo heertamarta ugu sarraysa ku jira meel kasta oo ka mid ah tusaha kalgalka curiyeyaasha.

Curiyaha ku xiga argon oo ah kaaliyam oo ah ka 19aad, elektaroonka sagaal iyo tobnaad waxa uu gelaya heertamarta yar ee 4s, inkasta oo aanay heertamarta saddexaad weli buux-samin, waayo, heertamarta 4s tamarteeda ayaa ka hoosaysa ta 3d (eeg jaantuska 2.19). Kaalsiyam lafteeeda oo ah curiyaha 20naad, elektaroon labaad ayaa gelaya heertamarta yar ee 4s. Curiyaha 21naad oo ah iskaandiyam, elektaroonka 21aad waxa uu gelaya heertamarta yar ee ku soo xigta 4s ee la fieli karo oo ah 3d. Siddeeda curiye ee ku xiga iskaandiyam meel yar mooyee sidaas ayuun baanay buuxinta heertamarta yar ee 3d u soconaysaa. Raad weyn oo xiiso gaar ah leh ayay elektaroon-nadaa lagu ridayo heertamarta 3d, iyada oo ay buuxdo heertamarta yar ee 4s, ku leedahay kimistariga curiyeyaasha iskaan-diyam ilaa sinka. Waxa aad arkaysaa in astaamaha kimikaad ee curiyeyaashaasi, aanay wax sidaas ihi iska beddelin inkasta oo uu tiro-atamku kordhaayo Kalka lixaad laftiisa arrintaas oo kale ah oo xataa kaba sii fiiccan ayaad ku arkaysaa. Curiyeyaasha 57 ilaa 71, oo la yidhaahdo laantanaydyada, buuxinta atammadoodu waxa ay ku timaaddaa, elektaroonnada oo lagu ridayo heertamartoodu waxa ay ku timaaddaa, elektaroonnada oo lagu ridayo heertamartooda ay laba heertamarood debadda ka xigaan. Isbeddelkaa ka dhacaaya meel atamka gudihiiisa ihina sidaa uma saameeyo astaamaha kimikaad. Sidaa awgeed curiyeyaasha laantanaydu waxa ay leeyihii astaamo kimikaad oo isku mid ah.

### Summadda Elektaroonikaad

Casharradii hore waxa aynu ku soo qaadnay qaar ka mid ah waxyaalaha la xidhiidha dhismaha elektaroonikaad ee atam-

mada. Haddaba inta aynaan u gelin xidhiidhka ka dhexeeya astaamaha atammada iyo ratibaadda elektaroonnada, wawa habboon in aynu marka hore ka fiirsanno sidii aynu u heli la-hayn hannaan fudud oo loo qori karo sida ay elektaroonnadu u ratiban yihiiin. Sidii aynu horeba u soo sheegnay, tirada elektaroonnada ee heertamarta ugu sarraysa aya sugta astaamaha atammada intooda badan. Tirada elektaroonnada ee heertamarta ugu sarraysa ee atammada wawa lagu muujiyaa summada elektaroonikaad Tusaalooyin muujinaya summadaah elektaroonikaadna waa kuwa soo socda:

Na      Ca:      S:      H      F:      C.

Sida aad kor ku arkaysid, summada elektaroonikaadku, wawa ay ka kooban tahay summadda curiyaha oo ay baro ha-reeraha kaga yaalliiin. Xarfuhu wawa ay u taagan yihiiin bu'-da atamka iyo elektaroonnada ku jira heertamaraha ka hooseeyaa heertamarta ugu sarraysa. Baruhuna wawa ay u taagan yi-hiiin elektaroonnada heertamarta ugu sarraysa ku jira, wawa marmarka qaarkood lagu magacaabaa ELEKTAROONNADA KAAFTO-OMIDDA, waayo iyaka ayay kaaftoonnada cuu xi-dhan yihiiin.

Tusaale ahaan atamka salfartu wawa uu leeyanay du' ay 16 borooton ku jiraan. Laba elektaroon aya heertamartiisa kowaad ( $n = 1$ ) ku jira, siddeedna wawa ay ku jiraan heertamarta labaad ( $n = 2$ ), lixda hadhayna, wawa ay ku jiraan heertamarta saddexaad ( $n = 3$ ). Sumadda elektaroonikkaad ee salfarta, lixda elektaroon ee heertamarta ugu sarraysa oo qu-dha, ayuun bay lixda barood u taagan yihiiin. Atamka intiisa hadhay oo ka kooban bu'da, heertamarta kowaad iyo ta labaad-na wawa u taagan summadda s.

### JIMIDHYADA ATAMKA

Jimidhka atamku waa astaan sida loo sugaa ay aad u

adag tahay, waayo mar haddii uu elektaroonku xoog u socdo way adag tahay sidii loo heli lahaa inta (gacanta atamka) uu bu'da u jiraa. Isla markaasna inta uu elektaroonku u jiro bu'da atamka, waxa kale oo si aad ah u saameeya atammada kale ee ay deriska yihii. Sidaa awgeed-marka aad fiirinayso tusa-yaasha ay ku muujisan yihii qimayaasha gacmaha atammadu, waa in aad ogaataa in qimaha la siiyey gacanta atam kastaa ay tahay ta inta badan laga helo elektaroonka. Siyaabaha lagu helo qimaha gacmaha atamyada hadda u gel meynno, hase yeeshee, waxa aynu u fiirsanaynaa sida ay gacmaha atammadu isu beddelaan marka la eego curiyeyaasha isku kalka ah ama kuwa isku ururka ah. (Qimaha gacanta atamka waxa lagu cabbiraa angistaroomyo, halkii angistaroon ( $A^\circ$ ) waxa uu la mid yahay  $10^{-3}$  sm).

Guud ahaan gacmaha atammadu way kordhaan marka kal kasta bidix ilaa midig loo raaco. Haddaba maxay ku dhac-day? Jaantuska 2.21 waxa muujisan sida ay gacmaha atammada kalka kowaad isu beddelaan. Waxa Kale oo ku muujisan inta borotoon ee bu' kasta ku jira iyo ratibaadda elektaroonnda ee atammadaasi.

	Li	Be	B	C	N	O	F
Gacanta							
atamka A	1.23	0.89	0.80	0.77	0.74	0.74	0.72
Tirada							
borotoonnada	3	4	5	6	7	8	9
Elektaroonnada n = 1	2e-						
Elektaroonnada n = 2	1e-	2e-	3e-	4e-	5e-	6e-	7e-

JT. 2.21

Marka aad kalkan bidix ilaa midig u raacdidi tirada borotoonna-da ee bu'da ku jiraa waxa ay ka tegayaan 3 borotoon ilaa 9 bo-rotoon, hase yeeshi, heertamarta ay elektaroonnadu gelayaan isma beddalayso. Sidaa awgeed xoogga ay bu'du ku soo jiidanayso elektaroonnada way kordhaysaa. Taasina waxa ay la imaanaysaa in gacanta atamku ay sii yaraato marka kalka bidix ilaa midig loo raacaba.

Waxaa kale oo jirta in gacanta atamku ay korodho urur kasta hoos loo raaco. Haddaba maxay taasina ku dhacday? Jaantuuska 2.22 waxa ku muujisan sida ay gacmaha atammada ururka kowaad isu beddelaan. Waxa kale oo ku muujisan inta borotoon ee bu' kasta ku jira iyo ratibaadda elektaroonnada ee atammadaasi.


Curiye	Gacanta atamka	Tirada bo-rotoon-naada	Ratibaaddi Elektaroonnada
Li	1.23	3	2e- 1e-
Na	1.57	11	2e- 8e- 1e-
K	2.03	19	2e- 8e- 8e- 1e-
Rb	2.16	37	2e- 8e- 18e- 8e- 1e-
Cs	2.35	55	2e- 8e- 18e- 18e- 8e- 1e-

Marka aad ururka hoos u raacdaba, mar kastaba waxa kordhaya hal heertamar. Inkasta oo ay tirada borotoonnada ee bu'da ku jiraa kordhayaan, marka ururka hoos loo raacoba o taasina ay yaraynayso gacanta atamka, haddana inta ay taas soo yaraynayso gacanta atamku way ka yar tahay inta ku kor dhaysa gacanta marka ay heertamari kordho. Isla markaasn xoogga ay bu'du ku soo jiidanayso elektaroonnada heertamarta soo korodhay ku jira, waxa yaraynaya elektaroonnada heertama.

raha hore ku jira, oo kaga gudban bu'da, elektaroonnada heer-tamarta soo kordhay ku jira. Sidaas awgeed urur hoos loo raa-coba gacanta atamku way korodhaa.

### Tamarta Ayonoobidda

Marka hal elektaroon laga xayuubiyo atam dhexdhexaad ah oo aan danab lahayn, saxarka soo hadhaa waa mid danab togan leh, waxana looyaqaan AYOON TOGAN. Habkaasna wa-xa la yidhaa AYONIIBIDDA atammada, tusaalaha soo socda ayaana innoo muujinaya;



Summadda elektaroonnada ee bidixda ku qorani, waxa ay tusaysaa atam naatriyam ah oo dhexdhexaad ah. Ayonoobidda kaddibna waxa dhasha ayoon naatriyam ah, waana ka bidixda ku muujisan isaga oo wata calaanadda + oo u tagaan atam naatriyam ah oo hal elektaroon lumiyey. Halkaa elektaroonna waxa tusaysa calaanadda e. Tamarta loo baahan yahay si hal elektaroon looga soo saaro atamkana waxa loo yaqaan TAMARTA AYONOOBIDDA. Siyaabaha loo soo saaro tamarta ayonoobidda hadda u geli meyno, hase yeeshee, waxa aynu u fiirsanaynaa sida ay tamarta ayonoobiddu isu beddesho marka kalalka bidix ilaa midig loo raaco iyo marka ururrada hoos loo raaco.

Marka kalalka tusaha kalgalka curiyeyaasha bidix ilaa midig loo raaco, tamarta ayonoobiddu way korodhaa. Laba sababood ayaana taas ugu wacan. Ta hore waxa ay tahay,

marka kal bidix ilaa midig loo raaco tirada borotoonnada ee bu'da atamku way korodhaa, taasina waxa ay la imanaysaa xoogga ay bu'du ku soo jiidanayso elektaroonnada oo kordha. Sidaa awgeedna tamarta ayonoobidda ee loo baahan yahay in elektaroon laga qaado atamku way kordhaysaa marka kalka bidix ilaa midig loo raaco. Sababta labaad waxa ay tahay, marka kal bidix ilaa midig loo raaco jimidhka atamku wuu yaraadaa, taasina waxa ay la imanaysaa in elektaroonnadu ay ku soo chowaadaan bu'da. Mar haddii ay bu'da iyo elektaroonnadu isku soo dhowaadaanna xoogga ay isku soo jiidanayaan wuu kordhayaa. Sidaa awgeed tamarta ayonoobidda ee loo baahan yahay in elektaroon laga qaado atamku way kordhaysaa marka kalka bidix ilaa midig loo raaco, iyada oo qiimaha ugu sarraysa yeelanaysa neefta wahsatada ah ee kalka midigta ugu xigtaa.

Waxa aynu ognahay in jimidhka atamku uu kordho mar ka ururrada tusaha kalgalka curiyeyaasha hoos loo raacoba. Taasina waxa ay la imanaysaa in xoogga ay isku soo jiidanayaan bu'da iyo elektaroonnada heertamarta ugu sarraysa ku jiraa uu sii yaraado. Sidaa awgeedna tamarta ayonoobidda ee loo baahan yahay in elektaroonnada lagaga saaro atamku way korodhaa marka ururrada hoos loo raacaba. Inkasta oo ay tira da borotoonnada ee bu'da ku jiraa kordheysa marka ururrada hoos loo raacoba, hase yeeshee, xoog-isjiidashada ka dhexeysa borotoonnada iyo elektaroonnada heertamarta ugu sarraysa ku jira ee ay taasi keeneyso, waxa yaraynaya elektaroonnada heertamaraha hoose ku jira oo bu'da kaga gudban elektaroonnada heertamarta ugu sarraysa ku jira.

#### Xiiso-elektaroon :

Waxa jirta in atam mada qaarkood ay xiiso gaar ah u lee yihiin inay elektaroonno qaataan. Xiisahaa gaarka ah oo la yidhaa xiiso-elektaroonna, waa tamarta atam dhexdhexaad ah oo aan danab lahayni uu sii daayo marka uu elektaroon qaato.

Marka uu atam dhexdhexaad ihi elektaroon qaatana waxa soo baxa ayoon taban. Tuusaale ahaan marka atam koloriin ah oo dhexdhexaad ihi uu elektaroon qaato waxa soo baxa ayoon koloraydh ah oo taban.

Cl<sup>+</sup> e<sup>-</sup>

Cl<sup>-</sup>

Haddii aynu u fiirsanno xiisaha ay u leeyihiin atammada ururka toddobaad in ay elektaroonno qaataan, waxa aad arkaysaa inay aad u badan tahay, waayo hal elektaroon oo lagu kordhiyo heertamarta ugu sarraysa ,ee atammada ururkaasi, waxa ay siinaysaa elektaroonnada atammadaasi ratibaad ay 8 elektaroon ku jiraan heertamarta ugu sarraysa. Horeyna waxa aynu u soo aragnay degganaanshaha gaarka ah ee la xidhiidha 8da elektaroon oo ku jira heertamarta ugu sarraysa. Isla mar-kaasna waxa aynu filaynaa in xiisaha ay atammada ururkaasi u leeyihiin inay elektaroonno qaataan, ay yaraato marka ururka hoos loo raacoba. Taasina waxa ugu wacan iyada oo elektaroonka lagu kordhiyo atamku uu gelayo heertamar'aad uga fog bu'da marka ururka hoos loo raacoba. Sidaa awgeedna ay sii yaraanayso xoogga ay bu'du ku soo jiidanayso atamkaa dheeraadka ah. Halkaa waxa ka muuqata in curiyeyaalka ku jira dhinaca midigta ee tusaha kalgalka curiyeyaashu, gaar ahaan-na kuwa ugu sarreeya ururradu, ay xiiso weyn u leeyihiin in ay elektaroonno qaataan.


#### Astaamaha Biraha:

Biruhu waxay leeyihiin dhawr astaamood oo koox ahaan ka dhexeeya. Astaamahaasina waxa ay yihiin :


1. Biruhu dhammaantood waa adkeyaal, marka laga reebo meerkuri oo hoor ah mooyee, giddigoodna way widhwidhaan.
2. Biruhu waxa ay leeyihiin heerkullo kar iyo kuwo dhalaal

oo aad u sarreya. Tusaale ahaan heerkulka dhaalaalka ee xadiidku waa 1530°C.

3. Biraha waa la lawaxi karaa haddii dubbe lagu garaaco, oo waxa laga dhigi karaa sixni ballaadhan oo kale, isla kaasha waa la miiqi karaa oo waxa laga dhigi karaa taar aad u dhuuban.
4. Biraha oo dhammi si fiican ayay kulka iyo danabkaba u gudbiyaan. Tusaale ahaan aluuminamta waxa laga samaystaa weelka wax lagu karsado, maartana taararka danabka gudbiya.
5. Marka ay biruhu la falgalaan ogsoojiinta waxa soo baxa ogsaydhyo beys ah. Haddii ay ogsaydhyadaasi biyaha ku milmaanna waxa soo baxa haydarogsaydhyo. Tusaale ahaan.



6. Biruhu si hawl yar ayay elektaroonno u bixiyaan iyaga oo qaadanaya ratibaadda elektaroonnada ee neefta wahsatada ah ee ugu dhow, marka la eego tusaha kalgalka curiyeyaasha. Tusaale ahaan,




ratibaadda elektaroonnada neefta wahsatada ah ee niyoona.

### Astaamaha Bir-ma-aheyaasha

Bir-ma-aheyaashu waxa ay leeyihiin dhawr astaamoo i oo koox ahaan ka dhexaysa. Astaamahaasi waxa ay yihiin :

- 1) Bir-ma-aheyaasha intooda ugu badani waa hoorar iyo neefo. Inta kalena waa adkeyaal jilicsan oo widhwidhin marka laga reebo dheemanta, (dheemantu waa jinsi ka mid ah jinsiyada kaarboonka).
- 2) Bir-ma-aheyaasha lama lawaxi karo lamana miiqi karo, waanay burburaan haddii la garaaco.
- 3) Bir-ma-aheyaashu, marka laga reebo garaafaytka, kulka iyo danabka toona si fiican uma gudbiyaan.
- 4) Marka ay bir-ma-aheyaashu la falgalaan ogsoojiinta waxa soo baxa ogsaydhyo asiidh ah. Haddii ay ogsaydhyadaasi biyaha ku milmaenna waxa soo baxa asiidho. Tusaale ahaan.



- 5) Bir-ma-aheyaashu si fudud ayay elektaroon u qaataan iyaga oo yeelanaya ratibaadda elektaroonnada ee neefta wahsatada ah ee ugu dhow, marka la eego tusaha kai-galka curiyeyaasha. Tusaale ahaan.



ratibaadda elektaroonnada neefta wahsatada ah ee argon.

H

bi-ro

bir-ma-aheyaal

He

Li	B	C	N	O	F	Ne												
Na	Mg																	
K	Ca	Sc	Ti	V	Zn	Cr	Mn	Fe	Co	Ni	Cu	Ga	Ge	As	Se	Br	Kr	
Rb	Sr	Y	Zr	Nb	Mn	Tc	Ru	Rh	Pd	Ag	Cd	In	Sn	Sb	Te	I	Xe	
Cs	Ba	-	Hf	Ta	W	Re	Os	Ir	Pt	Au	Hg	Tl	Pb	B	Po	At	Kn	
Fr	Ra	-																

JT. 2.23

Xarriiq jarjanjar oo kale ah ayaa curiyeysaasha u kala qaybisa biro iyo bir-ma-aheyaal, (eeg jaantuska 2.23).

Curiyeysaasha xarriiqda ka xiga bidixdu waa biro, kuwa xagga midigta ka xigaana waa bir-ma-aheyaal. Curiyeysaasha xarriiqda ku dhowi waxa ay wax ka leeyihin astaamaha biraha iyo kuwa bir-ma-aheyaashaba, waxana loo yaqaan bir-u-ekeyaal.

### DABARRADA KIMIKAAD

Tusaha kalgalka ee curiyeysaashu si weyn ayuu wax ugn taray sidii la isugu soo ururin lahaa, barashadooduna ay u hawl yaraan lahayd curiyeysaasha ay astaamahoodu isku dhow yihiin. Hase yeeshee, ilaa hadda waxba innoogamuu sheegin sida ay atammadu isugu dabramaan ee ay molikiyuulladu u samaysmaan. Helitaanka neefaha wahsada iyo ogaanshihii la ogaaday in aanay curiyeysaasha kale la falgelin ayaa u horseeday kimistariyaqaannada in ay si hagaagsan wax uga sheegaan sida ay atanimadu isugu dabramaan.

Marka loo eego neefaha kale, neefaha wahsadaa waa hal-

atamleyaal. Curiyeyaasha kalena lama falgalan. Isla mar-kaasna, marka laga reebo heliyam oo laba elektaroon ku leh heertamarteeda ugu sarraysa mooyee, neefaha wahsada ee kale oo dhammi siddeed elektaroon ayay ku leeyihiin heertamarahooda ugu sarreya. Waxa kale oo jirta in ay aad iyo aad u adag tahay in elektaroonno laga qaado ama lagu kordhiyo atam-mada neefahaasi. Ratibaadda elektaroonnada ee heertamara-ha qaar ka mid ah neefahaasi, waxa muujinaya jaantuska 2.24.

Neefta wahsa-tada	Sum- madda	Tiro- atamka	Tirada elektaroonnada ku jira heertamaraha			
			1	2	3	4
Heliyam	He	2	2			
Niyoon	Ne	10	2	8		
Argon	Ar	18	2	8	8	
Kiribton	Kr	36	2	8	18	8




#### J.T. 2.24. Ratibaadda elektaroonnada ee neefaha wahsada.

Si loc sharxo sida ay atammadu isugu dabramaan ee ay molikiyuul-ladu u dhashaan, waxa la isku raacay, in marka ay atammadu isku dabramayaan, ay elektaroonnada ku jira heer-tamarta ugu sarraysa ee atam kastaa ay u ratibmaan sidii ay ku gaadhi lahaayeen ratibaadda elektaroonnada ee neefta wah-satada ah ee ugu dhow; sababtuna ay tahay iyada oo ratibaad-da elektaroonnada ee neefta wahsata ihi ay aad u deggan tahay. Markaa dabadeedna ay atammadu isku dabramaan. Ratibaad-da neefta wahsatada ah laba siyaabood ayay atammdu ku gaa-dhaan: (A) Iyadoo qaar ka mid ah elektaroonnada heertamarata ugu sarraysa ku jira ee hal atam ay u wareegaan atam, kale, oo dabeetana ay ayoonnada .alkaa ka dhashaa isa soo jii-

taan, dabarka isu hayaana uu yahay DABAR AYOON ah. (B) Iyada oo ay atammadu elektaroonno wadaagaan, dabarka isu hayaana uu yahay mid ELEKTAROON-WADAAG AH.

### DABARKA AYOONKA AH


Dabarka ayoonka ihi waxa uu sida caadiga ah dhextiraan atammada ay tamarta ayonoobiddoodu yar tahay iyo kuwa xiisaha badan u leh elektaroonnada. Taasina waxa ay badanaa chadcaa marka biraha iyo bir-ma-aheyaashu isla falgalaan. Tu-saalooinka soo socda ee ku muujisan jaantuska 2.25 ayaana arrintaa innoo muujinaya.



JT. 2.25 Dabarrada ayoonka ah

Haddii aynu u fiirsanno falgalka dhexmara atammada litiyam iyo kuwa foloriin, waxa aynu ognahay in atamka litiyamta ihi uu leeyahay tamar ayonoobid oo aad u yar, taas oo ah tamar badan ayuu sii daayaa marka elektaroon dheeraad ah lagu kordhiyo heertamartiisa ugu sarraysa. Haddaba bal waxa aad ka soo qaaddaa in labadaa atam ay is-hirdiyaan oo ay usla falgalan. Sida uu tusayo jaantuska 2.25, atamka litiyamta ihi waxa uu marka hore heertamartiisa ugu sarraysa ku lee yahay hal elektaroon. ka foloriinta ihina toddoba elektaroon. Is-hirdiga dabadii halka elektaroon ee heertamarta ugu sarraysa ee atamka litiyanita ihi waxa uu u wareegaya heertamarta ugu sarraysa ee atamka foloriinta ah, si labada atam uu mid kastaaba u yeesho ratibaadda elektaroonnada ee neefta wahsatada ah ee ugu dhow.

Marka taasi dhacdana atamka litiyamka ihi waxa uu ncqonayaa ayoon litiyam ah oo danab togan leh, atamka foloriinta ihina waxa uu ncqonayaa ayoon foloraydh ah oo danab taban leh. Labadaa ayoon ee uu danabkoodu kala duwan yahay ayaa dabadeed isa soo jiidanaya, waxana halkaa ka dhalanaya moli-kiyuul litiyam foloraydh ah oo uu dabar ayoon ihi isu hayo.



Marka iskudhisyada ayoonnada ka koobani ay samays-mayaan waxa lagama maarmaan ah in tirada elektaroonnada ah ee uu atam lumiyoo iyo kuwa uu atamka kale qaataa ay isle-ekaadaan. Falgalka kor ku yaallaa ee dhexmara litiyamta iyo foloriinta, hal elektaroon ayuu atamka litiyamta ihi lumiyey, atamka foloriinta ihina hal elektaroon ayuu qaatay. Haddii ay-

nu u fiirsanno waxa aynu arkaynaa in halkaa ay ka muuqato inay tirada elektaroonnada ah ee uu atam lumiyaa ama uu qaataa ay tahay ta atamka gaadhsii kartaa ratibaadda elektaroonnada neefta wahsatada ah ee ugu dhow. Guud ahaanna biraha hal, laba ama saddex elektaroon ku leh heertamartooda ugu sarrayasa elektaroonnadaas ayay lumiyaan marka ay isla falgalaan bir-ma-aheyaasha ay heertamartooda ugu sarrayasa ka dhiman yihii hal, laba, ama saddex elektaroon si ay u gaa-dhaan ratibaadda elektaroonnada ee neefta wahsatada ah ee ugu dhow. Haddii aynu u fiirsanno tusaalah (t), ee jaantus-ka 2.25 waxa aynu ku arkaynaa in marka magniisiyam iyo koloriin ay isla falgalaan uu atamkii wal ee magniisiyamka ahaaba luminayo labada elektaroon ee heertamartiisa ugu sarrayasa ku jira. Sidaa awgeedna loo baahanayo laba atam oo koloriin ah oo kala qaata labadaa elektaroon. Iskudhisca soo baxa oo ah magniisiyam koloraydhna waxa uu ka kooban yahay hal ayoon oo magniisiyam ah iyo laba ayoon oo koloraydh ah, naa-yistiisuna waa  $MgCl_2$ . Hoosgalaha 2 ee koloriinta ku hoos qoran iyo hoosgalaha 1 (oo aan meesha ku qorrayn waayo waa la iska garanayaa) ee magniisiyamka ku hoos qorani, waxa ay kala muujinayaan in marka uu samaysmaya iskudhisca magniisiyam koloraydh, laba atam oo koloriin ah loogu baahan yahay halkii atam ee magniisiyamka ahaaba.

Tusaalooyinka aynu soo shcegnay waxa kale oo ka muuqata in marka iskudhis ayoonno ka samaysani uu samaysmaya ay tirada elektaroonnada ah ee uu lumiyaa ama uu qaataa ay la mid tahay kaaftoonka atamkaas. Sidaa awgeedna iskudhisca litiyam foloraydh, waxa aynu odhan karraa kaaftoonka litiyam waa «hal togane», ka foloriinna waa «hal tobane». Iskudhisca kaalsiyam ogsaydhna, kaaftoonka kaalsiyam waa laba togane ka ogsijiinna waa laba takane. Marka la rabo in la tuso in iskudhisyadaasi ay ka kooban yihii ayoonnona waxa naanaysahooda loo qoraa  $Li^{1+} F^{1-}$  iyo  $Ca^{2+} O^{2-}$ . Haddiise aan loo baahinayn in la tuso in iskudhisyadaasi ay ka kooban yihii

ayoonno, naanaysaha iskudhis yadaa waxa loo qoraa  $\text{LiF}$  iyo  $\text{CaO}$ . Waxa kale oo aad ogaataa in iskudhis yadaa ay dhexdhexaad yihin oo aanay danab yeelan. Taasina waxa ay ku imaanaysaa iyada oo ay wadarta aljabre ee tirada elektaroonnada lumay iyo ta elektaroonnada la qaataay ay isku noqoto ibir. Sidaa awgeed marka bir iyo bir-ma-ahe ay isla falgalan, si ay u soo saaraan iskudhis ayoonno ka samaysan, waa in iskudhis kaasi uu ka koobnaadaa tirada ayoonnda ah ee iskudhiskaa dhexdhexaad ka dhigi karta. Tusaale ahaan haddii aynu rabno inaynu qorno naanaysta iskudhiska ka dhasha marka aluu-minam iyo ogsijiin ay isla falgalan waa khalad inaynu u qorr  $\text{Al}^{3+} \text{O}_2^-$  waayo tirada elektaroonnada ah ee lumay iyo kuwa la qaataay isma le'eka. Sidaa awgeed naanaysta hagaagsani waxa ay noqonaysaa  $\text{Al}_2\text{O}_3$ , ama  $\text{Al}_2\text{O}_5$  (Baabka kan ka dambeeyaa ayaad arrintaa si tifaftiran ugu baran doontaa).

Sidii aynu horeba u soo sheegnay xidhiidh weyn ayaa ka dhexxeeya tirada elektaroonnada ee uu atam fumiyo ama uu qaato oo ah kaaftoonkiisa iyo ratibaadda elektaroonnada ee heertamartiisa ugu sarraysa. Arrintaasina waxa si fiican in-noogu muujinaya jaantuska 2.26 oo ku siinaya kaaftoonnada dhawr curiye.

1 +	2 +	3 +	1 -	2 -	3 -
Li	Be	Al	F	O	N
Na	Mg	Cr	Cl	S	P
K	Ca	Fe	Br		
Rb	Sr		I		
Cu	Cu				

J.T. 2.26 Kaaftoonnada dhowr curiye.

Mai haddii guud ahaan ay curiyeyaasha tusaha kaigalka curiyeyaasha xaggiisa bidixda ku jiraa ay leeyihii tamar ayoobid oo aad u hoosaysa, curiyeyaasha xagga midigta ku jiraa-nay ay xiiso weyn u leeyihii elektaroonnada, waxa aynu filay-naa in dabarro ayocn ihi ay isu hayaan iskudhisyada ka dhasha marka ay falgallo dhixmaraan curiyeyaasha. Sidaas awgeed bi'r kasta oo alkali ihi (ururka I) waxa ay la falgashaa halojiin kasta (ururka VII) waxana samaysa iskudhis ayoonno ka samaysan. Sidaas oo kale ayaa curiyeyaasha ururka II aad ay intooda badani ula falgalan halojiinnada ama curiyeyaasha ururka V aad, iskudhisyo ayoonno ka samaysanna ay uga dha-shaan.

#### Astaamaha iskudhisyada ayoonnda ka samaysan.


Iskudhisyada ayoonnda ka samaysani waxa ay leeyihii dhowr astamood oo koox ahaan ka dhexeeya laguna soo sooci karo. Astaamahaasi waxa ay yihiin :

1) Iskuudhisyada ayoonnda ka samaysani waa wirigleyaal adke ah heerkulka qolka, xoog-isjiidadka ka dhexeeya ayoonnda ay ka kooban yihiinna laxaadkiisu aad ayuu u badan yahay. Haddii la rabo in la dhalaaliyo ama uumi loo ro-gana waa in tamar aad u badan la siiyaa si xoog-isjiidadkaa faraha badan looga hortago. Sidaas awgeed iskudhisyada ayoonnda ka koobani waxa ay leeyihii heerkul dhalaal iyo mid kar oo aad u sarreeya. Tusaale ahaan heerkulka dhalaalka ee NaCl ugu dhowaan waa  $212^{\circ}\text{C}$ , ka CaO ugu dhowaan waa  $2570^{\circ}\text{C}$ .

2) Marka ay dhalaashan yihiin iyo marka ay milan yihiinba, iskudhisyada ayoonnda ka samaysani way gudbiyaan danabka. Taasina daliil ayay u alay inay ayoonno ka kooban yihiin; ayoonndaasina ay kala furmaan marka biyo lagu milo.

3) Falgallada dhixmara iskudhisyada ayoonnda ka sa-

maysani aad ayay u dhaqso badan yihiin, waayo ayoonnadu wawa ay u baahan yihiin oo keliya in ay istaabtaan. Tusaale ahaan marka aad isku darto milan arjantam näytareyt ah iyo mid naatriyam koleraydh ah waxa aad markiiba arkaysaa ruushi arjantam koloraydh ah oo markiiba fadhiistay.



### Dabarka elektaroonwadaagga ah


Inkasta oo ay jiraan iskudhisyo badan oo leh astaamihii aynu ku soo sheegnay iskudhisyada ka samaysan ayoonnada, haddana waxa jira walxo badan oo ay astaamahoodu ka duwan yihiin kuwii aynu ku aragnay iskudhisyada ayoonnada ka samaysan. Walxahaasi heerkulka qolka waa adkeyaal, hoorar ama neefo, waxana ay leeyihiin heerkullo dhalaal iyo kuwo kar oo hooseeva, danabkana ma gudbiyaan. Astaamahaasi waxa ay innoo sheegayaan in aanay atammada walxahaasi isu hay-nin dabarro ayoon ihi. Isla markaasi way adag tahay sidii dabarrada isu haya atammada qaarkood loogu sharxi lahaa dabarro ayoon ah. Tusaale ahaan, ma dhici karto in hal atam oo haydarojiin ihi uu ka qaadi karo hal elektaroon atam kale oo ay si kastaba isugu mid yihiin oo haydarojiin ah.

Si haddaba loo sharxi karo dabarrada noocas ah ee ka duwan kuwa ayoonka ah, waxa loo qaatay in atammadu ay elektaroonno wadaagaan si ay mid kastaba elektaroonnadiisu u gaadhaar ratibaadda elektaroonnada ee nefta wahsatada ah ee ugu dihow. Dabarka noocas ah ee ay atammada isku dabrani elektaroonno wadaagaanna waxa la yidhaa dabar ELEKTAROONWADAAG AH. Inta badan labada atam ee isku dabrani, waxa ay wadaagaan laba elektaroon oo keli ah, oo heertamrahooda ugu sarreeya ku jira, iyada oo uu atam waliba dhiibyo nai elektaroon. Jaantuska 2.27 ayaana innoo muujinaya dhawr tusaale oo kuwaas ka mid ah.

(b) molikiyuulka  
haydarojiin




(t) molikiyuulka  
foloriin




H<sup>-</sup> → Atam waliba siddeed elektaroon  
ayuu heertamartiisa ugu sarraysa  
ku leeyahay.

(j) molikiyuulka  
biyha



Atamka ogsijintu siddeed elektaroon  
ayuu heertamartiisa ugu sarraysa ku leeyahay.

(x) molikiyuulka  
ammoniya



Atamka naytarojiintu siddeed elektaroon ayuu heertamartiisa ugu sarraysa ku leeyahay.

JT. 2.27 Dabarre elektaroon wadaag ah.

Marka ay laba atam oo haydarojiin ihi is-hirdiyaan laba elektaroon ayay wadaagaan sida uu tusayo tusaalaha (b) ee jaantuska 2.29. Taasina waxa u sabab ah iyada oo atam kasta oo haydaroojiin ahba ay heertamartiisa ugu sarraysa qaadi karto hal elektaroon oo kale . (Baabkii hore waxa aynu ku soo aragnay in heertamarta n = 1 ay ugu badnaan geli karaan laba

elektaroon). Isla markaasna labada atam midkoodna ma wada xoogi karo labada elektaroon, waayo awoodda ay elektaroonnda ku soo jiitaan way isll'eg tahay. Naanaysta molikiyuulka haydaro iinta ahna waxa loo qoraa H<sub>2</sub>, si loo tuso in molikiyuulki wal ee fiaydaro iinta ahaaba uu ka kocban yahay lama atam (laba atamle).


Haddii aad u fiirsatc tusaalaha (6) ee jaantuska 2.29, atamki kasta ee foloriinta ihi toddoba elektaroon ayuu heertamartiisa ugu sarraysa k' leeyahay, hal elektaroon oo qudhayaana uga dhiman ratibaadda elektaroonnada ee neefta wahsata ah ec niyoon oo siddeed elektaroon ku leh heertamarteeda ugu sarraysa. Marka ay laba atam oo foloriin ihi is-hirdiyaanna, mid kastaaba waxa uu isku dayayaa inuu elektaroon qaato, haase yeeshiee, midna ka kale kama qaadi karo elektaroon. Sidaa awgeed labada atam ee foloriinta ihi, laba elektaroon ayay wadaagaan, iyaka oc uu midha elektaroon dhiibayo si uu ugu yaraan mid waliba waqtiga qaarkii siddeed elektaroon ku yeesho heertamartiisa ugu sarraysa. Dabarka labadaa atam isu hayaanna waa mid elektaroon-wadaag ah, labada elektaroon ee ay wadaagayaanna, waxa ay u taagan yihiin hal dabar oo qudh, waxana badanaa lagu muujiyaa jiitin u dhexaysa labada atam ee isku dabran, tusaale ahaan F-F.

Mararka qaarkood waxa dhacda in loo baahdo in ay labada atam ee isku dabramiyaa wadaagaan afar elektaroon an lix elektaroon si uu atam kastaaba u yeesho ratibaadda elektaroonnada ee neefta wahsata ah ee ugu dhow. Marka ay labada atam wadaagaan afar elektaroon iyada oo uu mid kastaaba dhiibayo laba elektaroon, dabarka isu haya ee elektaroon-wadaagga ah waxa la yidhaa DABAR LAMAAN, waxana badanaa lagu muujiyaa laba jiitimood. Marka ay labada atam ee isku dabrani lix elektaroon wadaagaan, iyada oo uu atam kastaa dhiibayo saddex elektaroonuna, dabarka isu haya ee elektaroon-wadaagga ah waxa la yidhaa DABAR SADDEXAN, waxana ba-

danaa lagu muujiyaasaudex jiitimood. Tusaalooyinka soosocda ee ku muujisan jaantuska 2.28 ayaana innoo muujinayaababarrada lammaan iyo kuwa saddexanba.



b) Molikiyuulka kaaboон laba-ogsaydh (CO<sub>2</sub>).




Afarta elektaroon  
ee ay wadaagaan  
(dabar lammaan)

Aiaria elektaroon  
ee ay wadaagaan  
(dabar lammaan)

Atam kastaa siddeed  
elektaroon ayuu  
heertaartiisa ugu O=C=O  
sarraysa ku leevahay

t; Naytarojiin (N<sub>2</sub>)




Lixda elektaroon  
ee ay wadaagaan  
(dabar saddexan)

Atam kastaa siddeed  
elektaroon ayuu heer- N=N  
tamartiisa ugu sarraysa  
ku leeyahay

JT. 2.28 dabarrada lammaan iyo kuwa saddexan

Haddii aynu u fiirsano atamyada isla curiyaha ah waxa aynu filaynaa in awocdda ay elektarocnnada ay wadaagaan ku soo jiitaan ay isle'eg tahay. Haddaba, maxaa aad ka filaysaa atamyada kala jaadk ah ee isku dabran. Marka ay haydarojiin koloraydhtu samaysmayso waxa aynu filaynaa in atamya-

da haydarcjiinta ah iyo kuwa koloriinta ihi ay isula falgalaan sidatan :



Fikasta oo ay haydarcjiinta koloriintu ka soo jiidaan og tahay elektaroonnada, haddana ma dhici karto in koloriintu ay wada qaadato labada elektaroon ee ay wadaagaan, waxana dhacaysa inay lajada elektaroon wadaagaan, hal dabarna uu isu hayo. Hase yeeshoo; waxa kale oo jirta in labadaa elektaroon ee ay wadaagaan ay xagga koloriinta u dhow yihiin, waqtiga intiisa badanna elektaroonnada. (Eeg Jaantuska 2.29).

Mar haadii atamyada isku dabrani aanay si isle'eg u waadaagaan elektaroonnada oo ay dhaco in elektaroonnada ay waadaagaan ay u dhow yihiin atamyada midkood, waxa dhacaysa in atamka ay elektaroonnadu u dhow yihiin uu yeesho woxoogaa danab taban ah oo dheeraad ah, ka kalena woxoogaa danab tagan ah oo dheeraad ah. Sidaa awgeed, molikiyuullada aanay elektaroonnada ay atamyadu wadaageen isku in u jirin labada atam, ee ay midkood u dhow yihiin, waxa la yidhaa CIDHIFLEYAAL, gabarrada elektaroonnwadaagga ah ee atamyadaa isu hayana waxa la yidhaa dabarro elektaroonwadaag ah oo CIDHFLEYAA, ah. Molikiyuulka HCl, dabarka elektaroonwadaagga ah ee haydarcjiinta iyo koloriinta u dhexeyaa waa dabar elektaroonwadaag ah oo cidhifle ah, waayo koloriintu way ka elek-

taroonjiddasho badan tahay haydarojiinta. Sidaa awgeedna ci dhifka molokiyuulka ee ay koloriintu ku taallaa wixa uu yeelanaya woxoogaa danab taban ah oo dheeraad ah, ci dhifka molokiyuulka ee ay haydarojiintu ku taallaana wixa uu yeelanaya woxoogaa danab togan ah oo dheeraad ah.

Waa suuragal in la sheegi karo, in uu molokiyuul laba' atamle ihi ci dhifile yahay iyo in kale. Haddii ay labada atam ee isku dabrani ay isku mid yihiin sida kuwa haydarojiinta, dabarka elektaroonwadaagga ah ee isu haya ma ah ci dhifile, sidaa awgeed molokiyuulkuna ma aha ci dhifile. Haddiise ay labada atan ee isku dabrani kala jaad yihiin, dabarka isu hayaana uu elektaroonwadaag yahay, dabarkaasi wixa uu noqonaya ci dhifile, molokiyuulkuna wixa uu noqonaya ci dhifile. Marka faraqa u dhexeeya awoodda ay atammadaasi elektaroonnada ku soo jiitaan ay aad u korodhana danabka dheeraadka ah ee ci dhifile yada molokiyuulka saarani wuu kordhayaa.

Molokiyullada ka kooban laba atam wax ka badan, way adag tahay sidii loo garan lahaa inay ci dhifleyaal yihiin iyo in kale. Wixa dhici karta in molokiyulladaasi aanay ci dhifleyaal anay inkasta oo ay dabarradoodu ci dhifleyaal yihiin. Tusaale ahaan CO<sub>2</sub> waa molokiyuul aan ci dhifile ahayn, inkasta oo dabaraada isu haya cgsijiinnada iyo kaarboonka uu mid kastaa ba ci dhifile yahay. Awoodda ay cgsijiintu ku soo jiidato elektaroonnada, sidaa awgeed dabarka u dhexeeya ogsijiinta iyo kaarboonku waa ci dhifile. Hase yeeshi, mclikiyuulka kaarboon laba - ogsaydhka ah atamyadiisu way isku tocsan yihiin, danabyadi dheeraadka ah ee ci dhifyada saaranina way isla go'ayaan. Sidaa awgeedna molokiyuulka kaarboon laba - ogsaydhku ma aha ci dhifile. Molokiyuulka biyuhu ci dhifile ma yahay?

ELEKTAROONJIIDASHO : Awoodda ay atammadu elektaroonnada ku soo jiitaan, wixa ay ku xidhan tahay tamarta

ayonoobidda ee atamkaasi iyo xiisaha uu u leeyahay atamkaasi inuu elektaroonno qaato. Tusaale ahaan molikiyuulka Br Cl dabarka isu haya atamka boromiinta ah iyo ka koloriinta ihi. waxa uu ka kooban yahay laba elektaroon oo ay wadaagaan, una dhow atamka koloriinta ah. Labada elektaroon ee ay wadaagaan, waqtiga intiisa badan waxa av ku quaataan, una dhow yihiin atamka koloriinta hareerihisa, waayo tamarta loo baahan yahay in elektaroon laga qaado atamka boromiinta ah oo loogu wareejiyo atamka koloriinta ah ayaa ka yar ta loo baahan yahay in elektaroon laga qaado atamka koloriinta ah oo loogu wareejiyo atamka boromiinta ah. Marka la xisaabinayo tamarahaa elektaroon ta lagaga qaadayo atam. ee mid kale loogu wareeji-nayona, waxa lagama maarmaan ah in la ogaado tamarta ayo-noobida iyo xiiso-elektaroonka atam kasta. Hase yeeshee dhawr curiye oo ha ayaa xiiso-elektaroonkooda la og yahay. Sidaa awgeed wav adag tahay in awoodda ay. atanimada kala duwani u leeyihiin inay elektaroonno ku soo jiitaan laga xisaabiyo tamarta ayonoobiddoda iyo xiiso-elektaroonnadooda. Hase yeeshee, dhawr astaamood oo kale oo ay molikiyuulladu leeyihiin, oo ay ka mid tahay tamarta loo baahan yahay in dabarrada atammadocda v dhex eya lagu fajabiyo, ayaa laga xisaabiyey elektaroonjiidashada atammada curiyeasha kala duwan. Foloriin ayav elektaroonjiidashadeeda ugu badan tahay curiyeasha oo dhan. Ncefaha wahsdaa badanaa lama falgalan curiyeasha kale, elektaroonjiidashadoodana lama xisaabin. Guud ahaan elektaroonjiidashada atammadu way korodhaa marka tu-saha kalgalka curiyeasha bidix ilaa midig loo raaco. Taasina waxa u sabab ah iyada oo tirada borootonnada ee bu'da ku jiraa ay kordhayso, heertamaraha ay elektaroonnadu gelayaannaa aanay isbeddelayn. Curiyeasha tusaha kalgalka curiyeasha xagga bidixda ugū xiga, ayay elektaroonjiidashadoodu ugu yar tahay, kuwa xagga midgta ugū xiga, marka laga reebo neefaha wahsada, ayaanay elektaroonjiidashadoodu ugu badan tahay. Waxa iyana jirta in elektaroonjiidashada atammadu ay


yaraato marka urur kasta hoos loo raaco, waayo jimidhka atamka ayaa kordhaya.

Haddii la ogyahay elektraocnjiidashada atammada, laba siyaabood ayay wax innoogu taraysaa. Tan hore wawa ay tahay wawa aad sheegi kartaa in dabar uu ayocn yahay iyo inuu elektarocnwadaag yahay, waayo mar haddii elektaroonjiidashadu ay tahay awoddhaa uu atam ku soo jiito elektaroonnada, wawa aynu filaynaa in dabarka isu haya laba atam oo ay elektaroonjiidashadoodu aad u kala weyn tahay, sida Na iyo Cl, uu noqdo dabar ayoon ah. Laba atam oo ay elektaroonjiidashadoodu isku dhowdaha, sida Cl iyo Br, uu dabarka isu hayaa noqdo dabar elektarocnwadaag ah. Ta labaad ee ay innagu caawinaysaana wawa ay tahay, wawa ay innoo suurtagelinaysaa in aynu sheegi karro in uu dabar cidhifle yahay iyo in kale. **Marka ay elektaroonjiidasnada laba curiye sii kala weynatoba, dabarka isu haya atamnadooda cidhiflenimadiisu way sii kordhaysaa.**


#### **DABARKA ELEKTAROON-DEEQQA AH:**

Inkasta oo ay jiraan dabarro badan oo dhasha marka ay laba atam uu mid waliba elektaroon dhiibo, haddana wawa jira dabarro badan oo elektaroonwadaag ah oo ka dhasha iyada oo labada atam ee isku dabran uu midkood keli ihi dhifib labada elektaroon ee ay wadaagaan. Laba tusaale oo arrintaa innoo muujinaya ayaana ku muujisan jaantuska 2.30.

Tusaalah (b) ayoon haydarojiir ah ayaa dabar elektaroonwadaag ah la samaynaya naytarojiinta molikiyuulka ammooiyada, iyaka oo isticmaalaya labada elektaroon ee naytarojiinta ee aan waxba ku dabranayn. Molikiyuulka ammooniyadu waa dhexdhixaad danabna ma laha, hase yeeshee, marka uu qaato ayoonka haydarojiinta ah waxa soo baxa ayoon ammooniyam ah oo nal togane ah. Tusaalah (t) ayoon haydarojiin ah ayaa dabar elektaroonwadaag ah la sameeya laba ka



ayoon molikiyuul ayoon  
haydaro- ammooniya ammooniyam  
jiin ah ah ah



ayoon biyo ayoon  
haydaro- - - - haydarooni-  
jiin ah

### JT.2.30 Dabarro elektaroondeeq ah

mid ah afarta elektarocn ee aan waxba ku dabranayn ee ogsi-jinta molikiyuulka biyaha, waxana soo baxa ayoon haydaroo-niyam ah oo hal togane ah,  $\text{H}_3\text{O}^+$ . Dabarka elektaroonwadaaggaa ah ee caynkaas u samaysma waxa la yidhaa DABAR ELEKTAROON-DEEQ ah, waayo atam keli ah ayaa labada elektaroon ee dabarka ka qayb qaata ku deeqaya. Hase yeeshie, mar had-dii uu dabarku samaysmo, lagama garan karo dabarrada kale ee elektaroonwadaagga ah. Sidaa awgeed dabarka elektaroon-deeqa ihi waxa keliya ee uu dabarka elektaroonwadaagga ah ee caadiga ah kaga duwan yahay waa sida uu u samaysmo.

Ayoonka haydarooniyamka ah, mar haddii ay weli jiraan laba elektaroon oo aan waxba isku dabrayni, su'aasha iswey-diinta lihi waxa ay tahay, ayoon kale oo haydarojiin ihi ma ku dabrami karaa labadaa elektaroon? Inkasta oo aad mooddo in ay taasi maangal tahay, haddana waxba kama suurtagelayaan,

waayo ayoonka haydaroniyamka ahi waa hal togane, ayoon kasta oo haydarojiin ah ooisna togane ahna way kala didayaan.

Isla sidaas ay u samaysmeen ayoonnada ammooniyamta ah iyo kuwa haydaroniyamta ihi, ayaa waxa jira ayoonno kale oo fara badan oo iyana ka hashay curiyeyaa kala duwan oo ay atamyadooda dabarro elektaroonwadaag ihi isu hayaan, kuwa caanka al na waxa ku tusaya jaantuska 2.31.

Kaaftoonka = 1 — Kaaftoonka = 2 — Kaaftoonka = 3 —

Naanays	Magac	Naanays	Magac	Naanays	Magac
$\text{ClO}_3^-$	Kolareyt	$\text{SO}_3^{2-}$	Salfayt	$\text{PO}_4^{3-}$	Fosfeyt
$\text{ClO}_4^-$	Beerkolloreyt	$\text{SO}_4^{2-}$	Salfeyt		
$\text{CN}^-$	Sayanaydh	$\text{CO}_3^{2-}$	Kaarbo-		
$\text{HCO}_3^-$	Haydarojiin		oneyt		
	Kbooneyt				
$\text{HSO}_4^-$	Haydarojiin				
$\text{NO}_3^-$	Salfeyt				
$\text{NO}_2^-$	Naytreyt				
$\text{OH}^-$	Naytarayt				
	Haydaro-				
	gsaydh				

J.T. 2.31 Dhowr ayoon oo taban.

## Astaamaha Iskudhisyada Elektaroonwadaagga ah

Iskudhisyada elektaroonwadaagga ihi waxa ay leeyihiin dhawr astaamood oo ay kaga duwan yihiin. Iskudhisyada ayoonnada ka sumaysan. Astaamahaasina waxay yihiin:

1. Iskudhisyada elektaroonwadaagga ah intooda ugu badani waa hoorar iyo neefo. Haddii ay adkeyaal yihiinna waa qaar jilicsan oo heerkullo dhalaal iyo kuwo kar oo hooseeyya leh marka loo eego kuwa iskudhisyada ayoonnada ka samaysan.
2. Milannada iskudhisyada elektaroonwadaagga ihi ma gudbiyaan danabka. Tusaale ahaan isbiirtaha iyo bensiintu toona ma gudbiyaan danabka.
3. Falgallada ay ka dhashaan iskudhisyada elektaroonwadaagga ihi ma dhaqso badna.

## LAYLIS :

1. In yrs ka qor daliilka loo hayo in elektaroonku uu wax jira yahay ?
2. Waa maxay daliilka loo hayo in mugga atamka ay intiisa badani madhan tahay ?
3. Sheeg saddexda saxar ee ugu muhiimsan ee uu atamku ka kooban yahay. Wuxuu kale oo aad sheegtaa cufka saxar kasta iyo xaddiga danabka ah ee saaran?
4. Shax sida ay tijaabooyinkii Radarfoord u tuseen in fikraddii J.J. Toomsan ee ku saabsanayd dhismafia atamku ay qalad ahayd?

5. Maxay ku kaal duwan yihiin tirada cufka iyo tiro-atamku? Maxaa qiima ah ee uu leeyahay tiro-atamku?
6. Maxay lagama maarmaan u noqotay in la yidhaa atamku heertamaro ayuu leeyahay?
7. Waa maxay macnaha ereyga iskugod? Sidee ayay isku-godiyadu u sameeyaan culays-atamka curiyaha?
8. Marka tusaha kalgalka curiyeyaasha urur kasta hoos loo raaco, sidee ayuu jimidhka atamku isu beddelaa? Sabab u raadi jawaabta aad bixisid?
9. Marka tusaha kalgalka curiyeyaasha bidix ilaa midig loo raaco jimidhka atamku wuu yaraadaa, maxaa arrintaa u sabab ah?
10. Tamarta ayonoobidda ee koloriin way ka badan tahay ta naatriyam. Maxay ku dhacday arrintaasi?
11. Marka hal elektaroon laga qaado atam dhexdhexaad ah oo aan danab lahayn dabadeed, ma waxa aad filaysaa in tamarta loo baahan yahay in elektaroon kale lagaga qaado atamka, in ay tii elektaroonkii hore lagaga qaadi atamka ka badato, mise in ay ka yaraato? Jawaabta aad bixiso sharax.
12. Maxaa u sabab ah in xiisaha uu atamka boromiintu u leeyahay elektaroonnada ay ka badato ta uu atamka aayodhiintu u leedahay elektaroonnada?
13. Maxay kala yihiin labada siyaabood ee uu ayoon ku dhalan karaa?
14. Sharax macnaha ereyada:

(b) Ayoon (t) Ayoon taban (j) Ayoon togan.

15. Sawir ku muuji dhismaha atamka: (b) Haydarojiin (t) Naatriyam.

16. Muuji ratibaadda elektaroonnada ee curiyeyaasha ay tiro-atamyadoo du kala yihii: (b) 3 (t) 8 (j) 12 (x) 20

17. Marka aad u fiirsato ururrada tusaha kalgalka curiyeyaasha, xaggee baa laga helaa atamyada: (b) Tamarta ayoonoobidda ee ugu sarrayya leh, (t) Jimidhka ugu weyn leh.

18. Adiga oo isticmaalaya tusaha kalgalka curiyeyaasha soo saar tirada (1) Borotoonnada iyo (2) ta niyuutaroonna da ee ku jira (b) iskugod naatriyam ah (Na) oo ay  $A = 24$  (t) iskugod kobalt ah (CO) oo ay  $A = 56$  (j) iskugod yurayniyam ah (U) oo ay  $A = 234$ .

19. Adiga oo aan eegeyn tusaha kalgalka ee curiyeyaasha, wax kasta oo ka mid ah kuwa soo socda ka soo saar curiyeyaasha isku kalka ah :

(b)  $Z = 3, 8, 10, 12, \dots$  (t)  $Z = 14, 16, 18, 20$

(t)  $Z = 17, 20, 34, 37, \dots$  (x)  $Z = 16, 18, 20, 22,$

20. Atam ayaa heertamarta  $n = 1$  waxa ku jira laba elektaroon, heertamarta  $n = 2$  siddeed elektaroon, heertamarta  $n = 3$  sagaal elektaroon, heertamarta  $n = 4$  laba elektaroon. Adiga oo warkaa ka faa'iideysanaya, xaddiyada soo socda kii allaale kii warkan lagala soo dhex bixi karroba sheeq: (b) Tiro-atamka (t) tirada cufka (j) inta elektaroon ee s ah (x) inta elektaroon ee p ah (kh) inta elektaroon ee d ah (d) inta borootoon ee bu'da ku jira (r) inta niyuutarooon ee bu'da ku jira.

21. Adiga oo aan eegeyn tusaha kalgalka ee curiyeyaasha, tax kasta oo ka mid ah kuwa soo socda ka soo saar curiyeyaasha isku ururka ah :
- (b) Z = 3, 19, 12, 7,.. (t) Z = 39, 27, 33, 21,  
(c) Z = 6, 30, 14, 48,.. (x) Z = 9, 35, 28, 53,
22. Adiga oo aan eegeyn tusaha kalgalka ee curiyeyaasha, waxa aad qortaa summadda elektaroonikaad ee curiyeye kasta oo ka mid ah kuwa hoos ku qoran :
- Li (Z = 3); N (Z = 7); Ne (Z = 10);  
Mg ((Z = 12); K (Z = 19); Cl (Z = 17).
23. Adiga oo u eegaaya meelaha ay tusaha kalgalka curiyeyaasha kaga jiraan, curiyeyaasha soo socda kuwee ayaad ka filaysaa inay kulka iyo danabkaba si fiican u gudbiyaan: Na, Br, S, Sr, Cl, F.
24. Adiga oo adeegsanaya tusaha kalgalka ee curiyeyaasha, iskudhisyada haydarogsiga ah ee hoos ku yaalla, kuwee ayaasasiidh ah, kuweese beys ah :
- Ba(OH)<sub>2</sub>; CsOH P(OH)<sub>3</sub>; ClOH; SO(OH)<sub>2</sub>.
25. Litiyam waxa uu sameeyaa iskudhisyada ay ka mid yihiin: Litiyam ogsaydh, Li<sub>2</sub>O, Litiyam haydarogsaydh, LiOH, litiyam saltaydh Li<sub>2</sub>S. Qor magacyada iyo naanaysaha iskudhisyada kuwaa litiyam oo kale ah ee naatriyam iyo kaaliyam ?
26. Curiye alkali ah ayaas ayoonno soo saara. Ayoonnadaasi waxa ay leeyihii ratibaadda elektaroonada ee neefta wahsatada ah ee ka horraysa curiyahaas marka la eego tusaha kalgalka ee curiyeyaasha. Waa maxay waxyaabaha ay ayoonnadaasi kaga duwan yihiin neeftaa wahsatada ah? Waa maxay waxyaabaha ay iskaga midka yihiin ?

27. Qor magacyada afar neefood oo wahsadaayaal ah. Wax-yaabaha ay neefahaasi kaga duwan yihin curiyeyaasha kalena sheeg.
28. Sharax faraqa u dhexeeyaa dabarrada ayoonka ah iyo kuwa elektaroonwadaagga ah?
29. Ku muuji jaantuska faraqa u dhexeeyaa (i) atam koloriin ah (ii) ayoon koloraydh ah iyo (iii) molikiyuul koloriin ah. Dabar nooceé ah ayaa isu haya atamyada molikiyuulka koloriinta.
30. Tiro-atamka magniisiyam Mg, waa 12, ka ogsijiinna, O, waa 8. Adiga oo sawirro adeegsanaya sharax sida uu molikiyuulka magniisiyam ogsaydh u samaysmo iyo dabarka isu haya atammadu nooca uu yahay?
32. Adiga oo adeegsanaya falgalka dhexmara naatriyam iyo kloriin, sharax faraqa u dhexeeyaa biraha iyo bir-ma aheyaasha marka loo eego xagga elektaroonbixinta iyo eiektaroonqaadashada?
33. Sidee ayay isu beddeshaa awoodda elektaroonjiddashada atamyadu marka (b) kalalka tusaha kalgalka curiyeyasha bidix ilaa midig loo raaco iyo (t) marka ururrada loos loo raaco.
34. (b) Maxuu yahay dabarka elektaroonwadaagga ihi ? Maxaanu yahay dabarka elektaroondeeqa ihi? (t) Kad-dib marka ay sainaysmaan labadaa dabar, suurtagal matahay in la kala gartaa.

## BAABKA SADDEXAAD

### OGSIDHAYN IYO YARAYN

Labadatan hab aad ayay kimistariga caan ugu yihiin, waxtar weynna wey leeyihiin. Asalkeedii hore ogsidhaynta waxa loo yiqiin marka walax ogsijiin lagu daro, sidaa darteedna, tusaale ahaan, gubashada magniisayamku waa ogsidhayn.



sida gubashada salfarta iyo ta kaarboonkuba ay u yihiin




Magniisiyamka, kaarboonka iyo salfartaba waxa la yidhaa way ogsidhocbeen, ogsijiinta oo ah walaxda wax ogsidhaynay-sana waxa la yidhaa waa ogsidheeye.

Tusaale kale oo isna cgsidhayn ah waxa laga heli karayaa falgalka dhexmara, marka haydarojiin la dulmariyo kubrik ogsaydh kuulul.



Marka taasi dhaado waxa la yidhaa haydarojiinta ayaa kubrik ogsaydhta biyo u ogsidhaysay, ayaduna ogsijiin korodhsatay. Waxa kale oo aynu oran karraa haydarojiintu ogsijiin ayay kubrik ogsaydhta ka sarraysaa, saaridda ogsijiintuna waa falgalka dhexmaray haydarojiinta iyo kubrik ogsaydhta, hadarcjiintu waa yareeye, kubrik ogsaydhtuna waa ogsidheeye.



Ogsidheeye yareeye

Kubrik ogsaydhita haydarojiinta ayaa yaraysay, haydarojiintana kubrik ogsaydhita ayaa ogsihaysay. Habka ogsidhaynta iyo ka yarayntana waxa aynu u qeexi karraa sida soo socota: Ogsidhayntu waa marka walax ogsijiin lagu daro yarayntu waa marka walax ogsijiin laga saaro.

Marka ikudhis haydarojiin laga saaro waxa loo qaatay in ay u dhigan tahay iyada oo ogsijiin lagu daro, dabeetara qeexiddii hore waxa loo ballaadhiyey: Ogsidhayntu waa marka walax ogsijiin lagu daro, ama haydarojiin laga saaro. Yarayntuna waa marka walax ogsijiin laga saaro ama haydarojiin lagu daro.

Waa in aynu u aragnaa in labada hab ogsidhaynta iyo yarayntu, ay yiniin qaar isbuuxinaya, waayo sida caadiga ah, marka walaxi ay ogsidhowdo, walaxda wax ogsidhaynaysa oo ah ogsidheeyuhu way yaraanaysaa.

Fikrad cusub ayaa ku soo biirtay dhacdada ogsidhaynta siyo yaraynta, markii la ogaaday in falgallo badani ay ayoonno ku xidhan yahiin. Tusaaleahaan, markii hiaydarojiintu ay kubrik ogsaydhta yaraynaysay, waa in aynu ogaaninaa in kubrik ogsaydhtu ay ka kooban tahay ayoonnada  $Cu^{2+}$  iyo  $O^{2-}$ .




Halkaa waxa aynu ka aragnaa in ayoonnadii kubrainta ahaa atammo loo rogay, taasina waxa ay ku imaanaysaa, ayoon nadasoo elektaroonno korodhsanaya.



Ruq ahaantii, kubrik ogsaydhtu ogsijiin may lumin, waxana ka hagaagsan iyada oo aynu nidhaahno, ayoonnada kubramta ihi elektaroonno ayay korodhsadeen, kubrik ogsaydhtuna

way yaraatay. Sidaa awgeed waxa muuqata in yaraantu ay elektaroon korodhsii ku lugleedahay.

Labada elektaroon ee uu ayoohka kubramta ihi qaataay, waa in ay noqdaan kuwo uu molikiyulka haydarojiinta ihi ku deeqiy, marka uu ayocnka ogsijiinta ah la falgalo.




Falgalkan, oo ay elektaroonno lumayaan, yaraynta ayuu ka horjeedaa, sidaa awgeedna, waa in uu noqdaa ogsidhayn. Taasina macnaheedu waxa weeye haydarojiinta ayaa ogsidhowday run ahaantiina waa go'aankii aynu markii hore gaarnay oo kale.

Mar labaad bal hadda aynu u fiirsanno gubashada magnisiyamka oo sida caadiga ah loo qoro



Magnisiyam ogsaydh wuxuu ka samaysan yahay ayoonno, islet egtana waxa loo qori karaa



Magnisiyamku elektaroonno ayuu lumiyey, taas oo ali wuu ogsidhowbay, molikiyulka ogsijiinta ihina, elektaroonno ayuu korodhsaday, taas oo ah way yaraatay. Sidaa awgeed waa in aynu hadda ka tagnaa qeexiddii hore ee ogsidhantya iyo yaraynta oo aynu sida soo socota u qeexnaa:

Falgal kimikaad oo kasta ee uu atam ama ayoon uu hal elektaroor, ama in ka badan lumyo waxa la yidhaa ogsidhayn.


Faigal kimikaad oo kasta ee uu atam ama ayoon uu hal elektaroon ama ir: ka badan uu korodhsadana waxa la yidhaa yarayn.

Sidaas oo kale ayuu ogsidheeyuhuna u hayay walax elektaroonno qaadata, yareeyuhuna walax elektaroonno bixisa ama ku decqda. (Elektaroon qaate iyo elektaroon deeqe):


Waxa lagama maarmaan ah in labada hab, ogsidhaynta iyo yarayntu ay mar wada dhacaan, mar haddii ay elektaroonradu ka tegayaan atam ama urur atamyo ah oo ay u wareegayan atam ama urur atamyo ah oo kale. Sidaa awgeed waxa la qaatay in aynaan ogsidhaynta iyo yaraynta u kala qaadin laba hab, ee aynu mid keli ah iskaga dhigno. Habkaa keliyana waxa loo yaqaan habka ogsidhayn-yaraynta.

Falgallo badan oo aan berigii hore loo arki jirin in ay yihii falgallo ogsidhayn-yarayn ah ayaa hadda run ahaantii le arkay in ay ayoonno ka qayb qaataan. Falgalladaa waxa ka mid ah :


1. Falgalka dhexmara asiidhada iyo biraha firfircooni. Tu saale shaanna waxa aynu u qaadan karraa:



oo aad aikayo in ay la mid tahay




2. Falgalka dhexmara bu'da xadiidda iyo mid salfar ah,



Wejiga ogsidhaynta ee curiye waxa had iyo jeer ka wakii ah tiro summad len oo la yidhaa tirada ogsidhaynta. Tiradaasi waxa ay u taagan tahay inta elektarocn ee uu atam lumiyey ama uu korodhsadaya ma uu atam kale la wadaago. Curiye keliidii ah tirada ogsidhaynta ee atamkiisu waa ilir. Marka uu curiye ama ayocn uu ogsidhowto, tirada ogsidhayntu way korodhaa. Tusaale ahaan,



Tirada ogsidhayntu waxa ay ka tegaysaa O — 2+, falgalka hore, ka labaadna 2 + — 3+. Marka uu curiye ama ayoon uu yaraadana, tirada ogsidhayntu way yaraataa. Tusaale ahaan,



Falgalka hore tirada ogsidhayntu waxa ay ka tegaysaa O — 2-, ka labaadna 1 + — O. Sidaa awgeed, ogsidhaynta iyo yaraynta waxa marmarka qaarkood loo qexi karaa :

Ogsidhayntu waa tirada ogsidhaynta oo korodha, yarayn tuna wa tirada ogsidhaynta oo yaraataa.

Ogsidhavn—tirada ogsidhayntu way

Kerdhaysaa—elektaroonno ayaa lumaya

—6—5—4—3—2—1 0 1 2 3 4 5 6 7 9 10

Yarayn -- tirada ogsidhayntu way

Yaraanaysaa — elektaroonno ayaa kordha


Tirada ogsidhaynta ee atammada ama ayoonnada waxa loo samecyey xecrar lagu garan karo, waana kuwa soo sooda:

1. Tirada ogsidhayta ee atam keligii ah ee curiye waa ibir. Tusaale ahaan. K<sup>+</sup>, Cu<sup>+</sup>, Na<sup>+</sup>, iwm.
2. Tirada ogsidhaynta ee ayoon hal atamle ahi, waxa ay la mid tahay inta elektarocn ee uu lumiyey ama uu korodh-saday ama uu mid kale la wadaago. Tusaale ahaan tirada cgsidhaynta ee Na<sup>+</sup> waa 1<sup>-</sup>, halka ay tirada ogsidhaynta ee S<sup>2-</sup> ay ka tahay 2<sup>-</sup>.
3. Wadarta aljebre ee tirooyinka ogsidhaynta ee atammada ku jira naanays iskudhis waa ibir. Tusaale ahaan isku dhiska Na<sup>+</sup> Cl<sup>-</sup>. tirada ogsidhaynta ee Na<sup>+</sup> waa 1<sup>-</sup>, ta Cl<sup>-</sup> waa 1<sup>-</sup>. Haddii la isu geeyo labada tirona. wadartoona aljebre waa ibir.
4. Tirada ogsidhaynta ee haydarcjiin waa 1<sup>-</sup> marka laga reebo, tirada ogsidhaynta ee haydarogsaydhyada oo ay 1<sup>-</sup> tahay mooyee.
5. Tirada ogsidhaynta ee ogsijiin had iyo jeer waa 2<sup>-</sup> marka laga reebo beer-ogsaydhyada oo ay 1<sup>-</sup> tahay mooyee.
6. Marka ay bir-ma-aheyaalku isu tagaan, tirada ogsidhaynta ee curiyaha elektaroonjiidashada badani, way taban tahay ta curiyaha elektaroonjiidashada yarina way to-gan tahay. Tusaale ahaan iskudhiska SO<sub>4</sub><sup>2-</sup>, tirada ogsidhaynta ee ogsiliijintu waa 2<sup>-</sup>, ta salfartuna waa 4<sup>-</sup>.
7. Tirada ogsidhaynta ee xididshe (avyoon ka kooban laba atam ama in ka badan oo danabaysan) waxa ay la mid tahay wadarta tirooyinka ogsidhaynta ee atammada ku jira ayocnka. Tusaale ahaan, tirada ogsidhaynta ee xididshaha la yidhaa SO<sub>4</sub><sup>2-</sup>, waa 2<sup>-</sup>.

## Siyaabaha loo raadiyo tirada ogsidhaynta

### Tusaale 1 :

Haddii aynu u fiirsanno molikiyuulka  $\text{H}_2\text{SO}_4$ , tirada ogsidhaynta ee O waa 2 ta H waa 1, sidaa awgeed wadarta tirooyinka ogsidhaynta ee afarta ogsijiinna waa  $2 \times 4 = 8$ , wadarta ogsidhaynta ee labada haydarojiinna waa  $1 + 2 = 2+$ . Marka labadaa tiro la isu geeyana ( $8 - + 2 - = 6 -$ ), waxay soo saarayaan tiro taban oo  $6 -$  ah. Si wadarta aljebre ee tirooyinka ogsidhaynta ee atamyada molikiyuulku ay ibir u noqotona, waa in tirada ogsidhaynta ee salfartu ay  $6 +$  noqotaa.



Tirada ogsidhaynta ee atan kasta, waxa lagu dul qoraa summaadda atamka. Halkaas ayaa dabeetana laga xisaabiyyaa tirada cgsidhaynta ee atanika aad rabtid.

Tusaale 2: Xisaabi tirada ogsidhaynta ee  $\text{Mn}^{+7}$  ku jira  $\text{KMnO}_4$ .

FURFURID: K waa curiye ku jira ururka kowaad, sidaa awgeedna, tirada ogsidhayntiisu waa  $1 +$ . Tirada ogsidhaynta ee cgsijiintuna waa  $2 -$ , sidaa darteedna wadarta tirooyinka cgsidhaynta ee afarta ogsijiinna waa  $2 - \times 4 = 8 -$ . Mar haddii  $\text{KMnO}_4$  uu yahay molikiyuul dhedhexaad ah (aan danabaysnayn), tirada ogsidhaynta ee Mn waa  $+ 7$ , mar haddii  $(+ 1) + (\text{Mn}) + (8 -) = \text{O}$ .



Tusaale 3. Xisaabi tirada ogsidhaynta ee  $\text{Cr}^{+6}$  ka ku jira  $\text{Cr}_2\text{O}_7$ .

FURFURID: Tirada ogsidhaynta ee ogsijiin waa  $2 --$ , sidaa

awgeed, wadarta tirooyinka ogsidhaynta ee toddobada ogsijiin waa  $2 - x 7 = 14$ . Tirada ogsidhaynta ee ayoonkuna waa 2-sidaa awgeed waa in wadarta tirooyinka ogsidhaynta ee atam-mada ayoonka ku jira ay iyana noqotaa 2 -. Si taasi u suurtagashona waa in wadarta tirooyinka ogsidhaynta ee labada atam ee koroomiyamka ihi ay noqotaa 12 +. Tirada ogsidhaynta ee atamkii keli ahaa ee koroomiyamka ahaana waxa uu noqcnayaa 's +.

Tus: Marka SO<sub>4</sub> biyo lagii milo falgalka dhacayaa waa



Haddaba, falgalkani ma falgal ogsidhayn-yarayna baa?

Waxa aynu arkaynaa in aan tirada ogsidhaynta ee O iyo ta H midna aanay isbeddelin. Bal hadda ta salfartana aynu xisaabinnu wadarta tirooyinka ogsidhaynta ee saddexda atam ee ogsijiinta ah ee ku jira SC<sub>2</sub> waa  $2 - x 3 = 6$  -. Mar haddii SO<sub>4</sub> uu yahay molikiyuulna waa in wadarta tirooyinka ogsidhaynta ee atammada ku jiraa ay isku noqotaa ibir. Sidaa awgeed tirada ogsidhaynta ee salfarta ku jirta SO<sub>4</sub>, waxa ay noqonaysaa 6 +. Isla sidaas oo kale aaya haddii aynu xisaabinnu tirada ogsidhaynta ee salfarta ku jirta HSO<sub>4</sub> ay u noqonaysaa 6 +, waayo tirada ogsidhaynta ee ayoonku waa 1 -, wadarta tirooyinka ogsidhaynta ee atamyada ayoonka ku jiraana waa inay noqotaa 1 -. Si taasi loo helona waa in ay salfartu noqotaa 6 +, waayo tirada ogsidhaynta ee haydarojiintu waa 1 +, wadarta tirooyinka ogsidhaynta ee afarta ogsijiinna waa  $2 - x 4 = 8$  -. Sidaa awgeed falgalkan wax ogsidhoobay iyo wax yaraaday toona ma jiraan.

Tusaale 5: Iskudhiska la yidhaa C<sub>2</sub>H<sub>4</sub> aaya waxa loo rogay C<sub>2</sub>H<sub>2</sub>O. Adiga oo isticmaalaya tirocyinka ogsidhaynta, sug in falgalkan yahay mid ogsidhayn-yarayn ah iyo in kale.

**FURFURID :** Labada iskudhisba tirada ogsidhaynta ee C waa 2 —. Sidaa awgeed ogsidhayn iyo yarayni toona ma dhicin Haddii aan sidatan loo hubsaninna waxa loo qaadan karaa, mar haddii ogsijiin lagu daray iskudhiska, in ogsidhayni dhacday. Taasina waa qalad, sida ay tirada ogsidhayntu inna tusayso.

\*  
Miisaamidda isle'eg, ada ogsidhayn.yaraynta ah.

Miisaamidda isle'egyada ogsidhayn-yaraynta ihi waxa ay ku fadhidaa oo sal u ah, xeerka waariidda elektaroonnada. Taa-si oo ah inta elektaroon ee uu yareeyuhu lumiyey waa in ay la mid noqotaa inta elektaroon ee uu ogsidheeyuhu qaatay. Dariiqo ka mid ah kuwa isle'egyada lagu miisaamaana waa ta ka faa'iidsata isbeddelka tirooyinka ogsidhaynta, tallaaboo yinka soo socda ayaana loo raacaan.

1. Qor naanaysaha falgaleyaaalka iyo kuwa maxsuullada.
2. Curiye walba ku dul qor tirada ogsidhayntiisa, dabeela na sug waxa ogsidhowbay iyo waxa yaraaday.
3. Qor isle'egta elektaroonikaad ee ogsidhaynta iyo ta yaraynta.
4. Hagaaji weheliyeyaasha labada isle'eg, ee elektaroonikaad, si ay tirada elektaroonnada lumay iyo kuwa la korodhsaday ay isu le'ekaadaan.
5. Weheliyeyaalka geli isle'egta aan miisaanayn ee tallaabada kowaad.
6. Miisaan isle'egta inteeda kalena, adiga oo gelinaya weheliyeyaasha ku habboon, si aad u daryeeshid xeerka waariidda atammada (cufka).

Tallaabooyinka aynu kor ku soo sheegnay waxa si fiican innoogu muujinaya tusaalooyinka hoos ku qoran.

Tusaale: 1 Neefta la yidhaa haydarojiin salfaydh wa-xa ay ku gubataa hawada, waxana halkaa ka dhasha neefta la yidhaa salfar laba-ogsaydh iyo biyo. Qor isle'egta miisaa man oo u taagan falgalka.

1. Warkan ayaa innoo suurtagelinaya in aynu qorro naa naysaha falgaleyasha iyo kuwa maxsuullada.




- 2 Curiye walba ku dul qor tirada ogsidhayntiisa. Isbeddelka tirooyinka ogsidhaynta ayaana innoo suurtageeli naya in aynu ogaanno in salfartu ay ogsidhowday iyada oo ka tegeysa  $2+$  ilaa  $4+$ , ogsijiintuna ay yaraatay iyada oo ka tegeysa O ilaa  $2-$ . Tirada ogsidhaynta ee haydarojiintu isma beddelayso.



3. Beddelaadda wejiga ogsidhaynta ee salfartu waxa ay u baahan tahay in lix elektaroon lumaan,

$$(2-) - (6-) = 4 +$$


Beddelaadda wejiga ogsidhaynta ee ogsijiintuna waxa ay u baahan tahay in laba elektaroon kordhaan,  $(\text{O}) + (2-) = 2-$  Isle'egyada elektaroonikaad ee labadaa arrimoodna waxa ay noqonayaan :



Ogsijiinta hawada ku jirtaa waa laba atamle, sidaa aw-geed, waa in 4 elektaroon kordhaan marka molikiyuul cisisijin ah oo hawada ku jiraa uu yaraado.



4. Hadda aynu hagaa inno wehe iyeyasha labada isle'eg ee elektaroonikad, si aynu isu le'ekaysiinno tirada elektaa roonnada lumay marka salfartu ay ogsidhowdo iyo tirada elektaa roonnada kordhay marka ogsijiintu ay yaraato. Tirada elektaa roonnada ah ee ugu yar ee ka dhaxayn kartaa labada isle'eg ee elektaroonikaad waa 12. Taasina waxa aynu ku heli karraa iyada oo aynu isle'egta elektaa roonikaad ee ogsidhaynta 2 ku dhufanno, ka yarayntana aynu 3 ku dhufanno.



5. Sidaa awgeed weheliyayaasha  $H_2S$  iyo  $SO_2$  waa 2, ka  $O_2$ .  
 3. U fiirso  $60^{2-}$  ayoon waxa loo kala qaybiyaa maxsuulada kala ah  $SO_2$  iyo  $H_2O$ .
6. Haddeer waxa aynu diyaar u nahay in aynu hagaajinno weheliyayaasha isle'egta inteeda kale, si aynu u daryee ilo xeerka waarridda ee atammada, hase yeeshhee, falgalkan taas looma baahna, waayo isle'egtu way iska misaaman tahay




### TUSAALE 2:

Falgalka dhixmara manganiis laba-ogsaydh iyo haydarkkclorik asiidh waxa ka dhasha biyo, manganiis koloraydh iyo neefta la yidhaa kolo:iin. Qor isle'egta miisaaman ee taagnaan karta falgalkan. Qor naanaysaha oo dhan



Tiro ogsidhayn aynu curiye walba siinay, waxana aynu aragnaa in  $Mn^{4+}$  uu u yaraaday  $Mn^{2+}$ ;  $Cl^-$  ka qaarkiina uu

u cg sidhoclay Cl<sup>-</sup>. Haydarojiinta iyo ogsijiintuna ismay bedde-lin. Isle'egyada elektaroonikaad ee isbeddelladaa innoo muuji-nayana waa.



Tirada elektaroonnada ah ee lumay iyo kuwa kordhayna way isle'eg yihiin. sidaa awggeed, weheliyeyaasha ayaynu gelinava-naa isle'egta aan miisaanayn ee aynu markii ugu horreysay qorray.



Hadda waa in aynu miisaannaas isle'egta oo dhan. Waxa aynu arkaynaa in loo baahan yahay 2 molikiyuul oo kale oo HCl ah, si ay u soo saaraan labada Cl<sup>-</sup> ayoon ee MnCl<sub>2</sub>ka. Taasina waxa ay la inaanaysaa in loo baahdo 2 molikiyuul oo biyo ah oo iyakuna daryeela labada ogsijiin ee MnO<sub>2</sub>ka. Isle'egta miisaaman ee ugu dambaysaana waxa ay noqonaysaa.



Labada tusaale ee aynu kor ku soo falanqaynay, si hawl yar ayaynu u miisaami kari lahayn falgallada, haddii aynu isticmaallo dariiqadii aynu buuggii labaad ku soo barannay ee ahayd in weheliyeyalka ku habboen falgalka la iska maleeyo. Hase yeeshée, waxa aynu ku baranaynay labadatan tusaale sida loo miisaamo isle'egyada talgallada ogsidhayn-yaraynta ah ee aan si dhib yar loogu miisaami karin dariiqadhi lagu isticmaalay buuggii labaad.


Labada tusaale ee soo socda waa qaar intii hore ka yar hawl badan, hase yeeshée, si fudud ayaa loo miisaami karaa haddii aynu si fiican uga faa'iidaysanno tirooyinka ogsidhaynta iyo sida ay isu beddelayaan.

Falgaika ogsidhayn-yaraynta an ee dhixmara haydarsko. Lekrik asiidk iyo kaaliyam beermaanganeyt waxa ka dhasha maxsuullada soo socda biyo, kaaliyam koloraydh, manganiis koloraydh iyo koloriin. Qor isle'egta miisaaman ee falgalkaa muujinaysa.


### Furfurid :

#### Tusaale 3:


Marka ugu horreysa waa in aynu qoraa isle'egta aan miisaannayn ee muujinaysa waxyaalahi isla falgalay iyo waxa ka soc baxay, innaga oo taas ku tusayna naanaysaha thabta ah ee falgalyaalk iyo kuwa maxsuullada, isla markaasna curiye walba ku dul qorayna tirada ogsidhaytiisa.




Waxa aynu arkaynaa in ayoonnada koloraydhka ah ay qaarkood u cgsidhoobayaan atammo koloriin ah, ayoonka mangaiinska ah ee beermanganeytkuna uu u yaraanayo  $\text{Mn}^{2+}$ . Labadaa arrimoodna isle'egyada elektaroonikaad ee soo socda aaya kuu muujinaya



Tirada elektaroonnada lumay iyo ta kuwa kordhay waa in ay isku mid noqotaa. Tiradaasina waa 10. Sidaa awgeed isle'egta elektaroonikaad ee hore waxa lagu dhufanayaa 5, ta dambana waxa lagu dhufanayaa 2, waxana soo baxaya



Hadda waa in weheliyeyaaalka isle'egyadaan loo raacaa isle'egta aan miisaanayn ee aynu markii ugu horraysay qorray. Taasi oo noqonaysaa



Haddii aynu u sii fiirsanno, waxa aynu arkaynaa in me likiyuul oo KMnO<sub>4</sub> thi ay soo saarayaan 2KCl iyo 8H<sub>2</sub>O ah. Sidaa awgeed, 2KCl iyo 2MnCl<sub>2</sub> waxa ay u baahanayaan 6 mo likiyuul oo dheeraad ah oo HCl ah. Isle'egta miisaamanina waxa ay noqonaysaa




#### Tusaale 4 :


Miisaan isle'egta hoos ku taalla.




**FURFURID :** Marka ugu horreysa curiye walba ku duu qor tirada ogsidhayntiisa



Waxa aynu arkaynaa in salfartu ay ogsidhowday. koromiyam kuna uu yaraaday



hase yeeshi, laba atam oo koromiyam ah ayaa yaraaday, sidaa awgeed, isle'egyada elektaroonikaad waxa ay noqonayaan




Tirada elektaroonnada iumay iyo kuwa korribay waa inay isku mid noqtaan. Tirada ugu yar ee ay labada 1-le'eg isdhyaatsan karaanna waa 6 elektaroon. Siida awgeed, waa in aynu 3 ku dhufannaa isle'egta hore, ta dambena 1,



Hadida waa in aynu weheliyeyaashaa isle'egyadan u rarraa, isle'gta aan miisaannayn ee la inna siiyey,

$2\text{H}_2\text{S} + \text{K}_2\text{Cr}_2\text{O}_7 + \text{HCl} \longrightarrow \text{S} + 2\text{CrCl}_2 + \text{KCl} + \text{H}_2\text{O}$

isle'egta inteeda hadhay waa in aynu haddaa miisaannaa. Wa xaa aynu arkaynaa in laba atam oo kaaliyam ihi ay ku jiraan valgaleyaalka, sidaa awgeedna si aynu u daryeello xeerka waanridda atamyada, waa in laba atam oo kaaliyam laga helaa maxsuullada. Taasi macnaheedu waxa weeye waa in ay soc baxaan 2 molikiyuul oo KCl ihi. Haddii ay taasi dhacdana, wadarta tirada atamyada koloriinta ah ee maxsuullada ku jiraa waxa ay ncqonayaan 8. Siddeeddaa atamna waxa aynu heli karraa haddii aynu isticmaallo 8 molikiyuul oo HCl ah. Haddii ay taasi dhacdona waxa ay imaanaysaa in 14 atam oo haydarojiina la isticmaalo. Si taa loo daryeelona waa in ay soo baxaan 7 molikiyuul oo H<sub>2</sub>O ihi. Isle'egtuna dabeed way miisaamaysaa.



#### LAYLI :

1. Sheeq qeexiida guud ee ereyada, ogsidhayn iyo yaryn.
2. Walaxdii ogsidhowda, maxaa loc yidhaa waa yareeye.
3. Falgallada soo socda, ku qor isle'egyo ayoonno ku tibaan xan.


b) Gubashada magniisiyamka

i) Balanibon hal ogsavdhay haydarojiin yaraysay.

j) Radka ay haydarokolorik asiidh badhax ihi ku lee dahay sinka.

x) Falgalka dhexmara bu' xadiid ah iyo mid salfar ah

4. Waa ka sheeg falgallada soo sooda adiga oo ogsidhayn iyaa arayn u eegaya.



5. Adiga oo u qaadanaya in isutag kimikaad uu dhexma ray curiyeyaalka soo soeda, sheeg curiyaha tirada ogsidhaytiisu ay tiro taban tahay.

b) Haydarojiin — naatriyam (t) koloriin — foloriin

x) Koloriin — ogsijiin (x) haydarojiin — litiyam (kh) boromiin — haydarojiin.

5. Waa immisa tirada ogsidhaynta ee curiye waliba isku-dhisyada soo socda :

b)  $\text{Mn}_2$  (t)  $\text{H}_3\text{PO}_4$  (j)  $\text{HNO}_3$  (x)  $\text{P}_2\text{O}_{10}$  (kh)  $\text{NaOH}$





d)  $\text{CuSO}_4$  (r)  $\text{CaClO}$  (s)  $\text{Na}_2\text{HPO}_4$  (sh)  $\text{Fe(OH)}$  (k)  $\text{H}_2\text{O}_2$

l)  $\text{H}_2\text{SO}_4$  (n)  $\text{HClO}_4$

7. Mar allaaliyaale marka ay ogsidhayni dhacdo maxay yaraynina u dhacdaa?

8. Sidee ayay tirada ogsidhaynta ee walax elektaroonno qaadataa isu beddeshaa?

9. Falgallada soo socda kuwee ayaa ogsidhayn-yarayn ah





10. Falgal kasta oo ogsidhayn-yarayn ah ee ku jira su'aasha 9aad sheeg: (b) walaxda ogsidhowday, (t) walaxda yaraatay, (j) ogsidheeyaha iyo (x) yareeyaha.

11. Falgalka ogsidhayn-yaraynta ah ee dhexmara kubram iyo naytarik asiidh rib ah, waxa ka dhashay maxsuullada soc sccda: kubrik naytreyt, biyo iyo naytarojiin laba ogsaydh. Qor isle'egta miisaaman ee falgalkaa muujil-naysa.

12. Falgalka dhexmara kubram iyo naytarik asiidh badhax ah waxa ka soo baxa maxsuullada soo socda: kubrik naytreyt, biyo iyo naytarojiin hal-ogsaydh. Qor isle'egta miisaaman ee falgalkaa muujinaysa.

13. Miisaan isle'egyada hoos ku qoran.




## BAABKA AFRAAD

### HORSIIMADA TAXA FIRFIRCOONAANTA

Markii aynu dhiganaynay raadadka asiidhadu ay biraha ku leeyihiin, waxa aynu aragnay in aanay maartu haydarojiin soc saarin. Haddii aynu aad u sii guda gallo, waxa aynu ar-kaynaa in aanay maarta oc keliya ahayn waxa sidaa yeeila. Dhawr curiye oo kale, sida lacagta iyo dahabka, ayaan laftoodu haydarojiinta ka saarin asiidhada.

Marka ay haydarojiin ka soo baxayso asiidhada, ayoonno haydarojiina ayaa elektaroonno qaata, sida isle'egta soo socota tusayso.



Elektaroonnadaasi waxay ka yimaadaan biraha ay asil dhu la falgalayso, sida sink,



Haddaba, dhalashada haydarojiintu waxa ay ku xidhan tahay awoodda ay u leedahay birtaasi inay elektaroonno bixiso, mana jirto wax sabab ah oo loogu qaadan karo inay biraha oc dhammi isku hawl yari elektaroonnada u bixiyaan. Atamka naatriyamka, elektaroonka heertamarta ugu saraysa ku ji. raa, aad buu uga fog yahay bu'da, marka elektaroonnada kale loo eego. Sidaa awgeedna elektaroonkaas ayaa luma, ayoonka naatriyamka ah ee dhashaanu wuu ka yar yahay atamka naat. riymka.




Taas macnaheedu wuxuu yahay ayoonka naatriyamka ayaa ka deggan atamka naatriyamka, waanay hawl yar tahay inuu ayoon naatriyam ihi dhasho, laakiin way ku adag tahav ayoonka inuu elektaroon qaato si uu atam uga dhasho.

Atamyada waaweyn, sida dahabka oo kale, arrintu si-daa way ka duwan tahay. Faraqa u dhexeeya gacanta atam-ka iyo ta ayoonkuna wax sidaa u sii ridan ma aha. Guud ahaan atamyadooda ayaa ayoonnada ka deggan. Awoodda uu dahabku u leeyahay inuu elektaroonno lumiyo aad bay u yar tahay, sidaa awgeedna lama falgalo asiidhada.

Halidii aynu u fiirsanno arrimaha aynu soo sheegnay, waxa cad in ay suuragal tahay in la taxo biraha. Taxaas oo ku xidhan hawl yarida ay ayoonno uga dhashaan biraha, una kala firfircoon yihiin. Horsiimadaa la helay, waxa la yidhaa taxa firfircoonaanta ee biraha waana sida soo socota:


B i r	Summad
Kaaliyam	K birta ugu elektaroon.
Kaalsiyam	Ca bixin og.
Naatriyam	Na
Magniisiyam	Mg
Aluuminam	Al
Sink	Zn
Feeram	Fe
Balambam	Pb
Haydarojiin	H
Kubram	Cu
Meerkuri	Hg
Arajantam	Ag birta ugu elektaroon.
Ooram	Au bixin yar.

Inkstoo aanay bir ahayn, haddana haydarojiintu taxa way ku jirtaa. Taas waxa loo yeelay si loo tuso halka ay taxa ka geli karto, iyo iyada oo ay ayoonnadeedu tabane yihiin, sida tiraha. Biraha haydarojiinta ka sarreeyaa, haydarojiin bay asiichada ka saaraan, kuwa ka hocseeyaase kama saaraan. Biraha taxa xagga sare kaga jira, sida kaaliyamka iyo naatriyamka, s' hawl yar bay elektaroonno u bixiyaan, aad baanay u firfircoon yihiin, kuwa xagga hoose ku yaallaana, sida maarta iyo lacagta, hawl yari elektaroonno uma bixiyaan, aadna uma firfircoona. Kaaliyamka, naatriyamka iyo kaalsiyamku xataa biyaha qabow ayay haydarojiin ka saaraan.



Waxa kale oo aad arkaysaa in biraha taxa xagga sare kaga jiraa ay biraha xagga hoose ku jira cusbooyinkooda ka saaraan meeshoodana galaan.

Xadiid



JT. 4.1 (b)

Tijaabo 4.1 Barabixinta ay biri, bir kale barabixiso.

b) Waslad xadiida miridhka ka nadiifi. Milan kubram salfeyt ah ku shub bakeeri  $250 \text{ sm}^3$  ah, dabadeedna birta ku qotomi milanka  $5 - 10 \text{ daqiiqo}$  [eeg jaantuska 4.1 (b)]. Maxaa ka soo baxay?

t) Taar maar ah oo badh warwareegsan yahay soo qaado. (Warwareegyada waxa aad ku heli kartaa adoo taarka


2  
dhuun ku dhuudhuuba). Laba saddexaad (-) bakeeri  
3

$250 \text{ sm}^3$  ah, milan arjantam naytareyt ah ku shub. (O. goow haragga iyo dharkaba wuu madoobeeyaa milanka arjantam naytareytku). Taarka inta warwareegsan ku rid milanka [eeg jaantuska 4.1 (t)].

U fiirso waxa ka soo baxa.

Tijaabada «b» iyo «t» waxa ay inna tusayaan in xadiidkii


uu barabixiyey maartii, maartiina ay barabixisay lacagtii. Taa-sina waxay tusaysaa in bir waliba ta ka hoosaysa ay barabixin karta meesheedana ay geli karto.



Taxa biraha oo kale ayaa loo samayn karaa bir-ma-ahe. yaalka laftooda.

Koloriinka  
barabixinaysa  
boromiinta

Boromiintaa  
barabixinaysa  
Aayodhiinto




#### Tijaabo 4.2

- b) Diyaarin biyo koloriin leh. 3—5 gm oo kaaliyam koloreyt ah dhalo ku rid. 3 — 5 $\text{sm}^3$  oo haydarokolorik asiidh ahna ku shub. 5 — 10 daqiiqo furka ku adkee, daba-deedna miyir biyo ugu shub, si hagaagsanna u rux. Biyo koloriin leh ayaa soo baxaya.

- t)  $5 \text{ sm}^3$  oo milan naatryam boromaydh ah dhuun-hub-sasho ku shub.  $25 \text{ sm}^3$  oo biyo koloriin lehna ku dar. Aad u rux,  $25 \text{ sm}^3$  oo kaarboon afar-koloraydh ( $\text{CCl}_4$ ) ahna miyir ugu dar, dabadeedna iskujirka rux. Koloriinta ayaa boromiinta ka saaraysa milanka. Ku celi tijaabada adigoo isticmaalaya kaaliyam aayodhaydh.
- j)  $2 \text{ sm}^3$  oo biyo boromiin leh ah ku dar  $5 \text{ sm}^3$  oo milan kaaliyam aayodhaydh ah. Si hagaagsan u rux.  $1 \text{ sm}^3$  oo kaarboon afar-koloraydh ( $\text{CCl}_4$ ) ahna ku dar; dabadeedna iskujirka miyir u rux. Boromiinta ayaa aayodhiinta ka sraaaysa milanka.

Tijaabadani waxay inna tusaysaa in koloriintu, boromiinta iyo aayodhiintaba barabixin karto, boromiintuna aayodhiinta barabixin karto.



Koloriintu biyaha laftooda, haydarojiin koloraydh bay u ogsidhaysaa, iyada oo ogsijiinta saaraysa. Boromiinta laf-teeda ayaa sidaa yeesha, laakiin aayodhiintu ma samayso.

Innaga oo ka faa'iiday sanayna sida ay u kala firfircoona yihii ayaynu tax u samyn karraa bir-ma-aheyaasha. Taxaas oo ku xidhan sida ay ayoonto tabani uga kala dhalan ogyihii. Taasi oo ka imanaysa elektaroon-jiidashada atamyadooda. Taxa firfircoonaanta ee bir-ma-aheyaasha iyo ka birahana waynu isku dari karraa si aynu u hello tax firfircoonaan oo dhan:

## ELEKTAROON BIXIYE

Marka taxa aad  
hoos u raacdid.  
firfircoonaanta  
biruhu way yaraa  
naysaa.

Firfircoonaanta  
bir ma-aheyaashu  
way yaraataa had-  
dii taxa kor loo  
raaco.

Kaaliyam	
Kaalsiyam	
Naatriyam	bir
Magniisiyam	
Aluuminam	
Sink	
Feeram	
Balambam	
Haydarojiin	
Kubram	
Arjantam	
Kaarboon	
Naytarojiin	
Salfar	bir.ma.ahe
Ogsijiin	
Koloriin	
Foloriin	

### Elektaroon jiite

Si loogu shaqaysan karo, taxa bir.ma.aheyaasha waxa  
aynu ku dari karnaa ayoonnada taban. Marka aynu sidaa  
yeellona taxa firfircoonaanta xaggiisa hoose waxa ay noqo-  
naysaa:

Haydarojiin	
Haydarogsayl	OH <sup>-</sup>
Aayodhaydh	I <sup>-</sup>
Boromaydh	Br <sup>-</sup>
Koloraydh	Cl <sup>-</sup>
Naytareyt	NO <sub>3</sub> <sup>-</sup>
Salfeyt	SO <sub>4</sub> <sup>2-</sup>
Foloraydh	F <sup>-</sup>

Waxa aynu soo aragnay in tamar badan loo baahan yahay si ayoonnada kaaliyamka ama kuwa naatriyamka atammo loogu beddelo, laakiin tamar taa ka yar loo baahan yahay si ayoonnada kubramta loogu beddelo atammo. Sidaas oo kale ayaa tamar yar loo baahan yahay si uu ayoonka haydarogsaylka ihi elektaroon u lumiyoo, laakiin tamar taa ka badan loo baahan yahay haddii ayoonnada ka hooseeyaa ay elektaroonno luminayaan. Elektaroon.lumini waa ogsidhayn, waanay adag tahay in ayoonka foloraydhka ah, oo taxa firfircoonaanta ugu hocseeye, loo ogsidheeyo atam foloriin ah, laakiin way hawl yar tahay in ayoonka koloraydhka, boromaydhka ama aayodhaydhka loo ogsidheeyo atamyadooda marka loo eego foloriinta.

#### **WAXTARKA TAXA FIRFIRCOONAANTA:**

Taxa firfircoonaantu wax weyn ayuu ku taraa Barasha da curiyeyaalka iyo iskudhisydoodaba. Hase yeeshie, lagama yaabo in uu boqolkiiba boqol wax kaaga sheego astaamaha curiyeyaasha iyo iskudhisydoodaba, inkasta oo uu kugu caawinayo sidii aad u fahmi lahayd una dersi lahayd waxyaalaha tijaabooyinka ka soo baxa. Waxtarka taxa firfircoonaantana saddex qaybood ayaynu u kala saari karraa:

1. Pirba kirta ay ka sarrayso taxa, ayay ka barabixin kartaa cusbadeeda, meesheedana ay qaadan kartaa; taasiin waxa muujinaya tijaabada 4.1.
2. Biraha ay awooddooda elektaroon.bixintu ka badan tahay ta haydarojiinta, haydarojiin bay ka saaraan asii-dhada haydarckolorik iyo salfiyuurik. Birahaa ay awoodda elektaroon.bixintoodu ka badan tahay ta haydarojiinta, waxa ay sameeyaan ayoonno Aad uga deggan ayoonka haydarojiinta, sidaa awgeedna ka barabixin ka ra ayoonnada haydarojiinta milannada ay ku jiraan.

Hawl yarida ay ayoonnadaasi u barabixinayaan ayoon  
 nada haydarojiintana waxa ay ku xidhan tahay hadba  
 inta birta haydarojiinta barabixinaysaa ay awoodda elek-  
 taroona**bixinteedu** ka badan **tahay haydarojinta**; taas oo  
 ah meesha ay birtu kaga jirto taxa firfircoonaanta. Bi-  
 raha ay ka mid yihiin magniisiyam, ee taxa xagga sare  
 kaga jiraa, si dhaqso ah ayay ula falgalan asiidhada,  
 haydarojiinna uga soo saaraan, halka ay feeramta iyo  
 balambamta oo kale si aad u dhaqsa daran ula falgalan  
 asiidhada. Kubramtu iyadu xagga hoose ayay ka xigtaa  
 haydarojiinta, awoodda elektaroon**bixinteeduna** way ka  
 yar tahay ta haydarojiinta. Sidaa awgeed waxa aynu  
 ka filynaa in aanay la falgelin asiidhada, ayoonnada  
 haydarojiintana aanay ka barabixin milannada ay ku  
 jiraan.

3. Taxa firfircoonaantu waxa kale oo uu wax ka sheegayaan  
 falgalka dhexmara biraha iyo biyaha. Falgalkan waxa  
 uu asalkiisu yahay, elektaroonno ka imanaya atamyada  
 birta oo u wareegaya ayoonnada haydarojiinta, kuwaasi  
 oo dabadeeto ay ka dhalanayso neef haydarojiin ahi.



**Xusuus:** Waxa aad ogataa in taxa firfircoonaantu uu  
 caawiye uun yahay, sidaa awgeedna waa in aanad ka filin inuu  
 boqolkiiba boqol ku siiyo wax allaale wixii la xidhiidha astaa.  
 maha curiyeyaalka iyo iskuohisyadaba.

#### LAYLIS :

1. Adga oo isticmaalaya isle'egyo ayoonno ku tibaaxan  
 qor waxyaalaha soo socda:
  - b) Falgalka dhexmara magniisiyam iyo milan kubram  
 salfeyt ah.

- t) Falgalka dhexmara naatriyam iyo biyaha.
- j) Falgalka dhexmara sink iyo salfiyuurik asiidh badhax ah.
2. Wax ka sheeg waxa laga yaabo ipaad aragtid haddii (b) sink fara tadan lagu rido milan kubram salfeyt ah, (t) in yar oo kaaliyam ah la dul dhigo warqad miirta ah oo dul sabbaynaysa biyo sarsar ku jira.
3. Sabab u raadi waxa (b) naatriyamta saliid dhexdeed loogu kaydiyo (t) fosfoorta biyo dhexdood loogu kaydiyo
4. Biraha hoos ku qoran, u tax sida ay u kala firfircooni yihin: Aluuminam, kaaliyam, kubram, feeram, magniisiyam, sink iyo balambam.
5. Sharax sida taxa firfircoonaanta ee briaha loo soo saari karo. Wuxuu kale oo aad tustaa sida meelaha ay taxa kaga jiraan biraha ah naatriyam, magniisiyam balambam iyo sink ay ugu xidhan yihin falgalka dhexmara birhaas iyo (b) biyaha (t) haydarokolorik asiidh badhax ah.
6. Maxaa looga jeedaa inarka la leeyahay bir ayaa bir kale ka elektaroon-bixin og? Sharax tijaabo hawl yar oo aad ku tuşayso in sinku uu ka elektaroon-bixin ogyähay kuba.
7. Tus sida, aqoon aad u leedahay taxa firfircoonaanta ee biruhu, ay kuugu suurtagelinayso in aad sharaxdo waxa (a) aanay kubramtu (maartu) haydarojiin u soo saarin marka asiidhada badhaxa ah lagu daro, (t) ay naatriyantu si xooggan ugula falgasho biyaha, laakiin aanay magniisiyamku ugula falgelin sidaas oo kale, (j) marka

magniisiyam fara badan lagu d'aro milan kubram salfeyt ah uu aakhirka milanka u midab raaco.

8. Adiga oo isticmaalaya isle'egyo ayoonno ku tibaaxan qor waxyaalaha soo socda: (b) Falgalka dhixmara foloriin iyo milan naatriyam koloraydh ah, (t) Falgalka dhixmara foloriin iyo milan kaaliyam aayodhaydh ah, (j) Falgalka dhixmara foloriin iyo biyaha.
9. Sharax sida aad tax firfircoonaan ugu samayn lahayd bir.ma.aheyaasha.
10. Foloriin waa curiye bir.ma.ahe ah, hase yeeshi, foloriin keliiged ah adduunyada lagama helo, waxaanay had iyo jeer ku jirtaa iskudhisyo. Maxaad u malaynaysaa in ay arrintaasi ku dhacday?

## **BAABKA SHANAAD**

### **DANAB SOOCID**

Tijaabooyin badan oo tusaya raadadka uu danabku ku leeyahay iskudhisyada ayaynu soo aragnay, iskudhisyadaasi ha milnaadeen ama ha dhalaashanaadeene. Wuxuu aynu aragnay in danabku uu kala bixiyo iskudhisyadaa, isbeddel kimika ahna uu keeno. Marka aynu danabka sidaas u isticmaallo waxa habkaa la yidhaa danab-soocid.

Inta aynaan here u sii soconin waxa habboon in aynu ereyo badan oo aynu isticmaali doonno qeexno:

#### **Danabsoocid:**

Danabsoociddu waa kala bixin iskudhis, ha milnaado ama ha dhalaashanaado ee, marka maayad danab ah la dhextariyo.

#### **Gudbiye.milme:**

Waa iskudhiska, ha milnaado ama ha dhalaashanaado ee danabka gudbiya, isaguna kala baxo. Gudbiye-milmayaalku waxa ay ka samaysan yihiin saxarro danabaysan oo la yidhaa ayoono.

#### **Magudbiye-milme:**

Waa iskudhis milan ama dhalaashan oo aanu danabku kala bixin karin.

#### **Qotinno:**

Qotir.nadu waxa weeye labada cidhif ee uu gudbiye.mil.

inaha midna danabku ka soo galo midna uu ka baxo. Qotin-  
nadu waxa ay ka samaysan yihiin bir ama kaarboon.

**Qotin toga ze:**


Waa qotinka togan, waana ka uu danabku ka soo galo,  
taas oo ah ka elektaroonnada qaata.

**Qotin tabane:**

Waa qotinka taban ee uu danabku ka baxo, waana ka  
elektaroonnada bixiya.

#### **DANABSOOCIDDA MILANNADA:**

Marka la danabsoocayo cusbooyinka dhalaashan, laba  
ayoon oo kala jaada oo keliya ayaa jira. Markii aynu danab-  
soocaynay balambam boromaydhka, ayoonno balambam ah iyo  
ayoonno boromaydh ah oo keliya ayaa jiray. Marka milanna-  
da la danabsoocayo ayoonno haydarojiin ah iyo kuwa haydar-  
gsaydh ah ayaa iyana meesha jira. Ayoonnadaasi waxa ay ka  
yimaadeen biyaha. Inkasta oo aanay biyuhu danabka gudbin,  
haddana waxoogaa yar bay ayonoobaan.



Biyaha sooca ah ribnaanta ayoonnada haydarojiinta iyo  
kuwa haydarogsaydhka oo la isku dhuftay waa  $10^{-14}$  litirkiiiba.  
Ribnaantaasuu aad bay u yar tahay, laakiin waa in aynu ogaan-  
naa in tamarta loo baahan yahay in lagu saaro ayoonno hay-  
darojiin ah ama kuwa haydarogsaydh ah ay aad uga yar tahay  
tamarta loo baahan yahay in ay dhaliso biraha iyo bir-ma-ahe-  
yaasha intooda badan.


Sidaa darteed, haddii aynu isku dayno in aynu danab-  
soocno badhax salfiyuurik asiidh ah, ayoonnada togan, ee gud.

biye.milmaha ku jiraa waa kuwa Haydarojiinta oo keliya ee ka yimid biyaha iyo asiidh. Ayoonrada taban ee meesha jiraan-a waa salfeytka ( $\text{SO}_4^{2-}$ ) ka yimid asiidha iyo haydarogsaydhka ( $\text{OH}^-$ ) ka yimid biyaha. Waxa aynu filaynaa in ayoonnada haydarojiintu ay qotin tabanaha tagaan si ay elektaroonno uga helaan, neef haydarojiin ihina uga dhalato. Waxa kale oo ay nu filaynaa in ayoonnada haydarogsaydhka ihi ay tagaan qotin toganaha, ayoonnada salfeytka ihina ay milanka ku hadraan, sababta oo ah iyada oo ay hawl yar tahay in la ogsidheeyo ayoonnada haydarogsaydhka ah.

**Tijaabo 5.1.: Danabsoocidda badhax salfiyuurik asiidha (biyo)**  
 Biyo sooc ihi danabka ma gudbiyaan. Dhawr dhicood oo salfiyuurik asiidh badhax ah oo lagu daro ayaa u suurtagelin kara biyaha in ay danabka gudbiyaan. Unug-gudbiye.milme oo biyo ahna waxa aynu u samayn kartaa sida jaantuska 5.1 tusayo.

(*نۇڭ ئەنۋېلىم-ئىلەم*)

## 11.2.1 DONAPROGCI: 990 رەخەنە



Marallaale marka aynu mareegta danabka xidhmo ayaynu ar-kaynaa neer ~~ka see baxaysa qotinnada~~, kuna buraysa dhuh-maha-hubsashada. Waxa kale oo ayuu arkaynaa in neefta qotin

tabanaha ka soo baxaysaa ay ugu dhowaan laba jeer ka badan tahay ta qotin toganaha ka soo baxaysa. Duur ololaya ku hubi neeta ka soo baxaysa qotin tabanaha, ku ifayana ku hubi neeta ka soo baxaysa qotin toganaha.

Ayoonnada soo socda ayaa milanka ku jira:

$H^+$  iyo  $SO_4^-$  oo ka yimid salfiyuurik asiidha.

$H^+$  iyo  $OH^-$  oo ka yimid biyaha.

Qotin tabanaha:

$H^+$

Wuukuu u guurayaa qotin tabanaha, elektaroon buu qaadanyaa, dabadeedna atam haydarojiin ah ayuu noqonaaya.

$H^+ + e^- \rightarrow H$   
atamyada haydarojiinta ayaa laba-laba isugu tegaya si ay molikiyuul u sameeyaan

$H + H \leftarrow H_2$

$SO_4^-$  oo qotin toganaha u guura iyo  $H^+$  oo baxaa waxa ay u dhigan tahay ribnaanta salfiyuurik asiidha oo yaraata.

Qotin toganaha

$SO_4^- & OH^-$

Labaduba qotin toganaha ayay u guurayaan, halkaas oo  $OH^-$  ka laga doorbidayo  $SO_4^-$  oo ka elektaroon bixin yar.

$OH^- \leftarrow e^- \longrightarrow OH$

Ururro OH ah ayaa isu tegaya si ay biyo iyo ogsijiin u dhaashaan.

$OH + OH \longrightarrow H_2O + O$   
 $O + O \longrightarrow O_2$

Bixitaanka  $OH^-$  ka ayaa labaya dheellitiranka biyaha, biyo kale ayaan ayoonoobaya si ay u soo celiyaan dheellitirankaa


$H_2O \leftarrow H^+ + OH^-$

$H^+$  dashay iyo  $SO_4^-$  qotinka imanayaa waxa ay u dhigan yihiin ribnaanta salfiyuurik ee kcrodha.

Si hal molikiyuul oo ogsijiin ihi uu u soo baxo, waxa iu-

maya afar elektaroon. Afartaa elektaroon waa in ay qotin tabanaha tagaan si uu u hagaagsanaado isbeddelka kimikada ihi.

### Qotin tabanaha



### Qotin toganaha


Guud ahaan asiidhnaanta wax iskama beddelaan, maxsuulka soo baxaana waa 2 mug oo haydarojiin ah iyo 1 mug oo ogsijiin ah.

#### Tijaabo 5.2: Danabsoocid kale oo badhax salsiyuurik asiidh ah

Tijaabadii 5.1 waxa aynu isticmaalaynay qotinno balaatinam ah ama kaarboon ah. Bal hadda tijaabadii aynu ku celinno innaga oo isticmaalayna qotinno maar ah halkii balaatinamka si aynu u eegno bal in waxa soo baxaa ay isku mid yihiin. Sidii aynu tijaabadii hore u samaynay ayuun baynu u soconaynaa. Neefta soo baxda ururi, dabadeedna hubi.

Waxa aynu arkaynaa in neefi ka soo baxayso qotin tabanaha, neefstaasina ay haydarojiin tahay, laakiin wax neef ah oo qotin toganaha ka soo baxaysaa ma jirto. Sidaa darteed ayoonno haydarogsaydh ihi markan ma baxayaan.

Qotinnada aynu beddelley ayaa taas keenay. Markaa waxa aynu u qaadan karnaa in abuurta qotinnadu ay raa'i weyn ku leedahay maxsuulka danabsooca. Haddii aynu aad ugu fiirsanno agagaarka qotin toganaha waxa aynu arkaynaa, in midabkiwo xoogaa yar buluug yahay, taas oo ah astaamihii milannada maarta, una sabab yihin ayoonnada maartu. Sadex arrimood ayaa qotin toganaha ka dhici kara: ayoonnada OH<sup>-</sup> ama kuwa SO<sub>4</sub><sup>2-</sup> oo baxa ama atammo maar ah oo ayoonno isu beddela.




Sa'dexdaa hadba kii dhacayaa waxa uu ku xidhan ya. hay tamarta loo baahan yahay, waxaana muuqata in tamarta loo baahan yahay si ay ayoonno maar ihi uga dhashaan qotinka maarta ah ay ugu yar tahay. Sidaa darteed, qotinka ayaa milmaya.

**Qodobbada saameeyya nooca danabsoocidda:**


Marka aynu u fiirsanno wixii aynu soo dhiganay, waxa muuqda in waxyaalaha soo socdaa ay raad ku leeyihiiin danabsoocidda.

**1. Halka uu ayoonku kaga jiro taxa firfircoonaanta.**

**Ayoonnada togan:**



**Ayoonnada taban:**



Haddii aan wax kale soo dhexgelin, ayoonnada milan ku wada jira, midba kuu ka hooseeyo taxa firfircoonnaata ayaa loo dooranayaa danabsoocidda. Sidaa awgeed ayoonka haydaro. jiinta ayaa laga doorbidayaa ka naatriyamka, marka ay milan ku wada jiraan, isaga ayaana ka baxaya milanka. Sidaas oo kale ayaa ayoonka kubramta ahna looga doorbidayaa ka haydarojiinta ah, haydarogsaydhkuna wuu ka hooseeyaa salfeytka.

Isla markaas ayoonnada togani waxa ay ka baxayaan qotin tabanaha, kuwa tabanina qotin toganaha ayay ka baxayaan.

## 2. Abuurta qotinka:

Tijaabadii 5.2 waxa ay ina tustay in abuurta qotinku ay raad weyn ku leedahay maxsuulka danabsoocidda. Sida caadiga ah qotinnada waxa laga dhigaa balaatinam, waayo balaatinamku meel aad u hoosaysa ayuu taxa firfircoonaanta kaga jiraa, lagamana yaabo in uu milmo. Qotinnada sida balaatinamka aanay danabsoociddu waxba yeelin waxa loo yaqaan qotinnada aan isbeddelin.

## 3. Ribnaanta Milanka:


Ribnaanta ayoonnada milanka ku jiraa raad bay ku leeyihin doorashada ayocnka baxaya. Taasna waxa aynu ku tusi karnaa danabsooca milan naatriyam koloraydh ah.

**Tijaabo 5.3 Danabsoocidda milan naatriyam koloradh ah.**

Saabaanka la isticmaalayaa waa kii tijaabadii 5.1. In-naga oo isticmaalayna qotinno balaatinam ah ama kaarboon ah, bal aynu danabsoocno milan rib ah oo naatriyam koloraydh ah. Duur ololaya ku hubi neefta qotin tabanaha ka soo baxaysaa in ay haydarojiin tahay. Neefta qotin tabanaha ka soo baxaysana warqad litmas ah u dhig. Neeftaasi warqadda litmaska ah way midab tiraysaa, urteeduna astaamihii kolorinta ayay leedahay.

Milanka waxa ku jira afar ayoon oo kala nooca: Laba ayocn oc togane ah,  $\text{Na}^+$  iyo  $\text{H}^+$  iyo laba ayoon oo tabane ah,  $\text{OH}^-$  iyo  $\text{Cl}^-$ . Haddii aynu taxa firfircoonaanta u fiirsanno waxa aynu filaynaa in ayoonnada haydarojiinu ay qotin tabanaha ka baxaan, (sidaas ayaana dhacda), ayoonnada haydarogsaydkuna ay qotin toganaha ka baxaan. Hase yeeshee, ta

dambe ma dhacdo, ayoonnada koloraydhka ah baana baxa. Habka ay waxu u dhacaanna waa sida soo socota :



Waxa keliya ee bixitaanka ayoonnada koloraydhka looga doorbiday kuwa haydarogsaydhka, waa ribnaanta ay ka riban yihiin. Raadka ay ribnaantu ku leedahay maxsuulka da nabsoocidda, wax sidaa u weyn ma aha, lagamana yaabo inaad la kulantid tusaalooyin sidaas u sii badan oo uu maxsuulka da nabsoociddu ku xidhan yahay ribnaanta. Maxsuulka danabsoocuna waxa uu inta badan ku xidhan yahay halka uu ayoonku kaga jiro taxa firfircoonaanta.

Tusaalooyin kale oo la xidhiidha danabsooca milano kale

#### Tijaabo 5.4 Danabsoocid milano:

Mar walba saabaanka tijaabadii 5.1 ayaa la isticmaali karaa. Milannada soo socda danabsooc.

- b) Milan kuþram salfeyt ah, iyada oo aad qotinno balaatinam ah isticmaalayso.
- t) Milen kubram salfeyt ah iyadoo aad qotinno kubram ah isticmaalayso.
- j) Milan naatriyam haydarogsaydh ah iyadoo aad qotinno balaatinam ah isticmaalayso.

(Haddii qotinno balaatinam ah la waayo, kuwa kaarboon ah ayaa la isticmaali karaa). U fiiroso bal in neefi ka dhalato qotinnada agagaarkooda. Duur ifaya ku hubi in ay haydarojiin tahay haddii neefi ka dhalato qotin tabanaha, duur ololyana wixii neef ah ee ka dhalata qotin toganaha. Waxa kale


oo aad u fiirsataa bal in wax isbeddel ihi ku dhacay qitinnada  
iyo gudbiye milmahaba.

Waxaa ka soo baxaa danabsoocyadaasi, sida soo socota  
ayaa loo soo koobi karaa:


b) Milan kubram salfeyt ah qotinnaduna talaatinam yihiin

**Qotin tabanaha:**

Cu<sup>++</sup> iyo H<sup>+</sup> waxay u guura-  
yaan qotin tabanaha.. Taxa  
firfircoonaanta kubramta ayaa  
ka hoosaysa haydarojiinta,  
iyadaana bixitaanka loo doora-  
ranayaa. Kubramtu waxay  
dulfulaysaa qotinka balaati-  
namka ah, wax neef ah oo soo  
baxaysaana ma jirto. (Nay-  
tarik asiidh rib ah oo aad mu-  
quuriso ayaad qotinka kub-  
ramta kaga nadiifin kartaa)



SO<sub>4</sub><sup>-</sup> iyo OH<sup>-</sup> waxay u guura-  
yaan qotin toganaha. OH<sup>-</sup> ka  
ayaa ka hooseeya SO<sub>4</sub><sup>=</sup> ka, isa-  
gaana bixitaanka loo doorana-  
yaa. Ururrada haydarogsay-  
dhka ah ee soo baxaana way  
isu tegayaan si ay biyo iyo og-  
sijiin u soo saaraan. (Sidii ay  
salfiyuurik asiidhaba sameeyeen).



Ayoonnada kubramta ah ee qotin tabanaha ka baxayaan  
waxa ay keenayaan midab lumis. Haddii danabsoociddu sii  
socotana waxa dhacaya in milankuba uu midab beelo, salfiyu-  
rik asiidhna uu isu rogo.


t) Milanka kubram salfeytka ah, ee ay qotinnaduna kub-  
ramta yihiin. Qotin tabanaha — sidii (b) ayuun baa  
kuhram soo baxaysaa. Beddelaadda nooca qotinku wax-  
ba kama beddclayso waxa ka soo baxaya qotin tabanaha.  
Qotin toganaha — tamarta loo baahan yahay in atam-  
maadu kubramta loogu beddelo ayoonno kubram ah ayaan

ka yar tamarta loo baahan yahay in ayoonnada haydarogsaydhka ama kuwa salfeytka lagu saaro. Sidaa dar-teed qotinka kubramta ah ayaa milmaya.

**Qotin tabanaha**



**Qotin toganaha**



Dhaahsaha ay kubramta qotin toganuhu ku milmayo iyo ka ay birtu qotin tabanaha ugaga dhalanaysaa waa isku mid. Ribraanta milankana wax iska beddelayaa ma jiro, mar haddii qotin toganuhu milmaya.


Marka maarta la safaynayo iyo marka walxaha maar lagu dheehayoba, dariiqadaas ayaa la isticmaalaa.

- j) Milanka naatriyam haydarogsaydh ah qotinnaduna ay healtinamka yihin.

Qotin tabanaha — ayoonnada  $\text{Na}^+$  iyo  $\text{H}^+$  waxa ay u guurayaan qotin tabanaha. Haydarojiinta oo taxa firfircoonaanta ka hoosaysa naatriyamka ayaana baxaysa.

Qotin toganaha — ayoonnada keliya ee taban ee meesha jiraa waa kuwa haydarogsaydhka, iyagaana baxaya, biyo iyo ogsijiinna samaynaya.

**Qotin tabanaha**



**Qotin toganaha**




Halka kan waxa aad arkaysaa in maxsuulladu ay kuwii danabsooca salfiyuurik asiidh badhaxa ah oo kale yihin, haydarojiinta soo baxdaana ay mugga ogsijiinta laban laabkii ta hay. Intaas waxa raaca saamiga ay labadaa mug isu yihin

oc la mid ah ka ay biyaha isugu dhisan yihiin atammada hay-darojiinta iyo kuwa ogsijiintu.


Dhuun-U ah ayadoo aynu jisticmaalayno ayaynu tijaa-booyinkaasi wada samayn karnaa. Tusaale ahaanna bal ta soc socota aynu eegno.

Tijaabo 5.5 Danabsooc milan CuCl<sub>2</sub> ah.




JT. 5.2 Danabsocidda milan CuCl<sub>2</sub> ah


#### Qotin tabanaha




#### Qotin tabanaha



#### Qotin toganaha



#### Qotin toganaha



## Waxtarka Dānabsoocidda


### 1. Safaynta biraha :

Danabsoocidda waxa aad loo isticmaalaa marka la doonayo in la soo saaro biro aad u safaysan. Marka maarta la safaynayo, qotin toganaha unugga, maar aan safaysnayn ayaa laga dhigaa qotin tabanahana waslad maara oo sooc ah ayaa laga dligaa, gudbiye-milmūhuna waa milan kubram salfeyt ah. Qotin toganaha ayaa milmaya, maar saafi ihina qotin taabanaha ayay dulfulaysaa. Wixii wasakh ihi way milmaya ama way degeysaa. Sinka iyo biro kale oo badanna sidaas oo kale ayaa loo safeeyaa.

### 2. Danab-dheehid :


Danabsoocidda waxa kale oo aad loo isticmaalaa marka bir mid kale lagu dheehayo. Habkaasna waxa loo yaqaan hab ka danabdheehidda. Unugga danabsoocidduna wuxuu ka samaysan yahay milan cusbo birta wax lagu dheehayo ah, shayga la dheehayey (oo qotin tabanaha ah) iyo waslad birta wax lagu dheehayo ah (oo qotin toganaha ah). Wixii bir ah ee intay milanka ka baxdo qotin tabanaha dulfuusha waxa meesheedii buuxinaya birta ka imanaysa qotin toganaha milmaya.

Sidaa awgeed ribnaanta milanku ma doorsoomeyso. Da.




nabdheehicda waxa loo sameeyaa si loo kordhiyo il-qabatinka walaxda (lacag); yareeyo madhashada walaxda (arjantam iyo koromiyam), kordhiyo qarada qalabka makiinadaha ee Iisma.

Qotin tabanaha




Qotin toganaha



### Xeerarka Faardhey ee Danabsoocidda

Maykal Faardhey oo kimistariyaqaan iyo fisikisyaqaan Ingiriis ahaa ayaa 1830kii xeerarka danabsoccidda hirgeliyey, isagaana dabadeed loogu magac daray. Xeerarkaasi waxay leeyihin :

1. Cufka walaxda ee fadhiista ama soo baxaa wuxuu saamigal qumman u yahay xaddiga danabka ee qotinka mara.
2. Xaddi danab ah oo isle'eg haddii la dhixmariyo gudbiye-milmeyaal kala jaada oo weelal issdabayaal isugu xidhan ku jira, cufafka walxaha soo baxaa waxay saamigal quman u yihiin culayska garaam. iskudhignaantooda.



JT. 5.4 Xeerk faaradhey ee Labaad

Xeerarka Faaradhey waxa ay yihii waa la sharxi karaa, haddii falgallada qotinnada ka dhacaya loo fiirsado.

Tusaale ahaan, marka NaCl dhalaashan la danabsooco falgalka qotin tabanuhu



wuxuu sheegayaa in hal atam oo naytariyam ihi uu soo baxayo marka hal ayoon oo naatriyam ihi uu hal elektaroon qaato. Marka tirada Afogaadaro oo elektaroonno ah qotin tabanaha loo gudbiyaana, hal mool oo  $\text{Na}^+$  ah ayaa qarsoomaya, hal ga-raam-atam oo naatriyam ihina wuu soo baxayaa. Falgalkan, halkii garaam-isudhigan ee Na ihi waa 23 g, sidaa awgeed tira-da Afogaadaro oo elektaroonno ah oo la gudbiyaana waxay soo saaraysaaq 23 g, oo Na ah. Xaddiga danabka ah ee la gudbiyey oo la laban laabaana wuxuu laban laabayaa cufka naatriyamka ah ee soo baxaya.

Tirada Afogaadaro oo elektaroonno ihi waa wax ku hab-boon cabbi-raadda xaddiga danabka, waxaana la siiyey magac gaar ah oo la yidhaa FAARADHEY. Halkaa faaradhay wuxuu la mid yahay 96500 kuuloom oo danab ah. KUULOOMKA danabka ihina waa xaddiga danabka ah ee la gudbiyo marka maayad hal ambiyeer ihi qulqusto hal seken — Kuuloom = ambiyeer x seken. Xaddiga danabka ah oo kuuloomyo ah oo loo qayhiyey 96500 waxay la mid tahay tirada faaradheyda.

Fadhl falgallada qotinnada ee ku tibaaxan ayoonno, elektaroonno, iyo atammada waxa loo akhriyi karaa moolal iyo ga-raam-atammo haddii danabka lagu tibaaxo faaradheyo. Markaa



waxa loo akhriyi karaa «hal ayoon oo naatriyam ihi wuxuu la

falgelayaa hal elektaroon si uu u dhaliyo hal atam oo naatriyam ah» ama «hal mool oo ayoonno naatryiam ihi waxay la falgelayaan hal faaradhey oo danab ah si ay u soo saaraan hal qaraam atam oo naatryiam ah».

### TUSAAFE :

Immisa garaam oo koloriin ah ayaa ka soo bixi kara danabsoocidda NaCl dhalaashan, haddii maayad 10.0 ambiyeer ihi ay 5 daqiqo socoto?

$$\begin{aligned} \text{Kuuloom} &= \text{ambiyeer} \times \text{seken} \\ &= 10.0 \times 5.00 \times 60 = 3,000 \end{aligned}$$

$$\text{Faaradhey} = \frac{3,000}{96,500} = 0.0311$$



2 faaradhey oo danab ihi 1 mool oo Cl<sub>2</sub> ayay soo saarayaan, 0.0311 faaradhey oo danab ihina 0.0156 mool oo Cl<sub>2</sub> ayay soo saarayaan, 0.0156 mool oo Cl<sub>2</sub> culayskooduna waa (0.0156) x (70.9), ama 1.11 oo garaam.

### Tusaale 2:

Maayad 3.0 ambiyeer ah ayaa 25 seken la dhexmariyey milan CuSO<sub>4</sub> ah. Immisa garaam oo kubram ah ayaa soo baxay?

Mar haddii cufka kubramta ah ee soo baxay uu ku xiidhan yahay xaddiga danabka ah ee milanka dhexmaray, waa in aynu marka hore xaddigaa sugnaa. Mar haddii kuuloomku

uu u lhigme ambiyeer x seken weynu xisaabin karraa tirada kuuloomyada.

$$\begin{aligned}\text{Kuuloomyada} &= \text{Ambiyeer x seken} \\ &= 3.0 \times 25 \times 60 \\ &= 4.5 \times 10^3\end{aligned}$$

63.4

$$\text{Culayska garaam.isudhiganka kubramta} = \frac{63.4}{(C.G.I.)} = 31.77g$$

2


$$\begin{aligned}\text{inta garaam ee kubramta ah ee soo baxay} &= 31.77 \times \frac{4.5 \times 10^3}{96,500} \\ &= 1.48 \text{ g}\end{aligned}$$

Tusaale 3:


Waa immisa cufka Cu ah iyo ka  $\text{Cl}_2$  ah ee soo baxayaan, marka maayad danab ah oo 5.00 ambiyeera la dhexmariyo mi lan Cu-Cl<sub>2</sub> muddo 30 daqiiqo ah.

Furfurid :

Falgalka qotin tabanaha ka dhacayaa



falgalka qotinka togan ka dhacaayana



60 s

$$\text{Xaddiga danabku} = 5.00 \text{ amb. x } \frac{(30.0 \text{ daqiiqo x }}{\text{daqiiqo}}$$

= 9000 amb sek aina 9000 kuuloom

**Culays-isudhigannadu :**

$$\text{Cu} = 63.6/2 = 31.8 \quad \text{Cl} = 71/2 = 35.5$$

96500 kuuloom waxa ay soo saaraan hal garaam-isudhigan,  
Culayska Cu soo baxday

$$\frac{9000 \text{ kuul}}{96,500 \text{ kuul/isudhigan}} \times 35.5 \text{ g/isudhigan} = 2.97 \text{ g}$$

**Culayska Cl<sub>2</sub> soo baxdayna**

$$\frac{9000 \text{ kuul}}{96,500 \text{ kuul/isudhigan}} \times 35.5 \text{ g/isudhigan} = 3.31 \text{ g}$$

**Tusaale 4:**

Waa immisa xaddiga danabka ah ee loo baahan yahay  
si 2.158 g oo Ag ah looga soo saaro milan AgNO<sub>3</sub> ah?

**Furfurid :**

Culays-isudhiganka Ag = 107.9 1 = 107.9,  
tirada isudhigannada Ag ah ee kku jira 2.158 g oo Ag ah

$$\frac{2.158 \text{ g}}{107.9 \text{ g/isudhigan}} = 0.02 \text{ isudhigan}$$

Xaddiga danabka ah ee soo saari kara halkii isudhigan  
waa 96,500 kuuloom, xaddiga danabka ah ee 0.02 isudhigan  
soo saari karaana,

$$= \frac{0.02 \text{ isudhigan} \times 96,500 \text{ kuul/isudhigan}}{1.93 \times 10^3 \text{ kuuloom}}$$

### Tusaale 5 :

Xaddi danab ah ayaa la dhexmariyey milanoo isdaba-yaal isugu xidhan. Milannadaasi waxa ay yihiin  $\text{AgNO}_3$ ,  $\text{CrCl}_3$ ,  $\text{Zn SO}_4$  iyo  $\text{CuCO}_3$ . (b) Haddii 1.00 g oo arjantam ihi ka soxay milanka ugu horreeya, maxay noqonayaan culaysyada biraha kala duwan ee iyana isla markiiba ka soo baxaya milannada kale? (t) Waa meeqa xaddiga danabka ah ee la isticmaalay?

### Furfurid :

b) Isle'egyada badh-falgallada qotinnada tabani waa :



Culays-isudhigannadu:

$$\begin{array}{ll} \text{Ag} = 107.9/1 = 107.9 & \text{Zn} = 65.4/2 = 32.7 \\ \text{Cr} = 52.0/3 = 17.3 & \text{Cu} = 63.6/2 = 31.8 \end{array}$$

Sida uu odhanayo xeerka Faardhey ee labaad, cufafka walxaha kala duwan ee soo baxaa waxa ay saamigal qumman u yihiin culayska garaam-isudhigañnadooda iyo tirada faaradheyda danabka ah ee milnnada la dhexmariyey. Sidaa awgeed mar had-dii halkii faaradhey uu soo saarayo hal garaam-isudhigan, tirada faaradheyda danabka ah ee milannada dhexmaray waxa ay noqonayaan.

$$= \frac{1.00\text{g Ag}}{107.9\text{g Ag faaradhey}}$$

17.3 g

$$\text{Cuf. Cr ee soo baxay} = 0.00927 \text{ faara.} \times \frac{17.3 \text{ g}}{\text{faaradhey}} = 0.160 \text{ g}$$

32.7 g

$$\text{Cuf. Zn ee soo baxay} = 0.00927 \text{ faara.} \times \frac{32.7 \text{ g}}{\text{faaradhey}} = 0.303 \text{ g}$$

31.8 g

$$\text{Cuf. Cu : } \text{baxay} = 0.000927 \text{ faara.} \times \frac{31.8 \text{ g}}{\text{faaradhey}} = 0.295 \text{ g}$$

t) Xaddiga danabka ah ee milanka la dhexmaray


$$= \frac{96,500 \text{ kuul/faaradhey}}{107.8 \text{ g/faaradhey}}$$

= 849 kuuloom

**Tusaale 6 :**

Inimisa faaradhey ayaa loo baahan yahay in ay ka socsaaraan xaddiyada soo socda milan ay ayoonno  $\text{Ni}^+$  ihi ku jiraan. (b) hal garaam oo Ni ah (t) hal mool oo Ni ah (j) hal garaam isudhigan oo Ni ah.

**Furfurid :**



b) Falgalkan waxa aynu ka aragnaa in labadii faaradhey ay soo saarayaan hal mool oo Ni ah. Halkii mool ee nikalka ahaana culayskiisu waa 58.71 g. Sidaa awgeed halkii garaam ee nikalka ahaa waxa soo saari karaya

— — — — x 2 faaradhey

5.87 g

$$= \frac{5.87}{2} = 0.034 \text{ faaradhey}$$

t) Mar haddii falgalka qotinka taban ka dhacyaa uu yahay  
 $\text{Ni}^{+} + 2e^{-} \rightarrow \text{Ni}^{+}$ , 2 faaradhey ayaa loo baahan yahay si  
hal mool oo nikal ihi uu u soo baxo.

j) Isudhiganka nikal waa, culays-atamka nikal oo loo qay.  
biyey kaafatoonkiisa,

58.7

— — — —  
2

58.7 g


$$\therefore \text{garaam-isudhiganka Ni} = \frac{58.7}{2} = 29.35 \text{ g}$$

Halkii mool ee nikalka ahaa oo ah 58.7 g waxa soo saari kara  
2 faaradhey, sidaa awgeed halkii garaam-isudhigan ee nikalka

$$\text{ahaa waxa soo saari kara} \frac{58.7 \text{ g}}{2 \text{ g}} \times \frac{1}{58.7 \text{ g}} \times 2 \text{ faaradhey}$$

$$= 1 \text{ faaradhey}$$

(Waxa aad ogataa in had iyo jeer uu hal faaradhey soo  
saaro hal garaam-isudhigan.)




### 77. 5.5

Unugyadii hore tamar danab ayaa iyada oo maayad ah la isticmaalay si ay u keento falgal ogsidhayn-yarayn ah. Si da kalena waa suurtogal; taas oo ah in falgal cgsidhayn-yarayn ihi uu dhalayo maayad danab ah. Wuxuu ugu weyn ee loo baa-han yahay waxa weeye in ogsidheeyaha iyo yareeyaha la kala qoqobo, si uu danabku u maro taar labada qotin isugu xidhan. Kaaliye alliyaale kaaliyihii ~~an~~ intaa dhaliyana waxa la yidhaa unugga Galfaani ama unugga focialta, iyada oo locgu magac daray Lu'iji Galfaani (1780) iyo Alisaandaro Foulta (1800).


Marka waslad sink ah lagu qotomiyo milan kubram saleyt ah ( $\text{CuSO}_4$ ), kubram ayaa ku dhaaadhmaysa wasladda sinka ah (eeg jaantuska 5.5). Falgalkuna waxa weeye,



Isbeddelkani sinku wuu ogsidhoobay, ayoonka  $\text{Cu}^{++}$  ihina wuu yaraaday, waxaana ugu wacan elektaroonnada sinka ka tegey ee kubranita u wareegay. Si taas hagaag loogu arki karo falgalka ayaynu laba u kala jabin karnaa:



### JT. 5.6 Unugga galfaani



Unugvada Galfaani wuxuu ku shaqeeyaa xeerka ah, labi eadh. falgal oo kala qoqoban oo mar wada dhici kara, elekta-roon wareegguna taar ka dhacayo. Unugga Galfaani ee aad jaantuska 5.6 ku aragtaana wuxuu isticmaalayaa falgalka,



Unuggii kasta ee falgalkan isticmaala waxa la yidhaa unugga Daaniyaal. Xarriiqu wuxuu u taagan yahay qoqobe habe ahi oo weelka laba qol u kala qaybinaya, laakiin, weli oggolaanaya ir ayoomhadu labada dhinac isaga gudbaan. Qolka bidixda waxa ku jira milan sink salfeyt ah, waslad sink ihina way ku qo. Tontaa qolka midigtana waxa ku jira milan kubram salfeyt ah, wasiad kubram ihina way ku qotontaa. Marka labada qotin taar la isugu xidho, maayad danab ah ayaa qulqulaysa, ambi veer-beegga mareegta ku xidhan ayaana ku tusaysa. Ammin

dabadeed wasladda sinka ihi way cunmaysaa, wasladda kubramta ahna, kubram baa ku dhiehmaysa.

Unuggu sida soo socota ayuu u shaqeeyaa: Wasladda sinka ah waxa ku dhacaya ogsidhayn. Bad-falgalka




wuxuu soo saarayaa ayoonno  $\text{Zn}^{++}$  ah iyo elektaroonno. Ayooni naadada sinka ihi milanka ayay gelayaan, elektaroonnaduna taarka ayay raacayaan, sida jaantuska 5.6 tusayo. Wasladda kubramta ah waxa ka dhacaya yarayn, elektaroonnada taarka soo raacivana waxa lagu isticmaalayaa falgalka




ayocnnada kubramta ee milanka ku jiraa way dhinmaayaan, dabadeedna kuwa cusub ayaa qotinka kubramta ah agagaar, kiisa imanaya. Mareegtuna way dhan tahay. Elektaroonno ayaa taar maraya, maayad danab ahna waxa laga helayaa tal galaka ogsidheyn-yaraynta ah. Unuggu wuxuu shaqaynayaan ilaa iyo inta sinka ama ayoonnada  $\text{Cu}^{++}$  ihi dhammaanayaan. Qoqobka wuxtarkiisu waxa weeye in uu ayoonnada  $\text{Cu}^{++}$  ah ka ilaaliyo inay hawl yari u gaadhaan wasladda sinka ah oo dabadeedna ay unugga mareeg binisiyaan.

#### Unug kaydka balambam :



JT. 5.7 Unug kaydka balambam

Jaaniuska 5.7 wuxuu tusayaa dhismaha unug kaydka balambbam. Lix kuwaasa oo isdabayaal isugu xidhan ayuu beytariga baabuurta ee 12 foolt ihi ka samaysan yahay. Labada qotin mid waa balambbam, ka kalena waa balambbam laba og-saydh ( $PbO_2$ ), gudbiye milmuhuna waa salfiyuurik asiidh badhax ah, cufnaanteeduna 1:25 iyo wax u dhow ay tahay. Marka beytarigu danab soo saaravo qotinka balambamta ah ayaa ogsidhooba ( $Pb \rightarrow Pb^{2+} + 2e^-$ ). Ayoonka  $Pb^{2+}$  ah ee soo baxaana wuxuu la falgelayaa  $SO_4^{2-}$  ka asiidha si ay u sameeyaan ma-milme  $PbSO_4$  ah. Falgalka qotinka  $PbO_2$  ihina waa :




$PbSO_4$  soo baxaana wuxuu dulfuulayaa qotinka.

Waxa aynu arkaynaa in danab-furanka unuggu uu labada qotinba  $PbSO_4$ , ka dhalinayo, labada badh-falgal oo la isku daraana ay salfiyuurik asiidh gudbiye-milmaha ka saarayso. Taas ayaa sharxaysa waxa ay cufnaanta gudbiye-milmuhu hoos uen dharayso, marka uu unuuggu danabfurmo.

Haddii la dameeo in unugga dib loo danabeeyo, waa in falgallada dib loo wada celiyaa. Taas macnaheedu wuxuu yahay, unugga ayaa unug gudbiye-milme lagá dhigayaa. Waxa arrintaa la heli karaana haddii (generator) ama maayad danab ah oo kale mareegta lagu xidho. Balambam salfeytka ayaa qotinnada ka qaadmaya, ribnaanta salfiyuurik asiidhuna kor ayay u kacaysaa.

#### Unug Yaabis (Leclanche cell)

Jaantuska 5.8 wuxuu tusayaa dhismaha unugga yaabis. Run ahaantiina unuggu ma engegna. Waxa uu ka kooban yahay qotin kaarboon ah oo ku dhex jira cajiin yara qoyan o.



### JT. 5.8 Unug Yaabis

$\text{MnO}_2$  iyo  $\text{NH}_4\text{Cl}$  ah. Waxaa oo dhammina waxa ay ku dhex jiraan koob sink ah. Warqad habe ayaa u dhexaysa cajiinta iyo koobka sinka ah. Qotinka sinka ah. sinka ayaa ogsidhooba.



Inkasta oo aan falgalka qotinka kaarboonka ka dhaca la hubin, haddana waxa loo arkaa in  $\text{MnO}_2$  uu yaraanayo sida falgalka soo socda tuisayo,

$2\text{MnO}_2 + 2\text{NH}_4^{+} + 2e^{-} \longrightarrow \text{MnO}_2\text{O}_3 + 2\text{NH}_3 + \text{H}_2\text{O}$  (yarayn); Ammooniyada soo baxda waxay isu tegayaan ayooniada sinka ah, waxaana soo baxaya sink aminiin:



Beytari ka samaysan 28 unugyadaasi ah oo isdabayaal la isugu xidhay, wuxuu soo saarayaa kayd 42 foqlt ah.

## Kaydka Ogsidhaynta

Unugyadii aynu soc aragnay muxuu isbeddelka kimika da ihi ugu dhacavey sidii uu yeelay? Jawaabta ugu cadi waxa ay tahay sinka ayaa awooodda elektaroon-bixintiisu ka badan tahay ta kubramta. Sidaa awgeed isaga ayay ogsidhayntiisu hawl yar thay. Haddii aynu sinka ku beddello bir kale oo ku qotonta milan cusbada birtaasi ah - tuaale ahaan Ni iyo NiSO<sub>4</sub> waxa aynu arkaynaa in falgalku uu raaco isle'egta.



Kaydka unugguna waxa weeye 0.52 foot. Kaydka hoos u dha-cay awgii waxa aynu u qaadan karnaa in elektaroon-bixinta nikalku ay ka yar tahay ta sinka, haddana nikalku wuu ogsi dhoobay kubramtuna way yaraatay.

Haddii aynu nikalka ku beddello arjantam iyo milan AgNO<sub>3</sub> ah, waxa aynu heleyntaa falgalka




Kaydka unugguna waa 0.46 foot. Dowrka ay hadda kubramtu ciyaaraysaa waa ka geddisan tahay kuwii unugyadii hore, awooodda elektaroon-bixinteeduna ka badan ta arjantamta. Doo-dasi oc kale ayeynu isticmaali karraa si aynu u cabbirro awocda-ha elektaroon-bixinta ee biraha. Si taa loc helc, waxa habboon in aynu ogaanno in unug waliba uu ka kooban yahay laba badh-unug. Haddii aynu badh-unug waliba siinno kayd go-an, wadarta aljebre ee labada badh-unug waxa ay soo saa-raysaa kaydka unugga oo dhan.



Ma jirto si loo cabbiri karo qotin keli ah kaydkiiisa, sidaa awgeedna waxa la doortay qotin beeggal ah. Qotinkaasina waa ka haydarojiinta, waxaana la siiyey kayd 0.0000 foot ah.



Haddii badh-unugga haydarojiinta lagu xidho badh.unug kale, tusaale ahaan badh.unug sinka ah, kaydka unugga oo dhammi wuxuu noqonayaa kaydka badh.unugga sinka kaas oo ah + 0.76 foolt.



Qotinka sinka ah haddii lagu beddeelo mid maar ah, kaydka unuggu wuxuu noqonayaa — 0.34 foolt. Summadda tabani waxa ay ku tusaysaa in haydarojiintu ay ka ogsidhoobi ogtahay maarta. Waxa kale oo aynu arkaynaa in sinku uu ka ogsidhoobi ogyahay haydarojiinta iyo maartaba. Sidaa aw geed marka aynu u fiirsanno unugga foolt, kaydka unugga oo idili wuxuu noqonayaa.



Marka badh-falgal geddisankiisa loo qoro, summadda kaydku way isbeddelaysaa.

Badh-falgallada cuuriyeeyalka caanka ah oo idil, tax ayaas loo sameeyey. Taxaas oo ku xidhan kaydka danabka ee soo baxa marka loo eego kaydka danabka ee badh-falgalka haydarojiinta oo ibir ah. Taxaasi waxa la yidhaa tax firfircooni, kaydka danabka ah ee badh-falgallada wadana waxa la yidhaa xoog danab dhaqaaq.

	<b>Badh.falgal</b>		<b>Kayd. footyo</b>
Li	$Li + e^-$	+	3.05
Na	$Na + e^-$	+	2.71
Mg	$Mg + 2e^-$	+	2.37
Al	$Al + 3e^-$	+	1.66
Zn	$Zn + 2e^-$	+	0.76
Fe	$Fe + 2e^-$		0.44
H <sub>2</sub>	$2H + 2e^-$		0.
Cu	$Cu + 2e^-$	-	0.34
2I	$I_2 + 2e^-$	-	0.54
Ag	$Ag + 2e^-$	-	0.54
2Br	$Br_2 + 2e^-$	-	0.80
2H <sub>2</sub> O	$O_2^- + 4H + 4e^-$	-	0.85
2Cl	$Cl_2 + 2e^-$	-	1.09
2Fe	$F_2 + 2e^-$	-	1.23
		-	1.36
		-	1.27

JT 59      Badh.falgallo iyo kaydka ogsidhayntooda.

#### **LAYLIS :**

1. Qeex ereyada soo socda: (u) danabsoocid, (t) gudbiye milme (j) qotin tabane, (x) qotin togane, (kh) ayoon. (d) ayoon tabane, (r) ayoon togan.
2. Sharax waxa ay danabsoocidda milano fara badan ay haydarojiin uga soo baxdo qotinka taban, ogsijiinna qotinka togan.

3. Adiga oo adeegsanaya isle'egyo ayoonno ku qoran, isla markaana tusaya waxa qotin walba ka soo baxaya, tus waxa ka soo baxa danabsoocidda milaa nada soo socda:
  - b) Milan kubram salfeyt ah qotinnaduna ay balaatinam yhiin.
  - t) Salfiyuurik asiidh badhax ah, qotinnaduna ay maar yhiin.
  - j) Salfiyuurik asiidh badhax ah, qotinnaduna ay balaatinam yhiin.
  - x) Milan naatriyam koloraydh ah qotinnaduna ay balaatinam yhiin.
4. Maxay yhiin qodobbada saameeya nooca danabsoocidda? Tuusaalooyin bixi.
5. Wax ka qor waxtarka danabsoocidda.
6. Sharax habka naatriyam haydarogsaydh looga heli karo danabsoocidda naatriyam koloraydh. (Ogow qotin tabanuhu waa meerkuri.
7. Marka la danabsoocayo HCl, neefta haydarojiin ayaa qotinnada mid ahaantood ka soobaxda, qotinka kalena neesta la yidhaa koloriin ayaa ka soo baxda. Sawir unug ku habboon danabsoociddan. Calaaniadi qotin tabanaha iyo qotin toganaha, falgalka mid walba ka dhacana qor. Waxa kale oo aad ku tustaa sawirka, jihaday ay ayoonnada taban iyo kuwa togan iyo elektaroonnadu ay u scconayaan. Waxa kale oo aad qortaa isle'egta falgalka unugga oo dhan u taagan.
8. Sheeg xeerarka faaradhey ee danabsoocidda.

9. Qeex ereyada soosocda: (b) kuuloom, (t) faaradhey, (j) garaam-isudhigan.
10. Haddii maayad danab ah oo 0.25 ambiyeer ah la dhextariyo unug guudbiye-milme muddo 1.00 maalin ah, immisa garaam oo mid wal oo ka mid ah walxaha soo socda ayaa qotin tabanaha fadhiisanaya, marka mid walba ti jaabo loo sameeyo?
- b) Ag ta laga heli karayo ayoonno Ag<sup>+</sup> ah oo maalin ku jira.
- t) Cu ta laga heli karayo ayoonno Cu<sup>+</sup> ah oo milan ku jira.
- j) Hg ga laga heli karayo ayoonno Hg<sup>+</sup> ah oo milan ku jira.
11. Maayad danab ah ayaa la dhextariyey milan Cu<sub>2</sub>S, ilaa 31.8 g oo Cu ihi ay soo baxeen. Immisa kuuloom oo danab ah ayaa la isticmaalay?
12. Maayad danab ah oo 2.00 ambiyeer ah ayaa la dhextariyey milan COSO, muddo 10 saacadood ah iyada oo la isticmaalayo qotinno balaatinam ah. Waa immisa culayska kobaltka qotin tabanaha dulfuulay?
13. Maayad danab ah oo 1 ambiyeer ah ayaa muddo 75 daqiqadood ah la dhextariyey, salfiyuurik asiidh badhax ah. Waa immisa culayska iyo mugga H<sub>2</sub> ta ah ee ka soo bixi karaa marka heerkulku yahay 25°C cadaadiskuna uu yahay 750 mm oo Hg ah?
14. Maayad danab ah ayaa la dhextariyey milano isdabaayaal isugu xidhan. Milannadaasi waxa ay yihiin:

AgNO<sub>3</sub>; FeCl<sub>3</sub>; NiSO<sub>4</sub>; CrCl<sub>3</sub>; . 2.158 g

oo arjantam ah ayaa milanka hore ka soo baxday.

- b) Waa immisa culayska kala duwan ee biraha kale ah ee isla markaas ka soo baxaya milannada kale? t) Waa meeqa laxaadka danabka (oc ambiyeerro ah) ee la isticmaalayaa?

15. Milanno kala ah kubram salseyt iyo arjantam naytareyl ayaa weelal isdabayaal lagu shubay.

- b) Haddii 0.1525 g oo arjantam ihi ay ka soo baxday milanka arjantam naytreytka h. immisa garaam oo kubram ah ayaa iyana soo baxay?
- t) Haddii danabka la isticmaalayaa uu yahay 0.25 ambiyeer, muddo intee ah ayay danabsoociddu soconay. saa?

16. Muddo intee a. ayaa loo baahan yahay in maayad danab ah oo 3.06 ambiyeer ihi ay dhexmarto milan ZnCl<sub>2</sub> ah si ay uga soo baxdo 3.27 g oo Zn ihi?


17. Marka la danabsooco milan KCl ah, falgalka ay isle'egta hoos ku qorani tusayso ayaa dhaca:



- b) Waa immisa mugga H<sub>2</sub> ah ee soo bixi karaa marka heerkulku yahay 25°C, cadaadiskuna 760 mm oo Hg ah, haddii ay 7.10 g oo Cl<sub>2</sub> ihi ay soo baxeen?
  - t) Haddii maayad danab ah oo 10.0 ambiyeer ah la isticmaalayey, muddo intee ah ayay danabsaaciddaas: soconaysaa?
18. Waxa aad xisaabisaa xaddiga danabka ah oo kuuloomyo ah ee uu halkii elektaroon leeyahay.

19. Milan ay ku jiraan  $ZnSO_4$ , iyo  $CdSO_4$ , labaduba, ayaa la danabsoocay ilaa ay sinkii ( $Zn$ ) iyo kaadhmiyamkiiba ( $Cd$ ) ay milankii ka baxeen. Haddii culayska iskujirka labada birood ee soo baxay uu yahay 95.0 g, xaddiga danabka ee la isticmaalayana uu yahay 2.00 faaradhey, waa immisa culayska sinka isku jirka ku jiraan?
20. Maxay noqonaysaa maayadda danabka ah ee loo baahan yahay si 6 g oo  $Au$  ihi ay uga soo baxdo milan ay ku jiraan ayoonno  $Au^{+}$  muddo 30 daqiiqo ah?
21. Haddii 25,000 oo kuuloom ay ka soo saarayaan 25 g oo bir ah milan ay ku jiraan ayoonno birtaas ihi
- b) Muxuu noqonayaa culays-isudhiganka birtu?
- c) Muxuu noqonayaa culays atamka birtu haddii la og yahay in ay hal kaafoonle tahay?
22. Danabsoocid ayaa arjantamta lagu safayn karaa, waxaanay ku dheehmataa qotinka taban iyada oo sooc ah, haddii arjantam aan safaysnayn laga dhigo qotinka toagan. Haddaba immisa kuuloom oo danab ah ayaa loo baahan yahay haddii la doonayo in la safeeyo 1 kiloogaraam oo arjantam aan safaysnayn ah, haddii waxyaa laha ku khaldani ay culays ahaan 1.5% yihiin?
23. Maayad danab ah, oo 5 ambiyeer ah, ayaa la dhixmariyey milanoo weelal isdabayaal isugu xidhan oo ay ku kala jiraan ayoonnada togan  $A^+$ ,  $B^{2+}$  iyo  $C^{3+}$ . Muddo 1 saac ah dabadeed, immisa mool oo mid walba ah ayaa soo baxaya?
24. Waa maxay faraqa u dhexeeya unugga galfaani iyo unugga danabsoocidda (unug-gudbiye-milme)?

25. Waa maxay waxtarka qoqobaha habaha ah ee kala qay  
tiya unugga galfaani? Maxaa locgu baahan waayey  
qoqobahaas oo kale unugga danabsoocidda?
26. Waxa aad sawirtaa, sawir muujinaya unugga galfaani.
27. Beytariyadda qaarbaa dib loo danabayn karaa, sidheey  
tariga baabuurta, haddii falgallada qotinnada ka dhaca  
dib loo celiyo iyada oo la isticmaalayo kayd danab ah oo  
dibadeed. Qor qotin kasta falgalka ka dhaca, marka  
dib loo danabaynayo unugyada beytariga balambam.
28. Wax faraq ihi ma u dhexeeyaa kaydka danabka (fooltyo)  
ah ee ka dhasha unug yaabis oo miiska aad wax ku qo  
ranayso le'eg iyo unugga yaabis ee raadiyowga lagu is  
ticmaalo? Haa iyo maya jawaabta aad bixiso, mid kas  
taba sababta aad u tidhi sheeg.
29. Wax ka qor sida taxa firfircoonaanta ee biraha loo heli  
karo adiga oo ka faa'iidaysanaya kaydka danabka ah ee  
la xidhiidha ogsidhaynta ama yaraynta birahaas.
30. Muxuu noqonayaa kaydka danabka ee uu soo saarayo  
unug ku shaqeeya labada badh-falgal.




Jawaabo :

10. (b) 24.1 g, (t) 7.11 g, (j) 22.4 g, 11. 9650 kuuloom  
12. 22.0 g, 13. 0.0509 g, 622 ml. 14. (b) 0.5585 g, Fe.  
0.5871 g Ni, 0.3477 g Cr, (t) 0.5361 ambiyeer. 15 (b) 0.045 g  
(t) 9.2 daqiqadood. 16. 0.894 saacadood. 17. (b) 2.45 litir,  
(t) 1930 Sek. 18.  $1.60 \times 10^{-14}$  kuuloom. 19. 24.4 g  
20. 4.9 ambiyeer 21. (b) 96.5, (t) 96.5 22. 881,000 kuuloom  
23. 0.19 mocl A<sup>+</sup>, 0.094 mool B<sup>2+</sup>, 0.0062 mocl C<sup>3+</sup> 30. 1.56 footit

## BAABKA LIXAAD

### ASIIDHO IYO BEYSYO




#### JT.6.1 Qalabka Mitimiska

Iskudhisyada marka ay biyaha ku milan yihiin ugu jira ayoonno ahaan ayaa waxa la yidhaa asiidho, beysyo ama cusbooyin. Asiidhada oo in badan la yaqiinnay waxa xitaa beryihii horena la rumaysnaa in ay yihiin koox ah iskudhisyo gaar ah. Maanta asiidhada, oo ah lagama maarmaan, meel kasta waa laga heli karaa. Khudaarta inteeda badan iyo cuntadaba waxa ku jira asiidho kala duwan. Tusaale ahaan liin xaamudda iyo liin macaanta waxa ku jira maalik asiidh. Sidaas oo kale ayaa caanaha suusaca ah iyo khalkana ay ugu kala jiraan. asiidhada ah laaktik asiidh iyo asetik asiidh sida ay u kala horreeyaan. Asiidhadaasi oo dhani waxa ay yihiin asiidho orgaa.

niko ah, iyaga ayaana ugu wacan dhadhankaa gaarka ah ee ay khudaartaas iyo hoorarkaasi leeyihiiin. Hase yeeshi, asiidhada ay ka mid yihiin salfiyuurik asiidh, naytarik asiidh iyo hayda, rokolorik asiidh waa asiidho orgaanik.ma.aheyaal ah waxana laga sameeyaa curiyeyaasha ay ka kooban yihiin.

### Dabiicadda Asiidhada:

Kimistariyaqaankii la odhan jiray Arhiinas ayaa ugu horrayn isku deyey in uu sharxo dabiicadda asiidhada isaga oo tixraacaya aragtida ayonoobidda, waxa uuna ku qeexay asidhada, iskudhisyo marka ay biyaha ku milmaan bixiya ayoona haydarojiin ah oo togan ( $H^+$ ). Asiidhada orgaanik.ma.aheyaalka ah ee ay ka mid yihiin  $H_2SO_4$ ,  $HCl$  iyo  $HNO_3$  waa isku dhisyo elektaroonwadaag ah oo ay mid walba naanays moli-kiyuulkeeda ku jirto curiyaha ah haydarojiin. Salfiyuurik asiidh iyo naytarik asiidh waa danab-gudbiyeyaal daciif ah marka ay sooc yihiin; taasna waxa ugu wacan iyaga oo in yar ayonooba. Hoorka ah haydarojiin koloraydh waa danab.ma.gudbiye. Hase yeeshi, saddexdaasi asiidh, ee aynu kor ku soo sheegnay, marka biyo lagu daro si xoog ah ayey u ayonoobaan. Taasina waxa ugu wacan biyaha oo ah hoor ay molókiyuulla. diisu yihiin cidhifleyaal. Ayonoobidda asiidhadaasina waxa loo qori karaa :




Sida aad isle'egyada sare ku aragtid milannada oo dhan waxa ku wada jira ayoonka haydarooinka ah ( $H_3O$ ); waxana loo qaadan karaa in astaamaha asiidhada ee isku dhow uu ugu wacan yahay ayoonkaa hayda amk. ah ee milannado ku wada jira.

Marka salfiyuurik asiidhtu ay aad u badhaxantahay, wa-  
xa dhici karta in ayoonka haydarojiin salfeytka ihi ( $\text{HSO}_4^-$ )  
uu sii ayoonoob oo uu bixiyo ayocni haydaroniyam ah oo dhee-  
raad ah.




Hase yeeshi,  $\text{HSO}_4^+$ , waa asiidh daciif ah, wax sidaasi u  
sii ridanna ku kordhinmeysa wadarta ayocnnada haydaroni-  
yamka ah ee ku jira asiidhaa badhaxa ah. Haddii ay ayoono-  
bidda asiidhu ( $\text{H}_2\text{SO}_4$ ) ay dhammaystiran tahayna isle'eg a  
aycnochbiida waxa loo qorayaa:




Asiidhada marka biyaha lagu daro si dhammaystiran u  
ayonooba waxa la yiraahdaa asiidho xooggan; waxana ka mid  
ah salfiyuurik asiidh haydarokolorik asiidh iyo naytrik asiidh.  
Asiidhadha bixiya, marka ay biyaha ku milan yihiin, ayoonno  
haydaroniyam ah oo tiro yar, ayonoobiddooduna ay kala dhan-  
taalan tahay waxa la yidhaahdaa asiidho daciif ah; waxana  
ka mid ah kaarboonik asiidh ( $\text{H}_2\text{CO}_3$ ), salfiyuuras asiidh  
( $\text{H}_2\text{SO}_3$ ) iyo asiidhada orgaanikada ah oo dhan.


Haddii aad u fiirsatid, ayoonka ah haydaroniyamku si-  
da runta ah waa borootoon ( $\text{H}_2\text{O}$ ) cokan, taasoo ah molikiyuul  
biyo ah ayuu haystaa ( $\text{H}_2\text{O}$  ama  $\text{H}_3\text{O}^+$ ). Waxa aynuna u  
qaadan karraa in aan borootonnadu ( $\text{H}_2\text{O}$ ) soo bixin ilaa ay he-  
laan ayoonno kale ama molikiyuullo ku jira milanka oo qaadan  
kara krotocnnadaasi. Tusaale ahaan, haddii haydarojiin ko-  
lcraydh lagu milo milaha cidhiflaawaha ah ee tolowiin, wax  
borootonno ahi soo bixi maayaan haba yaraatee. Haddiise hay-  
darcjii kolcraydhita lagu milo mile cidhifle ah sida biyaha, wa-  
xa markiiba soo baxaya borotocnno ( $\text{H}_2\text{O}$ ) iyada oo haydarojiin  
koloraydhtu ku ayoncbeysa biyaha sida isle'egta hoose muu-  
jinayso,



sida aad isle'egta sare ku aragtid hal borotoon ayaa u wareegay oo qabsaday molikiyuulka biyaha ah ee cidhiflaha ah hal kaasina waxa ka dhashay hal ayooh oo haydaroniyam ah. Isla sidaas oo kale ayaa ayoon amnooniyam ahi u samaysmaa marka haydarojiin koloraydhta lagu daro milan amnooniya ah Halkaasina hal borotoon ayaa ka yimaadda haydarojiin koloraydhta oo u wareega molikiyuulka amnooniyada ah ee cidhiflaha ah sida isle'egta hoose muujinayso.



Sidaa darteed ayay kinistariyaqaannadii la kala odhan jiray Baronisted iyo Lawri ay ugu qeexseen asiidha iskudhiis boroontoon deeqa ah. Sidaa awgeedna haydarojiin koloraydhtu waxa ay noqonaysaa asiidh, marka la tixraaco qeexidda Barooneisted iyo Lawri, inkasta oo aanay ku jirin ayoonnno haydarojiin ahi marka ay sooca tahay. Haddii aynu raacno qeexidda guud ee Barooneisted iyo Lawri waxa aynu arki karraa in bivu hu u dhaqmaan sida asiidhada marka neef amnooniya ah la dhixmarsho. Taasina waxa si fiscan innoo tusi karta isle'egta hoos ku qoran.



Inkasta oo asiidhada siyaabo badan oo kala duwan loo qeexi karo, haddana qeexyadaa kala duwani waxba ka beddeeli maayaan astaamaha asiidhada ee aad ku soo dhigatay buugga labaad.

### Beysyo :

Kimisatriyaqaankii la odhan jiray Arhiinas ayaa, sidii asiidhada, ugu horrayn isku deyey in uu sharxo dabiicadda beysyada; waxa uuna ku tilmaamay beysyadu inay yihiin haydarogsaydh kasta oo milme ah oo burin kara astaamaha asiidhada marka milannadooda la isku caro. Waxa aynu hore u soo barannay in marka falgal isfasaq ahi dhacayo ay isu tagaan ayoonnada haydaroonyamka ah iyö ayoonnada haydarogsaydhta ( $\text{OH}^-$ ) ahi. Halkasina ayoonka haydarogsaydhta ah ayaa hal borooton ka soo qaadata ayoonka haydaroonyamka ah si ay u sameeyaan molikiyuullo biyö ah.




Sidaa darteedna Lawri iyo Baroonisted waxa ay ku qeebeen beyska iskudhis borooton qaafo. Ayoonka haydarogsaydhta ( $\text{OH}^-$ ) ah ayaana ugu caansan beysyada. Hase yeeshi, haydarogsaydhada biraha ee minneyasha ah ee marka biyo lagu daro bixiya ayoonho ( $\text{OH}^-$ ) iyo milanka ammoniyadaba ayaa weli lagu magacaabaa beysyo. Inkasta oo ay ayoonka haydarogsaydhta ( $\text{OH}^-$ ) tahay ta falgalka isfasaqa ka qayb qaadanaysa ee ka saaraysa milanka ayoonka haydaroonyamka ( $\text{H}_3\text{O}^+$ ) ah.

Sidii aynu hore u soo sheegnay, marka la raacayo qeedidda Lawri iyo Baroonisted, asiidhu waa borooton deeqe, beyskuna waa bortoon qaate. Hase yeeshi, waxa jira ayoonno iyo molikiyuullo kale oo qaadan kara borootonno, sidaa darteedna ereyga ah beys waxa lagu isticmaali karaa walxo fara badan oo

aanay ku jirin ayoonno haydarogsaydh ihi. Haddii aynu u fiirsanno isle'egta ayonoobidda ee haydarokolorik asiidha,



waxa aynu arkaynaa in molikiyuulka biyaha ahi ka qaadanayo haydarokolorik asiidha hal borotoon; sidaa awgeedna molikiyuullada biyaha ihi waxa ay ncqonayaan beys. Isla markaas ayoocnka koloraydhta ( $\text{Cl}^-$ ) ihi waxa ay ka qaadan kartaa ayoonka haydaroniyamka ah hal borotoon, halkaasina waxa mar labaad dib u samaysmaya haydarokolorik asiidhtii. Mar ka HCl lagu daro hoor ammooniya ah, molikiyuulka ammooni yada ayaa u dhaqmaysa sida beyska:




Halkaasina waxa innooga muuqata in molikiyuul ama ayocn kasta oo ku deeqi kara borotoonno uu yahay asiidh, isla markaas molikiyuul ama ayoon kasta oo qaadan kara borotoon-nadaasina uu yahay beys. Marka asiidh bixiyo borotoon, qaybta asiidhaa ka soo hadhaa waxa ay noqonaysaa beys, iyada oo awood u leh inay soo qaadato borotoonno. Tusaale ahaan HCl waa asiidh. Marka ayse bixiso hal borotoon ( $H^+$ ) waxa soo hadhaya ayoon koloraydh ( $Cl^-$ ) ah oo taban oo awood u leh inuu soo qaato hal borotoon. Sidaa awgeedna  $Cl^-$  waxa ay noqonaysaa beys. Isla sidaas oo kale marka uu beysku soo qaato hal borotoon ama in ka badan waxa dhasha ayoon togan oo karti u leh in uu bixiyo borotoonnadaasi kuj dheeraadka ah, sidaa dar-teedna ayoonkaa togan ee soo baxaa waxa uu noqonayaa asiidh.


Halkaasina waxa innooga cad in asiidh kastaa uu leeya-hay beys, isla markaas beys kastaana uu yeelan karo asiidh isaga ka yimid. Guud ahaan asiidhada iyo beysyada xoogani

waxa ay leeyihii beysyo iyo asiidho daciif ah oo iyaga ka yi-maadda sida ay u kala horrreyaan.

Isla sidaas oo kale ayaa asiidhada daciifka ihi bixiyaan borctoonno ay uga samaysmaan beys xooggani; marka ay beys yada daciifka ahi qaataan borotoonona ay u samaysmaan asiidho xooggani. Tusaale ahaan marka falgal ifsasaq ahi ka dhex dhæo.kaarboonik asiidh iyo naatriyam haydarogsaydh, waxa samaysmaa cusbada ah naatriyam kaarbooneyt iyo biyo.



Ayoonka kaarbooneytka ( $\text{CO}^-$ ) ahi waxa uu ka yimid kaarboonik asiidh oo ah asiidh daciif ah. Sidaa awgeedna ayoonka kaarbooneytka ahi waa beys. Taas ayaana u sabab ah waxa uu milanka naatriyam kaarbooneytka ihi ugu rogo litmaska buluug. Naatriyam kaarbooneytka marka lagu milo biyo waxa soo baxaya ayoonno haydarogsaydh ( $\text{OH}^-$ ) ah sida isle'egta hoose muujinayso; ayoonnadaas ayaana ugu wacan beysnima-da cusbadaas.



Marka ammooniyam haydarogsaydh iyo haydarokolorik asiidh ay ifsasaqaan waxa ka-dhasha ammooniyam koloraydh iyo biyo.



Ayoonka ammooniyamka ( $\text{NH}_4^+$ ) ahi waxa uu ka yimid ammooniyaa oo ah beys daciif ah. Sidaa awgeedna ayoonka ammooniyamka ( $\text{NH}_4^+$ ) ahi waa asiidh. Taas ayaana u sabab ah wax uu litmaska buluugga ihi, uu casaan isugu beddelo marka lagu dhex rido milan ammooniyam koloraydh ah. Ammooniyam koloraydhta marka lagu milo biyo, waxa soo baxa ayoonno

haydarooniyam ah; ayoonnadaas ayaana ugu wacan asiidhni-mada milankaasi.




Guud ahaan cusbooyinka kā dhasha falgalka ka dhex dhaca beys xooggan iyo asiidh daciif ah, milannadoodu waxa ay u dhaqmaan sida beyska, cusbooyinka ka dhasha isfasaqa beys daciif ah iyo asiidh xoogganna, marka biyo lagu daro waxa ay u dhaqmaan sida asiidhada. Falgalkaa gaarka ah ee ka dhex dhaca cusbooyinkaas iyo biyahana waxa la yidhaa falgal biyood.

#### Raadka uu miluhu ku leeyahay asiidhnimada milanka:

Si aynu u aragno xidhiidhka ka dhexeeya asiidhnimada uu milan leeyahay iyo milaha uu ku dhex jiro, bal hadda aynu u fiirsanno tijaabooyinka soo socda.

Tijaabo: 6.1 Soo qaado woxoogaa naatriyam koloraydh ah oo ku dhex rid dhalo sur laba dalool leh wadata. Masaf gelidaloollada midkood, ka kalena xidhiidhiso dhex geli (Eeg jaantuska 6.2).



JT. 6.2

**Dabadeed woxoogay salfiyuurik asiidha oo rib ah ku shub**  
dhaladaa adiga oo soo dhex marinaya masatka. Neefta soo bax-  
da oo ah haydarojiin koloraydh sii dhixmari dhalo kale oo ay  
ku jirto salfiyuurik asiidh rib ahi si ay uga reebto wax allaale  
wixii biyo ah ee ku jira neetaas. Dabadeed neeftaas ah HCl  
dhixmari milan tolowiin ah. milanka ay tolowiintu ku jirtan  
u hubi sida soo socota:

1. Dhexmari danab oo eeg in milanku danabka gudbiyo iyo  
in kale.
2. Milankaas in ka mid ah ku dhex rid litmas buluug ah  
Wax isbeddel ihi mi ku dhacay?
3. Woxoogay kaalsiyam kaarbooneyt ah ku dhex rid mi-  
lankaasi qayb ka mid ahi. Wax kaarboon laba.ogsaydh  
ahi ma soo baxay?
4. Ugu dambeyn ku rid waslado yaryar oo sink ah, una fii-  
so in wax neef ahi soo baxayso.

Mar labaad neeftii ahayd HCl ta ee ka soo baxaysay dha-  
lada, ee lagu soo engejiyey salfiyuurik asiidha ribta ah dhex-  
mari biyo. Dabadeedna hubi milanka samaysma adiga oo ku  
isticmaalaya afarta tijaabo ee aynu kor ku soo sheegnay.

Go'aanka tijaabooyinkani aad ayay qiimo iyo xiisaba u  
leeyihin. Wuxuu aynu aragnay in marka HCl la dhex marشو  
milan tolowiin ah, uu milanka soo baxaa aanu tusayn astaami-  
hii asiidhada ee caadiga ahaa. Milankuna waxa uu noqonayaa  
danab.ma.gudbiye. Taasina waxa ay inoo caddaynaysaa in aan  
milanka wax ayoonno ahi ku jirin. Hase yeeshay, marka hay-  
darojiin koloraydhta la dhex marشو biyaха, milanka soo ba-  
xxaa waxa uu noqonayaa asiidh. Isla markaas milanku si fi-  
can ayuu danabka u gudbinayaa. Halkaasina waخа innooga

caduun, inaad weyn ku leeyahay asir ihnimada milan  
nada. Giud ahaan asindhiidu waxa ay samay naan marka eg  
saydhada bir ma ahayasha ah ama neefsta HCl la dhexnariyo  
biyo.

### Ribnimada ama Ribnaanta Milannada

Ribnimada milanku waxa ay sheegaysaa ama ay muuji naysaa inta garaam ee milmaha ah ee ku jirta milanka. Ribnimada milankana waxa lagu sheegi (Tibaaxi) karaa siyaabo leegan. Waxa ka mid ah iyada oo xaddiga milmaha ah mool ahaan loo qoro, mugga milankana lagu sheego litirro Ribnimada caynkaas ah waxa la yidhaa moollani. Moollanida milankana waxa loo qeexi karaa inta mool ee milmaha ah ee ku jirta hal litir oo milankaas ah; waxana loo taagaa xarafka M. Tusaale ahaan hal mool oo naatriyam koloraydh (NaCl) ah culayskeedu waa 58.5 garaam (culays-molikiyuulkeeda). Xaddigaas oo lagu milay biyo ku filan oo mugga milanka gaadhiin karta hal litir, waxa ay sameeyaan milan ay moolanidii-su tahay hal ama hal-moollan (1 M). Xaddigaas badhkiis oo ku jira milan hal litir ihina waxa uu samaynayaa milan ibir-bar-shan moollan (0.5 M). Xaddigaas laban-laabkiisuna ( $2 \times 55.5$  g), waxa uu samaynayaa milan laba-moollan (2 M). U fiirso weheliyeyaashu waxa ay sheegayaan inta mool ee milmaha ah ee ku jirta hal litir oo milanka ah.


Xisaab ahaan moollanida milanka waxa loo qori karaa:

	=	Inta mool ee milmaha ah
Moollani	=	1 litir oo milanka ah
ama	=	Inta mool ee milmaha ah
M	=	1 litir oo milanka ah

Inta milmool ee milmaha ah

Mili-litir oo milanka ah.

Marka la doonayo in la diyaarsho milan leh moollani go'an waxa la isticmaalaa dhalo gaar ah (eeg jaantuska 6.3) Xaddiga milmaha ah ee loo baahan yahay ayaa la miisaamaa. ~~deed si fiican~~ ayaa logu milaa qayb milaha (biyo) ka mid ah oo dhalada ku jira. Marka uu milniihu wada milmana waxa lagu kordhiyaa milaha ilaa nugga milanku gaarayo ca laamadda gaarka ah ee ku samaysan surka dhalada.



### JT.6.3

Bal hadda, si aynd u aragno arrintaas, aynu u fiirsannu tusaalooyinka soo soeda

1. Diyaari-litir ah milan naatriyam haydarogsaydh ah oo  $1\text{ M}$ ?

Litir ah milan naatriyam haydarogsaydh ihi oo 1 M wiixa ku jira 1 mool oo NaOH ah. Hal mool oo NaOH ahina waxaa ay la mid tahay 40 garaam. (Culays-molikiyuulkeeda). Sidaa darteed, waa in 40 garaam oo NaOH ah lagu mliaa biyo ilaa uu mugga milanku ka gaadhayo hal litir.

2. Soo saar inta garaam ee K<sub>2</sub>SO<sub>4</sub> ah ee loo baahan yahay si loo diyaarsho litir K<sub>2</sub>SO<sub>4</sub> ah oo 0.5 M?

Hal litir oo 0.5 M K<sub>2</sub>SO<sub>4</sub>, ah waxa ku jira 0.5 mool oo K<sub>2</sub>SO<sub>4</sub>, ah.

Culayska 0.5 mool oo K<sub>2</sub>SO<sub>4</sub>, ihina waa:

Culays-molikiyuulka K<sub>2</sub>SO<sub>4</sub>, ta 174.2 87.1 g

2 2

#### LAYLISYO : 6.1

- Haddii 12 garaami oo NaOH ah lagu milay biyo kuu flan mugga milankuna yahay 500 sm<sup>3</sup>, waa maxay moollan da milankaasi
- Soo saar inta garaam ee KOH ah ee loo baahan yahay si loo diyaarsho milan 400 sm<sup>3</sup> ah oo 0.12 M ?
- Soo saar xaddiga nilmeyaasha ah ee loo baahan yahay si loc diyaarsho (b) lijir H<sub>2</sub>SO<sub>4</sub> oo 0.1M.  
ah oo 0.5 M. (x) 500 mili-litir oo HCl oo 1M.  
t) 250 sm<sup>3</sup> oo NaOH ah oo 1 M. (j) 500 mili-litir oo HCl ah oo 0.5 M. (x) 500 mili-litir oo HCl ah oo 1 M  
kh) 250 mililitir oo Na<sub>2</sub>CO<sub>3</sub> ah oo 1 M

JAWAABO: 1. 0.60 M 2. 2.7 g 3. (b) 9.8 g (t) 10 g (j)  
9.125 g (x) 18.25 g (kh) 26.5 g

## Garaam.Iskudhiganka Iskudhisyada :

Ribnimada milannada waxa kale oo lagu tibaaxi karaa garaam-isudhiganno. Garaam.isudhiganka walaxina (curiye ama iskudhis) waxa loc qecxaa inta garaani ee walaxdaas ah ee ay ku jiraan ama barabixin kara tirada Afogaadaro oo atammo haydarojiin ah. Tirada Afogaadaro oo atammo haydarojiin ihina, waxa ay la mid yihin hal mool oo atammo haydarojiin ah, ama mool badhkee (1 2) oo molikiyuullo haydarojiin ah. Taasina waxa ay la mid tahay 1.079 garaam oo haydarojiin oo la sii mid ah culayska hal garaam-atam oo haydarojiin ah.

Halka atam ee haydarojiinta ahi marka uu falgal ka qayb gelayo, waxa uu bixiyaa ama uu qaataa hal elektaroon. Halka mool ee haydarojiinta ihina waxa ay bixiyaan ama ay qaataan tirada Afogaadaro oo elektaroonno ah (mool elekta-roonno ah). Sidaa darteedna garaam.isudhiganka waxa loo qaadan karaa inuu yahay culayska walaxdaas ee bixin karaa ama soo qaadan kara tirada Afogaadaro ee elektaroon ah.

Sidii aynu hore ugu soo aragnay buugga labaad, culays-isudhiganka curiyuhu waxa uu la mid yahay culays-atamka curiyahaas oo loo qaybshey kaafatoonkiisa. Xisaab ahaani, waxa loo qori karaa.

Culays-atam

Culays.isudhigan

Kaafatoonka curiye

Waxa kale oo aynu soo aragnay in marka falgal dhacayo ee ay curiyeyaashu isuu tegayaan ay isugu darsamaan saamigal go'an oo la mid ah culays.isudhigannadocila. Haddaka, Chadadaa ku saabsan culays isudhiganku kuma koobna curiyeyaa sha oo keli ah ee waa lagu isticmaali karaa isudhisyadana.

Haddii aynu u fiirsanno isle'egta kimikaad ee ah



Waxa aynu arki karraa in 2 garaam-atam oo haydarojiin ihi marka ay la falgalaaan koloriinta ay samaynayaan 2 mool oo haydarojiin koloraydli ah. Sidaa darteedna hal garaam-atam oo haydarojiin ihi waxa ay samaynaysaa 1 mool oo haydarojiin koloraydh ah. Halkaasna waxa aynu ka arki karraa in halka mool ee haydarojiin koloraydh ihi uu u dhigan yahay halka garaam-atam ee haydarojiinta ah. Hase yeeshi, halka garaam-atam ee haydarojiinta hi waxa ay la mid tahay culays-isudhiganka haydarciinta. Culays-isudhiganka haydarojiin koloraydhta ihi waa inuu la mid noqdaa culays-molikiyuulka haydarojiin koloraydhta. Sidaa awgeedna culays-isudhiganka haydarojiin koloraydhta waa 36.5 (culays-molikiyuuleeda).

Haddii aynu u qaadanno haydarojiin koloraydhta beegat, culays-isudhigannada iskudhisyada kale oo dhan si dhik yar ayaynu u heli karaynaa. Si aynu arrintaas u fahamno bal aynu u fiirsanno tusaalooyinka iyo isle'egyada kimikaad ee soo socda:




Haddii aynu u fiirsanno isle'egta sare, waxa aynu arki karnaa in hal mool oo naatriyam haydarogsaydh ihi ay la falashay hal mool oo haydarojiin koloraydh ah. Hase yeeshi halka mool ee haydarojiin koloraydhta ihi waxa ay la mid tahay culays-isudhiganka haydarojiin koloraydhta. Sidaa darteed, halka mool ee naatriyam haydarogsaydhta ihina waa in ay la mid noqotaa culays-isudhiganka naatriyam haydarogsaydhta; mar haddii ay falgalayaashu isugu darsamaan saamigal go'an oo la mid ah culays-isudhigannadooda. Sidaa awgeedna culays-isudhiganka naatriyam haydarogsaydhta waa 40 (culays-molikiyuulkeeda).



Sida aad isle'egta sare ku aragtid, hal mool oo kaalsiyam haydarogsaydh ihi waxa uu la falgelayaa oo uu u baahan ya hay 2 mool oo haydarojiin koloraydh ah. Halkaasina waxa in nooga muuqda in hal mool oo haydarojiin koloraydh ihi u baa han lahaa 1/2 mool oo kaalsiyam haydarogsaydh ah. Sidaa darteed 1/2 molka kaalsiyam haydarogsaydhka ihi waa in uu la mid neqdaa culays-isudhiganka kaalsiyam haydarogsaydhka. Sidaa awgeedna culays-isudhiganka kaalsiyam haydarogsaydhku waa 37 (1/2 culays-molikiyuulkiisa).

3. Haddii aad u fiirsatid isle'egta ah:



Waxa aad arkaysaa in culays-isudhiganka aluminam haydarogsaydhku uu la mid yahay 1/3 mool oo aluminam haydarcgsaydh ah ama 1/3 culays-molikiyuulkiisa.

U fiirso tirooyinka ah 2 iyo 3 waxa ay la mid yihin kaaf toonka ayoonka kaalsiyamka iyo ka aluminamka sida ay u kala hoireeyaan; ama inta ayoon ee OH<sup>-</sup> ah ee ku jira beys yadaasi.

Guud ahaan culays-isudhiganka iskudhisyadu waxa uu tiro ahaan la mid yahay culays-molikiyuulka iskuudhiskaas oo loo qaybtshay wadarta kaaftoonka ayoonnada togan ama taban ee iskudhiskaasi leeyahay. Xisaab ahaanna waxa loo qori karuu.

Culays-moli ka iskudhiska  
Culays-isudhiganka iskudhiska = -----  
W. Kaaf. ayoonka togan

ama

Culays-amoli ka iskudhiska

W. Kaat ayoonka taban

98

Sidaa darteed culays-isudhiganka H<sub>2</sub>SO<sub>4</sub> 49

2

Sidaas oo kale ayaa loo heli karaa culays-isudhigannada Na<sub>2</sub>CO<sub>3</sub>, HNO<sub>3</sub>, iyo H<sub>2</sub>O<sub>2</sub>. Wuxuu ayna kala yihiin 53,63, iyo 32,67 sida ay u kala horreecyaan.

Garaam isudhiganku waxa uu aad ugu habboon yahay in lagu isticmaalo falgalaka ifsasaqa ah ee ka dhaca asu-dhada iyo beysvada, waayo waxa isu tegaya oo isla falgelaya tiro isle'eg oo ayoonno haydarooniyam (H<sub>2</sub>O) ah iyo ayoonno haydarogsaydh (OH<sup>-</sup>) ah. Halkii mool ee ayoonno haydarooniyam ihi waxa uu la falgalaya oo uu milanka ka saarayaan hal mool oo ayoonno haydarogsaydh ah, si ay u sameeyaan lataa mool oo biyo ah sida isle'egta hoose muujinayso.



Hase yeshee, halkii garaam isudhigan ee asiidh ahi waxa uu bixiyaa hal mool oo ayoonno haydarooniyam (borotooni no) ah, isla niarkaas halkii garaam isudhigan ee beys inini waxa uu qaataa hal mool oo ayoonno haydarooniyam ah. Sidaa darteed, falgalaka ifsasaqa waxa lagu qexi karaa falgal ay ga raam-isudhiganno isle'eg oo asiidh iyo beys kala ihi ay isil falgalayaan

## LAYLIS : 6.2

1. Soo saar culays-isudhiganka iskudhisyada soc soeda
- b) Na PO<sub>4</sub>, (t) AgNO<sub>3</sub>, (j) NaCl, (n) Na<sub>2</sub>CO<sub>3</sub>, (kin) K<sub>2</sub>SO<sub>4</sub>

- 2.. Soo saar inta garaam-isudhigan ee ku jira 20 garaam oo  
K<sub>2</sub>SO<sub>4</sub> ah
- 3 Xisaabi inta garaam-isudhigan ee ku jira 50 garaam oo  
(b) CaCO<sub>3</sub> ah. (t) KOH ah (j) H<sub>2</sub>SO<sub>4</sub> ah iyo  
(x) Al<sub>2</sub>(SO<sub>4</sub>)<sub>3</sub> ah.

JAWAABO: 1. b) 54.7. t) 16.9. j) 585. x) 53. kh) 87.1  
2. 0.23 g. 3. b) 0.5. t) 0.89. j) 1.02. x) 0.88.

### Garaam isudhiganka iyo milannada caadiga ah:

Ribnimada milanka waxa aynu ku sheegi karraa darii-qo kale oo ka duwan tii noollanida. Taasina waxa ay tahay iyada oo xaddiga milmaha ah, ee ku jira hal litir ama muq-kaleba oo miilanka ah, lagu tibaaxo garaam-isudhiganno. De riiqadaasha waxa la yidhaahdaa caadinimo, summadda caadi-nimaduna waa xaratka weyn ee N. Caadinimadu waa tibaax-tusaysa inta garaam-isudhigan ee milmaha ah ee ku jirta hai-litir oo milanka ah. Tusaale ahaan, hal mool oo naatriyaan-haydarogsaydhi ah culayskiisu waa 40 (culays molikiyuulkeeda), isla markaas garaam-isudhiganka naatriyam haydarog-saydhtu waa 40 garaam. Xaddigaas (40 garaam) oo lagu mi-lay biyo ku filan oo gaarsiin kara shugga milanka hal litir ayaa sameeya milan caadinimadiisu tahay hal (1 N). Haddii xad-digaas badhkiisna (20 garaam) uu ku jiro milan hal litir ah, caadinin ada milankaasi waxa uu noqonayaa 0.5 N. Xaddigaas labadiisna (2x40 garaam) waxa uu samaynayaa milan ah 2 N.

U fiirso, weheliyaashu waxa ay mar kastaba muujin-yaan inta garaam-isudhigan ee milmaha ah ee ku jira halki-litir ee milanka ahaa.

Xisaab alaaan caadinimada milanka waxa loo qori karaa:

**Caadinimo (N)**

Inta garaam-isudhigan ee milmaha ah

Hal litir oo milanka ah.

ama

Inta mili g/isudhigan ee milmaha ah

N

Mili litiro milanka ah

Marka la doonayo in la diyaarsho milan caadinimo go-an leh waxa la isticmaala dhalo gaar ah oo la mid ah tii ayne isticmaalay markii la diyaarinayey milan moollani go'an leh Xaddiga milmaha ah ee loo baahan yahay ayaa si aan khalad lahayn loo miisaamaa, dabadeedna si fiiqen ayaa loogu milaa qayb milaha (biyo) ka mid ah oo dhalada ku jira. Marka nu milmuhu wada milmona waxa lagu kordhiyaa milaha ilaa mug-ga milanku gaaray calaamadda gaarka ah ee ku samaysan surka dhalada.

Bal hadda si aynu arrintaas u fahamno ayn u fiirsanno tusaalooyinka soo socda

1. Diyaari litir ah milan naatriyam haydarogsaydh ah oo caadinimadiisu tahay hal (1 N).

Milan hal litir ah oo caadinimadiisu tahay hal (1 N) oo ah naatriyam haydarogsaydha waxa ku jira hal garaam-isudhigan oo beyska ah. Hase yeeshee, halka garaam-isudhigan ee NaOH ta ah culayskiisu waa 40 garaam (culays.isudhiganka NaOH ta). Sidaa darteed 40 garaam oo naatriyam haydarogsaydh ah ayaa lagu milaa biyaha ilaa uu mugga milanku gaaryo hal litir.

2. Soo saar inta garaam ee loo baahan yahay si loo diyaarsho litir NaOH ah oo ah 0.1 N ?

Halka litir ee NaOH ta ah ee leh caadinimo ah 0.1 N, wa

xa ku jira 0.1 garaam-isudhigan. Hase yeeshi, 1kii garaam-isudhigan waxa ku jira 40 garaam, sidaa darteed 0.1kii garaam-isudhigan waxa ku jira 4 garaam oo NaOH. Sidaa awgeed culayska naatriyam haydarogsaydha ah ee loo baahan yahay waa 4.00 garaam.

Mar haddii ay run tahay in tirada isu-dhigannada ah ee falgaleyaasha isu tegayaa in ay isle'eg yihiin, waa in milan ha' litir ah oo HCl ahi uu ku jiro 1 garaam-isudhigan oo HCl ah litirkiiba, uu la falgalaa oo ay isfasaqaan milan hal litir ah oo NaOH ah oo uu ku jiro 1 garaam-isudhigan oo NaOH ahi litirkiiba. 100 sm<sup>3</sup> oo isla milankaa haydarojiin koloraydha (HCl) ahina, waxa uu fasaqi karaa 100 sm<sup>3</sup> oo isla milankaa NaOH ta ah. Isla markaas milan hal litir ah oo HCl ah oo uu ku jiro 1 garaam-isudhigan oo HCl ahi, waxa uu la falgelayaa oo ay isfasaqayaan milan 500 ml ah oo NaOH ah oo ay ku jiraan 2 garaam-isudhigan oo NaOH ihi litirkiiba. Hal litir oo milan HCl ah oo uu ku jiro 1 garaam-isudhigan oo HCl ahi litirkiiba, waxa ay isfasaqayaan 5 litir oo milan NaOH ah oo ay ku jiraan 0.2 garaam-isudhigan.

Tusaalooyinkaa aynu kor ku soo sheegnay waxa aynu ka arki karraa in mugga milan ee HCl ta ah X inta garaam-isudhigan ee litirkii HCl ta ahaa ku jira = Mugga milanka ee NaOH ta ah ee ay isfasaqeen HCl ta X inta garaam-isudhigan ee litirkii NaOH ta ku jira.

Haddii aad u fiirsatid inta garaam-isudhigan ee litirkii milanka ahaa ku jira waxa uu la mid yahay caadinimada milanka. Sidaa darteed isle'egta sare waxa aynu u qori karraa :

Mugga milanka HCl ta ah X caadinamada HCl ta, ==  
Mugga milanka NaOH ta ah ee ay isfasaqeen HCl ta X  
Caadinimada NaOH ta.

Haddii aynu mugga milanka asiidhta iyo ka beyska u kala qaadanno V<sub>a</sub> iyo V<sub>b</sub>, caadinimada asiidhta iyo fa'beyska na N<sub>a</sub> iyo N<sub>b</sub>, sida ay u kala horreyaan, waxa aynu isle'egta sare u qori karraa:



Sidii aynu hore u soo sheegnay, marka falgal dhacayo wixa isu taga garaam-isudhiganno isle'eg, oo falgaleyaa ah. Sidaa darteed marka falgal isfasaq ihi dhacayo, Mugga asiidhta X Caadinimada asiidhtu = Mugga beyska X Caadinimada beyska  
ama  $V_a N_{a\text{HCl}}$  (asiidh) =  $V_b N_{b\text{NaOH}}$  (beys)

1. Soo saar inta militir ee ah 0.30 N HNO<sub>3</sub> ah ee loo baahan yahay inay isfasaqaan 24 ml oo 0.25 N KOH ah ? Inta garaam-isudhigan ee HNO<sub>3</sub> ah iyo inta garaam-isudhigan ee KOH ah, ee isla falgalayaa waa inay isle'ekaadaan.

Inta ml oo HNO<sub>3</sub> ah X 0.30 garaam-isudhigan

1000 ml

24 ml oo KOH X 0.2 g.isudhigan

1000 ml

24 ml X 0.25 garaam-isudhigan 20 ml

M.I. HNO<sub>3</sub>, tu = \_\_\_\_\_ = \_\_\_\_\_  
0.30 garaam-isudhigan.

Sidaa darteed 20 ml oo HNO<sub>3</sub> ah ayaa loo baahan yahay. Si aynu xisaabtan uga shaqayno waxa kale oo aynu isticmaali karraa isle'egta ah :

$$V_a \times N_a = V_b \times N_b$$

$$V_a \times 0.30 \text{ N} = 24 \text{ ml} \times 0.25 \text{ N}$$

$$V_a = \frac{24 \text{ ml} \times 0.25 \text{ N}}{0.30 \text{ N}} = 20 \text{ ml.}$$

Sidaa darteed 20 ml oo HNO<sub>3</sub> ah ayaa loo baahan yahay.

2. Soo saar inta mililitir ee 0.10 N HCl ah ee loo baahan yahay in ay isfasaqaan 150 ml oo 0.01 N KOH ?

$$V_a \times N_a = V_b \times N_b$$

$$V_a \times 0.70 \text{ N} = 150 \text{ ml} \times 0.01 \text{ N}$$

$$V_a = \frac{150 \text{ ml} \times 0.01 \text{ N}}{0.1 \text{ N}} = 15 \text{ ml.}$$

Sidaa darteed 15 ml oo HCl ah ayaa loo baahan yahay.

3. Xisaabi inta garaam ee KOH ah ee la falgelayaa 100 ml oo 0.80 N HCl ah ?

Inta garaam-isudhigan ee KOH ka ahi =

Inta garaam-isudhigan ee HCl ah.

Inta garaam-isudhigan ee HCl ah ee ku jira 100 ml oo milanka ahi

$$= \frac{0.80 \text{ garaam-isudhigan} \times 100 \text{ ml}}{1000 \text{ ml}} = 0.08 \text{ garaam-isudhigan}$$

Mar haddii ay garaam-isudhiganka HCl ta iyo ka KOH ku isle'.  
 eg yihiin, inta garaam-isudhigan ee KOH ta ihina = 0.08.  
 Hase yeeshee, halkii garaam-isudhigan ee KOH ka ahi = 56.. g.  
 Sidaa awgeed 0.80 garaam-isudhiganna =  $56.. \text{g} \times 0.08 = 4.5 \text{ g}$ .

4. Soo saar caadnimada milan ah  $\text{H}_3\text{PO}_4$  haddii 40 ml oo milankaas ka mid ah ay ifasafeen 120 ml oo NaOH ah oo ay caadnimadeedu tahay 0.53 N ?

$$\begin{aligned} V_a \times N_a &= V_b \times N_b \\ 40 \text{ ml} \times N_a &= 120 \text{ ml} \times 0.53 \end{aligned}$$

$$N_a = \frac{120 \text{ ml} \times 0.53}{40 \text{ ml}} = 1.59$$

Sidaa awgeed caadnimada  $\text{H}_3\text{PO}_4$  tu = 1.59 N.

#### LAYLIS :

1. Soo saar inta garaam ee (b)  $\text{H}_3\text{PO}_4$  ee loo baahan yahay si loo diyaarsho 200 ml oo ah 0.5 N  $\text{H}_3\text{PO}_4$ . (t) ee  $\text{Ca}(\text{OH})_2$ , ah ee loo baahan yahay si loo helo milan 100 ml oo ah 0.1 N  $\text{Ca}(\text{OH})_2$ .
2. Xisaabi caadnimada milannada soo socda ee ay Ku kala jiraan milmeyaasha soo socdaa :
  - b. 31.5 garaam oo  $\text{HNO}_3$  ah halkii litir.
  - t. 4.00 garaam oo NaOH ah 100kii ml.
  - j. 3.7 garaam oo  $\text{Ca}(\text{OH})_2$ , ah 25kii ml litirba.
  - x. 0.98 garaam oo  $\text{H}_2\text{SO}_4$  ah halkii litir.

3. Soo saar inta mililitr ee 0.25 N HCl ah ee loo baahan ya hay in ay isfasaqaan 500 ml oo ah milan ay ku jiraan 8.00 garaam oo NaOH ahi ?

JAWAABO: 1. 0.98 g t) 0.38 g (2) b) 0.5 N, t) 1 N, j) 14.8 N  
3. 800 ml oo HCl ah.

### Ribnaanta Ayoonnada Haydarojiinta ( $H^+$ ) ah:

Biyaha sooca (xareedda) ahi in yar ayay ayoonoobaan sida isle'egta hoose muujinayso:



Taas ayaana ugu wacan danab-gudbinta dacijifka ah ee ay biyaha sooca ihi tusaan. Waxaana tijaabo ahaan lagti helay oo lagu soo saaray in ribnaanta ayoonnada  $H^+$  ah oo la'mid ah ta ayoonnada  $OH^-$  ah ay tahay  $1 \times 10^{-7}$  garaam-aayoon halkii litirba. Sidaa darteed ayaanay biyuhu u noqdeen iskudhils dhexdhexnad ah oo aan lahayn astaamaha asiidhada iyo kuwa beysyada midkoodna.

Madoorsamaha ayonoobidda biyahana waxa loo qoraa :

$$\frac{[H^+] \times [OH^-]}{[H_2O]} = K_w$$

Sakalka ah [ ] wuxa uu sheegayaa  
ribnaanta oo lagu tibaaxay mool/litir

Mar haddii ay ribnaanta (55.55 mool litirkilba) biyaha aan ayonoobini ay aad uga badan tahay ribnaanta ayoonnada  $H^+$  iyo t aayoonnada  $OH^-$ , waxa ribnaanta biyaha aan ayonoo bin loo qaataa inay tahay madoorsoome, sida caadiga ahna, waxa la siyyaa qiimo ah 1. Sidaa darteedna isle'egta sare waxa ay noqonaysaa  $[H^+] \times [OH^-] = K_w$ .

$K_w$  waxa la yidhaa taranka madoorsoomaha ayoonka biyaha  
Haddii aynu kala siinno  $[OH^-]$  iyo  $[H^+]$  qimaha ah

$$10^{-7}$$
, waxa aynu arkaynaa in  $K_w = [H^+] \times [OH^-] = 10^{-7} \times 10^{-7} = 10^{-14}$ .

Qimahaas ah  $10^{-14}$  oo la mid ah Taranka Ayoonka biyu-hu waa madoorsoome aan marna isbeddelin kaalad kasta milanku ha ku jiro ee. Taasiina waxa ay inna tusaysaa in milan kasta oo ay biyo ku jiraan taranka ribnaanta ayoonnada  $H^+$  iyo kuwa  $OH^-$  ay noqonayaan  $10^{-14}$ . Tusaale ahaan, haddii aynu HCl ku darro biyo sooc ah ilaa ay ribnaanta ayoonnada  $H^+$  gaarayso  $1 \times 10^{-1}$  garaam-aayoon litirkiiba, riisnaanta ayoon-nada  $OH^-$  waxa ay markiiba u soo yaraanaysaa  $1 \times 10^{-13}$  garaam-aayoon litirkiiba si taranka ribnaanta ayoonnada ah  $H^+$  iyo  $OH^-$  ee milanku u noqdo  $10^{-14}$ . Haddii aynuse ku darro NaOH biyaha sooca ah ilaa ay ribnaanta  $OH^-$  noqonayso  $1 \times 10^{-1}$  garaam-aayoon litirkiiba, isla markiiba waxa ay ribnaantaa ayoon-nada  $H^+$  isu rogeysaa  $10^{-13}$ , si taranka ribnaanta ayoonnadu uu u noqdo  $10^{-14}$ . Halkaasina waxa innooga muuqata in marka ribnaanta ayoonka haydarojiintu kerodhoba ay yaraanayso ta kuwa ayoonnada  $OH^-$ ; marka ribnaanta ayoonka haydarog-saydhu korodhona ay yaraanayso ta ayoonnada  $H^+$ .

Halkaana waxa innooga cad, in haddii ribnaanta ayoon-nada  $H^+$  ay ka badan tahay  $10^{-7}$  garaam-aayoon litirkiiba ( $10^{-6}$  ilaa  $10^{-7}$ ) uu milanku noqonaayo asiidh, haddiise ay ka yar tahay  $10^{-7}$  garaam-aayoon litirkiiba ( $10^{-8}$  ilaa  $10^{-13}$ ) uu milanku noqonaayo beys. Taasina waxa ay la mid tahay in asiidh nimada iyo beysnimada milanku ay ku xidhan yihiin ribnaanta ayoonka haydarojiinta ( $H^+$ ) ee ku jira milankaas. Tusaale ahaan milan ay ribnaanta ayoonnada haydarojiinta ( $H^+$ ) ee ku jiraa ay tahay  $1 \times 10^{-6}$  waxa uu noqonayaan asiidh dacif ah. Tirooyinka ah  $1 \times 10^{-6}$ ,  $1 \times 10^{-7}$  iyo wixii kale ee, la mid ahiba aad ayay u hawl badan yihiin, sida awgeedna asiidh nimada iyo

beysnimada milannada waxa Jagu qiyasaa tiro kale oo la yi-dhaahdo pH. pH ka waxa loo qeexaa logridamka rogaalka rib-naanta ayoonka haydarojiinta oo lagu tibaaxay garaam-aayoon-ka haydarojiinta oo lagu tibaaxay garaam-aayoonno litirkiiba. Tusaale ahaan ka soo qaad in ribnaanta ayoonnada  $H^+$  ay tahay  $1 \times 10^{-6}$  garaam-aayoon litirkiiba. Rogaalka ribnaantaasi waxa

1  
ay tahay \_\_\_\_\_ oo la mid ah  $1 \times 10^{-6}$ .  
 $1 \times 10^{-6}$

Logridamka  $1 \times 10^{-6}$  waa 6. Sidaa darteed pH ka milanku waa 6. Halkaasina waxa innooga muuqata in pH ah 6 uu la mid yahay ribnaan ayoonno  $H^+$  ah oo ah  $10^{-6}$  mool litirkiiba. Isla sidaas oo kale ayaa pH ah 8.2 uu u tusayaa milan ay rib-naanta ayoonnada haydarojiinta ah ee ku jiraa ay tahay  $1 \times 10^{-8}$  mool/litir.

Xisaab ahaan pH ku =  $\log \frac{1}{[H^+]}$

Tusaha soo socdaana waxa uu si fiican innoogu muujina. yaa xiriirka ka dhexeeya pH-ka, ribnaanta ayoonka haydaro-jiinta iyo sida asiidhnimada iyo beysnimada milanku ay isula beddelaan pH ka.

Ribnaanta ayoon- nada H <sup>+</sup>	Ribnaanta ayoon- nada OH	Taranka ribnaanta ayoonnada	pH ka	xaaladda milanka
$1 \times 10^{-11}$	$1 \times 10^{-1}$	$1 \times 10^{-14}$	1	beys xooggan
$1 \times 10^{-12}$	$1 \times 10^{-2}$	$1 \times 10^{-14}$	2	beys xooggan
$1 \times 10^{-11}$	$1 \times 10^{-3}$	$1 \times 10^{-14}$	3	beys xooggan
$1 \times 10^{-10}$	$1 \times 10^{-4}$	$1 \times 10^{-14}$	4	beys
$1 \times 10^{-9}$	$1 \times 10^{-5}$	$1 \times 10^{-14}$	5	beys daciifa
$1 \times 10^{-8}$	$1 \times 10^{-6}$	$1 \times 10^{-14}$	6	beys daciifa
$1 \times 10^{-7}$	$1 \times 10^{-7}$	$1 \times 10^{-14}$	7	dhexdhexaad
$1 \times 10^{-6}$	$1 \times 10^{-8}$	$1 \times 10^{-14}$	8	asiidhi daciifa
$1 \times 10^{-5}$	$1 \times 10^{-9}$	$1 \times 10^{-14}$	9	asiidhi daciifa
$1 \times 10^{-4}$	$1 \times 10^{-10}$	$1 \times 10^{-14}$	10	asiidh
$1 \times 10^{-3}$	$1 \times 10^{-11}$	$1 \times 10^{-14}$	11	asiidh xooggan
<del><math>1 \times 10^{-2}</math></del>	$1 \times 10^{-12}$	$1 \times 10^{-14}$	12	asiidh xooggan
$1 \times 10^{-1}$	$1 \times 10^{-13}$	$1 \times 10^{-14}$	13.	asiidh xooggan

JT. 6.4

U firsso marka pH ku uu kordhoba ribnaanta ayoonnada H<sup>+</sup> way yaraanaysaa, asiidhnimada milankuna hoos ayay u dhacaysaa.

#### Isku Mitimiska Asiidhada iyo Beysyada :

Marka falgal ifsasaq ahi dhacayo ayoonka haydarogsay-dhka (OH<sup>-</sup>) ah ee beyska ayaa hal borotoon ka qaata ayoonka haydarobniyamka (H<sub>2</sub>O<sup>-</sup>) ah ee asiidhta; waxana samaysma molikiyuullo biyo ah.



Sidii aynu horeba u soo aragnay falgalka ifsasaqa ahi

waxa uu dhacaan marka ay garaam-isudhiganno beysyo ah iyo kuwo asiidho ah oo isle'egi ay isu tagaan. Waxa aynu soo aragnay in hal litir oo biyo ah ay ku jiraan  $10^{-7}$  mool oo ayoonno  $\text{H}_3\text{O}^+$  ah iyo  $10^{-7}$  mool oo ayoonno  $\text{OH}^-$  ah; isla markaas uu taranka ayoonnadaasi yahay  $10^{-14}$ .

Haddii 0.1 mool oo haydarokolorik asiidh ah lagu daro hal litir oo biyo ah, ribnaanta ayoonka haydaroniyamku sare ayuu u kacayaa, waxa aanu noqonayaa  $10^{-1}\text{M}$ . Mar haddiise taranka ayoonnada  $[\text{H}_3\text{O}^+] \times [\text{OH}^-] = 10^{-14}$ , waa in ribnaanta ayoonka haydarogsaydhka ihi ay u yaraataa  $10^{-13}\text{M}$ .

Hase yeeshie, yaraantaa ay yaraatay tirada ayoonnada haydarogsaydhka ah ee ku jira milanka, waxa ay ka timid falgalika ka dhex-dhacay ayoonnada haydarogsaydhka iyo ayoonnada haydaroniyamka ah ee milankaasi ku jira. Halqaasina waxa aynu ka aragnaa in  $10^{-14}$  mool oo ayoonno haydaroniyah, ay la falgaleen ayocnno haydarogsaydh ah oo ay ka baxeen milanka. Hase yeeshie, xaddigaasi aad ayuu u yar yahay, mar ka loo eego ribnaanta ayoonnada haydaroniyamka ah ( $10^{-1}\text{M}$ ) ee ku jira milankaasi.

Bal hadda aynu mar labaad u fiirsanno waxa dhaca mar ka 0.1 mool (4 garaam) oo naatriyam haydarogsaydh ah lagu kordhiyo milan hal litir ah oo  $10^{-1}\text{M}$  oo  $\text{HCl}$  ah. Naatriyam haydarogsaydhu way milmaysaa. Waxa ayna milanka ku soo kordhinaysaa 0.1 mool oo  $\text{OH}^-$  ah. Sida aad aragtidna ribnaanta ayoonnada  $\text{OH}^-$  ah iyo ta kuwa  $\text{H}_3\text{O}^+$  ahi aad ayay uga sareeyaan qiimihii ahaa  $10^{-7}$ . Isla markaasna taranka ayoonnadaasi aad ayuu uga badan yahay qiimihii ahaa  $10^{-14}$ . Hase ahaatee, ayoonnada  $\text{OH}^-$  ah iyo kuwa  $\text{H}_3\text{O}^+$  ah ee milankaasi ku jiraa, sidi tusaalihii hore, ayay isula falgelaan. Arrintuse aad ayay tii hore uga duwan tahay iyada oo tiro isle'eg oo ayoonno  $\text{OH}^-$  ah iyo kuwo  $\text{H}_3\text{O}^+$  ahi ay mar walba milanka ka baxayaan, ilaa uu taranka ayoonnadaasi, ee milanka ku soo

hadhay noqonaayo  $10^{-14}$ . Ribnaanta ayoonnada  $\text{OH}^-$  ah iyo ta kuwa  $\text{H}_3\text{O}^+$  ah ee ku jira milankuna waxa mid kastaaba ay noqonaysaa  $10^{-7}\text{M}$ .

$$[\text{H}_3\text{O}^+] = [\text{OH}^-] = 10^{-7}$$

Taasina waxa ay la mid tahay ribnaanta ayoonnada  $\text{OH}^-$  ah iyo kuwa  $\text{H}_3\text{O}^+$  ah ee ku jira biyaha caadiga ah. Sidaa darteed milanku waxa uu noqonayaan dhedhexaad aan ahayn asiidh iyo beystoona; waxana la odhanayaan falagal isfasaq ah ayaa dhacay. Ku daristaa isdabajoogga ah ee ásiidha lagu darayo milan beys ah ama beyska lagu darayo milan asiidh  $\text{pH}$  ayaa loo yaqaannaa MITIMIS. Mitimiskana waxa loo qee-xi karaa hab lagu soo saari karo ribnaanta milan aan ribnimadiisa hore loo aqoonnin iyada oo si tartiib ah loogu darayo milan ribnimadiisa la yaqaanno ilaa la gaadhayo barta isfasaqa.

Mitimisku waa habka ay ku xidhan tahay ama ku dhisan tahay dariiqada saafid-muggeedku; waxana lagu soo saari karaa culayska isku dhisyada la isku mitiminayo midkood. Waxana la isticmaalaa tilmaame ku habboon falgalkaas. Saddexda tilmaam vaal ee caanka ahina, waa litmiska, mitayloranjka iyo finooftiliinka. Tusaha soo socda ayaana inna tusi doona sida midabbadoodu isula beddelaan asiidhnimada iyo beysni mada milannada iyo midabka kala guurka oo ah ka la arko, marka la gaadho barta isafasaqa.

Tilmaame	Midabka ay asiidhu ka dhigto	Midabka kala guurka	Midabka uu beysku ka dhigo
Litmaso'	Casaan	Bink	Buluug.
Mitaylorenj	Casaan	Liimi	Hurdi (woob)
Finooftiliin	midab.ma.laha	Bink	Casaan..


Saddexdaa tilmaameyaal mid kastaaba, waxa uu ku habboon yahay falgal ifsasaq ah oo gaar ah. Tusaale ahaan, marka la isku mitiminayo beys daciif ah ( $\text{Na}_2\text{CO}_3$ ) iyo asiidh xooggan (HCl) waxa la isticmaalaa oo ku habboon mitayloranj oo keli ah. Marka la isku mitiminayo asiidh daciif ah (sida ase tikkii asiidh) iyo beys xocggan (sida  $\text{NaCH}$ ), waxa ku habboon finooftiliin oo keli ah. Hase yeeshi, marka ay isla falgelayaan beys xooggan iyo asiidh xocggani mid kasta oo saddexdaasi tilmaameyaal ka mid ahba waa la isticmaali karaa.

**Soo saarista caadnimada milan ah  $\text{HCl}$  iyada oo lagu mitiminayo milan  $\text{Na}_2\text{CO}_3$  ah oo caadnimadiisa la yaqaanno:**

### TIJAABO 6.2

Soo qaado mitimiye oo ku dhaq biyo nadiif ah, dabadeed na ku dhaqdhaq in yar oo asiidha ka mid ah. Adiga oo isticmaalaya masaf nadiif ah, kaa buuxi mitimiyaha asiidha, kadibna woxoogay asiidha ka mid ah ka sii daa si' asiidhu u gasho afka dhuúban ee mitimiyaha.

Dabadeed u meerar saabaanka sida jaantuska 6.5 ku aragtid .



Dhalo toobineed lagu dhaqay biyo xareed ah oo nadiif ah ayaa waxa lagu shubaa  $25 \text{ sm}^3$  oo milanka  $\text{Na}_2\text{CO}_3$  ah iyada oo la isticmaalayo nuuge nadiif ah oo lagu dhaqdhaqay milanka  $\text{Na}_2\text{CO}_3$  ah. Sida loo cabbiro muggaasina waa sidatan :

Soo qaado nuuge ay ku taallo  $25 \text{ sm}^3$ , dabadeed ku soo nuug milanka ilaa heerka milanku dhaafayo calaamadda ku samaysan nuugaha. Dabadeed farta murdisada la yiraahdo (waa farta ku xigta suulka) ku qabo afka nuugaha, tartiibna uga sii daa milanka ilaa uu heerkiisa hoose la sinmo calaamadda nuugaha. Ku wareeji milankaas, adiga oo ka ifaalinaya in bar qudh ihi ka dhacdo, dhalo toobinkeeda. Saddex dhicood oo mitayl oraanj ahna ku dar.

Dabadeed asiidha mitimiyaha ku jirta tartiib ugu sii daa beyska, adiga oo marka ay woxoogay asiidh ihi ku dhacaan beyskaba dhalada tartiib u ruxaya, ilaa aad gaaraysid barta isfasaqa. Halkaasina ka soo saar inta  $\text{sm}^3$  ee asiidh ah ee loo baahday. Ku celi mitimiska laba jeer oo kale ijaa aad heshid qimo isku dhow; dabadeedna celceliska mugagga asiidha aad isticmaashay u qaado mugga dhabta ah ee loo baahan yahay.

Halkaan ka soo saar caadinimada milanka asiidhaas adiga oo raacaya sida hoos ku taal.

Marka la gaaro barta isfasaqa,

$$N_a \cdot V_a = N_b \cdot V_b$$

$$\therefore N_a = \frac{N_b \cdot V_b}{V_a}$$

Isle'egtaasi waxa qudha ee aan qiimihiisa la aqocnnin waa caadinimada asiidhada ( $\text{Na}$ ) oo si hawl yar loo soo saari karo.

Ribnimo = Caadinimo X Garaam iskudhiganka.

Sidaas oo kale ayaa lagu soo saari karaa ribnimada isku dhis kasta iyada oo la isticmaalayo habkaas mitimiska. Waxana lagu soo saari karaa xitaa saafinimada iyo soocnimada naamuunadaha macdanta ah ee laga soo saaro dhulka.

**LAYLISYO :**

1. Adiga oo raacaya aragtiyaha kala duwan ee Arhiinas iyo Baroonisted qeex ereyada ah beys iyo asiidh.
  - b) HCl, (t)  $\text{NH}_4^+$ , (j)  $\text{NH}_3$ , (x)  $\text{H}_3\text{O}^+$ , (kh)  $\text{SO}_4^{=}$ , (d)  $\text{Al}(\text{H}_2\text{O})_6^{3+}$ , (r)  $\text{CO}_3^{2-}$ , (s)  $\text{ClO}_4^-$ .
2. Adiga oo isticmaalaya aragtida Barochnisted iyo Lawri sheeg walxaha soo socdaa inay yihiin beys iyo inay yihiin asiidh :
  - b)  $(\text{NH}_4)_2\text{SO}_4$ , (t)  $\text{Na}_2\text{CO}_3$ , (j)  $\text{NaNH}_2$ , (x)  $\text{FeCl}_3$ , (kh)  $\text{NaCN}$ , (d)  $\text{Ba}(\text{NO}_3)_2$  iyo (r)  $\text{NaCl}$ .
3. Bal hadda saadaali raadika ay ku yeelan karaan litmas ka milanka cusbooyinka soo socda; isla markaas sababta sharax.
  - b)  $(\text{NH}_4)_2\text{SO}_4$ , (t)  $\text{Na}_2\text{CO}_3$ , (j)  $\text{NaNH}_2$ , (x)  $\text{FeCl}_3$ , (kh)  $\text{NaCN}$ , (d)  $\text{Ba}(\text{NO}_3)_2$  iyo (r)  $\text{NaCl}$ .
4. Sharax micnaha ereyada ah beys daciif ah, beys xoog gan, asiidh daciif ah iyo asiidh xooggan?
5. Waa maxay pH ku? (b) soo saar pH ka milannada ay ku kala jiraan (i)  $10^{-5} \text{ M H}_3\text{O}^+$ , (ii)  $10^{-5} \text{ M OH}^-$ .
6. Waa maxay mitimisku? Sheeg adiga oo tusaale qaada. naya sida habkaa mitimiska ah loogaga faa'iidaysto shaybaarrada.

## LAYLISYO:

7. Soo saar inta (i) garaani iyo (ii) gar<sup>a</sup>am-isudhigan ee loo baahan yahay si loo diyaarsho hal litir oo beysyada soo socda ah oo caadinimadood yihiin hal (1. N) (b) KOH, (t)  $\text{Na}_2\text{CO}_3$ ; (j)  $\text{NaHCO}_3$ ; (x)  $\text{Ba}(\text{OH})_2$ .
8. Waa maxay culayska naatriyam kaarbooneytka ooma-naha ah ee loo baahan yahay si loo diyaarsho milan  $200 \text{ sm}^3$  oo caadinimadiisu tahay  $0.5$  (0.5) ?
9. Soo saar mugga  $\text{N H}_2\text{SO}_4$  ec fasaqi kara (b)  $15 \text{ sm}^3$  N NaOH ah (t)  $25 \text{ sm}^3$  oo  $0.4$  N KOH. (J)  $20 \text{ sm}^3$  oo ah  $1.05$  N  $\text{Na}_2\text{CO}_3$  ah ?
10. 1 garaam oo naatriyam kaarbooneyt oomane ahi, haddii ay fasaqayso  $50 \text{ sm}^3$  oo milan salfiyuurik asiidh ah, xi-saabi ribnaanta milanka asiidha ah, iyo caadinimada asiidhaas ?
11. Haddii  $200 \text{ sm}^3$  oo milan naatriyam häydarogsaydh ahi uu fasaqayo  $100 \text{ sm}^3$  oo milan haydarokolorik asiidh ah. Waa maxay ribnaanta milanka NaOH ahi haddii ribnaanta milanka asiidha ahi uu yahay  $7.3$  garaam halkii litirba ?
12. Markii  $2.5$  garaam oo naatriyam kaarbooneyt oomane ah laga sameeyey milan  $500 \text{ sm}^3$  ah, kaddibna dhawr qaybood oo mid waliba  $25 \text{ sm}^3$  yahay lagu mitmiyo milan salfiyuurik asiidha, waxa la ogaadey in qayb waliba ay u baahan tahay  $22.5 \text{ sm}^3$  oo asiidhaas ah. Soo saar (b) caadinimada beyska (t) caadinimada asiidha ?
13.  $1.5$  garaam oo asiidh adke ah ayaa lagu milay biyo, waxana mugga milanka la gaarsiiyey  $250 \text{ sm}^3$ . Haddii  $30.2$

$\text{sm}^3$  oo milanka asiidha ahi uu fasaqo  $25 \text{ sm}^3$  oo  $0.115 \text{ N}$  naatriyam haydarogsaydh ah, xisaabi. (b) garaam isudhiganka asiidhaas. (t) Haddii asiidhu tahay hal boro. toone. soob saar culays molikiyuulkeeda.

**JAWAABO:**

5. (i) 5, (ii) 9. 7. (b) (i) 56 (ii) 1 (t) (i) 53 (ii) 1 (j)  
(i) 84, (ii) 1 (x) (i) 85 (ii) 1, 8. 53; 9. (b) 15  $\text{sm}^3$   
(t)  $10 \text{ sm}^3$  (j)  $21 \text{ sm}^3$ ,  $10. 18.5 \text{ g} \cdot 1$  iyo  $0.38 \text{ N}$ ;  $11.4 \text{ g} \cdot 1$
12. (b)  $0.09 \text{ N}$  (t)  $0.1 \text{ N}$ , 13. (b) 63 (t) 63.

## **BAABKA TODDOBAAD**

### **FALGALLADA KIMIKADA AH DHAQSAHOODA**

#### **IYO ISBEDDELKA TAMARTA**

##### **Kulka Falgalka**

Ilaa hadda falgallo fara badan ayaynu soo aragnay, falgalladaasina waxa aynu isku daynay in aynu ku qorro arna u taagno isle'egyo kimikaad. Sidii aynu horeba u soo aragnay, isle'egyadaasi laftoodu innooma sheegayaan waxa alliyaale wa-xa dhaca oo idil marka falgal dhaco. Baabkani waxa aynu ku soo qaadanaynaa tamarta la xidhiidha falgallada kimikada ah. Falgal kasta oo kimikaad kul buu bixiyaa ama ku<sup>t</sup> buu qaataa. Kulkaasi, mararka qaarko<sup>d</sup> si fiican aya loo arkaa, marar kalena aad buu xaddigiisu u yar yahay si fiicanna looma arko. Falgallada kimikaad ee kul bixiya ama sii daaya waxa la yi-dhaa kul-bixiyeyaal, kuwa kul qaatana waxa la yidhaa ku<sup>t</sup> qaateyaal.


Tijaabo 7..:

**Kala qaybinta falgallada:**

- b) 20 dhibcood oo salfiyuuri<sup>k</sup> asiidh rib ah dhibic-dhibic ugu dar 5 sm<sup>3</sup> oo biyaha qasabadda ah oo dhuun-hubsa-sho ku jira. Taabo dhuunta korkeeda. Maxaad dareentay ? (Ogow in aanad asiidh rib ah biyo ku shubin ee aad had iyo jeer biyaha asiidh ku shubto).
- t) 5 xabbadooood oo naatriyam haydarogsaydh ah ku rid dhuun-hubsasho oo ay 5 sm<sup>3</sup> oo biyaha qasabadda ihi ku jiraan. Si hagaagsan u rux dhuunta, dabeetana taabo korkeeda. Maxaad dareentay ?

- j) 40 garaam oo ammooniym koloraydh ah ku dar 10 sm<sup>3</sup> oo biyaha qasabadda ab oo dhuun-hubsasho ku jira Taabo oogada dhuunta. Maxaad dareentay ?
- x) Milan arjantam naytreyta oo badhax ah ku dar 10 sm<sup>3</sup> oo haydarokolorik asiidh bedhaxa ah. Ku wad arjantam naytreytka ilaa ruushi cad oo dambe uu samaysmi waa yo. Taabo dhuunta. Maxaad dareentay ? In kasta oo aynaan garanayn xaddiga kulka ah ee ay bixiyeen ama ay qaateen, haddana falgallada aynu kor ku soo sheeg-nay waxa loo kala qaadi **karraa** kul-bixiyeaal iyo kul-qaateyeaal. Haddii la damco in la cabbiro xaddiga kulka ee falgalka la xidhiidha waxa la isticmaalaa weelkul. Halbeegga kulkuna waa jool (j), 4.2dii joolna waa tamarta loo baahan yahay si **heerkulka** hal garaam oo biyo ah 1°C kor locgu dhigo. Joolka waxa lagu beddeli karaa kaalori, halkii kaalorina wuxuu la mid yahay 4.2 jool.

Isticmaalka weelkulka **caadiga** ihi wuu hawl badan ya hay, waqtii badanna wuu qaataa, sidaa awgeed, dhalo foobin 250 sm<sup>3</sup> ah ayaynu isticmaali **karraa** si aynu u cabbirro kulka falgallada soo socdaa ay bixiyeen ama ay qaataan. Helimeyno qiyaasta dhabta ah, laakiin **waxa aynu** u qaadanaynaa in kulka falgalku uu ku baxay beddelaa **heerkulka** milanka iyo weelka. Kulka agagaarka **weelka** ku lumayaa aad buu u yar yahay, waana la iska illoobi karaa.



## **Tijaabo 7.2 Kulka falgalka naatriyam haydarogsaydh iyo haydarokolorik asiidh**

Cabbir 100 sm<sup>2</sup> oo haydarokolorik asiidh ah oo 0.5 M adigoo isticmaalaya dhalo.toobin 250 sm<sup>2</sup> ah. Waxa kale oo aad cabbirtaa 100 sm<sup>2</sup> oo naatriyam haydarogsaydh ah oo 0.5 M adigoo isticmaalaya bakeeri 250 sm<sup>2</sup>. Labada milanba waa in ay in ku filan yaallii si heerkulkoodu uu ka qolka ula mid noqdo. Taasna waxa aad ku hubisaa heerkulbeeg, dabadeedna heerkullada milannada qor. Hadda milanka naatriyam haydarogsaydhka ah ku shub milanka haydarokolorik asiidha ah Degdeg isugu qas, heerkulka ugu sarreeya ee ay gaadhaanna qor.

Heerkulka oo kor u kacaa waxa uu tilmaamayaa in falgalku uu kulbixiye yahay, isaga oo hoos u dhacaana waxa ay tilmaamaysaa in falgalku uu kulqaate yahay. Xaddiga kulkun ah ec baxa ama uu falgalku qaatana waa la xisaabin karaa Falgallo badan ayay kulkocda kimistriyahannadu cabbireen kultaasina waxtar weyn ayay u leeyihii kimistariyaqaannada warshadaha ka shaqeeya.

### **Dhakhsaha Falgallada Kimikada ah.**

Waxa la yidhaa falgallada kimikada ah, dhakhsahoodu wuu kaal duwan yahay. Haddaba ereyga la yidhaa «dhakhsaha falgalka» waa maxay miinahiisu? Si taa aynu u garan karro, hadda bal aynu u fiirsanno dhawr falgal. Waxa aad ka soo qaaddaa biraha iyo bir-ma-aheyaalka, oo labaduba la falgalaan ogsijiinta hawada. Falgalladaasi qaarkood aad bay u qaarabiyaan, cashocinna way qaataan (ku dhammaadaan), qaarna aad bay u dhakhsa badan yihiin, dhawr daqiqadood oo keliya ayaanay u baahar yihiin.

Haddii suyuc jiro, xadiidku cgsijiinta hawada ayuu la

falgalaa ciabadeetana wuu mirdhaa. Falgalkani waa mid dha khsa daran. In foosfoor ah haddii hawada loo soo saaro, markija way oloshaa, falgalkuna aad buu u dhakhsa badan yahay. Labada falgal waa isku mid xag haddii laga eego, waayo xadiid. ka iyo fcsfoerkuba ogsijiin ayay la falgelaan, waxase kala duwan dhakhsaha ay ula kala falgelayaan.

Dhakhsaha falgalladu waa xaddi go'an oo la hubo. Had da bal aan u fiirsanno falgalka dhexmara salfar laba-ogsaydh iyo ogsijiin marka ay sameeyaan salfar saddex-ogsaydh.



Dhakhsaha falgalka kor ku qoran, saddexda siyaabood ee soo seeda ayaa midkii la doono lagu tibaaxi karaa :

Xaddiga  $\text{SO}_2$  ee la isticmaalay

a) Dhakhsaha

Amminta uu qaatay

Xaddiga  $\text{O}_2$  ee la isticmaalay

b) Dhakhsaha

Amminta uu qaatay

Xaddiga  $\text{SO}_3$  ee soo baxay

c) Dhakhsaha

Amminta uu qaatay

Hadba tibaaxda la isticmaalayaan waxa ay inta badan ku xidhan tahay, hawl yarida cabtiraadda walxaha falgalka ka qayb qaata. Walaxda ay cabbiraaddeeda ugu hawl yar tahay ayaana la isticmaalaa si dhakhsaha falgalka loo soo saaro. Sharax kaasi oo kale ah ayaa la isticmaali karaa, marka la cabbirayo dhakhsaha falgalka dhexmara ammooniyaa iyo hay. darojoon koloraydh ee ay sameeyaan ammooniyam koloraydh :



Dhakhsaha uu qaaca cad ee cufan ee ammoniyam kolo. raydhka ihi ku samaysmo, ayaa la isticmaali karaa si loo gartu dhakhsaha falgalka oo dhan.

#### Xaddiga NH<sub>3</sub>Cl ee soo baxay

Dhakhsaha = Amminta uu qaatay

Guuri ahaan falgal kimika ah dhakhsahiisa waxa loo qeexaa. Inta garaam ee falgaleyaaalka ah ee qarsooma ama inta garaam ee maxsuullada ah ee ka soo baxa xaddi go'an oo falgaleyaaalka ah halkii sekendba.

#### Oodobbada saameeya dhakhsaha falgallada

Mar haddii dhakhsaha uu falgalku ku dhacayaa uu ku xidhan yahay dhakhsaha ay saxarrada isla falgelayaa ay isku hirdiyayaan wax allaale wixii raad ku leh is-hirdigaasi, raad ayuu ku yeelan karaa dhakhsaha falgalka. Sidaa awgeed qodobbada soo socdaa raad bay ku leeyihiin dhakhsaha falgallada kimikada ah.

1. Ribnaanta
2. Heerkulka
3. Abuurta falgaleyaaalka
4. Kalkaaliyaha.

Tijaabooyinka soo socda bal hadda aynu ku eegno raa. dadka ay qodobbadaasi ku leeyihiin falgallada kimikada ah.

Tijaabo 7.3 Baadhista raadadka ay ribnaanta iyo heeri kulku ku leeyihiin falgallada kimikada ah.

Laba milan oo qiyaasan ayaa lagu siiyey :

Milan B: Waxa ku jira kaaliyam aayodheyt (4.3 g oo  $KIO_3$  ah litirkii milanka ahaaba).

Milan T: Waxa ku jira woxoogaa yar oo istaarj ah iyo naatriyam taayosalfeyt (0.2 g oo  $Na_2SO_4$ , 4 g oo istaarj miilme ah iyo 5 sm<sup>3</sup> oo  $H_2SO_4$  1 M ah).

Marka labada milan la isku qaso, aayodhiinta ugu dambaynta soo baxdaa waxa ay la falgelaysaa istaarjka, midabka milankanaa buluuq bay ka dhigaysaa. Soo bixitaanka aayodhii, ntuna wakay shéegaysaa in falgalku uu dhammaaday.

#### 1. Raadka Ribnaanta :

- b) 10 sm<sup>3</sup> oo milan B ah ku shub dhuun hubsasho, 10 sm<sup>3</sup> oo milar. Tahna mid kale ku shub.
- t) Labada milan isku qas adigoo, milan B ku shubaya milan T (B — T), ammiinta uu midab buluuq ihi ku soobaxana qor.
- j) Haadda diyaari ribnaanta kala gaar ah oo milan B ah adigoo sida soo socota u badhxaya milanka;

#### Milan B

#### Biyaha lagu badhxayo

9.0	sm <sup>3</sup>	1.0	sm <sup>3</sup>
8.0	"	2.0	"
7.0	"	3.0	"
6.0	"	4.0	"
5.0	"	5.0	"
4.0	"	6.0	"
3.0	"	7.0	"
2.0	"	8.0	"
1.0	"	9.0	"

Ku celi (isticmaal) dariiqada. (b) ee kor ku taalla adigoo milan wal oo Ladhxanta 10 sm<sup>2</sup> oo milan T ah ku daraya, ma walbana amminta uu falgalku qaato qoraya.

Tuse gelii waxyaabaha kuu soo baxay, dabadeedna u fiir so sida amminta uu falgalku qaataa ay isula beddesho ribnaanta milan B. Haddii ay ribnaantu hadan tahay amminta uu falgalku qaataa way yaraanaysaa. Taas macnaheedu waxa weeye dhakhsaha falgalku wuu badanayaa.

## 2. Raadka Heerkuka

Si aynu u baadlno raadka uu heerkulku ku leeyahay dhakhsaha falgalka, tijaabo ta kor ku qoran u eg aynu sameyno, innaga oo heerkulka qolka iyo heerkullo kaleba isticmaalayna. Haase yeeshie, waan in aanay ribnaantu markan doorsoomin ee heerkulka uuni doorsoomaa.

b) Dhawr dhuun-hubsasho mid walba 10 sm<sup>2</sup> oo milan B ah ku shub (tirada dhuumqhu waxa ay ku xidhan tahay heerkullada aad isticmaalayo). Intaasi oo dhuun-hubsasho in le'egna waxa aad mid walba ku shubtaa 10 sm<sup>2</sup> oo milan T ah.

2

t) Saddex meeloodow laba meelood (—) bakeeri 250 sm<sup>2</sup> ah  
3

biyaha qasabadda ku shub. Bakeeri laambadda bensen dul-dhig, bir soleyna ka xigsii.

j) Isku qas miliannada B iyo T, adigoo milan B milan T ku shubaysa (B - T). Heerkulka qolka iyo ka milankaba qaad, sidii caadiga ahaydha amminta uu midabka bu luugga ihi ku soo baxo qaad.

- x) Laba dhuun-hubsasho oo ay milannada B iyo T ku kala jiraan ku rid bakeeriga biyaha kululi ku jiraan. Waxaa aad isku daydaa in aan heerkulka biyuhu wax sidaas oo doocrsoomin, taasi oo aad ku heli karto adiga oo isticmaala olol aan badnayn. Marka ay milannadu heerkul isku mid ah gaadhaan, heerkulka qaad, dabadeedna degdeg iisugu dar labada milan. Qaad amminta uu midabka buluungga ihi ku soo baxo.
- kh) Ku celi tijaabada adigoo isticmaalaya dhuumihii kale laakiin heerkulladu ay kii hore ka sarreeyaan. Mar kas taba heerkulka falgalka qaad, amminta uu falgalku dhammaad ku gaadhana qor. Tuse geli waxyaabaha soo baxa, una fiirso sida amminta uu falgalku qaataa ay isula beddesho heerkulka.

Mar labaad waxa aad arkaysaa in heerkulka oo sare loo qaadaa uu soo gaabinayo amminta uu falgalku ku dhammaanayo, dhakhsaha falgalkuna uu taa la kordhayo. Tusaha hoos ku yaalla ayaa tusaya waxa laga yaabaa inay soo baxaan, hadhihi tijaabada aad samayso. Labada raad, ka ribnaanta iyo ka heerkulkuba tusuhu wuu niuujirayaa.

#### Dhakhsaha Falgallada 1 (b) Raadka Ribnaanta

Milan B	Biyaha lagu daray	Milan T	Amminta uu falgalku qaatay
10 sm <sup>3</sup>	1 sm <sup>3</sup>	10 sm <sup>3</sup>	18.0
9 "	2 "	10 "	19.5
8 "	3 "	10 "	23.0
7 "	4 "	10 "	26.0
6 "	5 "	10 "	34.0
5 "	6 "	10 "	44.0
4 "	7 "	10 "	53.0
3 "	8 "	10 "	90.0
2 "		10 "	


1 (t) — Raadka Heerkulka

Milan B	Milan T	Heerkul	Amminta uu falgalku qaatay
10 sm <sup>3</sup>	10 sm <sup>3</sup>	10° C	32.0 S
10 "	10 "	15 "	2.70 "
10 "	10 "	20 "	23.0 "
10 "	10 "	25 "	20.0 "
10 "	10 "	30 "	18.0 "
10 "	10 "	35 "	17.0 "
10 "	10 "	40 "	15.0 "

JT. 7.2

3. Abuurta falgaleyaalka:

(Raadka ay ku leeyihiiin dhakhsaha falgallada kimikada ah). Raadka ay abuurta falgaleyaalku ku leeyihijin dhakhsaha falgallada, laba siyood ayaa looga fiirsan karaa: Mid ku xidhan wejiga duleed ee falgaleyaalka iyo mid ka imanaysa abuurta kimikaad ee falgaleyaalka. Kaalsiyam kaarbooneyt waxa uu la falgalaa haydarokolorik asiidh, si ay u dhaliyaan kaalsiyam koloraydh, kaarboon laba-ogsaydh iyo biyo.



Tijaabo 7.4 Baadhista dhakhsaha falgalka dhexmara haydarokolorik asiidh badhax ah iyo (b) kuuskuus kaalsiyani kaarbooneyta (t) budo kaalsiyam kaarbooneyta.

b) Soo qaad kuuskuus woxoogaa laa le'eg oo kaalsiyam kaa-

rhooneyta. Bakecri 10 sm<sup>2</sup> ah ku rid, dabadeedna hay-darokolorik asiidh badhax ah ku-dhibci, dhakhsaha fal-galkana u fiirso.

- t) Bujo kaalsiyam kaarbooneyt ah bakkee 100 sm<sup>2</sup> ah ku shub. Haydarokolorik asiidh badhaxa ku dhibci, dabee-tana u fiirso dhakhsaha falgalka.


Waxa zad arkaysaa in falgalka dambe uu ka hore ka chakhso badan yahay. Haydarokolorik asiidhu hawl yari bay budada kaalsiyam kaarbooneytka ah u wada gaadhaysaa mar-ka loo eego kuuskuuska. Tijaabadani waxa ay tusaysaa in we-jiga duleed ee abuurta falgalayaalku uu raad ku leeyahay dha-khsaha falgallada kimikada ah. Walxaha budada ihi si dhakh-so ayay u falgalaan marka loo eego walxaha isku yaalla (kuus-kuuska ah). Taasi waxa ay ku dhacaysaa, bedka duleed ee budada oo ka badan ka kuuskuuska.

#### Abuurta kimikaad ee falgaleyaalka

Tijaabooyin ayaa waxa ay tuseen in falgallada kimikada orgaanikada ihi ay ka dhakhso daran yihiin falgallada kimikada aan orgaanikada ahayn. Sababtuna waxa ay tahay, sidii aynu horeba u soo aragnay, iyadoo ay falgallada kimikada orgaanikada ihi ay inta badan dhexmaraan iskudhisyo elekta-roonwadaag ah, halka ay falgallada kimikada aan orgaanika-da ahayni ay inta badan dhexmaraan iskudhisyo ayoonno ka samaysan. Mar haddii awoodda socsocodka ee ayoonnada milinnada ku jiraa ay badan tahay marka loo eego ta molikiyuulla-da aan danabaysnayn ee iskudhisyada orgaanikada ah, waxa la filayaa in falgallada dhexmara ayoonnadu, ay ka dhakhsa badan yihiin kuwa dhexmara molikiyuullada elekta-roonwa-daagga ah.

**Tijaabo 7.5 Isu eegidda falgallada dhexmara iskudhisyada ayoonnada ah iyo kuwa dhexmara iskudhisyada elektaroonwadaagga ah.**

b) Milan arjantam naytreyt ali ku shub haydarokolorik asiidh badhax ah, ama naatrivam koloroydh, una fiirso ruushiga cad ee arjantam koloraydhka ab ee markiiba fadhijista.



rushi


cad



rushi

cad

t) Itanool ku dar asetik asiidh, xoogna u rux. Maxsuullada la filayo inay soo baxaan waa itayl aseteyt iyo biyo.



itanool

asetik

asiidh

itayl

biyo

aseteyt

Woxoogaa salfiyuurik asiidh rib ah ayaa lagu daraa si uu falgalku dhammaad u gaadho, laakiin weli waxa la arkayaan in heerkulka caadiga ah uu falgalkani uu aad u dhakhsa daran yahay. Xataa haddii heerkulka la gaadsiiyo 100°C, falgalkani markiiba dhammaad ma gaadho. Dhakhsa darrida falgalka waxa u sabab ah abuurta falgaleyaalka ee elektaroonwadaagga ah.

#### 4. Kalkaaliyeeyalka :

Tijaabo 7.6 Raadka kalkaaliyuhu uu ku leeyahay dhakhi saha falgallada.

- b)  $10 \text{ sm}^3$  oo naytarik asiidh badhax ah dhuun.hubsasho ku shub. In yar oo magniisiyam ah, dhererkiisuna  $1 \text{ sm}^3$  yahay ku rid. Inta seken ee uu magniisiyamku ku dhammaadana qor. Dhuun hubsasho oo kale  $10 \text{ sm}^3$  oo naytarik asiidh badhax ah iyo  $1 \text{ sm}^3$  oo kadmiyam sai. feyta ah ku shub. Intii hore in le'eg oo magniisiyam ahna ku rid. Inta seken ee uu magniisiyamku ku dhammaadana qor. (Eeg jaantuska 7.3).

Falgalku waxa uu qaadanayaq:

40 sekend                  25 Sekend



JT.7.3 Raadka uu kalkaaliyuhu  
ku leeyahay daqsaha  
falgallada

- t) Saddex dhuun.hubsasho mid walba  $5 \text{ sm}^3$  oo haydarojiin beer.ogsaydh 20% ku shub. Woxoogaa yar oo manganiis laba.ogsaydh ah ka hore ku rid, ka labaadna  $1 \text{ sm}^3$  oo salfiyuurik asiidha ku shub, ka saddexaadna  $1 \text{ sm}^3$  oo

naatriyam haydarogsaydh badhax ah. Duur ifaya mid walba ku hubi hal in ogsijiin soo baxayso. Saddexda dhuun-hubsashoba bakkeri biyo karayaa ku jiraar. ku rid, dabadeedna hubi in ogsijiin soo baxayso.

Waxa jira falgallo badan ee aayar socda marka falgale-yaalka keligood la isku daro, laakiin socodka la kordhin kato haddii walax kale lagu daro. Walaxda sidaas loo isticmaato waxa la yidhaa kalkaaliye. Habkaa dhakhsaha falgalka lagu beddelayo, iyadoo la istcimaalayo walax dheeraad ah oo aan doorsoomayna waxa la yidhaa kalkaalid.

Tijaabada 7.6 (b) Kaadhiyam salfeytka ayaa kalkaali-naya falgalka, waayo waxa uu kordhinayaan dhakhsaha falgal-ka. Haydarojiin beer.ogsaydhku iskii buu u kala baxaa mar-ka uu in badan iska yaallo, laakiin tijaabada 7.6 (b) manganis laba.ogsaydhka lagu daray ayaa kala baxaa soo dedejiyey. Ku darista naatriyam haydarogsaydhka lafteeda ayaa kala baxaa dedejisey, inkastoo loo baahan yahay in la kululeeyo. Asidha badhaxa ihi way xanibaysaa falgalka. Siidaa darteed asildhu hadda waa lidkalkaaliye.

#### Astaamaha Kalkaaliyaha

1. Marka falgalku dhammaado, culayska iyo samayska ki-mikaad ee kalkaaliyaha midna isma beddelo. (Waa laga yaabaa in muuqiisu isbeddelo).
2. Kalkaaliyuhu waxa uu kordhiyaa falgal kimika ah dhakhsihisa.
3. Kalkaaliyuhu waxba kama beddelo dheellitiranka isku-jirka ee falgallada isgeddiya (waxa aad ku arki doontaa baabka soo socda).

4. Kalkaaliyuhu falgal ma bilaabi karo; falgal iskji isaga socda ayuun buu karaariñ karaa.
5. Kalkaaliyaha, had iyo jeer shaqadiisu waa mid gaar ah. Haddii ay walaxi hal falgal kalkaaliso, taas macnaheedu ma aha falgal kastaba way kalkaalinyasa.

### **Tusaalooyin Kalkaalid**

Isticmaalka kalkaaliyeyaalka si ay u kordhiyaan dha-khsaha falgalladu aad bay u caan tahay, gaar ahaan kimikada warshadaha. Habka Heybar marka ammooniyada la soo saa-rayo, xadiidka ayaa kalkaaliye ahaan loo isticmaalaa. Marka asiidh la samaynaya balaatinam ayaa la isticmaalaa. Marka aad kimistariga baranaysid u firso kalkaaliyeyaalka lagu isticmaalayo falgallada kala geddisan ee aad la kulantid.

### **Insaymayda**

Tiro badan oo kalkaaliyeyaal ah oo la yidhaa insaymyo ayaa ku jira nudadka nafleyda. Kuwa caanka ah waxa ka niid ah insaymyada habdhiska dheefshiidka ee ay ka mid yi-hiin tayliinta candhuufada ku jirta iyo bebsinta dheecaanka gaastarigga. Shaqada insaymyadaasi waxa weeye inay dede-jiyaan burburidda molikiyuullada waaweyn, sida istaarjka iyo borotiinka, ay ugu burburayaan molikiyuullo yaryar oo uu jidhku qaadan karo. Insaymyo badan ayaan si hagaagsan we-li loo aqoonnin sida gaarka ah ee ay u shaqeeyaan.

### **Tijaabo 7.7 Falgal biyoodka istaarjka:**

Diyaari milan istaarja oo 1%, adigoo 1 g oo istaarj mil-me ah ku karinaya  $100 \text{ sm}^3$  oo biyo ah. 5 dhuun-hubsasho soo qaado, sida soo socotana u buux-buuxi.

- b) Diyaari milan 1% oo naatriyam koloraydha. Milankan

ku luqluqo si milan candhuufaysan uu u samaysmo. Shaandhee laba dhibcood oo isaga ah. kuna dar 5 sm<sup>3</sup> oo milan istaarja ah.

- t) Isku qas 5 sm<sup>3</sup> oo milan istaarja iyo 5 sm<sup>3</sup> oo milan 8% naatriyam haydarogsaydh ah oo 2 M.
- j) Isku qas 5 sm<sup>3</sup> oo milan istaarja iyo 5 sm<sup>3</sup> oo milan 7% oo haydarokojorik asiidha oo 2 M.
- x) 5 sm<sup>3</sup> oo biyo ah ku shub dhuun-hubsasho, laba dhib-cood oo milankii candhuufaysnaa ahna ku dar. Kari muddo laba daqiiqo ah. Qabooji, dabadeedna 5 sm<sup>3</sup> oo milan istaarja ku dar.
- kh) 5 sm<sup>3</sup> oo biyo ah iyo 5 sm<sup>3</sup> oo milan istaarja isku dar. Shinta dhuun-hubsashoba summad, dabadeedna isku mar biyo diirran (37°C) ku dhexrid. Diyaari warqad cad oo baro milan aayoodhiinnada ah dusha ku leh. 1—2 daqiiqo marka ay dhuumaha hubsashadu diiraan, mid walba dhibic qase qarsha ah kaga soo qaad, oo ku hubi bar milan aayodhiinna ah korkeeda. Midab bulug ihi waxa uu tusayaa in aan istaarjkii isbeddelin, midab casaana ama hurdi ihina wuxuu tusayaa max-suullada ka dhasha kalabaxa istaarjka. Haddii midaba la kala arki waayona waxa aynu u qaadanaynaa in falgal biyoodka istaarjku uu dhammaad gaadhey. Had-dii uu falgalku dhammaad gaadho, milanka fasaqa, milanka Fehlingna ku dar, dabadeedna u fiirso falgalaha falgalka ugu dhakhso badan soo saara.

Insaym kasta shaqadiisu waa mid gaar ah. Bal u fiirso tijaabada 7.7 oo ah falgal biyoodka istaarjka. Insaymka tay-liin ee candhuufada ku jira ayaa kalkaalintiisu ka xoog badan tahay ta asiidha iyo ta alkaligaba. Sida tijaabada ka muuqa.

ta kalkii tayliinta wuu dilaa. Astidhnaanta iyo alkalinaanta iyo kulkaba way u nugu yihin insaymyadu. Waxana ay si hagaagsan ugu shaqeyn karaan asiidhnaan, alkalinaan iyo heerkul gaar ah oo'keli ali.

### Kalkaaliyeyaal Noocvo kale ah

**Dedejiyeyaal:** Wuxuu kalkaaliyaha la guu daro kartidiisa kordhiyo. Walxahaan waxa la yidhaa dedejiyeyaal. Tusaale ahaan aluminam ogsaydh wuxuu kordhiyaa kartida kalkaaliyaha feeras ogsaydh ee lagu isticmaalo Habka Heybar, sidaa awgedna aluminam ogsaydh waa deejiyeye.

**Kalkaaliye Sumeeye:** Walxaha hoos u dhiga kartida kalkaaliyaha waxa'la yidhaa kalkaaliye sumeeeyeyaal. Kalkaaliye sumeeeyeyaalka intooda badani waa walxaha jidhka dadka sumeeya ee ay ka mid yihin arsiink ogsaydh iyo haydarojiin saynaydh.

**Kalkaaliyeyaal Guud:** Biraha sida fiican loo burburiyey gaar ahaan balaatinam iyo nika' waxa ay kalkaaliyaan falgallo badan oo orgaanika ah, gaar ah, falgallada ay haydarojiin ay ka qayb qaataan. Kalkaaliyeyaalkaasi waxa loo yaqaan kalkaaliyeyaal guud.

### Kalkaalidda :

Dhawr aragtiyood ayaa la soo jeediyey si loo sharxo kalkaalidda. Mid kuwaa ka mid ihina waxa ay adeegsataa dhala shada walax dhexdhexaad ah. Waxa la rumaysan yahay inuu kalkaaliyuhu soo geliyo falgalka tallaaboooyin dhexdhexaad ah. Tallaaboooyinkaasi ma ay dhaceen haddii aanu kalkaaliyuhu

meesha jirin. Kalkaaliyaha laatiisa tallaaboo yinka dambe ayaa dib u dhallya.

Waxa aad ka soo qaaddaa in X iyo Y ay falgaleyaal isu tegi kara oo X Y dhalin kara yihin, marka ay isla falgalan.

$$X + Y = XY \quad \text{--- (i)}$$

Dhakhsaaha uu XY ku waa la kordhin karaa haddii kalkaaliye K naalo. Haoka uu falgalku u dhaayana waxa soo gelaya tallaabo dhexdhexaad ah.

$$X + K = XK \quad \text{--- (ii)}$$


$$XK + Y = XY + K \quad \text{--- (iii)}$$

Halkan waxa lagu muujiyey waxtarka K uu leeyahay kalkaaliye ahaan, waayo labada falgal ee (ii) iyo (iii) waxa ay ku dhacayaan dhakhsa ka badan ka falgalka (i).

Tusaale dhab ahina waxa weeye ka la isticmaalo marka la samaynayo salfiyuurik asiidha. Isle'egta oo dhan waxa loc dhigi karaa,



Hase yeeshi, falgal-fani aad ayuu u dhakhsa daran yahay, sidaa awgeedna waxa la isticmaalaa kalkaaliyaha ah naytrojiin ogsaydh. Iskudhiska dhexdhexaadka ah ee soo baxa oo ah naytrojiin laba ogsaydh, ayaana qaada ogsijiinta. Sidaa awgeed laba ayaa habka wax u dhacayaan loo kala qaadi karaa,



Isle'egta (vi) naytrojiin ogsaydh oo kalkaaliyaha ah ayaa dib uga dhalinaya. Sidaa awgeedna naytrojiin ogsaydh waa tusaa-le kalkaaliye neef ah.

## Tamarta la xiriirta falgallada kimikada ah

Inkasta oo aynu wax badan ka soo hadallay qodobbada saameeya dhakhsaha falgallada kimikada ah, haddana iswey-dinta ah «Sidee ayuu falgal kimika ihi u dhacaa? Weli ka maynaan jawaabin. Sidii aragtida kalkaalidda, halkan lai-teeda dhawr aragtiyod ayaa la soo jeediyey si loo sharxi karo falgallo badan oo kimiko ah. Aragtiyahaas ta is-hirdiga ayaas aad la isugu raacay. Aragtidaasina waxa sal u ah ii-qaadasha-da ah; si uu falgal kimiko u dhaco, waa in is-hirdi dhexmaraa saxarrada walxaha isla falgelaya; saxarradaasi, molikiyuullo, atammo, ama ayoonno midka ay doonaanba ha ahaadeen ee.

Tusaale ahaan haddii walax B ay la falgelayo so walax T, waa in saxarrada B, molikiyuullo, atammo iyo ayoonno waxa ay docnaanba ha ahaadeen ee, iyo saxarrada T uu is-hirdi dhexmaraa. Marka uu is-hirdi dhaco atammada iyo elektaroonda-du sidoodii hore ahaan maayaan. Waxa dhacaya in-dabarrada kimikada ah ee isu haya atammada uu isbeddel ku dhaco, taas oo dabadeetona keeni karta in walxo cusubi ay halkaa ka dha-shaan.

Sida ay odhanayso aragtida is-hirdigu, dhakhsaha falgal kimika ihi waxa uu ku xidhan yahay (1) inta jeer ee ay saxarrada isla falgelayaa is-hirdiyaan sekenkiiba, iyo (2) qaybta is-hirdiyadaas ee falgal keeni kara. In uu dhakhsaha falgalku ku xidhan yahay inta jeer ee ay saxarrada isla falgelayaa is-hirdiyaan, waa wax iska cad. Tusaale ahaan sanduuq ay ku jiraan molikiyuullo B iyo molikiyuullo T, waxa dhacaysa inay inolikiyuullada qaarkood is-hirdiyaan sekenkiiba (aragtida socodka molikiyuullada qaarkood ayaa taa innoo sheegaysa). Haddii tirada molikiyuullada B ee sanduuqa ku jira la kordhiyo, waxa dhacaysa inay korodho inta molikiyuullada ee sekenkiiba is-hirdiyayaa, waayo molikiyuullada ayaa isku soo cidhii-chsamaya. Mar haddii uu is-hirdiga molikiyuullada isla fal-

5

gelayaa bataan, falgalka dhexn.araya B iyo T waa in uu dha-khso tataa. Hase yeeshie, sheekadu intaa kuma dhamma Markii la xisaabiyeey is.hirdiga saxarrada isla falgelaya waxa la arkay inay inta jeer ee ay saxarradu is-hirdiyayaan sekend-kiiba ay aad u badan tahay Tusaale ahaan iskujir neefo ah oo ka kooban 1 mool oo molikiyuullo neef B ah iyo 1 mool oo molikiyuullo neef T ah H.C.B, inta jeer ee ay is-hirdiyayaan way ka badan tahay 10<sup>th</sup> jeer sekenkiiba. Haddii is.hirdi wal oo kuwaa ka mid ihiba uu keeni karo falgal, falgalka oo dhammi waxa uu ku dhammaan lahaa muddo aan waxba mud-nayn, falgallada oo dhammina waxa ay ahaan lahaayeen waxaad u dhakhso badan oo aan loo taag helin. Hase yeeshie, markii loo fiirsaday waxa la arkay in aanay taasi dhicin, sidaa awgeed halkaa waxa ka muuqda in is-hirdiyada qaarkood uuni ay keenaan falgal.

Waxa laga yaabaa in is-hirdiga dhixmara molikiyuullada B iyo molikiyuullada T aanaa sidaa u weynayn, oo dabeetona aanay astaamaha molikiyuullada waxba iska beddelin is-hirdiga debadii. Taasina waxa ay ku dhacaysaa iyada oo ay elektaroonnada atammada B iyo kuwa T ay kala didayaan. Is.hirdiga caynkaas ihina waxa uu ku dhammaadaa molikiyuullada oo soo kala booda. Hase yeeshie, haddii molikiyuullada B ama kuwa T ama lablooduba ay leeyihin tamar-socod aad u badan is-hirdiga hortii, waxa ay si dhib yar u isticmaali karaan tamar-soccdkaas oo ay kaga hortegi karaan xoog-isriixa ka dhixeeya elektaroonnada atammada B iyo kuwa T. Is.hirdigaa-sina waxa laga yaabaa inuu keeno molikiyuullada oo in ku filan is-dhexgala oo dabadeetona ay halkaa ka dhashaan mid ama in ka badan oo walxo cusub ihi.

Tamarta dheeraadka ah ee loo baahan yahay si uu is-hirdigii u keeno falgal kimika ah waxa la yidhaa tamarta kaa-kicinta. Laxaadka tamartaasina waxa uu ku xidhan yahay abuurta falgaleyaaasha. Falgallada qaarkood, tamarta kaal-

cinty aad ayay u badan tahay, falgalladaasina aad ayay u dhaqso daran yihiin, waayo qayb aad u yar oo ka mid ah saxarrada isla falgelaya ayuunbaa leh tamar-socod ku filan oo keeni karta tamarta kaakicinta ee loo baahan yahay. Wuxa kale oc jira falgallo kale oo ay tamartooda kaakicintu aad u yar yihiin. Falgalla'aasi aad ayay u dhaqso badan yihiin, waayo qayb badan oo ka mid ah saxarrada isla falgelaya ayaa leh tamar-scccd ku filan oo keeni kara falgal.


Aragtida is-hirdigu waa ay sharxi kartaa sababta ay afartii qcdob ee aynu hore u soo sheegnay ay u saameeyaan dhakhsaha falgallada kimikada ah: (1) Dhakhsaha falgal kimika ihi waxa uu ku xidhan yahay abuurta falgaleyaalka, waayo tamaraha kaakicinta ee falgallada ayaa kala duwan (2) Dhakhsaha falgal kimika ihi waxa uu ku xidhan yahay rit-naanta falgaleyaasha, waayo inta jeer ee ay saxarradu is-hirdi-yayaan waa ay kordhaysaa haddii la kordhiyo xaddiga saxar-rada isla falgelayaa. Haddij u is-hirdigu batana waxa dhici karta in saxarro badani ay isla falgalaan. (3) Dhakhsaha falgal kimika ihi waxa uu ku xidhan yahay heerkulka, waayo, haddii uu heerkulku kor u kaco waxa dhacaysa in uu korodho dhakhsaha socodka molikiyuulladu. Haddii uu dhakhsaha socodka molikiyuulladu kordhana waxa laga yaabaa inay kordho inta jeer ee ay molikiyuulladu is-hirdiyayaan iyo xooggaa ay isku hirdiyayaanba. Taasina waxa ay keeni kartaa in ay molikiyuullo fara badani dhakhso isula falgalaan. (4) Dhakhsaha falgal kimika ihi waxa uu ku xidhan yahay kalkaaliye-yaasha, haddiiba ay dhacdo in uu falgalkaasi u baahan yahay kalkaaliye ama kalkaaliyeyaalba. Wuxa laga yaabaa in ay taasi sabab u tahay iyada oo uu falgaleyaasha midkood, ama in ka badan, uu marka hore la falgalo kalkaaliyaha, oo dabee-tona ay walaxdaa cusub ee samaysantay ay tahay falgale aad u firfircoon oo dhaqso ula falgala falgalaha ama falgaleyaasha hadhay.

Is-hirdiga oo keli ihi kuma filla inuu falgal keeno. Ta-

marta ka dhalata is-hirdigu waa inay ka badan tahay tamarta chalin karta falgalkaas. Sidaa awgeed waa in ka hor inta aa nu falgalku dhicin uu is-hirdigu molikiyuullada gaadhsiiyaa zaalad ay tamartocda kaydeani ay aad u sarrayso. Markaas ayaa la yidhaa molikiyuulladu way kacsan yihiin ama waxa ay sameeyeen kakan kacsan. Si aynu arrintaa hagaag ugu arki karro waxa aynu qaadanaynaa falgal hal tallaabo ku dha-ca, kaas oo ah mid ay hal molikiyuul oo walax B iyo Mal molikiyuul oo walax T ihi ay is-hirdiyayaan oo ay dabeetona ka dhalanayaan laba molikiyuul oo kala ah hal molikiyuul oo walax J ihi, iyo hal molikiyuul oo walax X ihi.



Waxa aynu u qaadanaynaa in marka uu hal molikiyuul oo B ihi iyo hal molikiyuul oo T ihi ay is-hirdiyayaan ay marka hore samaysmaan saxar dhexe oo kakan. Saxarkaa dhexdhe xaadka ah, ee aad u kakan, oo la yidhaahdo kakane kacsan, waxa uu u kala bixi karaa labadii molikiyuul ee hore ee kala ahaa B iyo T, ama uu u kala bixi karaa laba molikiyuul oo cusub oo kala jaad ah oo kala ah J iyo X. Hadba sida wax u dhacayaanna waxa laga ogaan karaa iyada oo la xisaabsho is-beddelka ku dhaca tamarta kaydsan ee molikiyuullada B iyo T marka ay sameeyaan kakanta kacsan iyo marka ay kakanta kacsani u kala baxdo molikiyuullada J iyo X. Jaantus 7.4 ayaana arrintaas muujinaya.



Dhidibka qotoma waxa ku qoran tamarta kaydsan, ha ahauto ta falgaleyaalka B iyo T, ama ta kakanta kacsan ama ta maxsuulka J iyo X ee. Dhidibka gudbanina waxa uu innoo sheegayaa ilaa inta uu falgalku ka socday xaaladdii uu ku bilaabmay ee uu u socday intii uu ka dhammaanayey. Tamarta kaydsani waa wadartaa tamarta kaydsan ee B iyo tamarta kaydsan ee T. Marka ay B iyo T isu soo dhowaadaan, xoog-is-riixa ka dhixeeyea elektaroonnadu waa uu kordhayaa. Sidaa awgeed waa in hawl la qabtaa si la isugu keeno B iyo T.

Taasina macnaheedu waxa weeye waa in tamarta kaydsani ay korcdhaa, waanay kordhaysaa ilaa ay gaadho heer la siman ka kakanta kacsan (Eeg jaantuska 7.4). Markaa dhaadeed ayay kakanta kacsani u kala baxaysaa molikiyuullada cuusub ee kala jaadka ah ee J iyo X. Marka ay J iyo X kala tagaanna, tamarta kaydsani hoos ayay u dhacaysaa.

Faraqa u dhixeeyea tamarta kaydsan ee B iyo ta T oo isu geeyey iyo tamarta kakanta kacsan (eeg jaantuska) ayaa ah tamarta loo baahan yahay in la siiyo saxarrada isla falgalaya si ay isula falgalaan. Tamartaasi ayaana ah tamarta kaakicinta ee falgalka. Badanaa waxa ay ka timaaddaa tamartaasi marka qayb ka mid ah tamar-socodka saxarrada isla falgelayaa loo geddiyo tamar kaydsan. Haddii molikiyuullada B iyo T aanay lahayn tamar-socod ku filan is-hirdiga hortii, u suurtagelimayo inay ka baxaan oo ay gaadhaan halka ay xarriiqdu ka soo laabato. Wawa laga yaabaa marmarka qaarkood in tamar-socodkooda oo dhammi uu isu geddiyo tamar kaydsan oo haddana aanay ku fillayn tamartaa kaydsani in ay gaadhsiiso molikiyuullada xaalad ay ku samaysan karaan kakan kacsan. Marka ay taasi dhacdana B iyo T dib ayay uga soo ncqonayaan dhinaca xarriiqda.

Arrintaasi waxa ay la mid tahay iyada oo aad meel taag ah kubbad kor u raaciso. Haddii aad kubbadda qun yar kor u

raacisid taagga, waxa laga yaabaa in marka ay woxoogaa ko. to taagga ay jocgsato, oc dabeetona ay dib u soo noqoto. Had-dilise kubbadda xoog loo raaciyo taagga, waxa la arkaa in ay kubtaddu gaadho figta taagga oo ay dhinaca kalena uga dhaadhaado. Sidaas oo kale ayaa haddii mclikiyuullada B iyo T ay leeyihiin tamar-socod ku filan ay u gaadhi karaan halka ay xarriiqda tamarta kaydsani ka soo laabato oo ay u samayn karaan kakan kacsan oc dabadeed u kala baxda J iyo X. Marka uu heerkulku aad u sarreeyo molikiyuullo fara badan ayaa heli kara tamarta kaydsan ee loo baahan yahay, inay keenito kakanta kacsan sekenkiiba, sidaa awgeedna falgalku dhaqso ayuu u dhacaya.

\* Haddii aad u fiirsato jaantuska 7.4 waxa aad arkaysaa in tamarta kaydsan ee J iyo X ay ka yar tahay tamarta kaydsan ee B iyo T, sidaa awgeedna ay tamarta kaydsani hoos u dha-cayho marka uu falgalkani dhaco. Tamartaasi hoos u dhac-day waxa ay badanaa u soo baxdaa kul ahaan. Falgalka




waxa uu noqonayaa kulbixiye. Tamarta ku baxday si B iyo T le isugu keeno oo dabeetona ay sameeyaan kakanta kacsan way ka yar tahay tamarta ka soo baxda marka ay kakanta kacsan u kala baxdo J iyo X; faraqa u dhexeeyaan kul ahaan ayuu u soc baxaa. Hase yeeshi, haddii ay tamarta kaakicintu aad u tadan tahay, falgalku aad u dhaqso badan maayo, inkasta oo ay tamarta kaydsani hoos u dhacday. Falgal aan aad u dhaqso badnayn oc kulbixiye ah waxa ka mid ah.



Inkasta oo aynu ugu tala gallay jaantuska 7.4 in uu inna tuso falgalka dhexmara B iyc T si ay u soo saaraan J iyo X, haddana sida kalena waa loo qaadan karaa oo sawirka ayaa

xagga midigta laga soo akhriyi karaa, haddii aynu rabno in aynu tusno falgalka dhexmara J iyo X ee ay ka dhashaan B iyo T. Sida uu jaantusku tusayana falgalka dhexmara J iyo X waa kulqaate. Isla markaas temarta kaakicinta ee falgalka dhexmara J iyo X way ka badan tahay ta falgalka dhexmara B iyo T.

Marka kalkaaliye lagu daro walxaha isla falgelaya, dariqa uu falgalku marayaa waa uu ka duwanaanayaa kii uu mari lahaa haddii aan kalkaaliye lagu darin, waayo kalkaaliyuu waxa uu kordhinayaa dhakhsaha falgalku. Sidaa awgeed tamarta kaakicinta ee falgalku waa ay ka yaraanaysaa ti hore marka falgalka kalkaaliye lagu daro. Jaantuska 7.5 ayaana arrintaa innoo muujinaya.



JT. 7.5



Xarriiqaa kala googo'ani waxa uu tusayaa dariqa uu falgalku marayo haddii kalkaaliye la isticmaalo. Waxa aad ar kaysaa in isticmaalka kalkaaliyuu uu hoos u dhigay tamarta l'aydsan (tamarta kaakicinta) ee loc baahan yahay in walxaha isla falgeiyaya la isugu keeno. Mar haddii ay taasi dhacdana

tiro aad u badan oo molikiyuullo ama saxarro kaleba ah ayaa isla falgeli kara sekenkiiba.

Taasina waxa ay kordhinaysaa dhakhsaha falgalka : Tusaale ahaan birta balaatinam ayaa kalkaalisa falgalka dhexmara ogsijiin iyo haydarojiin marka ay samaynayaan biyaha. Falaatinamka ayaa marka hore la falgala molikiyuullada haydarojiinta ah ( $H_2$ ) waxana ka dhasha atammo haydarojiin ah ( $H$ ). Ogsijiinta ayaa dabadeed la falgasha atammada haydarojiinta ah, halkii ay kala falgeli lahayd molikiyuullada haydarojiinta ah. Tamarta la isugu keenayo atammada haydarojiinta ah iyo cgsijiintuna aad ayay uga yar tahay tamarta la isugu kecni lahaa ogsijiinta iyq molikiyuullada haydarojiinta ah. Sidaa awreed falgalku intii hore wuu ka dhakhso badanayaa marka la isticmaalo kalkliyaha balaatinamka ah.

#### Xidhiidhka ka dhexeeya dhakhsaha falgalka iyo ribnaanta:

Waxa aynu hore u soo aragnay in dhakhsaha falgalladuu ku xidhan yahay ribnaanta falgaleyaa. Haddaba, sidee ayuu xaddi ahaan dhakhsaha falgalku ugu xidhan yahay ribnaanta. Ribnaanta waxa badanaa lagu cabbiraa inta mool ee walxahaas ah ee litirkiiiba ku jirta, waxana lagu muujiyaa sallo qaatkoedu [ ] yahay. Haddii aynu tusaale u qaadanno falgal hal tallaabo ku dhacaya oo uu hal molikiyuul oo walax B ihi la falgelayo hal molikiyuul oo walax T ah si ay u soo saaraan molikiyuul BT, falgalku waxa uu noqonayaa,



JT.7.6

Sida ay odhanayso aragtida is-hirdigu dhakhsaha uu BT ku dhalanayaa waxa uu saamigal qumman u yahay dhakhsaha ay B iyo T isku hirdiyaan. Waxa aad ka soo qaaddaa in aynu haysanno sanduuq ay ku jiraan woxoogaa molikiyuullo walax T ah iyo hal molikiyuul oo walax B ihi.

(Eeg jaantuska 7.6). Dhakhsaha uu halka molikiyuul ee B ihi ku hirdiyayo molikiyuullada T waxa uu saamigal qumman u yahay tirada molikiyuullada T ah ee sanduuqa ku jira. (Haddii aynu labanlaabno tirada molikiyuullada T ah ee sanduuqa ku jira, waxa dhacaysa inay labanlaabanto inta is-hirdiyood ee dhexmarta molikiyuullada T iyo molikiyuulka B sekenkiiba). Waxa aad ka soo qaaddaa in hadda aynu molikiyuul labaad oo B ah sanduuq ku ridno. Taasi macnaheedu waxa weeye tirada molikiyuullada B ah ee sanduuqa ku jiraa way labanlaabmaysaa, sidaa awgeedna inta is-hirdiyood ee dhexmarta molikiyuullada B iyo T mar labaad ayay labanlaabmaysaa sekenkiiba. Taasina waxa ay la mid tahay innaga oo nidhaahna, dhakhsaha ay molikiyuullada B iyo kuwa T isku hirdiyayaan waxa uu saamigal qumman u yahay ribnaanta B iyo ribnaanta T. Sidaa awgeedna dhakhsaha uu BT ku dhalanayaa waxa uu saamigal qumman u yahay ribnaanta B iyo ribnaanta T. Dhakhsaha falgalkanina waxa uu noqonayaa :

$$\begin{array}{ll} R & [B] \\ R & [T] \\ \therefore R = K [B] [T] \end{array}$$

R waxa ay u taagan tahay dhakhsaha falgalka, k waa inadoorsocme, sakalladuna waxa ay sheegayaan ribnaanta falgaleyaalka. Isle'egta caynkaas ahna waxa loo yaqqaan xeerka dhakhsaha ee falgalka. U fiirso jibbaarrada [B] iyo [T] ee xeerka dhakhsaha ee falgalkani waa hal-hal sida ay weheliyeyaaalka falgaleyaalka ee isle'egta muujinaysa falgalkuba ay u yihiin hal-hal.

Hadda bal aynu u fiirsanno xeerka dhakhsaha ee falgal ay weheliyeaasha falgaleyaalka isle'egta muujinaysa falgalku ay hal ka badan yihin.

Tusnale ahaan bal u fiirso falgalka

$$2B \longleftrightarrow B,$$

falgalkan waa in hal molikiyuul oo B ihi uu la hirdamaa hal molikiyuul oo kale oo B ah, si ay u dhaliyaan B. Dhakhsaha uu B, ku dhalanayaa waxa uu saamigal qumman u yahay dhakhsaha ay laba molikiyuul oo B ihi isku hirdiyayaan. Haddii aynu qaadanno hal molikiyuul oo ka mid ah molikiyuullada B inta jeer ee ay molikiyuul kale oo B ah is-hirdiyayaan sekenkiiba waxa uu saamigal qumman u yahay tirada molikiyuullada B ah ee sanduuqa ku jira. Haddii aynu labanlaabno tirada molikiyuullada B ah ee sanduuqa ku jirana dhakhsaha is-hirdiyada uu molikiyuulkaasi la yeelanayo molikiyuullada kale way labanlaabmaysaa. Haddii aynu molikiyuullada oo dhan qaadanno, halkii aynu halka molikiyuul oo qudha uga fiirsanaynay, inta is-hirdi ee dhacda sekenkiiba waxa ay saamigal qumman u tahay inta hirdiyood ee uu halkii molikiyuul ee B ahaa sameeyo sekenkiiba oo lagu dhufto tirada molikiyuullada B ah ee sanduuqa ku jira. Si kale oo arrintaa loo sheegi karaana waxa ay tahay, inta is-hirdiyood ee sekenkiiba dhacdaa (dhakhsaha) waxa ay saamigal qumman u yihin tirada molikiyuullada la hirdiyayo. Si kastaba aynu u nidhaahno ee, arrintu waxa ay tahay, dhakhsaha ay laba molikiyuul oo B ihi isku hirdiyayaan waxa uu saamigal qumman u yahay ribnaanta B oo lagu dhuftay ribnaanta B, ama labajibbaarka ribnaanta B. Sidaa awgeedna xeerka dhakhsaha ee falgalka

$$2B \longleftrightarrow B,$$

waxa uu noqonayaa:

$$R = K [B]^2$$

Haddii aad u fiirsatana waxa aad arkaysaa in jibbaarka ribnaanta B ee xeerka dhakhsaha ee falgakani uu yahay 2, sida uu weheliyaha B ee isle'egta falgalka tusaysaaba uu u yahay 2.

Guud ahaan falgallada hal tallaaba ku dhaca ee ay is le'egta u taagan falgalku tusayso in n molikiyuul oo B ah iyo m molikiyuul oo T ihi falgalka ka qayb qaateen, waxa uu xeerka dhakhsaha falgalku noqonayaa:

$$R = K [B]^n [T]^m$$

Waxa aad ogaataa in aan xeerka dhakhsaha ee falgallada, mar walba laga soo saari karin isle'gta u taagan falgalka oo dhan, waayo waxa jira falgallo badan oo dhawr tallaabo oo ay falgal. Io dhexdexaad ihi ka qayb qaataan soo mara, xeerka dhakh suhuna uu ku xidhan yahay tallaabooyinka mid ka mid ah.

#### L A Y L I :

1. Waa maxay faraqa u dhexeeya falgal kulbixiye ah iyo mid kulqaate ah? Mid walba tusaale ka mid ah sheeg.
2. Adiga oo isticmaalaya dhalo-toobineed iyo heerkulbeeg sidee ayaad u cabbiri lahayd kulka ka soo baxa falgalka dhexmara naatriyam haydarogsaydh iyo haydarokolo-rik asiidh ay labaduba badhax yihiin?
3. Sheeg qeexidda guud ee dhakhsaha falgal kimika ah?
4. Maxay yihiin qodobbada saameeya dhakhsaha falgalla- da kimikada ihi?
5. Haddii aad haysato kaalsiyam kaarbooneyt kuuskuus ahi iyo mid budo ah, oo aad labadaba ku darto haydarokolo.

rik asiidh badhax ah, iyama ayuu dhakhsaha falgalku  
badanayaa, maxaana ugu wacan?

6. (b) Kalkaliyuhu muxuu yahay?  
(t) Maxay tahay kalkaaliddu?  
(j) Sheeg astaamaha kalkaliyaha?
7. Maxay yihin insaymyadu, waana maxay shaqadoodu?
8. Sheeg saddex nooc oo kalkaliye, laba noocna mid wal-  
ba sida uu u shaqeeyo sheeg.
9. Adiga oo adeegsanaya laba walxood oo kala jaad ah **B** iyo  
**T** iyo kalkaliye **K**, sharax sida ay kalkaalidu u dhacdo.
10. Sida ay odhanayso aragtida is-hirdigu, sheeg laba arri-  
mood oo uu dhakhsaha falgal kimika ihi ku xiran yahay.
11. Molikiyuullo ka kooban laba neefood oo kala jaad ah oo  
weel ku wada jira, haddii is-hirdi wal oo dhexmara mo-  
likiyuulladu uu keeno falgal, maxaad u malanaysaa in  
uu falgalkaasi noqon lahaa?
12. Haddii ay elektaroonnada atammada molikiyuullada is-  
la falgelayaa ay kala didayaan, sidee ayay ku dhacaysaa  
in ay molikiyuulladu is-hirdiyaan?
13. Maxay tahay tamarta kaakicintu?
14. Sheeg sida ay u sharaxayso aragtida is-hirdigu sababta  
ay (b) dhalanka falgaleyaasha (t) ribnaanta falgaleya-  
sha (j) heerkulka iyo (x) kalkaliyaha, uu mid walib  
u sameeyo dhakhsaha falgalka.

15. Maxay tahay kakanta kacsani?
16. Adiga oo adeegsanaya dhalashada (smaysanka) kakanta kacsan iyo tamarta kaydsan ee falgaleyaasha, garaafna isticmaalaya, waxa aad si tafaftiran u sharaxdaa sida uu u dhacayo falgalka dhexmara molikiyuullada walax B iyo molikiyuullada walax T, haddii ay soo saarayaan laba wallood oo cusub oo kala ah J iyo X, falgalkuna uu kulbixiye yahay?
17. Wuxuu aad sharaxdaa sida uu isticmaalka kalkaaliyuhu u kordhin karo dhakhsaha falgal kimika ah, adiga oo eegaya sida uu u galoo tamarta kaakicinta ee falgalka (isticmaal garaaf).
18. Gubashada sonkortu waxa ay u baahan tahay heerkul aad u sarreeya, haddana sonkortu way ku gubaafaa jidhka dhexdiisa inkasta oo uu heerkulka jidhku yahay 37°C

Sharax waxa ay arrintaasi ku dhacdo?

## **BAABKA SIIDDEDAAD**

### **DHFELLITIRANKA FALGALLADA KIMIKADA AH**

Falgallada kimiikada ihi waa kala nooc-nooc. Baabkuu hore waxi aynu ku soo aragnay in xaaladaha uu falgalku ku dhacayo oo isbeddelaa ay la imanayso dhakhsaha falgalka oo isbeddelaa. Falgallada qaarkood walxaha soo taxaa, gabi ahaan way ka Juwan yihiin walxihi falgalka lagu bilaabay, mana jirto si alliyaale si ay ku suurtogelayso in walxahaa soo baxay dib loogu geddiyo walxihi falgalka lagu bilaabay, si kastaba vaaladaha ha loo beddelo ee falgallada noccaas ah waxa la yidhaa mageddismeyaal. Falgallada mageddismeyaalka ah waxa kale oo la odhan karaa «falgallada dhammaad gaadh». Tijaabada soo socota ayaana falgalladuu wax karta.

Tijaabo 3.1 Baadhista falgallada mageddismeyaalka ah :

- b) Diyaari woxoogaa milan naatriyam koloraydh ah, dasta deedna milan arjantam naytreyt ah ku dar ilaa iyo inta uu ruushi cad oo dambe samaysmi waayo.
- t) Woxoogaa quruuruxa oo sinka ah ku rid salfiyuurik asiidh rib ah, haddii loo baahdana, si uu falgalku dhakhsso ugu dhaco, bakeeri  $250 \text{ sm}^3$  ah oo biyo kululi ku jiraan ku yar diiri iskujirka.
- j) Kululee woxoogaa kaaliyam koloreyt ah oo dhuun-hubsasho ku jira ilaa iyo inta uu falgal dhacayo.

Saddexdaa falgal ee kor ku yaallaba, maxsuulka mid kastaba ka soo baxa sinaba dib looguma geddiyi karo falgalyaalkii lagu bilaabay. Dhawr sababood oo kala duwan awgooyaa yanay falgalladaasi mageddismeyaal ku noqdeen. Sababa haasina waa kuwa soo socda :


- i) Iyada oo ay walax mamilme ihi dhalato. Falgal dhammaad gaadho oo arrintaa tusayaana waa ka dhixmara arjantam naytareytkha iyo naatriyam koloraydhka ee u' ruushiga cadi soo bixiyo.



Ayoon ahaanna sida soo socota ayaa falgalka loo dhigi karaa

$$\text{Ag}^+ + \text{NO}_3^- + \text{Na}^+ + \text{Cl}^- \longrightarrow \text{AgCl} + \text{Na}^+ + \text{NO}_3^-$$

- ii) Iyada oo ay neefi soo baxdo — labada falgal (t) iyo (j). ee tijaabada kor ku taallaa waxa ay soo saarayaan maxsuullo neefo ah.




markan lafteeda ma suurtogelayso in neefaha soo baxay dib loogu geddiyo falgaleyaalkii falgalka lagu bilaabay.

Waxa jira falgallo nooc kale ah oo walxaha soo baxa (maxsuulka) dib loogu geddiyi karo falgaleyaalkii falgalka laagu bilaabay, haddii xaaladaha uu falgalku u baahan yahay la beddeko. Falgallada noocaasi ahna waxa la yidhaa geddis-meyaal. Tijaabada soo socota ayaana arrintaas inoo muuji-naysa.


#### Tijaabo 8.2 Raad uu kulku ku leeyahay ammooniyam koloraydhta.

Woxogaa wiriqo ammooniyam koloraydh ah ku riidhuun-hubsasho, dabadeedna miyir u kululee dhuunta, adiga oo isticmaala laambadda bensen. U fiirso waxa dhaca. Waxa aad arki doontaa in kulku uu ammooniyam koloraydhta u kaia

bixiyo labada neefood ee kala ah, ammooniya iyo haydarojiin koloraydh :




Hase yeeshee, marka ay labadaas neefood gaadhaan dhuunta-hubsashada xaggeeda sare ee qabow, dib ayay isugu tegayaan, si ay walaxdii ay ka yimaaddeen oo ah ammooniyam koloraydh u dhaliyaan:



Taas macnaheedu waxa uu yahay, marka ay xaalanduhu isbedbeddelaan, halkan waa heerkulka ee, falgalku hor iyo dib ayuu u soccoconayaa. Falgalka kor ku yaallaana waxa uu tuu saale fiican u yahay falgal geddisme ah.

Falgallada geddismeyaalka ah waxa lagu suntaa sum madda ah ——— ama = ee u dhexeysha falgaleyaaalka iyo maxsuulka. Falgalka kor ku yaallana waxa loo qoraa sida soco socota :



Falgallo kale oo geddismeyaal ah waxa ka mid ah (i) raadka uu kulku ku leeyahay meerkurik ogsaydhka :  $2\text{HgO} \longrightarrow 2\text{Hg} + \text{O}_2$  (ii) falgalka dhexmara salfar laba ogsaydh iyo ogsijiin ee ay ka dhalato salfar saddex ogsaydhtu.




(iii) Habka Heybar marka ammooniyada la samaynayo ce la isu geeyo haydarojiin iyo naytrojiin.




## Dheellitiranka Falgallada Geddisma

Falgal geddisine ah oo fudud waxa ka mid ah falgalka dhexmara xadiid aad u kulul oo casaaday iyo uumi biyo ah



isla markaana falgalkani wuu fulinayaa qeexidda falgal geddisme ah. Falgal geddisme ihi waa mid hor iyo dib, kolba ka uu u scconayaa, ay ku xidhan tahay hadba xaaladaha tijaabaru sida ay yihiin.



JT.8.1

Haddii uumi biyo ah la dulmariyo xadiid (feeram) kuul oo casaaciay, haydarojiin ayaa soo baxda; haydarojiintaana biyo ayaa lagu dul ururin karaa. Haddii haydarojiin la dulmariyo  $\text{Fe}_3\text{O}_4$ , aad u kululna, uumi biyo ah ayaa soo baxa. Uunrigaa biyaha ahna inta la qaboc, iyo a;ua la ururin karaa isa-

ga oc hoor ah. Labada jeerba falgalku dhammaad ayuu gaadhi karaa, taas oc ah xadiidka oo dhan waxa loo geddiye kar. Iha haddii haydarojiinta soo baxda la ururiye ogsaydh ka oo dhanna waxa loo geddiyi karaa xadiid, haddii uumiga biyaha ah ee soo baxa la ururiye. Xaaladaha beddelmay ee labada tijaabt waxa ay yihin maxsuulka ka soc baxay mid ahaantood ayaa falgaleyaalka ka kale ah, falgaleyaalka ka kaleena waa maxsuulka ka hore.

Hadda waxa aad ka soc qaaddaa in tijaabada ay xadiidka iyo uumiga biyaha ihi isla falgelayaan lagu samecyey weel xichan. Haydarojiin iyo  $\text{Fe}_3\text{O}_4$ , ayaa soo bixi doona, ha se yeeshee, muddo var dabadeed dib ayay isula falgelayaan, xadiid iyó umi biyo ihina wa' soo bixi doonaan waayo haydaaciinta soo baxdaa meel ay ka baxdo ma haysato. Aa khirkana waxa la gaadhayaan xaalad ay labada falgal isu dheellitiran oo ay afarta walxoodba,  $\text{Fe}$ ,  $\text{Fe}_3\text{O}_4$ ,  $\text{H}_2$ , iyo  $\text{H}_2\text{O}$  weelka ku wada jiraan.

Iskujirkaa dheellitiran, dhaqsaha ay falgaleyaalku isula falgelayaan falgaleyaalkii ay ka yimaadeen iyaka oo dib isula falgelayaa way isleeg yihin.

#### DHEELLITIRANKA MILANNADA:

Falgal kale oc geddisme ihi waa ka dhexmara itayl alkoholka iyé asetik asiidha, ee soo saara itayl aseteytka.



Falgalkani waa falgal dhexmara iskudhisyo elektaroon wadaag ah, sidaa awgeedna aad ayuu u dhakhso daran yanay. Marka asetik asiidha iyo itayl alkhooleekaa la isku darana, aakhirka waxa soo baxaya iskujir dheellitiran oo ay afarta walxoodba, asetik asiidh, itayl alkhooleek, itayl aseteyt iyo hiyo, ku

jiraan. Haddii heerkul aad u sareeya ia isticmaalo, labada far galba, ka hor u socda ee ay asiidha iyo alkohoolku isla falgela-yan, dhakhsaocdu wuu kordhayaa, dheellitirkana dhakho-ayaa loo gaadhayaa.

Tijaabada soo soccta awaa innoo muujinaysa dheellitirranka iskujirrada milan.

Tijaabo 8.3 Diyaari mi'an B - 13 g oo feerik koloraydh ah ku mil 50 sm<sup>3</sup> oc biyo ah. Wuxa kale oo aad diyaarisaa mi'an T - 8 g oo ammooniyam taayoosayaneyt ah ku mil 50 sm<sup>3</sup> oc biyo ah (Haddii aad heli kari weydid ammooniyam taayoo-sayaneyt, waxa aad isticmaashaa kaaliyam taayocsayaneyt). 2 sm<sup>3</sup> oc milan B ah iyo 25 sm<sup>3</sup> oo milan T ah ku mil 50 sm<sup>3</sup> oo biyo ah, milanka soo baxana waxa aad u bixisaa milan J. Afar bakeeri mid walqa waxa aad ku shubtaa 100 sm<sup>3</sup> oo milan J ah. Wuxa kale oc aad diyaarisaa mi'an ammooniyam koloraydh ah, adiga oo 3 g oo ammooniyam koloraydh ah ku milaya 50 sm<sup>3</sup> oc biyo ah. (Haddii aad markii hore isticmaashay kaaliyam taayocsayaneyt, halka ammocriyam koloraydhkana waxa aad ka isticmaashaa kaaliyami koloraydh). Afarta bakeeri milan-hada soc socda ku kala dardar.

- b) Mid ahaantocd bakeeriyada waxa aad ku dartaa 25 sm<sup>3</sup> oo biyo ah, waxana aad u isticmaashaa si aad midabkiisa (midat ma laha ee) midabbada kuwa kale aad ugu eegtid.
- i) Bakerriga labaad waxa aad ku dartaa 25 sm<sup>3</sup> oo milan B ah.
- j) Ka ugu daniteeyaa oo ah ka afaraadna waxa aad ku dar-taa 25 sm<sup>3</sup> oo milan ammooniyam koloraydh ah.

U fiirso sida uu nidabka milan kastaa isu beddelo marka aad ku dartid mid ka-tabaa milan J oo ku jiray bakeeriyada.

i algalka meesha ka dhacayaan waa mid ma geddisme ah; waana



Midaaka cas ee milanka waxa nugu wacan feerik taayoosayaneyt ka soc baxay. Milan B iyo milan T oo kala ah feerik koloraydh iyo ammoniyam taayoosayaneyt kolba kii lagu daraana midabkaa cas ayuu sii kordhinaya, waayo ammoniyam taayoosayaneytka soo taxaa ayay sii kordhinayaan. Hase yeeshi, marka milanka ammoniyam kclcraydhka ah lagu daro midabka casi wuu sii khafiisinaaya, taas oo ah ammoniyam taayoosayaneytka milanka ku jira ayaa yaraanaya. Sidaa awgeedna, hadba chinaca uu falgalku u dheelliayaa, ee uu u soconayaa waxa ay ku xidhan tahay hadba walxaha lagu daro. Haddii falgaleyaalka midkocd ama geddigocdba la kordhiyo oo inoo dheeraad ah lagu daro isle'egta xaggeeda bidixda, falgalku waxa uu u checliyayaa oo u socconayaa xagga midigta, maxsuul badan tyaana soc bixaya. Haddiise walxo dheeraad ah lagu daro chinaca maxsuulka falgalku waxa uu u dheelliayaa chinaca falgaleyaalka waxaanu u soconayaa isle'egta xaggeeda bidixda.

### Xecika lii Jaatiliyar (le chatelier)

Waxa aynu tijaabadii hore ku soo aragnay in isbeddel uu ku dhaco sida ay falgaleyaalka iyo maxsuulku ay isugu oo ee'itiran yihin haddii xaaladaha falgalka la beddelo. Arintacsina waxa si hagaagsan u soo koobaya xeerka lii Jaatiliyar. Waxa uu xeerkaasi odhanayaa: Mar allaale marka labbedde xaaladaha dibadeed ee falgai geddisme ah oo dheelliiran, isbeddel ayaa ku dhaca falgalka; isbeddelkaasi oo ka hor. Isoda ka ay xaaladaha dibadeed keeneen.

Tijaabadii hore ee ay fecrik kloraydhka iyo ammoniyam taayoosayaneyt isla falgelayecn, isbeddel ka mid ah xaaladaha dibadeed waxa uu ahaa ku daridda feerik koloraydh

dheeraad ah. Taasina isbeddel ayay falgalka ku keentay. Isbeddelkaas oo ahaa falgalka oc xagga midigta u dheeeliya, waa jec feerik koloraydh dheeraad ah ayaa falgalka ka qayb qaada-tay. Isla markaas isbeddelkaas uu falgalku u dheeeliyayo xagga midigta waxa uu hocs dhigayaa oc uu yaraanayaa xaddiga feerik koloraydhka ali ee milanka ku ~~jira~~. Sidaa awgeed i. beddelka ku dhacay falgalka ee uu xaddiga feerik koloraydhka ee milanka ku jira yaraanayo, waxa uu ka horjeedaa is beddelka ditadeed ee xaaladaha taas oo ah ku daridda feerik koloraydh. Waxa kale oc lagu isticmaali karaa xeerka Le Jaatliyar kulka la xidhiidha falgallada iyo isbeddelka ku dhaca nūgagga neefaha ee falgalada ay falgaleyaaalka iyo maxsuulada oo chammi ama qaarkoed ay neefo yihiin.


### 1. Raad uu heerkulku ku leeyahay dheellitiranka falgallada :

Arrintani waa lata is-huwan, ta hore oo ah heerkulka oo kor loc dhigaa waxa ay kcr'linaysaa dhakhsaha falgalka, (sida caadiiga ah heerkulka oo 10°C kor loo qaadaa way laban laabtaa dhakhsaha), ta labaadna kul ayaa la siinayaa falgalka. Haddii aynu u fiirsanno falgalka

$N_2 + H_2 \xleftarrow{NH_3} 11950$  kaalori  
 Falgalca midigta u socdaa waa kulbixiye, falgalca bidixda u socdaana waa kulqaate waayo 11950 kaalori aaya loo baahan ya tay si hal mocl oo ammochiyam ah locgu kala bixiyo naytroyin iyo haydarcjiin. Taasina waxa ay la imanaysaa in ammoo-nayadu u kala baxdo naytroyiin iyo haydarojiin. Sidaa awgeed haddii iskujir haydarcjiin iyo naytroyiin ah la kululeeyo, falgalku dhakhso ayuu u dheellitirmayaa waayo kulku waxa uu kor-dhinayaa dhakhsaha falgallada, hase yeeshay, ammooniyaa yarayaa soc baxaysc waayo falgalca dhexmara naytroyiin iyo haydarcjiin ee ay ammooniyaa soo baxdaa waa kulqaate. Guud nhaanna waxa aynu odhan karraa heerkulka oo kor u kacaa waxa uu kcrdhinayaa dhakhsaha falgalca kulqaataha ah, isaga oo hocs u dhacaana waxa ay kcrdhinaysaa dhakhsaha falgalca kulbixiyaha ah.

## 2. Raadka uu cadaadisku ku leeyahay dheellitiranka falgallada

Si aynu u tusno raadka uu cadaadisku ku leeyahay dheellitiranka falgallada, tal hadda aynu u fiirsanno falgalka soo socda :



Haddii aynu xeerka lii Jaatiliyar ku eegno falgalkan. wa ya aynu arkaynaa in haddii cadaadiska la kordhiyo uu falgalku u dheelliyayo oc uu u teecnayo dhinaca hoos u dhigi kara cadaadiska iskujirka neefaha ah. Falgalka kor ku yaallana, cadaadiska iskujirka neefaha ihi waxa uu hoos u dhici karaa i addii ay ammoo niyam kolcraydh dhalato, taas oo ka imanaysa mugga yaraanaya. Sidaa awgeed, falgalka kor **ku** yaalla, cadaadiska dibadeed oc kordhaa, waxa uu falgalka u socodsii nayaa dhinaca midigtu. Guud ahaan cadaadiska oo kordhaa waxa uu falgallada u socodsii nayaa; una dheellitiraa xaggaa falgalka ee saaraya mugga yar. Haddii aan mugga waxtu iska beddelayyna, cadaadiska dibadeed raad ku yeelan maayo falgallada geddisma. Tusaale ahaan falgalka dhixmara xa. Giidka iyo uumiga tiyaha ah



mugga falgaleyaalka neefaha ah ee isle'egta labadeeda dhinac. Iha waa isku mid (afar mug iyo afar mug). Sidaa awgeed cadaadisku raad ku/ne laha falgalkan. Cadaadisku wax raad ah kuma laha falgallada geddismeyaalka ah ee ay falgalyaalka iyo, maxuuulkuba ay adkeyaal yihiin ama ay milan ku jiraan.

### 3. Raadka uu kal/yuhu ku leeyahay dheelltiranka falgallada:

Sidii aynu horeba u soo heegnay kalkaaliyuhu waxa taal oo s u dhigaa tamarta kaakicinta ee falgallada. sidaa awgeed-na waxa uu kerdhiyaa dhakhsaha falgallada. Hddaba falgal lada geddismeyaalka ah, tamarta kaakicinta oo hoos u dhac-daa isku si ayay u samaynaysaa falgalka hor u socda iyo ka dib u soodaba.


Sidaa awgeed kalkaaliyuhu raad kuma laha falgal dheel litiran, hase yeeshee, kalkaaliyuhu waxa uu soo gaabiyaaminta uu falgalku ku dheellitirmayo, inkasta oo koleyba dheel litirankaa la gaadhayc haddii kalkaaliye la isticmaalo iyo had-dii kaleba.

### Xidhiidhka ka dhexeeya dheelltiranka falgallada iyo ribnaanta:

Laka saynisahan oo Noorwiijijan ah oo la kala odhan jiray Kaato McGsimilian Guldebeerj iyo Peter Waag (Cato Maximilian Gulberg iyo Peter Wage) ayaa markii ugu horreysay si fiican u tusay xidhiidhka ka dhexeeya dheelltiranka falgal lada iyo ribnaanta. Waxyaabihii ay derseenna waxa ka mid ahaa falgalka dhixmara tiraha aad u kulul iyo uumiga biyaha ah. iyo falgalka kaa ka soc hcrjeeda ee ay haydarojiinta soo taxda iyo ogaydhka birtu ay isula falgalaan. Tusaale kuwa ka mid ihina waa:



Falgal kale oo ay Guldebeerj iyo Waag derseenna waxa uu ahaa ka ay walax BT u kala baxdo B iyo T, waxana ka mid ah marka ay haydarojiin aayodhaytu u kala baxdo haydarojiin iyo aayodhiin,



Falgalkani waxa uu dhacaa hadciin HI lagu shubo weel xidhan, datadectuna weelka la kululeeyo. Heerkul kasta oo ka sarreeya la ay HI ku kala baxdo, waxa la gaadhi karaa dheellitiran uu dhakhsaha falgalka hor u socda iyo ka dib u socdaa ay isle ckaadaan. Maalka xaaladdaa la gaadhana, ribnaanta walix kastaa oo iskujirka ku jirtaa doorsoomimeyso.

Falgal kale oo ay Guldbeerj iyo Waage si fiican u der seenna waxa ka mid ahaa falgalka dhexmara itanool iyo asetiik asiidh ee ay Liyo iyo itayl asiteyt soo baxaan.



Guud ahaanna haddii aynu u fiirsanno falgalka dherex mara B iyo T ee ay J iyo X soo baxaan,



Heerkul kasta waxa la gaadhi karaa xaaladda uu falgalku isu dheellitiran yahay oo uu dhakhsaha falgalka hor u socda iyo ka dib u socdaa ay isle'eg yihiin. Xaaladdaa ay labada falgal isu dheellitiran yihiin, waxa ay Guldbeerj iyo Waage arkeen in haddii ribnaanta J oo lagu dhuftay ribnaanta X loo qaybiyo ribnaanta B oo lagu dhuftay ribnaata T ay madoorsoome tahay.

Haddii aynu dib ugu noqonno xeerka dhakhsaha ee falgalka kor ku yaalla, dhakhsaha falgalka hor u socda waxa uu noqonayaa

$$R = k_1 [B] [T]$$

Dhakhsaha falgalka dib u socdaana waxa uu noqonayaa

$$R = k_2 [J] [X]$$

Marka uu falgalku dheellitiran yahay, dhakhsaha falgalka hor u socda iyo ka dib u socdaa way isle'eg yihiin, sidaa awgeed, marka uu falgalka kor ku yaallaa dheellitiran gaadho


$$k_1 [B] [T] = k_2 [J] [X]$$

$$\frac{k_1}{k_2} = \frac{[J] [X]}{[B] [T]}$$

$k_1$  iyo  $k_2$  waa madoorsoomeyaal, sidaa awgeed  $k_1, k_2$  waa madoorsoome

$$K = \frac{k_1}{k_2} = \frac{[J] [X]}{[B] [T]}$$

K waxa loo yaqaan madoorsoomaha dheellitiranka, qii mihiisuun wuxuu ku xidhan yahay heerkulka. Haddii aynu u fiirsanno falgal ay weheliyeyaasha walxaha isla falgelaya ama kuwa soo baxaaba ay ka badan yihiin hal, weheliyeyaashu waxa ay no qonayaan jibbaarrada ribnaanta walxaha marka la qorayo madoorsoomaha dheellitiranka. Tuusale ahaan falgalka dhexmara naytrojiin iyo haydarojiin ee ay ammooniyaa soo baxdo,



madoorsoomaha dheellitiranka ee falgalku waxa uu noqonayaan

$$K = \frac{[NH_3]^2}{[N_2] \cdot [H_2]^3}$$

Marka la qorayo tibaaxda madoorsoomaha dheellitiranka ee falgallada uu iskujirka isu dheellitirani ka kooban yahay

adkeyaal iyo neefo ama hoorar iyo neefo, laguma muujiyo ribnaanta adkeyaasha iyo ribnaanta hoorarka toona. Sababtu waxaa weeye ribnaanta adkaha ama hoorka soocaahi isma beddesho, waayo marka uu xaddigoodu kordhoba mugga ay buuxinaya wuu kordhayaa. Tusaale ahaan falgalka dhexmara kaarboon iyo ogsijiin ee uu soo baxo kaarboon hal-ogsaydh,



madoocrsoomaha dheellitiranku waxa uu noqon lahaa :

$$K_1 = \frac{[CO]^2}{[C]^2 [O_2]}$$

Hase yeeshee, ribnaanta kaarbocnku waa madoorsoome, sidaa awgeed tibaaxda kor ku qoran "waxa loo qori karaa,

$$K_1 \frac{[C]^2}{[CO]^2} = \frac{[O_2]}{[C]}$$

mar haddii uu  $[C]$  madoorsoome yahayna

$$K_1 \frac{[C]^2}{[CO]^2} = K$$

$$K_1 = \frac{[CO]^2}{[O_2]}$$

Raadka ay ribnaantu ku leedahay dheellitiranka waxa si fiican innoogu muujinaya falgalka dhexmara itanool iyo asetik asiidh

$$K = \frac{[CH_3COOC_2H_5] [H_2O]}{[CH_3COOH] [CH_3CH_2OH]}$$

Maxaa dhacaya haddii asetik asiidha dheeraad ah lagu daro Mar haddii aannu madoorsoomaha dheellitiranku isbeddeleyn, waa inay ribnaanta itayl eseteytku iyo ta biyuhu ay kordhaan si aanu madoorsoomaha dheellitiranku isu beddelin. Taasina waxa ay la imanaysaa in ribnaanta itanooleku ay hoos u dhacdo ta itayl aseteytka iyo ta biyuhuna ay kordhaan marka asetik asiidh dheeraad ah la isticmaalo, haddii aanu heerkulku isbeddelin, waayo madoorsoomaha dheellitiranka ayaa heerkulka ku xidhan.

Maxaa dhacaya haddii biyo lagu daro iskujirka dheellitiran ? Mar haddii ay K tahay madoorsoome, waa inuu dhacaan isteddel hocs u dhigi kara ribnaanta itayl aseteytka, ta asetik asiidha iyo ta itanoolkana kordhin kara, si aanu isu beddelin qiiimaha madocrsoomuhu.

Maxaa dhacaya haddii aynu woxoogaa itanool ah ka qaadno iskujirka dheellitiran ? Taasi waxa ay yaraynaysaaq qiiimaha hooseeyaha, si aanu qiiimaha madoorsoomuhu isu beddelin oo uu falgalku u dheellitirnaadona waa inay itayl aseteyt dheeraad ah iyo biyo dheeraad ihi isla falgalan si ay u mag-dhabaan itanoclkii iskujirka laga qaaday.

Guud ahaan, isheddel kastaa ha dhaco ee, waa in uu falgalku raacaa xeerka lii Jaatliyar.

#### LAYLISYO :

1. Marka haydarojiin iyo aayodhiin ay isla falgalan waxa ay soo saarayaan haydar'aayodhik asiidh ( oo ay naanaysteedu tahay HI) falgalkuna waa geddisme.



Adiga oo adeegsanaya xeerka lii Jaatliyar, sharax tal-

laabtooyinka aad qaadi lahayd si aad u hesho xaddiga ugu badan ee suurtagalka ah ee asidhkaas ah.

2. Haydarojiin beerogsaydh waxa ay kaaliyam aayodhaydhka u ogsidhaysaa aayodhiin. falgalkana waxa muuji navsa isle'egta



dhakhsaha falgalkanina aad buu u yar yahay haddii ay asidh ku jirto milanka. Marka uu falgalku sii socdana, milanku kolba baroor buu sii noqdaa, taas oo ugu wacan tahay aaycdhiinta soc baxda oo biyaha ku milanta. Wixa la ogyahay inay arjantam naytareyt falgalkan kallaiso. Shrax tijaabo aad ku hubsanayso inay arjantam naytareyt kalkaaliye tahay oc ay falgalkan kalkaaliiso.

3. Sidee ayaad tijaabo ahaan ugu caddayn lahayd in uu falgalka



uu geddisme yahay? Wixa habboon in aad tijaabada ku isticmaashid feeras naytareyt, feerik naytreyt iyo arjantam naytareyt, haddii aad heli karaysid.

4. Sheeg xeerka lii Jaatiliyar.

5. Falgalka geddismaha ah ee








- b) Qor tibaaxda tuksaysa madoorsoomaha dheellitiranka.  
t) Maxaa dhacaya haddii cadaadiska la kordhiyo ?

- j) Maxaa dhacaya haddii heerkulka la kordhiyo?
- x) Maxaa dhacaya haddii naytarojjin dheeraad ah la isticmaalo.
- kh) Maxaa dhacaya haddii ammooniyada soo baxaysa loo oggolaado in ay weelka ka baxdo.

6. Falgal kasta oo ka mid ah kuwa soo socda, qor madoor socmaha dheellitirankiisa. (Waxa aad u qaadataa in walxaha oo dhammi ay neefo yihiin

(BaCo<sub>3</sub>, BaO, Ni iyo C mooyee).



7. Qor afar qodob oo uu mid waliba sameeyo dheellitiranka falgallada geddisma. Sida uu mid walba u sameeyana Sharax.
8. Si tafaftiran u sharax faraqa u dhexeeya falgallada geddisma iyo kuwa mageddismeyaalka ah,

CURIYE	SUMMAD	TIRO-ATAM	CULAYS. ATAM
Aktiniyam	Ac	89	227
Aluuminam	Al	13	26.98
Arjantam	Ag	47	107.868
Amerikiyam	Am	95	243
Aynishtaaniyam	Es	99	254
Argon	Ar	18	39.948
Arsinik	As	33	74.922
Aayodhiin	I	53	126.904
Astatiin	At	85	210
Beeriyyam	Ba	56	137.34
Berkeliyam	Ek	97	249
Beriliyam	Be	4	9.012
Bismas	Bi	83	208.98
Booron	B	5	10.811
Doromiiin	Br	35	79.90
Balambbam	Pb	82	207.19
Balaadiyam	Pd	46	106.4
Balaatinam	Pt	78	195.09
Barasoodiyam	Pr	59	140.9
Bolooniyam	Po	84	210
Boromitiyam	Pm	61	145
Borotaaktiyam	Pa	91	231
Bulatooniyam	Pu	94	242
Daysborosiyam	Dy	66	162.5
Erbiyam	Er	68	167.26
Faneediyam	V	23	50.94
Feermiyam	Fm	10	253
Foloriin	F	9	19
Faraansiyam	Fr	87	223
Fosfoor	P	15	30.97

CURIYE	SUMMAD	TIRO-ATAM	CULAYS. ATAM
Gaaliyam	Ga	26	55.847
Haafniyam	Hf	64	157.25
Heliyam	He	31	69.72
Feeram	Fe	72	178.5
Gadoliniyam	Gd	7	4.003
Holmiyam	Ho	67	164.93
Haydarojiin	H	1	1.008
Iskaandiyam	Sc	21	44.956
Indiyam	In	49	114.82
Iridiyam	Ir	77	192.2
Istaroontiyam	Sr	38	87.62
Istibiyam	Sb	51	121.75
Istaanas	Sn	50	118.69
Jermaaniyam	Ge	32	72.59
Kaaliyam	K	19	39.10
Kaalmiyam	Cd	48	112.4
Kaalsiyam	Ca	20	40.08
Kalifoorniyam	Cf	98	251
Kaarboon	C	6	12.011
Koloriin	Cl	17	35.45
Koromiyam	Cr	24	52
Kobalt	Co	27	58.933
Kiribton	Kr	36	83.80
Kuuriyam	Cm	96	247
Kubram	Cu	29	63.546
Laantanam	La	57	138.91
Looransiyam	Lw	103	257
Litiyam	Li	3	6.94
Lutiitiyam	Lu	71	174.97
Magniisiyam	Mg	12	24.31
Manganiis	Mn	25	54.94

CURIYE	SUMMAD	TIRO-ATAM	CULAYS. ATAM
--------	--------	-----------	-----------------

Mendeleefiyam	Md	101	256
Meerkuri	Hg	80	200.6
Molibidinam	Mo	42	95.94
Niyooldimiyam	Nd	60	144.24
Niyón	Ne	10	20.183
Nebtuuniyam	Np	93	237
Nikal	Ni	28	58.71
Niyoobiyam	Nb	41	92.91
Naytarojiin	N	7	14.0067
Nobiliyam	No	102	254
Naatriyam	Na	11	22.9898
Ogsjiin	O	8	15.9994
Ooram	Au	79	196.967
Raadiyam	Ra	88	226
Raadon	Rn	86	222
Riiniyam	Re	75	186.2
Roodiyam	Rh	45	102.90
Rubiidiyam	Rb	37	85.477
Rutiiniyam	Ru	44	101.07
Sameeriyam	Sm	62	150.35
Siiriyam	Ce	58	140.12
Wolfaram	W	74	183.85
Yurubiyam	Eu	63	151.96
Yufriyam	Y	39	88.905
Siliiyam	Cs	55	132.905
Siliiniyam	Se	34	78.96
Silikoon	Si	14	28.086
Salfar	S	16	32.064
Siinoon	Xe	54	131.30
Sink	Zn	30	65.37
Sirkooniyam	Zr	40	91.22

CURIYE	SUMMAD	TIRO-ATAM	CULAYS- ATAM
Tantaaalam	Ta	73	180.948
Tekneetiyam	Tc	43	99
Teluuriyam	Te	52	127.6
Teerbiyam	Tb	65	158.929
Taaliyam	Tl	81	204.37
Tooriyam	Th	90	232.038
Tuuliyam	Tm	69	168.934
Titaaniyam	Ti	22	47.90
Yuraaniyam	U	92	238.03
Yuteerbiyam	Yb	70	173.04

**VOLUME 4**

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA  
WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA  
XAFIISK MANAAHIJKA

PJ

2534

1A2

1555

1976

v.4

**BUUGGA**

**KIMISTARIGA**

**DUGSIGA**

**SARE**

**FASALKA AFRAAD**

INDIANA UNIVERSITY  
LIBRARIES  
SCHOOL

dm

4/9/80

# HORDHAC

Buuggan waxaa loogu tala galay fasalka afraad ee Dugsiga Sare. Qaybaha buugga oo aad mooddo inay aad u fara badan yihin awgeed, ayaa waxa macallinka lagula talinayaa inuu isu miisaamo qaybaha buugga iyo inta uu waqtii qayb walba ku qaadanayo si uu isu waa fajiyo waqtiga uu haysto iyo manhajka.

Xafiiska manaahijtu wuxuu u mahad naqayaa Yaasiin Xaashi iyo dhammaan dadkii kale ee ka qayb qaatay qorista iyo garaacista buugga.

Waxa iyana mahad gaar ah leh Wakaaladda Madbacadda Qaranka oo suurta gelisay sidii buuggani si dhakhsso ah ugu soo bixi lahaa.

Cabdiraxmaan Timir Cali

Maamulaha Xafiiska Manaahijita

## TUSMADA BUUGGA

1. Ururka toddobaad	Bogga
2. Ururka lixaad	> 32
3. Ururka shanaad	> 96
4. Ururka kowaad	> 149
5. Ururka labaad	> 183
6. Ururka afraad	> 214
7. Kimikada orgaanikada ah	> 252

## BAABKA KOOWAAD

*Ururka VIIaad*

### HALOJINNADA

*Astaamaha guud ee Halojiinnada*

Halojinnadu waa curiyeyaalka uu ururka VIIaad ee tusaha kalgalika curiyeyaalku ka kooban yahay, waxana ka mid ah, fcloriin, koloriin, boromiin, aayoondhiin iyo astatiin. Asalka magaca curiyeyaalku waa laatiin, macnihiisuna waxa weeye «cusba sameeye», waayo awood weyn bay halojinnadu u leeyihiin in ay toos ugu darsamaan biraha, cusbooyinna ay sameecyaan, tušaale ahaan, NaCl.

Heertamarta atammada halojinnada ugu sarraysa waxa ku jira toddoba elektaroon, si hawl yar ayayna hal elektaroon u qaataan, waxa ayna isu beddelaan ayoonno hal tabane ah. Sidaa awgeed kaaftoonka taban ee halojinnadu waa hal inta badan. Halojinnadu waxa ay leeyihiin astaamaha bir-maheyaalka.

Curiyaha Summad Culays			Tiro	Ratibaadda elektaroonnada					
		atam	atam	K	L	M	N	O	P
Folcriin	F	19.00	9	2	7	—	—	—	—
Koloriin	Cl	35.45	17	2	8	7	—	—	—
Boromiin	Br	79.91	35	2	8	18	7	—	—
Aayodhiin	I	126.90	53	2	8	18	18	7	—
Astatiin	At	210	85	2	8	18	32	18	7

JT 1.2

Halojiinnada keli ahaan adduunka loogama helo, waayo firsircoonaantooda ayaa aad u sarraysa, waxase la helaa iyaga oo iskudhisyo ku jira. Molikiyuullada halojiinnadu waa laba atamleyaal ay dabarro elektaroon-wadaag ahi isu hayaan, ( $F_2$ ,  $Cl_2$ ,  $Br_2$ ,  $I_2$ ,  $At_2$ ). Tusaale ahaan koloriinta sidan ayaa loo muujin karaa



Haddii ay laba curiye oo ururka halojiinnada ka mid ahi milan ku wada jiraan, hadba ka ururka xaggi hoose kaga jira ayaa milanka laga saaraa



Firsircoonaanta iyo xoogga ogsidhaynta ee halojiinnaduba way yaraadaan marka uu calays-atamku bataba. Halojiinnadu waa ogsidheyeyaaal, waxana ugu firsircoon foloriin, aayodhii ayaana ugu itaal yar. Haddii la soo koobo xoogga ogsidhaynta iyo firsircoonaanta kimika ahaaneed ee molkiyuullada halojiinnadu waxa ay u kala firsircoon yihiin sida tan:  $F_2 > Cl_2 >$

$Br_2 > I_2$ . Firsircoonaanta yareeyeyaaal ahaaneedna waxa ay isugu xigaan:  $I > Br > Cl > F$ .

Astaamaha kimikaad iyo kuwa duleed ee ururku way isku dhow yihiin, taana waxa ugu wacan ratibaadda elektaroonnada ee heertamarta ugu sarraysa ee ataminadooda oo isku wada mid ah.

Astaamaha duleed ee ururkan waxa aad si fiican ugu arki doontaa tusaha hoos ku yaal.

Curiyaha	Summad	Wejiga	Cufn g/sm <sup>3</sup>	Heerkulka dhalaalka °C	Heerkulka karka °C
Foloriin	F <sub>2</sub>	neef	1.110	-219.6	-188.1
Koloriin	Cl <sub>2</sub>	neef	1.557	-101.3	-34.1
Boromiin	Br <sub>2</sub>	hoor	1.12	- 7.3	- 58.8
Aayodhiin	I <sub>2</sub>	adke	4.93	-113.7	-182.8

JT. 1.3

### KOLORIINTA

#### Jiritaanka Koloriinta

Magaco koloriinta asalkiisu waa Giriig, macnihiiisuna waxa weeye midab cagaar hurdi xiga. Ugu horrayn 1774 ayaa koloriinta la ogaaday, hase yeecshee curiye ahaan 1810kii wara seo saaray Dheefi, oo magacana ugu bixshey midabkeeda, ayse ku badan tahay iskudhisiyada ay ka mid tahay: naatriyam koloraydh, kaas oo aad ugu badan biyaha baalda, harooyinka dhanaan iyo dhulka hoostiisaba.



#### Diyaarinta koloriinta.

Koloriinta waxa la heli akraa marka ayoonnada koloraydhka ah la oggidheeyo, sida isle'egta elektarconikaad ee hoose muujinayso.



Falgakaasina waxa weeye saldhigga clariiqooyinka kala duwan ee neefstaas lagu diyaarin karo. Dariiqo kuwaas ka mid ihina waa danabsoocidda milan naatriyam koloraydh ah, halkaas oo


ay koloriintu ku ururto qotinka togan. Markase lagu diyaari-nayo qolka shaybaadhka waxa la adeegsadaa falgalka ka dhex-dhaca baydarokolorik asiidh iyo ogsidheeye xcoggan sida manganiis laba ogsaydli ama kaaliyam beermanganeyt. Tusaale ahaan falgalka ka dhex dhaca manganiis laba-ogsaydh iyo haydarokolorik asiidh waxa loo qori karaa sida tan:



### *Shoybear ku Jaaarinta Koloriinta*

#### *Tiiabo 1.1*

Ediga oo raawaya jaaputuska 1.4. budo manganiis laba-ogsaydh ah ku shub dhaalada oo inasalku ku jiro. haydarokolorik asindib ahna ku dheridigaa oo istiemaalaya masaf dhuniin sheer leh. Marka dhiskoo, kuluuleeyo waxa soo baxda koloriin. waxana la sii dhex naariyo dhalo biyo ku jiraan, si koloriinta looga reebo ne ita baydaronii koloraydh. Waxa kale oo koloriinta la sii dhixmariysa dhalo labaad oo ay salfi-yunrik asiidh rib ahi ku jirto, si neetta loo gallajiyo. Neefta waxa caada xiriiriye, waxana ay ku ururtaa koobno.



*Astaamaha duleed ee koloriinta.*

Koloriintu waa neef uu midabkeedu yahay hurdi cagaar xigga. Urteedu aad bay u xun tahay, waana sun. Haddii qaa-ceeda la neefsado, waxa uu dhaawacaa cunaha iyo sambabka. Dagaalkii kowaad ee adduunka waxa loo isticmaali jirey sun ahaan. Cunfnaanta koloriintu labanlaab ayay ka badan tahay lan hawada. Cadaadiska  $4.56 \times 10^7$  sm ah ayaa neefta hoor joogu beddeli karaa marka uu heerkulku caadi yahay.

*Astaamaha kimikaad ee koloriinta.*

Koloriintu waa curiye aad u firfircooni, kaaftoonnada u dhexeeyaa hal ilaa toddobana way yeelan kartaa, in kasta oo kaaftoonka ugu caansani uu yahay 1--. Koloriintu way la falgashaa haydarojiinta, waxana soo baxda haydarojiin kolo-raydh. Falgalka ka dhexeeyaa koloriinta iyo haydarojiintu waxa uu ku dhaqsa badan yahay iftiinka, waxana laga yaabaa in uu garax la socdo falgalka.

*Falgalku ay koloriintu la leedahay biyaha.*

*Tijaabo 1.2*


Soo qaado laba koonbo oo ay koloriin qallalani ka buuxdo, dabadeedna mid ahaan ku dhex rid litmas buluug ah, ubax iyo maro midab leh. U fiirso waxa ku dhaca walxahaas. Koonbada kalena saddexdaa shey oo qoyan ku dhex rid. Maxaa ku dhacay walxihi?

Walxaha koonbada hore ku jira wax isbeddel ihi kuma dhacayaan midabka alaabta, laakiin walxaha koonbada danbe fu jira midabkoodu wuu tirmayaa. Taasi waxa ay ku tusaysaa in ay neefta koloriintu firfircooni tahay marka ay biyo jiraan. Marka ay koloriinta iyo biyo isku darsamaan, waxa samaysma laba asiidh oo la kala yiraahdo: Haydarokolorik asiidh iyo Haybokoloras asiidh (HOCl). Asiidhka danbe (HOCl) ma

Deggana, isla markiina waxa ay u kala baxdaa haydarokolorik asiidh iyo ogsijiin oo atam ahaan u soo baxda loona yaqaan Neysant ogsijiin (O),

Ogsijiintaasu aad ayay uga firfircoo tahay ogsijiinta caadiga ah. Sidaa darteed haybokoloras asiidhku way ka firfircoo tahay haydarokolorik asiidha, neysant ogsijiinta ayaana ugu wacan astaanta midab tirka ah ee koloriinta.

$\text{HOCl} + \text{midab} \longrightarrow \text{HCl} + [\text{midab} + (\text{O})]$  midablaawe. Laakiin koloriintu ma tирто midabka haddii aan biyo jirin, waayo HOCl ayaan samaysmin.



J.T. 1.5

Koloriintu ma caawisaa gubashada?

Tijaabo 1.3


Koonbo ay neef koloriin ahi ka buuxdo ku dhex rid shamac baxaya. Maxaa dhacay? Waxa aad arki doontaa in aanu shamaciid damin. Koonbadara waxa ku samaysmay manduul iyo haydarojiin koloraydh. Falgalkan waxa aynu ka garan karraa in ay koloriintu caawiso gubashada.

## Koloriintu toos ma ula falgashaa biraha ?

### Tijaabo 1.4 (b)

Naatriyam gubanaysa ku dhex rid koonbo ay neefta koloriin ka buuxdo. Maxaa dhaçay? Wawa dhacda in ay koloriintu dhaqso ugu darsanto biraha co dhan, waxana samaysma koloraydhyo. Tijaabada ku celi adiga oo qaadanaya dhaf kubram iyo sink ah oo gubanaya iyo saliig magniisiyam ah oo iyana gubanaysa, dhafka iyo magniisiyamtaba mid walba koonbo gaar ah oo koloriin ah ku dhex rid.


Waxa aynu arki doonaa in dhafka iyo magniisiyamtuba ay ku gubtaan koloriinta.





### Falgalka ka dhexeeya koloriinta iyo bir-ma-aheyaasha

### Tijaabo : 1.4 (t)

In yar oo fosfoor cad ah ku dhex rid koonbo ay neef koloriin ahi ka buuxdo. Maxaad aragtay? Wawa aynu arki doonaa in ay fosfoortii oloshay, qaac caddina samaysay. Qaacaa caddi waa laba koloraydh oo ay fosfoortu leedahay,






Tijaabada ku celi adiga oo isticmaalaya koonba kale oo ay koloriin ku jirto, kaarboon gubanaya ku dhex rid. Waxaa aad arki doontaa in uu kaarboonkii gubanayey demay.

Halkaa waxa innooga cad in aanay koloriintu toos ula falgelin kaarboonka, fosfoorkase ay toos ula falgascho. Taan macnaheedu ma ahaa in aanay jirin iskudhisyo uu kaarboonku leeyahay oo ay koloriin ku jirto. Iskudhisiyadka ka koojan kaarboon iyo koloriinna waxa ka mid ah kaarboon asar-koloraydh.

*Koloriinta iyo ururka intiisa kale.*

*Tijaabo : 1.5*

- b) Neef koloriin ah dhex mari milan kaaliyam boro-maydh ah. Maxaa dhacay? Waxa aad arki doontaa in uu milankii saafiga ahaa isu beddelay guduud, taana waxa ugu wacan bcromiintii oo curiye ahaan u soo baxday.



- t) Neef koloriin ah dhex mari milan kaaliyam aayo-dhaydh ah. Maxaa dhacay? Waxa aad arki doontaa milankii saafiga ahaa oo u beddelmay baroor, taana waxa ugu wacan aayodhiintii oo ay koloriintu ka barabixiso iskudhiska KI ka ah.



Tijaabooyinkani waxa ay inna tusayaan in ay koloriintu ka barabixiso boromiinta iyo aayodhiintaba iskudhisydooda.



Tijaabooyinka 1.3, 1.4 iyo 1.5 waxa ay dhammaan inna tusaayaari in koloriintu ay tahay ogsidheeye. Tusaalooyin kale oo fara badan oo muujinaya in ay koloriintu tahay ogsidheeye xooggan ayaa jira, waxana ka mid ah kuwa soo socda.

(b) Koloriinta iyo salfar laba-ogsaydh.


Tijaabo : 1.6


Neef koloriin ah dhex mari biyo ay salfar laba-ogsaydh ku jirto. Waxa samaysma milan isugu jira salfiyuurik asiidh iyo haydaro-kolorik asiidh.

Biyaha iyo salfar laba-ogsaydhu waxa ay sameeyaan salfiyuuras asiidh oo ay koloriintu u ogsidhayso salfiyuurik asiidh. Falgalka koloriinta iyo salfar laba-ogsaydhta ka dhexeeya waxa loo muujin karaa ayoon ahaan;



In ay milanka salfiyuurik asiidh ku jirto iyo in kale waxa lagu hubin karaa milanka oo beeriym koloraydh milan ah lagu daro. Haddii ay ayoonno  $\text{SO}_4^{2-}$  ahi ku jiraan milanka, waxa samaysma ruushi cad oo aan haydarokolorik asiidh barxan ku milmin.






- (t) *Falgalka ka dhexceya koloriinta iyo haydarojiin salfaydha*

*Tijaabo : 1.7*


Koloriin dhex mari biyo ka dhoregsan neefta haydarojiin salfaydh. Maxaa dhacay? Waxa aad arki doontaa in uu ruushi hurdi ahi dhex heehaabayo milanka. Ruushigu waa salfar oo curiye ahaan u soo baxay. Taa waxa ugu wacan haydarojiin salfaydhtii oo ay koloriintu u ogsidhaysay salfar, waayo haydarojiin salfaydhta ayaa u kala baxda ayoonno salfaydh ah. iyo kuwa haydarojiin ah, dabadeedna ayoonnada salfaydhka ah ayaa elektaroonno lumiya, elektaroonnadaas ayaanay moikiyuullada koloriintu qaataan, ayoonno koloraydh ah ayaa-nay isu beddelaan.



Maxaad u malaynaysaa in ay dhacayso haddii laba koonbo oo ay labada neefood oo qallalani ku kala jiraan la isku af genbiyo?

- (j) *Falgalka ka dhexceya koloriinta iyo cusbooyinka feeras.*

Marka koloriin la dhex mariyo milannada cusbooyinka feeras, waxa dhacda in ay koloriintu u ogsidhayso cusbooyin-kaa cusbooyin feerik ah.





- (x) *Falgalka ka dherdhaci koloriin iyo alkaliyada.*


Sidii aynu hore u soo aragnay, koloriintu waxa ay la fal-gashaa ~~bijalka~~ qabow, waxana samaysma labada asiidh ee la kala yiraahdo haydarokolorik asiidh ( $\text{HCl}$ ) iyo haybokoloras

asiidh ( $\text{HOCl}$ ). Sidaa darteed marka koloriin la dhex marsho, milannada alkaliyada ah ee kaaliyam haydarogsaydh. Naatriyam haydarogsaydh iyo kaalsiyam haydarogsaydh, waxa samaysma labada cusbo ee kala ah koloraydh iyo haybokolorayt. Cusbada ah haybokoloraytku waxa ay ka timid asiidha la yidhaahdo haybokoloras asiidh. Tusaale ahaan marka neef koloriin ah la dhex marsho milan naatriyam haydarogsaydh ah oo qabow waxa samaysma naatriyam koloraydh iyo naatriyam haybokolorayt.

Falgalka dhacayana waxa loo qori karaa:





Sidaas oo fad ayea milanka kaalsiyam haydarogsaydhka ahi ula falgalka koloriinta. Falgalkuna waa ka hoos ku qoran.






Kaalsiyam haybokoloraytka waxa la yidhaa biliij.

Haddiise ay milannada alkaliyadu ay kulul yihiin waxa samaysma cusbooyinka la yiraahdo koloraydh iyo koloreyt. Haybokoloraytka ayaad ugu nugul kulka, waxa ayna u kala baxdaa koloraydh iyo koloreyt. Sidaa darteed biliijka marka lagu diyaarinayo qolka shaybaadhka waa in aan heerkulka la gaadhsiin  $35^\circ\text{C}$ , haddii kale waxa uu markliba u kala baxayaa kaalsiyam koloraydh iyo kaalsiyam koloreyt. Falgalka ka dhaca koloriinta iyo milannada alkaliyada ee kulul waa kuwa hoos ku qoran :





qabow



kul



kul



### Isticmaalka koloriinta

Koloriinta waxa iagu isticmaalaa: Samaynta haydarokolorik asiidh, midab-tirka, safaynta biyaha iyo nadiifinta inus-qulaha, la dagaallanka cayayaanka iyo cudurraada dhirtaba.

### Iskudhisyaaya Koloriinta

Mar haddii koloriintu ay tahay curiye firfircoon oo curiyeysaassa badankooda la falgala, waxa ay samaysaa iskudhisyo fara badan. Iskudhisyadaas waxa ka mid ah koloraydhada biraaha iyo haydarojiin koloraydh.


### Haydarojiin koloraydh

Haydarojiin koloraydhu waa neef marka ay biyaha ku milanto samaysa asiidha la yiraahdo haydarokolorik asiidh. Waxa ayna ka dhalataa falgalka ka dhex dhaca salfiyuurik

asiidh rib ah iyo koloraydhada biraha. Falgalka dhacayaana waa geddisme, waxana loo qori karaa sida isle'egta hoose ku muujisan.



Hase yeeshi falgalku waxa uu u dheeliyaya oo uu u soconayaa dhinaca midigta. Taasina waxa ugu wakan haydarojiin koloraydhta oo bide ah oo ka soo baxaysa weelka falgalku ka dhacayo. Sidaa awgeed ayoonka haydarojiin salfeytka ahi heli maayo wax haydarojiin koloraydh ah oo uu dib ula falgalo si ay ku samaysmaan falgaleyaashii hore.



### JT. 1.8 Diyaarinta haydarojiin koloraydh


Haydarojiin koloraydhta waxa la yiqaannay ilaa iyo waqtigii alkiiimiyyinta. Haydarojiin koloraydhta waxa la helaa haddii milixda naatriyam koloraydh iyo saltiyuurik asiidh rib ah la isku kululeeyo.



Haatan waxa suuragal noqotay in koloriinta iyo haydarojiinta toos la isugu daro, si ay haydarojiin koloraydh u soo baxdo,



Waxa dhacda in falgal - biyood ka dhex dhaco biyaha iyo milan nada iskudhisyo fara badan oo ay falgal-biyoodkaa hay-darоjiin koloraydh ka samaysanto, sida,



### Astaamaha Haydarоjiin koloraydhta


Haydarоjiin koloraydhu waa neef aan midab lahayn, cuf-naanteeduna in yar bay ka sarreysaa cufnaanta hawada. Haydarоjiin koloraydhu ma firfircoona marka ay aad u qal-lalan tahay, astaamaheeda kimikaadna waxa aynu ka baran karraa tijaabooyinka soo socda:

#### Tijaabo—1.8

- b) Koonbo ay neefta haydarоjiin koloraydh ka buuxdo soo qaado, warqad litmas ah oo uu midabkeedu yahay buluug oo qoyanna ku rid koonbada.
- t) Duur baxaya ku dhex rid koonbo ay haydarоjiin koloraydh neef ahi ka buuxdo.
- j) Qase qarsha ah dar milan ammooniy ah oo rib ah, dabadeedna qasaha afka ka saar koonbo ay neefta hay-darоjiin koloraydh ka buuxdo, maxaa dhacay?
- x) Ku celi (j) adiga oo isticmaalaya milan arjantam naytareyt ah.
- kh) Bilaale yar ku rid woxoogaa xadiid xabuuba ah, dabadeedna kululay bilaalaha iyo waxa ku jiraba, oo dhuun adag oo qarsha ah ku dhex jira. Dabadeedna neef haydarоjiin koloraydh ah dul mari birta kulul. Tijaabada ku celi adiga oo markan  $\text{MnO}_2$  ka isticmaa-laya halkii xadiidka.

Tijaabooyinka sare waxa aynu ka baranay :

- 1) In ay neefta haydarojiin koloraydhku u beddesho litmaskii buluugga ahaa guduud, taas oo ku tusaysa in ay neeftu leedahay astaamo asiidheed.
- 2) In aanay neefta haydarojiin koloraydh caawin gu-bashada.
- 3) In ay ammooniyaa iyo haydarojiin koloraydhtu isla falgalaan, oo ay sameeyaan qaac cad oo ammooniyam koloraydh ah.




- 4) In ay neefta haydarojiin koloraydhtu kala baxdo marka la dul mariyo bir kulul, oo ay samaysmaan koloraydhka birta iyo neef haydarojiin ah, tusaale ahaan,



Biraha kubram ka sarreeya taxa firfircoonaanta oo dhammi sidaa oo kale ayay ula falgalaan haydarojiin koloraydhta, koloraydhyadoodaayaana samaysma.

- g) Ogsidheeyeyaalka ay ka mid yihiin  $\text{MnO}_2$ ,  $\text{PbO}_2$ ,  $\text{Pb}_3\text{O}_4$  waxay neefta haydarojiin koloraydhta u kala bixiyaan koloriin iyo haydarojiin, marka iyaka oo kulul la dul mariyo neefta, tusaale ahaan



#### *Haydarokolorik asiidh*

Haydarokolorik asiidhu waxa ay samaysantaa marka neef haydarojiin koloraydh ah biyo la dhix mariyo. Inta badan haydarokolorik asiidha ribnimadeedu waxa weeye 42%. Astaamaha asiidha waxa aynu si fiican ugu baran karraa tijaabooyinka soo socda :

- b) Litamas buluug ah ku dhex rid in yar oo milanka ka mid ah.
- t) Namuunado kala ah kaalsiyamkaarbooneyt, kubramkaarbooneyt iyo naatriyamkaarbooneyt, saddex dhuun-hubsasho ku kala shub. Dabadeedna in yar oo haydarokolorik asiidha ku shub dhuun kasta, neefta soo baxaysana dhex mari milan saafi ah oo kaalsiyam haydarogsaydha. Waxa kale oo aad ku dartaa asiidha sink, neefta oo baxdana hubi.
- j) Milan kaaliyam beermanyaneyt ah dhuun-hubsasho ku shub, dabadeedna haydarokolorik asiidh barxan ku dar. Neefta soo baxaysa ku hubi warqad lutmas ah oo qoyan.
- x) Milan arjantam naytareyt ah oo dhuun-hubsasho ku jira haydarokolorik asiidh ku dar, dabadeedna naytarik asiidh barxan ku dar iskujirka, si loc ogaado in tuushigu dhaqso u milmo iyo in kale.
- kh) Haydarokolorik asiidha ku dar milan arjantam naytareyt ah, dabadeedna ammooniyam haydarogsaydh ku dar.

Tijaabooyinkan yaryari waxa ay inna tuseen :

- 1) In uu milanku litmaska u beddelo guduud, taasina ay kuu caddaynayso in uu milanku asiidh yahay.
- 2) In uu milanku u kala bixiyokaarbooneytyada, kaarboon laba-ogsaydh iyo biyo, cusbooyinna ay samaysmaan, tusaale ahaan,



Haydarokolorik asdhiiku way la falgashaa beysyada, waxana samaysma koloraydhyo iyo biyo, sida :




Milanka barxan iyo ka ribka ah ee haydarokolorik asiidha thi biraha way la falgalaan, waxana samaysma cusbo iyo haydarojiin, sida:



- 3) Milanka haydarokolorik thi wuu la falgalaan ogsidheeyeyaalka, waxana soo baxda koloriin. Tusaale ahaan marka kaaliyam beermanganeyt lagu daro haydarokolorik asiidh qabow, waxa soo baxda koloriin.

Ogsidheeyeyaalka kale ee kala ah  $\text{MnO}_2$ , asiidha oo diirran ayay la falgalaan, koloriinna way soo baxdaa,



- 4) Haddii milan haydarokolorik asiidh ah lagu daro milan arjantam naytareyt ah, waxa samaysma ruushi cad oo arjantam koloraydh ah.



Ruushiga cad ee arjantam koloraydh, kuma milmo naytarik asiidha barxan waxase uu ku milmaa ammoniyam haydrogsaydhka barxan.

### Kusuus

Falgallada «1» iyo «2» waxa lagu isticmaalaa hubsashada haydarokolorik asiidha.

#### *Isticmalka Haydarokolorik asiidha*

Haydarokolorik asiidha waxa lagu isticmaalaa;

1. Diyaarinta koloraydhyada, qarxayaalka iyo kaarboon laba-ogsaydhka.
2. Waxa kale oo lagu isticmaalaa wershadaha sameeya warqadaha iyo xadiidka.

3. Waxa-kale oo haydarokolorik asiidha lagu isticmaalaan la dagaallanka cayayaanka iyo futsavinta biraha inta aan la dheehin ka hor.

### KOLORAYDHYADA

#### Koloraydhida Biraha

Biraha oo dhammi si xooggan ayay kolorijnta ula falga laan, waxana samaysma koloyadhyo. Dariiqooyinka lagu diyaariyo koloraydhyada hoos ayay ku keoban yihiin.

Haddii alkaliyada ama kaarbooneytyada ama ogsaydhyada bira ha lagu daro HCl barxan	K Na Ca Mg Zn Fe	Biraha oo dhammi si hawl yar hawl yar hawl yar falgalaan	Dhammaan bira hani way la falgalaan kolorijnta, waxana samaysma koloraydhyo
Kala baxa ogsaydhka, ama kaarbooneytka biraha marka HCl barxan lagu daro	Pb Cu Ag	Birahani lama fal galaan HCl asiidha	

#### Ammooniyam koloraydh

Ammooniyam koloraydhka waxa la diyaariyaa marka ammooniyam salteyi iyo naatriyam koloraydh la isku kululeeyo.



Naatriyami khleytka ayaa marka hore wiriqowda marka milanka kulul la qabtojivo, dabadeedna isku jirka ayaa la kala iniiraa. Miittaa waxa ku jira ammooniyam koloraydhtii

### *Kaaliyam koloraydh*

Kaaliyam koloraydh waxa ay ku jirtaa macdanta ay naanaysteedu tahay  $\text{KCl} \cdot \text{MgCl}_2 \cdot 6\text{H}_2\text{O}$ . Kaaliyam koloraydhita waxa la diyaarin karaa marka milan kaaliyam haydarogsaydh ah lagu fasaqo haydarokolorik asiidh barxan.



Naatriyam koloraydhka iyo kaaliyam koloraydhka muuqoodu waa isu eg yihii, dariiqooyinka lagu diyaariyaana waa isku mid, waxa keliya ee kala duwaani waa beyska la qaadanayo.

### *Kaalsiyam koloraydh*


Kaalsiyam koloraydhka oo milan waxa la helaa marka kaalsiyam kaarbooneytka lagu daro haydarokolorik asiidh barxan,



Kaalsiyam koloraydhku aad ayuu u sayaxe milmaa, waxa na lagu isticmaalaa qallajinta neefaha. Kaalsiyam koloraydhk ooman waxa la helaa haddii cusbada cokan la kululeeyo.

### *Feeras koloraydh*

Feeras koloraydhka oomani waa adke cad, oo la diyaarin karo marka birta xadiidka ah aad loogu kululeeyo uumi haydaroojin koloraydh ah



Milanka feeras koloraydh midabkiisu waa doog khafiif ah, haddii milan beys ah lagu darona waxa soo baxa ruushi doogo ah oo feeras haydarogsaydh ah.



### *Arjantam koloraydh*

Arjantam koloraydhku waxa ay soo baxdaa marka cusbada arjantam naytareyt lagu daro milan kasta oo ay ayoonno koloraydh ihi ku jiraan.



Arjantam koloraydhuu biyaha kuma milanto, sidaa aw. geedna waxa ay u soo baxdaa ruushi ahaan. Ruushiga waxa lagu maydhaa biyo xareed ah, dabadeedna saxan daboolan ayaa lagu qallajiyaa.

### *Astaamaha koloraydhyad*

#### *Tijaabo 1.10*


Adiga oo isticmaalaya koloraydhyada naatriyam, magnii-siyam, balambam, sink iyo kubram, samay tijaabooyinka soo socda :

1. Si aad u ogaato milmiddooda koloraydhyada kor ku qoran biyo ku dar.
2. Adke koloraydhyadaa ka mid ah iyo salfiyuurik asiidh rib ah isku kululay, neefta soo baxaysana qase aad amooniyam haydarogsaydh rib ah dartay ku hubi.
3. Koloraydhyada kor ku qoran mid ka mid ah, manganiis laba-ogsaydh iyo salfiyuurik asiidh rib ah ku kululay, waxa dhacana u fiirso.
4. Koloraydhyada kor ku qoran mid ka mid ah mil, dabadeedna milankaa waxa aad ku dartaa milan kale oo arjantam naytareyt ah. Waxa soo bixi ruushi arjantam koloraydh ah. Ruushigaa laba meelood u kala qaybi, qaybaha mid ka mid ah naytarik asiidh barxan ku dar, qaybaha kalena ammoonivam haydarogsaydh ku dar.

Mi'an feerik koloraydh ah uumibixin ku qallaji, waxa soo bixi feerik ogsaydh.

Tijaaktooyinkaa waxa aynu ku aragnay in ay :

- b) Koloraydhyada biraha balambam, arjantam, meer-kuri iyo ooram mooye ay kuwa kale biyaha ku milmaan.
- t) Koloraydhyada naatriyam iyo kaaliyam mooyee kuwa kale waa koloraydhyo cokan. Marka ay koloraydhyadu adkeyaal yihiinna waa wiriqleyaal.
- j) Koloraydhyada badankoodu way bidaan, qaarna way adke-uumiyoobaan. Dhaqsaha ay koloraydhyadu u bidaan waxa ay keentay in lagu isticmaalo hubsashada ololka ee biraha.
- x) Marka koloraydhka oo adke ah lagu kululeeyo salfiyuurik asiidh rib ah, waxa soo baxda haydarjiin koloraydh. Taasi waxa ay ku tusaysaa in ay salfiyuurik asiidha ribta ahi soo saarto haydarjiin koloraydhka marka koloraydhyada lagu kululeeyo.
- kh) Haddii koloraydhyada oo adke ah iyo salfiyuurik asiidh rib ah lagu kululeeyo ogsidheeyeyaalka ay ka mid yihiin ( $MnO_2$ ), waxa soo baxda neesta koloriin.
- d) Marka la isku daro milan koloraydh ah iyo milan arjantam naytareyt ah, waxa samaysma ruushi cad oo arjantam koloraydh ah.



Ruushigaasi kuma milmo naytarik asiidha barxan, laakiin ammooniyam haydarogsaydhka wuu ku milmaa. Falgalkan waxa lagu isticmaalaa in lagu hubiyo koloraydhyada.

## BOROMIINTA.

### Jiritaanka Boromiin.



Boromiin waa magac Giriig ah oo macnihiiisu yahay «U-Kun». Boromiinta lama helo iyada oo keliya, waxase laga helaa biyaha badda iyada oo ku jirta cusbooyin ay ka mid yihiin naatriyam boromaydh, kaaliyam boromaydh, magniisiyam boromaydh iwm.

### Shaybaar kudiyaarinta Boromiin.

#### Tijaabo 1.11

Boromiinta waxa lagu diyaarin karaa tabta koloriinta lagu diyaariyo oo kale. Diyaari iskujir ka kooban kaaliyam boromaydh iyo manganiis laba-ogsaydh, dabadeedna skujirkka ku shub dhaladaaad jaantuska ku aragtid, saabaankana u meerar sida uu jaantuska 1.9 ku tusaayo. Iskujirkka waxa aad ku dartaa salfiyuurik asiidh rib ah, dabadeedna dhalada iyo waxa ku jiraba kululay. Waxa soo baxda neef guduudan oo marka la qaboojiyo isu beddesha hoor boromiin ah.

kul



Baromiintu waxa kale oo laga soo saaraa biyaha badda, waxana milanka la dhex mariyaa neef koloriin ah si ay koloriintu u barabixiso boromeinta.



Astaamaha dulced ee Boromiinta.

Boromiintu waa curiyaha keliya ee ka mid ah bir-mahyealka ee heerkulka caadiga ah hoor ahaan loo helo. Boromiintu waxa ay ku kartaa  $58.8^\circ\text{C}$  cufnaanteeduna waa 3.14 g. sm<sup>3</sup>. Midabka boromiintu waa guduudan yahay, wal-xaha bidu ayaanay ka mid tahay. Boromiintu in yar bay biyaha ku miluntaa marka uu heerkulki caadi yahay, waxana samaysan wylan gudaadan oo 3% ay boromiin tahay. Qaaca boromiinta tighe heorkeeduba waa sun.

Astaamaha Kullakad ee Boromiinta.

Astaamaha Kullakad ee Boromiintu waxa ay la mid yihiin kuwa koloriinta, hase yahay. Tiroonaanta boromiintu way ka yar tahay inada koloriintu.

Falgalka ku dhaercaya Boromiinta iyo Haydarojiinta:

Tijaabo 1.12

Isku-af gesibi laba keonbo oo ay midi tahay haydarojiin, ta kalena ay boromiin ku jirto. Maxaa dhaçay? Halkaa waxa aynu ka arkaynaa in aanay haydarojiinta iyo boromiintu isula falgelin dhaqsihi ay koloriinta iyo haydarojiintu ay isula falgaleen. Sidaa awgeed xiisahay ay boromiinta iyo haydarojiintu isu hayaan wuu ka yar yahay xiisaha ay haydarojiinta iyc koloriintu isu hayaan. Laekin haydarojiinta iyc boromiintu waa isla falgalaan, waxana samaysma haydarojiin boromaydh oo lagu hubin faro arjantam naytareyt milan ah.



### *Diyaarinta Boromaydhyada:*

Boromiintu dhaqso ayey ula falgashaa biraha iyo bir-maheyaalkaba. Waxana samaysma boromaydhyo. Tusaale ahaan, boromiintu waa la falgashaa curiyeyaalka ay ka mid yihii naatriyam, feeram, kubramta, salfarta iwm, waxana soo baxa boromaydhyadooda. Tusaale ahaan:




### *Ogsidhaynta Boromiin:*

Boromiintu waa ogsidheeye, hase yeeshi ogsidhaynteedu ama xooggana sida ogsidhaynta koloriinta oo kale. Haddii miyan feeras salfeyt ah oo ay asiidh ku jirto, lagu daro dhawr ihibcood oo boromiin ah, iyada oo weelka uu milanku ku jiro la ruxaayo, waxa ~~dha~~cda in uu midabka milanku tirmo, feeras salfeytkuna ay u beddelanto feerik salfeyt. Taasi waxa ay ku tusaysaa in ay boromiintu ogsidheeye tahay.



### *Falgallada ka dhexeeya Boromiinta iyo Alkaliyada:*

Falgallada ay boromiintu la leedahay alkaliyadu waxa ay ta mid yihii falgallada ka dhexeeya koloriinta iyo alkaliyada; sidii hore oo kale ayaana waxa soo baxa laba cusbo, tusaale ahaan :






Boromiinta waxa lagu isticmaala wershadaha soo saara alaabta lagu isticmaalo sawirka, kuwa dayuuradaha sameeya, kuwa daawooyinka sameeya, iyo diyaarinta boromaydhyada.

### *Iskudhisyada boromiinta:*

Haydarojiin boromaydhu waa iskudhiis uu degganaanshihiisu ka yar yahay ka haydarojiin koloraydhta, waxa ayna ku yar kala baaxdaa kulka. Sidaas diyaarin karo


qolka shaybaadhka habkii loogu diyaarshay haydarojiin kold-raydhta. Sababta oo ah marka kaaliyam boromaydh iyo salfiyuurik asiidh rib ah la isku kululeeyo waxa soo baxa iskujir ka kooban haydarojiin boromaydh, boromiin iyo salfar laba-ogsaydh. Halkaasina waxa aynu ka aragnaa in aan haydarojiin boromaydh sooc ah laga heli karin falgalka ka dhex dhaca cusbo boromaydh ah iyo salfiyuurik asiidh rib ah oo kulul.

Sidaa awgeed marka la doonayo in la helo haydarojiin horomaydh sooc ah waxa la adeegsadaa falgalka ka dhex dhaca boromiin, fosfar cas iyo waxoogay biyo ah, (eeg jaantus 1.10). Marka hore waxa isla falgala boromiinta iyo fosfoorka cas, waxana ka dhasha fosfoor saddex-boromaydh iyo fosfooras asiidh. Falgalka dhacayana waxa inna tusaya isle'egta hoos ku qoran.



JT. 1-10 Diyaarinta haydarojiin boramaydh.

Haydarojiin boromaydhta waxa kale oo laga diyaarin kaa curiyeyaasha ay ka kooban tahay. Marka labada neefood ee haydarojiin iyo boromiin aad la isugu gubo, heerkulkana la gaarsiiyo ilaa 300°C, waxa soo baxda neetta ah haydarojiin boromaydh.



*Astaamaha Duleed iyo kuwa Kimikuud ee Haydarojiin*

*Boromaydh :*

Haydarojiin boromaydhatu waa neef ay cuunaanteedu tahay 2.8 g/sm<sup>3</sup>. Haydarojiin boromaydhu aad ayay biyaha ugu nilantaa, waxana soo baxa milan asiidhi ah. Ribnimada asiidhu aa 47%. Haydarojiin boromaydhu way ka degganaasha yar hay haydarojiin koloraydhta, si fudud bayna u kala baxta. Guud ahaan astaamaha haydarojiin boromaydhu waxa / u eg yihiin kuwa haydarojiin koloraydhta.

*Hubsashada Ayoonnada boromiinta.*

Haddii milan arjantam naytareyt ah lagu daro milan boromaydh ah oo in yar oo naytarik asiidh barxani ku jirto, waxa soo baxa ruuski midabkiisu hurdi khatma yahay oo arjantam boromaydh ah.



**AAYODHIIN**

*Jiritaanka*


Markii ay taariikhdu ahayd 1813kii ayaa Gey-Lusaak waxa uu gartay in walaxdii uu laba sannadood horteed Koortas ka helay dampaska saaruqda badda ay ahayd curiye cusub. Curiyahaa cusub waxa loogu magac daray midabka qaaciisa. Aayo-

dhiinta looma helo keli ahaan, waxase laga helaa dambaska saaruqda badda iyo naytareytkaa Jili, iyada oo ah naatriyam aayodhayt. Aayodhiintu waxa ay ku ururtaa meelaha ay ka mid yihiin xubnaha xayawaanka, gaar ahaan qanjidhada. Aayodhiinta adduunka ku jirta waxa lagu qiyaasay miisaan ahaan  $4 \times 10^{-4}\%$ .


### *Diyaarinta Aayodhiinta*

#### *Tijaabo 1.13*

Aayodhiinta waxa laga diyaariyaa dambaska saaruqda badda, shaybaarkase waxa aayodhiinta la heli karaa haddii cusbo aayodhaydh ah lagu daro salfiyuurik asiidh, sida:



Isku raqad in yar oo kaaliyam aayodhaydh ah iyo manganiis laba-ogsaydh, dabadeedna bilaale ku shub, salfiyuurik asiidhna ku dar, masafna ku af genbi. Marka aad meerarka saabaanka dhammaysid, bilaalaha iyo waxa ku jiraba kululay. Waxa aad arki doontaa uumi badan oo soo baxa, adke ahaanna u fariista meelaha qabow ee masafka. Qaaca faraha badan ee soo baxay waa aayodhiin oo uumi ahaan u soo baxday.



J.T. 1.11 Diyaarinta aayodhiinta

Waxa kale oo aayodhiinta la helaa haddii koloriin la dhex mariyo milannada cusbooyinka aayodhiin. Halkaa aayodhiinta ayaa cusbooyinkeeda laga bana bixiyaa, sida:



*Astaamaha Duleed ee Aayodhiin:*

Heerkulka caadiga ah aayodhiintu waa adke madow oo ay cufnaantiisu tahay  $4.9 \text{ g/sm}^3$ . Haddii aayodhiinta la yar diiryo, waxa ay isu beddeshaa uumi. Aayodhiintu biyaha kuma milanto, waxa ayse ku milantaa milanka kaaliyam aayodhaydh iyo milanno orgaanika ah, sida batroolka.

*Astaamaha Kimikaad ee Aayodhitinta:*

Firfircoonaanta aayodhiintu way ka yar tahay ta halojinnada kale, xiisaha ay u hayso haydarojiintana waa ka yar yahay ka ay halojinnada kale u hayaan haydarojiinta. Aayodhiintu waa ku darsantaa biraha, waxana samaysma aayodhaydhyo, in kasta oo aanay u firfircoonayn sida boromiinta iyo koloriinta. Falgallada ka dhxeeyaa aayodhiinta iyo alkaliyadu waxa ay u eg yihiin falgallada ka dhxeeyaa koloriinta ama boromiinta iyo alkaliyada. Aayodhiintu kama barabixin karto koloriinta iyo boromiinta iskudhisyadooda.

*Iskudhisyada Aayodhiinta*

*Haydarojiin aayodhaydh.*


Haydarojiin aayodhaydhtu waa neef ka degganaasha haydarojiin boromaydhta. Haydarojiin aayodhaydhta w helaa marka ay biyo iyo iskujir fosfoor guduudan iyo dhiin ahi isla falgalaan.

*Tijadbo 1.14*

Isku raqad in yar oo fosfoor guduudan ah iyo aayodhiin, dabadeedna dhuun-hubsasho ku rid. Afar dhibcood oo biya ahna ku dar, dabadeedna isla markiiba saabaanka u meerar

sida aad jaantuska 1:12 ku aragtid. Dhuunta iyo waxa ku jiraba kululay. Neefta soo baxaysa dhex mari milan arjantam naytareyt ah waxa dhacana u fiirso. Waxa samaysma ruushi uu midabkiisu yahay hurdi oo arjantam aayodhaydh ah.


Haddii dhuunta halkan  
Laga Kululeeyo waxa  
Laarkayaa uumi aayodhiin  
ah.



### JT. 1:12 Astaamaha Aayodhiin

#### Astaamaha Haydarojiin Aayodhaydh:

Haydarojiin aayodhaydh waa neef aan midab lahayn, oo biyahana aad ugu milanta. Marka ay neefta iyo uumiga biyuhu isla kulmaan waxa samaysma qaac badan oo neefta ah. Milanka haydarojiin aayodhaydh waa asiidh la yiraahdo Haydar-aayodhik asiidh. Neeftu waxa ay u kala baxdaa haydarojiin iyo aayodhiin marka la kululeeyo.



Neefta haydarojiin aayodhaydh waa yareeye, ogsidheeye kastana way yaraysaa. Tusaale ahaan, salfiyuurik asiidha

waxa ay u yaraysaa salfar laba-ogsaydh, cusbooyinka feerikna  
waxa ay u yaraysaa cusbooyin feeras ah.

*Hubsashada ayoonnada uayodhaydhka.*


Waxa aad milanka la hubinaayo kú dartaa milan arjantam naytareyt ah iyo naytarik asiidh barxan. Waxa aad arki doontaa ruushi hurdi ah oo arjantam aayodhaydh ah. Ruushiga arjantam aayodhaydh kuma milmo ammooniyam haydarog-saydhka.



**LAYLIS :**

1. Faallo kooban ka bixi astaamaha guud ee halojiinnada
2. Waa maxay labada astaamood ee halojiinnada ka dhexeeyya :
3. Haddii aad haysatid walxaha manganiis laba-ogsaydh, kaaliyam koloraydh, kaaliyam boromaydh, magniisiyam iyo salfiyuurik asiidh, sidee ayaad u diyaarin lahayd haydarokolorik asiidh, koloriin, boromiin, magniisiyam boromaydh ?  
Qor isle'egyada falgalladana.
4. Sharax falgalka ka dhexeeyya biyaha iyo koloriinta. Tijaabo ku sharax sida ay koloriintu midabka u tирто.
5. Intee in le'eg oo naatriyam koloraydh iyo salfiyuurik asiidh ah ayaa. loo baahan yahay si loo helo 150 g oo haydarojiin kolonaydh ah ?
6. Koloriintu ma caawisaa gubashada ? Sidee ayaad u caddayn lahayd jawaabta aad bixisid ?

7. Sharax falgalka ka dhexeeya koloriinta iyo bir-ma-aheyaalka.
8. Sidee ayaad u caadijnaysaa in ay koloriintu ogsidheeye tahay?
9. Maxaad u malaynaysaa in ay dhacayso haddii laba koonbo oo ay haydarojiin saltaydh iyo koloriin qallani ku jiraan la isku af genbiyo?
10. Ka soo qaad in lagu siiyey dhuumo ay ku kala jiraan milannada haydarokolorik asiidh, naatriyam koloraydh, naatriyam boromaydh iyo kaaliyam aayodhaydh. Maxaad samayn lahayd haddii aad doonaysaa inaad kala garatid dhuumaha ay milannadu ku kala jiraan?
11. Waa meeqa tirada ogsidhaynta ee halojiinnada ku jira iskudhisyada ama xididshaha hoos ku qoran?



12. Boqolkiibä meeqa foloriin ah ayaa ku jirta iskudhisyada:  $\text{Na}_3$ ,  $\text{AlF}_6$ ,  $\text{CaF}_3$ ?
13. Sidee ayaad u tusaysaa in ay aayodhiintu adkeuumiyowdo?
14. Sidee ayaad u hubinaysaa aayodhiinta?
15. Xisaabi culayska arjantam koloraydhka ah ee ruushi noqda haddii 20 g, oo ah milan sink koloraydh ay la falgasho milan arjantam naytareyt ah.
16. Maxaa haydarokolorik asiidha lagu isticmaalaa?
17. Si gaaban u sharax sidä loo diyaariyo koloraydhyada.
8. Sharax falgalka ka dhexeeya alkaliyada iyo halojiinnada.

**BAABKA LABAAD**  
**CURIYEYAAALKA URURKA VIaad.**


*Astaamaha Guud.*

1 H	4 Be	5 B	6 C	7 N	8 O	9 F	10 Ne
1 Li	4 Be	5 B	6 C	7 N	8 O	9 F	10 Ne
3 Li	4 Be	5 B	6 C	7 N	8 O	9 F	10 Ne
7 9		11 12	12 13	14 15	16 17	18 19	19 20
11 Mg		11 12	12 13	14 15	16 17	18 19	19 20
23 24		13 27	14 28	15 31	16 32	17 33	18 34
19 20	21 Ca	22 Sc	23 Ti	24 V	25 Cr	26 Mn	27 Fe
39 40	45 46	48 51	52 53	55 56	56 57	59 59	59 64
37 85	38 86	39 89	40 91	41 93	42 96	43 99	44 101
55 133	56 137	72 179	73 181	74 184	75 186	76 190	77 192
87 223	88 226	Hf	Ta	W	Re	Os	Ir
						Pt	Pt
						Au	Hg
						197	197
						201	201
						204	204
						207	207
						Pb	Pb
						209	209
						Bi	Bi
						Po	Po
						210	210
						At	At
						Rn	Rn
							222

Ururka VIaad waa bahda ogsajiinta. Curiyeyaalka uu ururku ka kooban yahay waa ogsijiin, salfar, siliiniyam, teluu-riyam iyo bolooniyam. Ururka intiisa kale aad bay ogsijiintu uga duwan tahay, gaar ahaan marka ay samaynayaan wejiyo ogsidhayneed oo togane ah. In kasta oo ay ogsijiintu yeelan karto wejiyo ogsidhayneed oo togan, ka ugu sarreeyaana uu yahay 2+, haddana taasi waa wax aad u naadir ah. Curiye-yaalka kale ee ururka oo dhammi waxa ay sameeyaan isku-dhisyo ay tirada ogsidhayntoodu tahay 4+ iyo 6+. Wejiga ogsidhaynta ee curiyeyaalkaa oo dhan u caadiga ahi waa 2-.

Curiyeyaalka ururka VI laba elektaroon ayaa uga dhiman dhismaha neefta wahsatada ah ee ugu dhow, si ay ratibaadda elektaroon naddoodu u noonto dhismaha wahsadahaas. Sidaa

awgeed ataamkii wal ee curiyeyaalkaa ihi waxa uu qaadan karaa laba elektaroon, waxa aanay sameeyaan iskudhisyo ayoona no ka samaysan, sida :



Ratibaadda elektaroonnadooda waxa kale oo ay ku dhammaystaan samaynta dabarro elektaroon wadaag ah.

Astaamaha duleed ee ururka waxa aad ku arki doontaa tusaha hoose.

*Summad Tiro Ratibaadda Heerkulka Heerkul-Tamarta  
atamka elektaroon. dhalaalka kulka ayonoobidda  
nada karka*

O	8	2.6	—219	—182	13.61	ef
S	16	2.8.6	119	444.6	10.36	»
Se	34	2,8,16,6	220	685	9.75	»
Te	52	2,8,18,32,18,6	450	1390	9.01	»
Po		2,8,18,32,18,6	—	—	—	—

Curiye kasta oo ururka ka mid ahi waa bir-ma-ahe ay firfircoonaantiisu ka yar tahay ta halojiinta ku xigta ee ay isku kalka yihiin. Marka ay tiro-atamku korodho firfircoonaanta curiyeyaalku way yaraataa. Kimiko ahaan curiyeyaalka ururkani waa bir-ma-aheyaal, laakiin kuwa culus waxa ka muuqata astaamo bireed. Astaamaha bireedna way kordhaan marka ay tirada gacan-atamku kordho, iyo marka ay tamarta ayonoobiddu yaraatoba.

Siyaabo dhawr ah ayay ogsijiintu uga duwan tahay ururka intiisa kale. Ogsijiintu waa neef laba-atamle ah marka ay

caadiga tahay, curiyeyaalka kalese waa adkeyaal dhismaha xubnahoodu ay aad uga adag yihiin, dhismo molikiyuullo labatamle ah. Jinsiyo kale duwan bay curiyeyaalka ururka oo dhammi leeyihiin.

Jirtaanka uu curiye u jiri karo hal nooc in ka badan, weji keliya, baa la yiraahaa jinsiyo. Sida ay ogsijiintu ugu jiri karto laba atamle ( $O_2$ ) iyo saddex atamle ( $O_3$ ) bay curiyeyaalka kalena ugu jiri karaan hal nooc in ka badan. Noocyadaasi waxa ay ku kala duwan yihiin tirada atamimada ec halkii miilikiyeul ku jirta iyo ratibaadda molikiyuullada marka ay adke yihiin. Marka ururka hoos loo raaco, waxa korodha fududaanta ay curiyeyaalka u fududaanayso in ay samecyaan silsilado dhaadheer oo atammo ah, oo ay dabarro clektaroon wadaag ihina isu hayaan.

Jimidhka atamka oo kordhaa marka ururka hoos loo raaco, waxa ay keentaa dhismaha curiyeyaalka oo kakanaada; lagamana yaabo in uu atam keli ahi kula dabranaado dabarro badan atam kale, waxayse u dhowdahay in uu atammo badan ku dabranaado halkii atamba marka uu atamka jimidhkiisu kordho.

#### *Ogsijiin.*

Curiyaha ugu horreeya ururka VI ee tusaha kalgalka curiyeyaalku waa ogsijiin. Ogsijiinta caadiga ah tiro-atamkeedu waa 8, bu'dana waxa ku jira 8 borotoon iyo 8 niyuutroon. Siddeeddaa elektaronna heertamaro ku wareegsan bu'da ayay ku jiraan. Heertamarta kowaad waxa ku jira laba elektaroon, ta ugu sarraynsana lix elektaroon.. Si ay heertamarta labaad u buuxsanto, ogsijiintu laba siyaabood bay mid u dhaqantaa, sida curiyeyaalka kale ee ay isku ururka yihiin. Waxa laga yaabaa in ay laba elektaroon qaadato iyada oo kala wareegaysa atam kale oo elektaroonbixiye ah, sida dhacda marka ay la falgasho birta naatriyam, markaas oo ay sa-

maysmaan ayoonno, taban oo ah O<sub>2</sub><sup>-</sup>. Waxa kale oo suuragal ah in ay kula dabranto laba dabar oo elektaroon wadaag ah atammo' kale oo iyaga laftoodu elektaroonno qaata, sida bir-ma-aheyaalka. Tusaale ahaan waxa kuugu filan labada dabar ee elektaroonwadaagga ah ee ka dhexeeyaa hal atam oo ogsijiina iyo laba atam oo haydarojiina marka ay hal molikiyuul oo biya ihi, H-O-H, samaysanto. Haydarojiintu waxa ay lee-dahay laba elektaroon sida hilyamta, ogsijiintuna siddeed elektaroon sida niyoonta. Labadooduba waxa ay ku tusaan ratib-naan deggan, biyaha oo ah iskudhiskii samaysmayna waa deggan yahay.

#### *Jiritaanka Ogsijiinta.*

Adduunka korkiisa ogsijiintu waxa weeye curiyaha ugu badan, marka loo eego cufka iyo tirada atammadaba. Cuf ahaan 49.5% waa ogsijiin, tira ahaanna atammadeedu waa ka badan yihiin tirada atammada kale oo la isku daray.

Iyada oo curiyé ah baa hawada laga helaa. Mug ahaan ogsijiinta hawada ku-jirtaa waa 20%, taa macnaheedu waxa weeye 100 ml ee hawa ahba 20 ml waa ogsijiin. Ogsijiintu waxa ay u jirtaa oo kale iyada oo macdanaha qaar ku jirta. Waxa kale oo ay ku jirtaa dhirta, xayawaanka, iyo biyahaba. Macdanaha ay ugu badan tahay waxa ka mid ah kuwa uu silikoonku ku jiro. Tusaale ahaan SiO<sub>2</sub>. Macdanta ay ogsijiintu ugu badan tahay ee aan silkoon ku jirini waa diddibka (CaCO<sub>3</sub>).


#### *Shaybaar kudiyaarinta ogsijiinta.*

Ogsijiinta iyo diyaaranteedaba waxa aad ku soo qaadatay sannadkii kowaad. Hadda waxa lagu xusuusinayaa falgalayaashii iyo dariiqadii oo keliya.

Inkasta oo ay ogsijiintu ka buuxdo hawada iyo biyaha innagu xeenan, haddana aad iyo aad ayay u adag tahay in

aynu iyada oo sooc ah ku diyaarinno shaybaarka innaga oo isticmaalayna hawada ama biyaha. Sidaa awgeed marka ogsijiinta shaybaadhka lagu diyaarinayo waxa la isticmaalaa isku-dhisyo kala duwan oo si fudud looga heli karo.

1. Ogsijiinta waxa la helaa marka kaaliyam koloreyt iyo manganiis laba-ogsaydh la isku kululeeyo. Neefta ogsijiinta ah ee soo baxdana waxa lagu ururiyaa biyo guudkood.



Manganiis laba-ogsaydhu kama qaybgasho falgalka, waayo waa kalkaaliye .

2. Waxa kale oo lagu diyaarin karaa neefta haddii in yar oo manganiis laba-ogsaydh ah oo ku jirta dhalo, lagu daro milan haydarojiin laba-ogsaydh ah. Dariqa hore oo kale ayaa na neefta loo ururiyaa.



#### Astaamaha ogsijintta.

Ogsijiinttu waa neef aan midab, ur, iyo dhadhan toona lahayn. In yar bay hawada ka culus tahay, biyahana aad uguma milanto. Ogsijiinttu curiyeyaalka intooda badan way la falgashaa, iyada oo ogsidhaynaysa curiyeyaalka, waxana samaysma iskudhisyo la yiraahdo ogsaydhyo. Ogsaydhku waa iskudhis ka dhasha isutagga kimika ahaaneed ee ogsijiinta iyo curiye kale, curiyehaasu bir iyo bir-ma-ahe midka uu doono ha ahaadee.

Guud ahaan ogsaydhyadu kooxay u kala qaybsan yihiin, taas oo ku xiran dabiicadda hadba curiyaha ay ogsijiinttu la falgasho.

*Ogsaydhyada asiidha ah.*

*Tijaabo 2.1*

Soo qaado in kaarboon ah, in salfar ah, iyo in fosfoor ah, mid walbana gooni ahaanteeda qaaddo ugu gub, oo dabadeedna koonbo gaar ah oo ay ogsijiin ka buuxdo ku dhex rid. Hubso sida ay mid kastaaba ugu gubato ogsijiinta. Marka ay guba-shadu dhammaatana mid walba in yar oo biya ah ku dar. Dabool oo rux koonbo kasta, dabadeedna warqad litmas bu-luugga ah ku rid koonba kastaba.


Fosfoorku aad ayuu ogsijiinta ugu ololaa, waxana samays-ma qaac badan oo fosfoor shan-ogsaydh ah.



Marka biyo lagu qaso danbaskana, milanku warqaddii lit-maska ahayd wixa uu u beddelaa casaan. Halkaa wixa inooga muuqata in uu milanku yahay asiidh, fosfoorik asiidh.



Olokii buluugga ahayd wixa uu u beddelaa casaan. Milanka soobaxaana waa asiidh, salfiyuras asiidh, waayo warqaddii litmaska ahayd wixa uu u beddelaa casaan.



Sidaas oo kale ayuu kaarboonkuna aad ugu gubtaa marka isaga oo baxaya lagu rido koonbo ogsijiin ah, waxana samays-ma kaarboon laba-ogsaydh oo milankiisu yahay asiidh.

Curiyeyaalkaa oo dhammi waa bir-ma-aheyaal; marka ogsaydhyadooda biyo lagu darona, milanno asiidh ah baa samaysma. Asiidhada samaysma oo dhammi waa ma degganyaal, waxana ugu itaal yar kaarboonik asiidha. Sidaa darteed cgsaydhada bir-ma-aheyaasha waxa la yiraahdaa ogsaydhyo asiidh ah.





*Ogsaydhyada Beyska ah:*

*Tijaabo 2.2*

b) Dalliig magniisiyam ah oo baxaysa ku rid koonbo ogsijiin ah, daboolka saar. Sidee bay gubashadii magniisiyamta ay ogsijiintu wax uga beddeshay? Maxsuulka samaysmay sidee ayuu u eg yahay? In biyo ah ku shub koonbada, daba-deedna rux. Litmas waqrاد casaan ahna ku rid koonbada, waxa ku dhacana eeg.

t) In naatriyam ah, in kaalsiyam ah, in jidhiidh xadiida ah, iyo in sink ah soo qaado. Mid walba gooni ahaanteeda qaaddo jigu kululay, oo koonbo ogsijiin ah ku rid, dabadeedna dabool. Mid kasta in biyo ah ku shub marka uu falgalku dhammaado, dabadeedna rux oo litmas cas ku rid. Hubso waqtiga uu falgal kastaa qaato, maxsuullada soo baxa, iyo sida ay bi-yaha ugu milmaan.

Curiyeyaalkas oo dhammi waa biro, waxa ayna la falgalaan ogsijiinta iyaga oo samaynaaya ogsaydhyo. Ogsaydhyada qaar baan biyaha ku milmin sida sink ogsaydh, qaarna in yar bay ku milmaan sida, kaalsiyam ogsaydhka, qaarna aad bay ugu milmaan, sida naatriyam ogsaydhka. Milannadooduna buluug bay u beddeelaan litmaska cas. Taasi waxa ay inna tu-saysaa in ay ogsaydhyadaa milannadoodu beys yihiin, sidaa darteed, ogsaydhyada biraha waxa la yiraahdaa ogsaydhyo beys ah. Isle'egyada falgallada korena waxa loo qoraa:



Dhagsaha ay biruhu ula falgalan ogsijiinta wuu yaraadaa mafka ay elektaroon-bixintoodu yaraatoba, marka hoos loo raaco taxa firfircoonaanta. Naatriyam aad bay ugu gubataa ogsijiinta, jiriirta xadiidka ahise marka ay caddaato uun bay ku gubataa ogsijiinta. Laakiin biraha kub am iyo neerkuri oo ah kuwa ugu hooseeya taxa, lama falgalan ogsijiinta iyaga oo aad iyo aad u kulul mooyee.


Marka ay bir-ma-aheyaashu ku gubtaan ogsijiinta waxa samaysma dabarro elektaroon-wadaag ah, laakiin dabarrada samaysma marka ay ogsijiinta iyo biruhu isla falgalan waa dabarro ayoon ah. Sahlanaanta ay dabarro ayoon ihi ku samaysmaan waxa ay ku xiran tahay degganaanta ayoonnada biraha ah ee samaysma. Ayoonnada binaha ee taxa xagga hore kaga jiraa way ka deggan yihiin ayoonnada biraha ee taxa xagga hoose kaga jira. Sidaa darteed biraha taxa xagga kore kaga jiraa si fudud bay ogsijiinta ula falgalan marka loo eego kuwa taxa hoos kaga jira.

Waxa jira ogsaydhyo kale oo ay ka mid yihiin sink ogsaydhyo iyo aluminam ogsaydh oo laba siyaabood u falgala.

### Tijaabo 2.3

Soo qaado laba inood oo isle'eg oo sink ogsaydh ah. Labada inood mid ka mid ah salfiyuurik asiidh ku dar, inta kaliena naatriyam haydarogsaydh. Maxaa dhacay? Waxa aad

arki doontaa in uu ogsaydhkii labadiiba la falgalay. Halkaa waxa aad ka garanaysaa in uu jiro nooc kale oo ogsaydh ihi oo ka duwan labadii nooc ee hore. Sida aad halkan ku aragtid, noocani asiidhada iyo beysyadaba wuu la falgalaa waxana samaysma laba cusbo oo kala duwan. Marka asiidh iyo ogsaydhka la isku daro, waxa soo baxa sink salfeyt, marka beyska lagu darona waxa soo baxa naatriyam sinkeyt.



Sink ogsaydh waa cad *yahay* marka uu qabow *yahay*, laakiin waa huruud marka uu *kulul yahay*. Ogsaydhyada noocaasi ah waxa ka mid ah oo *kale aluminam* ogsaydh, balambam ogsaydh, iwm.

#### *Dtyaarinta Ogsaydhyada:*



Sida qeexidda ereyga ah ogsaydh uu inna dareensiinaayo waa suurtagal in ogsaydhyada curiyeyaasha oo dhan lagu diyaariyo iyada oo la isu geeyo ogajiilinta iyo curiyeyaasha. Hase yeeshiee waxa jira darliqooyin kale oo ka sii habboon, siiba marka la diyaarinayo ogsaydhada biraha oo adkeyaal ah.

#### *Curiye iyo naytarik asiidh rib ah*


*(Kalabaxa naytareytyada)*

#### *Tijabo 2.4*

Waxoogaa sink ah dhuun hubsasho ku rid, dabadeedna saabaanka u meerar sida aad jaantuska 2.3 ku aragtid. Dhibic-dhibic ugu dar naytarik asiidh rib ah, ilaa falgalku dhammaado. Dabadeedna milanka uumibixi. Haraaga soo haray sii kululay. Haraaga soo haray waa sink *naytareyt*, oo marka la kululeeyo u kala baxa sink ogsaydh, *naytarojiin* laba-ogsaydh iyo ogsijiintuba waa neefo, waxa weelka ku soo harayna waa ogsaydhkii sinka.






Ogsaydhyada curiyeyaalka istaanas, balambam iyo kubramba sidaa oo kale baa loo diyaariyaa.



JT. 2.3


Sida aad isle'egta kimikaad ku aragtid ogsaydhadu waxa ay dhashaan marka naytareytyada biraha la kululeeyo. Sidaa awgeed ogsaydhada biraha caanka ah marka laga reebo kuwa ururka kowaad, waxa si dhib yar looga diyaarin karaa naytareytyadooda oo la kululeeyo:



*Haydarogsaydhyada ama kaarboonaytyada:*

Tijadbo 2.5

Milan naatriyam haydarogsaydh ah ku dar milan kale oo kubram salfeyt ah. Wuxa samaysma ruushi kubram haydarogsaydh ah. Ruushiga ka miir milanka, kubram haydarogsaydhka ruushiga ahna dhaal ku kululay. Wuxa dhaalka ku naraya kubrik ogsaydh madow.



kul




t) Milan naatriyam kaarbooneyt ah ku dar milan kale oo balambam (II) naytareyt ah. Wuxa samaysma ruushi balambam (II) kaarbooneyt ah. Ruushiga dhaal ku kululay. Ruushigu wuxa uu u kala baxayaa balambam ogsaydh, iyo kaarboon laba-ogsaydh.



kul



Ogsaydhyada curiyeyaalka magniisiyam, aluuminam, sink, feeram, istaanas, balambam iyo kubram sidaas oo kale ayaa loo diyaariyaa.




JT. 2.4

Haydarogsaydhyada iyo kaarbooneytyada curiyeyaasha ururka kowaad midna kulka kuma kala baxo. Halkaasina waxa aynu ka arki kárnaa in aan ogsaydhyada curiyeyaasha ururka kowaad lagu diyaarin karin dariqooyinka aynu kor ku soo sheegnay oo dhan. Curiyeyaasha ururka kowaad aad ayay u firfircoon yihiin, waxa ayna si dhakhso ah ula falgalan ogsijiinta. Sidaa awgeed waxa ogsaydhadooda lagu diyaarshaa iyaka oo toos loogu geeyo ogsijiinta.

#### *Ogsaydhada Sare:*



Ogsaydhyada sare waa ogsaydhyo ay ku jiraan molikiyuullo ogsijiin ah oo ka badan inta ku jiri karta halkii molikiyuul ee isla ogsaydhkaas birta ee beyska ah. Tusaale ahaan naatriyam waa bir hal kaaftoonle ah, waxa ayna leedahay ogsaydhka caadiga ah ee naatriyam ogsaydh oo naanaystiisu tahay  $\text{Na}_2\text{O}$ ; haddana waxa ay leedahay ogsaydh kale oo naanaystiisu tahay  $\text{Na}_2\text{O}_2$ . Sida aad naanaystaas ku aragtid ogsaydhkaasi waxa uu wataa molikiyuullo ogsijiin ah oo ka badan ka ogaydhka caadiga ah. Sidaa awgeed ogsaydhkaasi waa ogsaydh sare; ogsaydhkaasi gaarka ahi waxa uu samaysmaa marka naatriyam lagu gubo meel ogsijiin badan leh. Isla sidaas oo kale ayaa birta beeriyam ay samaysaa ogsaydh sare oo naanaystiisu tahay  $\text{BaO}_2$ . Haddii ogsaydhadaas ah  $\text{Na}_2\text{O}_2$ , iyo  $\text{BaO}_2$  lagu kala daro asiidho, waxa markiiba soo baxa isku-dhiska la yiraahdo haydarojiin beerogsaydh. Sidaa darteed ogsaydhaas waxa la yiraahdaa beerogsaydh.



Waxa kale oo jira nooc kale oo ogsaydhada sare ah, oo marka ay la falgalaan salsiyuurik asiidh rib ah soo saara necfta ogsijiin. Ogsaydhadaas waxa ka mid ah  $\text{MnO}_2$ ,  $\text{PbO}_2$ , waxaana la yiraahdaa laba-ogsaydho.



Ogsaydhadaasi marka ay la falgalan haydarokalorik asiidh rib ah oo kulul, waxa markiiba soo baxda neefta koloriin.





(Shay-baar ku diyaarinta koloriinta).

Halkaasi waxa aynu ka aragnaa in ogsaydhada sare loo kala saaray laba qaybood iyada oo ku xiran falgalka ay la yeeshaan asiidhada iyo maxsuullada ka soo baxaba.

#### *Yaraynta Ogsaydhada.*

#### *Tijaabo 2.6*


In yar oo kubrik ogsaydh madow ku dhex rid dhaal, dabadeedna dhaalka dhex dhig dhuun qarsho adag ah. Laba fur oo laba dhuumood oo yar yari ay ku kala jiraan labada af kaga xir, dabadeedna u meerr saabaanka sida aad jaantuska 2.5 ku aragtid. Neef haydarojiin ah oo engeegan dhex mari dhuunta gubashada, kaddibna dhaalka iyo waxa ku jiratii aad u kululee. Maxaad aragtay? Maxaa ku dhacay ogsaydhkii madoobaa? Waxa aad arki ogsaydhkii madoobaa oo baroor isu geddiyey iyo dhibcq hoor ah oo ku ururay afka dhinaca janjeera ee dhuunta. Midabkaa baroorka ahi waxa uu inna dareensiinayaa in kubrik ogsaydhkii isu geddiyey bir; isla mar-kaas dhibcahaa hoorka ah haddii kimika ahaan loo hubsado waxa aad arkaysaa in ay yihiin biyo. Halkaasina waxa aynu ka arki karraa in falgal ogsidh-ayn-yarayn ihi uu dhacay. Kubrik ogsaydhkii waxa loo yareeyey kubram; haydarojiintiina waxa ay u ogsaydhowday biyo. Falgalka dhacayana waxa loo qori karaa sida ay isle'egta elektaroonikaad ee soo socot-taa vso.



JT. 2:5 Yaraynta Ogsaydhyaada

Ku celi tijaabadii hore adiga oo kala isticmaalaya kaal-siyam ogsaydh, magniisiyam ogsaydh, sink ogsaydh ama aluminam ogsaydh, una fiirso in wax isbeddel ihi dhaco. Wawaad arki doontaa ogsaydhadii qo aan wax isbeddel ihi ku dhicin. Halkaasina waxa aynu ka gaari karraa in neefta hay-darojiintu aanay yarayn karin ogsaydhada biraha xagga hore kaga jira taxa firfircoonaanta. Guud ahaan curiyeba curiyaha uu ka sarreeyo taxa firfircoonaanta ayay adag tahay yaraynta ogsaydhkiisu. Neefta haydarojiintu si dhib yar ayay u ya-raysaa ogsaydhada biraha feeram iyo wixii ka hooseeyaba taxa firfircoonaanta. Inkasta oo taasi jirto, haddana yaraynta ogsaydhadu waxa ay badanaa ku xiran tahay awoodda yareeyaha la falgelaya. Kaarboon oo yareeye aad u xooggan ah marka uu kulul yahay waxa uu yarayn karaa xitaa ogsaydhka sinka.

kul



## LAYLIS 2.1

1. Sheeg xaaladaha ay ogsajiintu kula falgasho (b) kaarboon, (t) salfar, (j) magnisiyam, (x) feeram iyo (kh) kubram. Ka faallood astaamaha milannadooda.
2. Maxaa looga jeedaa: (b) kalkaaliye, (t) jinsiyo iyo (j) ogsaydh asiidh ah ?
3. Sidee bay isu beddeshaa firfircoonaanta curiyeyaalka ururka VIaad marka tirada atamka iyo gacanta atamku kordhaan ?
4. Tijaabo ku sharax sida ay ogsaydhyadu u yaraadaan.
5. Magacow saddex iskudhis oo ogsijiin bixiya marka la kululeeyo, isle'egyadoodana qor.
6. Sidee bay curiyeyaalka ururka VIaad u dhammadays-tiraan elektaroonnada heertamarta ugu sarraysa ?
7. Qor isticmaalka ogsijiinta.
8. Sharax kooban ka bixi diyaarinta ogsijiinta.
9. Raadadka uu kulku ku leeyahay kaarbooneytyada, naytareytyada iyo haydarogsaydhada biraha, guud ahaan waxa ay ku xiran yihiin hadba meesha ay taxa firfircoonaanta kaga jiraan. Weedhaasi ma sax baa? Haddiise ay tahay sidee baad u caddayn kartaa ?
10. Qor isle'egta kimikaad ee tusaysa raadka uu kulku ku leeyahay (b) sink kaarbooneyt, (t) kaalsiyam naytareyt, (j) balambam naytareyt, (x) kaaliyam kaarbooneyt, (kh) naatriyam haydarogsaydh.
11. Sharax adiga oo isticmaalaya isle'egyo kimikaad saddex dariiqo oo kubrik ogsaydh lagu diyaarin karo.
12. Wuxuu aad haysataa saddexda ogsaydh ee kala ah aluuminam ogsaydh, kaalsiyam ogsaydh, kubrik ogsaydh

oo ay ka lumeen warqadihiif magacyadoodu ku qorraa-yeen. Sidee baad u kala garan lahayd oo mid walba gooni ugu soo saari lahayd? Iisticmaal isle'egyo kimi-kaad marka aad sharxaysid.

13. Waa maxay ujeeddada ereyga ah ogsaydh dhexdhexaada? Tusaale kooban ka bixi.
14. Ururka marka hoos loo sii raacoba waxa sii kordha birnimada curiyeyaasha. Sheeg sababta.
15. Maxay yihiiin ogsaydhada sare? Maxayse ku kala duwan yihiiin beerogsaydhada iyo laba-ogsaydhadu?

#### S A L F A R

Salfartu waa curiyaha labaad ee ururka VIaad ee tusaha kalgalka curiyaasha. Tiro-atamkiisu waa 16, culays-atamkii-suna waa 32. Sidaa awgeed waxa ku jira bu'da atamka 16 borotoon iyo 16 niyuutaroon. Mar haddii uu atamka salfarku yahay dhexdhexaad oo aanu lahayn danab togan iyo mid taban toona, waa in ay ku jiraan 16 elektaroon. Elektaroonnadaasi waxa ay ku kala jiraan saddex heertamarood oo ku wareegsan bu'da atamka. Heertamarta kowaad waxa ku jira laba elektaroon, ta lbaadna siddeed. Heertamara ugu sarraynsana lix elektaroon. Mar haddii ay laba elektaroon ka dhiman yihiiin si ay u gaarto ratibaadda elektaroonnada neelta wahsatada ah ee ay isku kalka yihiiin, waxa aynu filaynaa in salfartu inna tusto astaamaha bir-ma-aheyaasha sida ogsijiinta.

Astaamaha salfarta iyo kuwa ogsijiintu way isu dhow yihiiin, waayo ratibaadda elektaroonnadooda ayaa isku dhow. Labadaba, heertamartooda ugu sarreysa waxa ku jira lix elektaroon. Sida ogsijiinta oo kalena salfartu waxa ay samaysaa ayoon taban oo ah S<sup>2</sup>; taasina waxa ay dhacdaa marka atammada salfartu ay elektroonno ka helaan atammo kale oo elektaroon-deeqeyaal ah sida biraha. Waxa kale oo uu ratibaadda

elektaroonnadiisa ku dhammaystirtaa isaga oo elektroonno la wadaagaya atammo kale; taas oo dhacda marka ay isu tagaan atammo ay elektaroon-jiidashadoodu isku dhow yihiin. Tusaale ahaan salfartu waxa ay la samaysaa haydarojiinta iskudhiska elektaroon-wadaaga ah ee la'yiraahdo haydarojiin laba salfaydh.

Labadaa curiye ee kala ah ogsijiin iyo salfar waxa ay lee-yihiin astaamo kala duwan; gaar ahaan astaamahooda duleed aad ayay u kala duwan yihiin. Ogsijiintu waa neef aan midab lahayn halka ay salfartu ka tahay adke midabkiisu yahay woob ('hurdi). Inkasta oo labada curiyeba ay sameeyaan ayoonno taban marka ay la falgalaan biraha, haddana waxa jira wax-yaalo badan oo ay ku kala duwan yihiin. Sida caadiga ah wejiga ogsidhaynta ee ay ogsijiintu qaadataa waa 2-, halka ay salfartu ka yeelan karto wejiyada ogsidhaynta ee kala ah 2-, 4+ iyo 6+. Lixda elektaroon ee ku jira heertamarta sad-dexaad aad ayay uga fog yihiin bu'da atamka, xoog daciif ahirin wuu soo jiidanayaa marka loo eego elektaroonnada lixda ah ee ku jira heertamarta ugu sarreysa ec atamka cgsijiinta co bu'da atamka u dhow. Sidaa darteed si hawl yar ayay uga bixi karaan atamka salfarta ah, dabadeedna atamka salfartu waxa uu noqon karaa ayoon togan marka uu la falgalo atam-kale oo ka elektaroon-jiidasho badan sida ogsijiinta.



#### *Jiritaanka Salfarta:*


Salfarta waxa la yiqiinney waayo hore, sida ogsijiintana salfarta keli ahaanteed ayaa loo heli karaa, hase yeeshec waxa iyada laga helaa dhulka hoostiisa halka ay ogsijiintu ku jirto hawada; kaydad fara badan ayaana dhulka qaarkiis ku jira. Meelaha ay kaydadka ugu ballaaranii ku jiraanna waxa ka mid ah waddanka Marayanka iyo Sisali oo ah waddanka Talyaan-niga. Salfarta waxa aad looga heli karaa meelaha fulkaanuhu ku dhaco. Salfarta waxa kale oo ay adduunyada ugu jirtaa

iyada oo curiyeyaal kale ku darsan oo la samaynaysa isku-dhisyo; iskudhisyada ay ku jirtona waxa ka mid ah kuwa la jiiyahdo salfaydhada ( $S^{2-}$ ), salfeytyada ( $SO_4^{2+}$ ), salfaytyada ( $SO_3^{2-}$ ) iwm. Salfarta waxa kale oo ay in badan u jirtaa, iyada oo curiyeyaal kale ku darsan, walxo badan oo orgaaniko ah, waxana ka mid ah timaha, ukunta, basasha, toonta iwm.

#### *Soo Saaridda Salfarta:*

In kasta oo salfarta la heli karo iyada oo ku jirta curiyeyaal fara badan, haddana inteeda badan waxa loo helaa keli ahaan . Waxana lagu soo saaraa habka la yiriihdo faraash. Habkaasi waxa uu ka faa'iideystaa oo shaqadiisu ku xiran tahay labada arrimood, ee ah heerkulka dhalaalka salferta oo hooseeya iyo isla markaas salfarta dhalaashan oo cufnaanteedu ka yar tahay ta biyaha.

Sida aad jaantuska 2.6 ku aragtid, saddex dhuumood oo midba ta kale ku dhex jirto ayaa dhulka la geliyaa ilaa ay gaaraan kaydka salfarta. Dhuunta ugu hoosaysa waxa la dhex marshaan hawo cadaadiskeedu aad u sarreeyo, dhuunta ugu sarraynsana waxa iyana la dhex marshaan biyo aad u kulul oo lagu isticmaalay cadaadis badan. Heerkulka biyuhu waa 170°C. Biyahaas kulul ayaa dhalaaliya salfarta. Dabadeena cadaadiskaa firaha badan ee lagu isticmaalay ayaa salfarta dhalaashan dibadda u soo tuura iyada oo dhex maraysa dhuunta dhexe. Biyaha kulul ee dhuunta dhexe dul maraya ayaa salfarta dhalaashan ka ilaasha qabowga. Salfarta dhalaashan ee ka soo baxda dhuunta dhexena waxa lagu ururiyaa haamo waaweyn, halkaas oo ay isugu rogto adke. Habkaas waxa san nad kastaba lagu soo saaraa malaayiin tan oo salfar ah.



JT. 2·6

#### *Jinsiyadaha salfarta:*

Sidii aynu hore ugu soo aragnay buugga kowaad, curiyaha waxa loo qaataa in uu yahay sinjiyo atammo ah oo leh astaamo gaar ah. Marka ay atammo isku mid ahi isu tagaan waxa samaysma curiye, laakiin marka ay atammo kala jaad ahi isu tagaan waxa dhasha iskudhis ama iskujir, taas oo ku xiran xaaladaha ay isugu darsamayaan.

Waxa dhacda in ay curiyevaalka qaarkood u jiri karaan noocyoo badan oo isku weji keli ah. Jiritaanka uu curiye u jiri karo hal nooc in ka badanna waxa la yiraahdaa jinsinimo. Noocyada kala duwan ee uu curiyuhu qaadan karana waxa

la yiraahdaa jinsiyada curiyaha. Curiyeyaasha ay ka mid yihiin kaarboon, fosfoor iyo salfar ayaa sameeyaa jinsiyo badan. Jinsiyada ay walax kastaa yeelan kartaana waxa ay ku xiran yihiin xaaladaha duleed ee walaxdaas la mariyo. Jinsiyada waxa loo kala qaybshaa kuwo deggan iyo kuwo aan degganeyn. Jinsiga ku waara xaalad duleed oo gaar ah isaga oo aan in yarna isu beddelin jinsi kale waxa la yiraahdaa jinsi deggan. Haddiise aantu ku waarayn xaaladdaas waxa loo qaataa in uu yahay jinsi aan degganeyn. Hase yeeshee isbeddelka uu jinsiba ka kale isugu geddiyaa waxa uu qaataa waqtidheer. Dhakhsaha uu isbeddel ku dhaco ee uu ku dhammaadaana waxa ay ku xiran tahay dabiiicadda walaxdaas iyo heerkulka.

#### *Diyaarinta jinsiyadaha salfarta:*


Si aynu u aragno jinsiyadaha salfarta qaabkooda kala duwan iyo xaaladaha ay u baahan yihiin marka la diyaari-nayoba, bal hadda aynu u fiirsanno tijaabooyinka soo socda.

#### *Tijaabo 2.7*

In yar oo salfar malaasan ah soo qaado oo daqiji; budada kuu soo baxdana, woxoogay ku shub dhuun-hubsasho oo uu ku jiro xaddi ah kaarboon laba-salfaydh. Hoorka kaarboon laba-salfaydhku si degdeg ah ayuu y. holcaa; sidaa darteed waa in wax alla wixii olol ah ee kugu dhow la damiyaa inta aan tijaabada la bilaabin. Markaa dabadeed inta aad iskujirka isku ruxdid miir adiga oo isticmaalaya miirtu qallalan oo nadiif ah. Miirtana seesar qarsho ah u dhig oo ku ururi sida aad jaantuska 2.7 ku aragtid.

Heerkulka uu kaarboon laba-salfaydhku ku karaa aad ayuu u hooseeyaa, sidaa awgeed miirtu dhakhsa ayay u uurmi haxaysaa, waxana seesarka ku soo hadhaya wiriqo salfar ah. Haddii aad wiriqahaas weyneysa ku eegtidna, waxa aad arkaysaa in qaabkoodu yahay qardhaas oo kale. Salfarta noocaa

ahna waxa la yiraahdaa salfar qardhaasle ama salfar. Salfartaasuna way deggan tahay inta aanu gaarin heerkulku 96°C.



wirig  
Salfar  
qardhaasle.  
ah



JT. 2.7 (t)

**JT. 2.7(b)**

### Tijaabo 2.8

Dhardhaar saar dhaal ay ku jirto budo salfar ahi sida aad jaantuska 2.8 ku aragtid; dabadeedna si miyir ah u kulee. Maddane qarsho ka samaysanna ku walaaq salfarta marka ay dhalaasho. Marka salfartu wada dhalaashona u oggolow salfarta inay mar labaad qabowdo. Ka saar maddanaha, salfarta dhalaashan oo dul qabo dhaalka, una fijirso waxyaabaha dhaca. Waxa aad arki hoor adag oo baroor ah oo ku dheggan caaradda maddanaha qarshada ah. Marba marka ay salfartu soo qabowdana hoorku wuu soo jilcaya ilaa uu noqdo biyo oo kale oo dib ugu soo da'o dhaalka marka uu heerkulku gaaro heerkulka ay salfartu ku fariisan lahayd ee ay noqon lahayd adke. Sida aad dareemaysid arrintaasi waa mid la yaab leh, waayo waxa aynu naqaannaa in sida caadiga ah, marka uu heerkulku kordhoba uu hoorku sii fududaado ilaa uu noqdo uumi; marka heerkulku hoos u dhacana uu sii ad-

kaado ilaa uu isu geddiyo adke. Hase yeeshie arrinta salfartu way ka duwan tahay sida aad tijaabada ku aragtay. Taasna waxa la runaysan yahay in ay u sabab tahay iyada oo ay jiraan jinsiyo salfar ah oo hoor ah.

Salfarta dhalaashan ee dhaalka ku jirta qabooji ilaa ay xayaabo adki dul fuudayso. Dabadeed laba meelood ka dalooli xayaabada samiaysantay, wixii hoor ah ee salfar ahna ka shub. Marka salafraa dhaalka ku soo hadhay ay aad u qabowdo ee uu heerkulkeedu gaaro ka qolka shey-baarkana, xayaabada oo dhan mindi kaga xayuubi. Waxa aad arki doontaa wiriqo fara badan oo irbado oo kale ah oo ka soo taag taagan dhinacyada dhaalka sida aad jaantuska ku aragtid, wiriqahaas salfarta ah ee irbadaha oo kale ahi waxa ay u taagan yihiin jinsi kale oo salfar ah. Jinsigaasna waxa la yiraahdaa salfar-salaxaale ama B-salfar.




### J T. 2.8

Jinsigani waxa uu samaysmaa marka heerkulku dhaafo 96°C. Heerkulkaas ah 96°C waxa loo yaqaannaa heerkulka kalaguurka, waayo waxa ku xiran samaysanka labada jinsi ee kala ah -salfar iyo B-salfar. Haddii heerkulku ku taagan yahay 96°C labada jinsiba way samaysmi karaan, laakiin marka heerkulku ka hooseeyo ama ka sarreeyo 96°C ayaa waxa samaysma oo qura -salfar ama B-salfar sida ay u kala horreeyaan.. Halkaasina waxa aynu ka aragnaa in -salfartu isu beddesho B-salfarta marka heerkulku dhaafo 96°C, B-salfartuna ay isu beddeli karto -salfarta marka heerkulku hoos uga dhaco 96°C.

## Tijaabo 2.9

Woxoogay salfara oo budo ah ku shub dhuun-hubsasho, dabadeedna aad u kari, isbedellada dhacana u fiirso. Marka ay salfartu dhalaasho waxa ay noqonaysaa hoor midbka can-tarka leh. Marka heerkulku sare u sii kacana waxa uu isu beddelaa madow; dabadeedna wuu karaa, waxana ka soo baxa uumi cas. Salfarta karaysa si degdeg ah ugu shub bakeeri ay biyo qaboobi ku jiraan. Waxa markiiba bakeeriga ay bi-yuhu ku jiraan ku samaysmaya salfar jilicsan oo sida caagga ama xanjada u kala jiidmaya, sida aad jaantuska 2.9 ku aragtid. Jinsiga salfarta ah ee sidaas ahna waxa la yiraahdaa salfar caag, waana wiriqlaawe. Haddii uu muddo meel yaallana, jileecu wuu ka baaba'a, waxa uuna tartiib tartiib isugu beddelaa jinsiga ah -salfar.




Qaboojinta degdega ahi, waxay Salfaska-  
Karaaya u beddeshaa Salfar Caag ah

JT. 2.9.

Tijaabooyinkaa dhawrka ah ee aynu soo samaynay, waxa aynu ka arki karraa in salfartu ay tahay curiye la yaab leh. Curiye kale oo sida salfartu isugu beddesho kulka isugu beddelaa ma jiro; isla markaas jinsiyadaa faraha badan ee ay leedahay salfartu, curiyeyaasha kale ma laha. Saddexda jinsi ee adkaha ah ee salfartu leedahayna waa -salfar, B-salfar iyo salfarta caagga ah.

Jiritaanka jinsiyadaha badan ee salfarta waxa lagu sharxi karaa siyaabaha kala duwan ee suurtagalka ah ee molikiyuullada salfartu u ratiban yihiin.


Molikiyuullada labada jinsi ee wiriqlayaasha ah ee -salfar iyo B-salfar waxa uu molikiyuul kastaaba ka kooban yahay siddeed atam oo salfar ah ( $S_6$ ) oo isugu xiran sida giraanta.



JT. 2.10

(eeg jaantuska 2.10). Fanaqa u dhexeeyaa labada jinsina waxa uu ku xiran yahay siyaabaha kala duwan ee giraamuhu isugu ratibmi karayaan.

Salfarta dhalaashan waxa ay molikiyuulladeedu ka kooban yihiin giraamo siddeed geesleyaal ah oo socsocon kara. Hase yeeshie marka heerkulka sare loo sii qaado ayaa giraamuhu kala furmaan, waxana samaysma silsilado sagsaag ah oo dhaadheer. Silsiladahaas dhaadheerina way isdhexgeli karaan iyada oo midba mijdda kale ku marmayso. Taas ayaana ugu wacan arrinta la yaabka leh ee salfarta dhalaashan aynu ku aragnay marka aad loo sii kululeeyo .



JT. 2.11 Sitsilad atammo  
Salfara ah

Haddii hoorka adag ee salfarta ah la qaboojiyo, si degdeg ah ayuu u fadhiistaa oo uu u noqdaa adke; inta aanay atam-mada salfarta hoorka ihi waqtii u helin ay ku sameeyaan gi-raamo. Sidaa awgeed ayaa salfarta caagga ah ay molikiyuul-ladeedu uga samaysan yihiin silsilado dhaadheer. Silsilada-has ayaana ugu wacan loodsanka salfarta caagga ah.

#### *Astaamaha Salfarta:*

##### *b) Astaamaha duleed:*

Salfartu waa adke midabkeedu yahay woob (*hurdi*) oo leh astaamaha bir-ma-aheyaasha oo dhan. Tusaale ahaan salfartu wax wirwir ah ma laha, waana danab magudbiso, si fududna waa loo burburin karaa. Salfartu waxa ay ku dhalaashaa heerkulka ah 119°C, waxa ayna kartaa marka heerkulka la gaarsiiyo 444°C, waxana soo baxa uumi baroor ah oo moliki-yuulladiisu ka kooban yihiin laba atam ( $S_2$ ). Marka uumigaas la qaboojiyana waxa soo baxa budo salfar ah. Cufnaanta sal-fartu way ka yar tahay ta biyaha, isla markaas biyaha kuma milanto, sidaa darteed salfartu waxa ay dul sabbaysaa biyaha.


##### *t) Astaamaha Kimikaad:*

Salfartu waa curiye firfircoon oo curiyeyaasha intooda badan la falgasha. Firfircoonaanta jinsiyada salfarta oo dhamminaa waa isku mid. Falgallada soo socda ayaana arrintaas innoo muujin doona.

#### *Salfarta iyo bir-ma-aheyaasha kale:*

##### *Tijaabo 2.10*

Woxoogay budo salfar ah ku rid dhaal, dabadeedna aad ii kululee. Maxaad aragtay? Maxaa ku dhacay salfartii? Waxa aad arki salfartii oo gubatay oo bixinaysa olol midab-kiisu yahay buluug; waxa kale oo soo baxaysa neef la yiraahdo salfar laba-ogsaydh.



Salfar laba-ogsaydhu waxa ay isu beddeshaa iskudhiska la yiraahdo salfar saddex-ogsaydh marka ay hesho ogsijiin badan. Salfar saddex-ogsaydhu waa uumi cad, uumigeeduna waxay dadka ka joojisaa hawada; dabadeedna qufac ayaa dadku yeeshaan. Qufacaas dheeraadka ah ayaana lagu gartaa ji-ritaanka salfar saddex-ogsaydhta.



### *Tijaabo 2.11*

Neef haydarojiin ah dul mari salfar dhalaashan. Maxaa dhacay? Wuxuu bixi doona neef qurmuun oo la yiraahdo haydarojiin salfaydh.



Sidaas oo kale ayaa milaha la yiraalido kaarboon laba-salfaydhku ( $CS_2$ ) u samaysmaa marka budo salfar ah iyo kaarboon aad la isugu kululeeyo.



Falgalkuna wuxuu ku dhacaa heerkul aad u sarreeyaa.

### *Salfarta iyo biraha:*

### *Tijaabo 2.12*

Iskujir ka kooban jidhiidh xadiid ah iyo budo salfar ah ku rid dhaal. Dabadeedna isku kululee. Maxaad aragtay? Maxaaq ku dhacay isku jirkii? Wuxuu bixi doona walax madow, isla markaas wuxa ka soo baxaya oo iskujirka dushiisa jagu arkayaa olol ama holac buluug ah. Walaxda soo baxdana wuxa la yiraahdaa feeris salfaydh oo aad ka dareemi karaysidinta qurmuun ee haydarojiin salfaydhu leedahay.



Sidaas oo kale ayaa biraha kale ee ay ka mid yihin kubram, sink, aluminam iwm, ay ula falgalan salfarta marka la isku gubo. Waxana soo baxu salfaydhada birahaas. Falgalladaas oo dhammi marka ay dhacayaan waxa ay bixiyaan tamar-kul, sidaa darteedna waa kul-bixiyeyaa. Falgalladaasu isla markas waa falgallo ogsidhayn-yarayn ah. Salfartu waxa ay ka qaadataa elektaroonno, biraha ay la falgaleyso sida isle'egta elektaroonikaad ee hoose inna tusayso.



Sida isle'egta sare tusayso, salfarta waxa loo yareeyay ayoonka taban ee  $\text{S}^{2-}$ , xadiikana waxa loo ogsidheeyey ayoonka togan ee  $\text{Fe}^{2+}$ . Sidaa darteed salfartu, halkan, waxa ay u dhaq-maysaa ogsidheecye ahaan. Falgallada ka dhex dhaca salfarta iyo biraha oo dhanna, salfartu waxa ay u dhaqantaa ogsidheeye.



*Salfarta iyo iskudhisyada ogsidheeyeyaalka ah.*

#### *Tijaabo 2.13*

Soo qaado laba dhuun-hubsasho oo nadiif ah. Midkood 1 sm<sup>3</sup> oo salfiyuurik asiidh rib ah ku shub, ka kalena xaddi le'eg oo naytarik asiidh rib ah. Mid walba in yar oo budo salfar ah ku dar, dabadeedna kululay. (Waa inaad aad u digtoonaataa marka aad kululaynayso iskujirkaa). Neefta ka soo baxaysa dhuun-hubsashada ay salfarta iyo salfiyuurik asiidha ribta ahi ku kululaanayaan miirto aad ku qoysay milan kaaliyam labakoromeyt ah u dhig. Maxaa ku dhacay warqaddii miirtada ahayd. Wuxuu aad arki doontaa miirtadii oo isu beddeshay ca-

gaar. Dhuunta ay salfarta iyo naytarik asiidhu ku kululaa-nayaanna waxa ka soo baxaysa neef baroor ah. Neefta hore waxa la yiraahdaa salfar laba- ogsaydh, ta baroorka ahna waxa la yiraahdaa naytarojiin laba-ogsaydh.

Falgallada dhacayana waxa loo qori.karaa:



Halkaas waxa aynu ka aragnaa in salfiyuurik asiidhtii iyo naytarik asiidhtiiba loo yareeyey salfar laba-ogsaydh iyo naytarojiin laba-ogsaydh sida ay u kala horreeyaan. Yarayntaasna waxa keenay salfarta lagu dhex kariyey. Sidaa darteed salfartu halkan waxa ay u dhaqmaysaa yareeye ahaan. Halkaasna waxa aynu ku aragnaa in salfartu noqon karto yareeye iyo ogsidheeyaba. Taasina waxa ay ku xiran tahay hadba walaxda ay salfartu la falgelayo. Marka ay biraha la falgelayo salfartu waxa ay tahay ogsidheeye. Hase yeeshoo marka ay la falgeleyso ogsidheeyeyaaal xooggan ama curiye kale oo ka elektaroon-jiidasho badan sida ogsijiinta, waxa ay noqotaa yareeye.

#### *Waxtarka salfarta:*

- 1) Salfarta inteeda badan waxa lagu isticmaalaa samaynta salfiyuurik asiidha.
- 2) Waxa kale oo lagu adkeeyaa cinjirka Cinjirku keli ahaantii wuu jilicsan yahay lagumana isticmaali karo lugaha baabuurta. Laakiin marka lagu daro salfar ee la isku kululeeyo ayuu noqdaa walax aad u adag.
- 3) Salfartu waxa ay dishaa cayayaanka yaryar iyo fangigaba. Sidaa darteedna waxa lagu buufiyaa beeraha.

### *Iskudhisyada salfarta:*

Salfartu waxa ay samaysaa iskudhisyo badan oo ay ka mid yihiiin:

1. Haydarojiin salfaydhta iyo iskudhisyada la yiraahdo salfaydhada.
2. Labada ogsaydh ee kala ah salfar laba-ogsaydh iyo salfar saddex-ogsaydh ee laga sameeyo salfiyuurik asiidhta.
3. Iyo cusbooyinka salfiyuurik asiidha.

### *Haydarojiin salfaydh.*

#### *Jiritaanka haydarojiin salfaydhta.*

Inkasta oo aan neefta la yiraahdo haydarojiin salfaydhta aan caadi ahaan looga helin hawada, haddana siyaabo badan ayay u geli kartaa. Marka ay qurmaan borotiinnadu, salfarta ku jirtaa waxa ay isu beddeli kartaa haydarojiin salfaydh oo urteedu ay la mid tahay urta ukunta qudhunta. Kowlka waxa ku dhex jira salfar, marka la gubana waxa ka soo baxa salfar laba-ogsaydh iyo woxoogay haydarojiin salfaydh ah. Biyaha qadhaadh ee biirta ah waxa iyana ku jira haydarojiin salfaydh. Haydarojiin salfaydhta ku jirta ayaana ugu wacan urta xun ee ay leeyihiin biyahaasi.


#### *Shey-baar kudiyaarinta haydarojiin salfaydhta.*

#### *Tijaabo 2.14*

Ku rid woxoogay feeras salfaydh ah dhalo uu kuaaburan yahay fur laba meelood ka daloola. Masaf dhex geli daloollada midkood, daloolka kalena ku xir xirjiiriso cirifka kale kula jirta maddibad biyo diirrani ku jiraan oo ay koombo iyana biyo diirrani ka buuxaan ku afgembiyen tahay, (eeg jaantuska 2.12). Haydarokolorik asiidh badhxan ku shub masafka. Waxa uad arki doontaa marka dhibcaha ugu horreeyaa ku dhacaan


feeras salfaydhka falgalkii oo bilaabmay. Waxana soo baxaya r.eef aan midab lahayn oo ur qudhmuun leh. Neeftaas ayaa la yiraahdaa haydarojiin salfaydh, waxana lagu ururiyaa bi-yaha diirran dushooda.

Salfaydhyada biraha caanka ah oo dhan waa la isticmaali karaa. Hase yeesh ee waxa badanaa lagu isticmaalaa shay-baadka feeras salfaydh, waayo feeras salfaydhtu way ka jaban tahay salfaydhyada kale oo dhan. Falgalka dhacayana waxa loo qori karaa:



Haddiise loo baahdo haydarojiin salfaydh badan oo aan go'ayn waxa la isticmaalaa qalabka kib. Sida aad jaantuska 2.13 ku aragtid qolka dhexe waxa lagu ridaa feeras salfadhta, haydarokolorik asiidhtuna waxa ay ku jirtaa qolka ugu sareeya; isla markaas kala badh ayay kaga jirtaa qolka ugu hoo-seeyana. Marka naaska la furona, asiidhtu waxa ay kor ugu

baxdaa qolka dhexe, halkaas oo ay kula falgasho feeras salfaydhta; haydarojiin salfaydhta ka dhalata falgalkaasina waxa ay ka baxdaa naaska furan ee qolka dhexe. Marka la xiro naaska qolka dhexe; haydarojiin salfaydhta qolka dhexe ku jirta ayaa hoos u soo cadaadisa asiidhta, halkaas oo asiidhtu dib ugu soo noqoto qolka hoose iyo ka shareba. Dabadeedna waxa joogsanaya falgalka. Habkaas ayaana lagu heli karaa neef joogto ah markii aad doontidba, taas oo dhalanaysa mar alla marka la furo naaska qolka dhexe.



JT. 2-13 Qalabka Kib

*Astaamaha haydarojiin salfaydhta:*

*Astaamaha duleed:*

Haydarojiin salfaydhtu waa neef aan midab lahayn co leh ur qudhmuun oo la mid ah urta ukunta qudhunta. Hay-

darojiin salfaydhtu biyaha qabow way ku milantaa. Sidaa darteed marka la diyaarinayo, haydarojiin salfaydhta waxa lagu ururshaa biyo kulul dushooda. Haydarojiin salfaydhtu waa sun, sidaa awgeed waa in la iska ilaalshaa neefsashadeeda badan.

### *Astaamaha kimikaad:*


Si aynu u aragno astaamaha kimikaad ee haydarojiin salfaydhta, bal hadda aynu samaynno oo u fiirsanno tijaaboo-yinka iyo tusaalooyinka soo socda.

*Muxuu yahay milan haydarojiin salfaydh ihi?*

### *Tijaabo 2.15*



Haydarojiin salfaydh dhax maro in muddo ah dhuun-hubsasho oo ay ku jiraan biyo qabow oo lagu dhax riday war-qad litmas buluug ah. Maxaa ku dhacay warqaddii? Waxa aad arki warqaddii oc midabkeedii casaan khafiif ah isu beddelay. Halkaasna waxa aynu ka garan karraa in milanka haydarojiin salfaydhta ihi yahay asiidh daciifa.

Haydarojiin salfaydhtu marka ay biyaha ku milanto waxa samaysmaya milan asiidh ah. Ayonoobidda ka dhax dhacaysa biyaha iyo haydarojiin salfaydhtana waxa loo qori karaa sida isle'egta hoose inna tusayso.




Sida isle'egta sare inna dareensiinayso, dheellitiranka ayonoobiddu waxa uu jiraa dhinaca bidixda. Taas macna-heedu waxa ay tahay in tirada ayoonnada ee haydarojiinta ah ee ka dhalatay milanka haydarojiin salfaydhtu ay yar tahay. Sidaa darteedna haydarojiin salfaydhtu waxa ay samaysaa' asiidh daciifa marka ay biyaha ku milanto. Mar haddii halkii mool ee haydarojiin salfaydh ihi uu bixinayo laba mool oo

ayoонно haydarojiинno ah ( $2\text{H}^+$ ), haydarojiin salfaydhtu waa асиidh laba-borootonle ah. Waxa аyna samayn kartaa cusbo асиidh ah iyo mid caadi ah marka ay la falgasho beysyada. Cusbooyinkeedaasi waxa ay u badan yиhiin kuwa caadiga ah. Falgallada ka dhex dhici kara beysyada iyo haydarojiin salfaydhtana waxa loo qori karaa:



*Kala baxa milanka haydarojiin salfaydhta:*  
*Tijaabo 2.16*

Bakeeri ay ku jiraan woxoogay milan haydarojiin salfaydh ihi dhig meal qorrax ah, una firso waxa ku dhaca muddo dabadeed. Waxa aad arki milankii oo ciroobay iyo saxarro yaryar oo midabkoodu yahay woob (hurdi) oo dul sabbaynaya milankii bakeeriga ku jiray. Isla markaas waxa aad arki milankii oo ay ka luntay асиidhnimadii. Saxarrada hurdiga ihi waa salfar. Sidaa darteed milanka haydarojiin salfaydhtu wuu kala bixi karaa. Waxaanu u kala baxaa salfar iyo biyo caadi ah. Taasna waxa keentay ogsijiinta hawada oo milanka ogsidhaysay sida isle'egta hoose inna tusayso.



*Astaamaha yaraynta ee haydarojiin salfaydhta:*


Astaamaha yaraynta ah ee haydarojiin salfaydhta waxa аynu si fiican uga arki kartaa falgallada iyo tijaabooyinka soo socda:

Tijaabo 2.17


b) Milan feerik koloraydh ah dhex mari neef haydarojiin salfaydh ah in muddo ah. Waxa aad arki in milankii baroorka ahaa ee feerik koloraydhtu uu isu beddelay cagaar. Isla markaas waxa aad milanka dushiisa ku arki doontaa saxarro yar yar oo salfar ah oo woob (hurat) ah. Halqaasna waxa aynu ka arkaynaa in isbeddel ku dhacay milankii feerik koloraydhta ahaa markii la dhex marshay neefta la yiraahdo haydarojiin salfaydhta. Haydarojiin salfaydhta waxa loo ogsidheeyey salfar, sidaa darteedna neeltaasi waa yareeye; waxa ayna feerik koloraydhta u yaraysaa feeras koloraydh oo ntidabka milan-keedu yahay cagaar. Falgalka dhacayana waxa loo qori karaa:



Sidaas oo kale ayaa haydarojiin salfaydhtu, marka la dhex marsho naytarik asiidh rib ah u yaraysaa. Waxana soo baxa qaac baroora oo ah naytarojiin laba-ogsaydh. Waxa kale oo weelka falgalku ka dhacayo ku samaysma saxarro salfar ah. Ihas yeeshce salfartaas samaysantay waxa ay naytarik asiidh ta ribta ahi u rogi kartaa salfiyuurik asiidh.



t) Neef ah haydarojiin salfaydh dhex mari milan kaaliyam laba-koromeyt ah oo in yar oo asiidh ihi ku jirto. Milankii liinta ahaa waxa uu isu beddelaa cagaar. Isla markaas saxarro salfar ah ayaa ku dhex samaysmaya milanka. Falgalka dhacayana waxa loo qori karaa:




Haydarojiin salfaydhtu waxa kale oo ay yaraysaa salfiyuurik asiidha ribta ah sida isle'egta hoose innoo muujinayso.

4H<sub>2</sub>O

Sidaa dar oo baydarottin salsiyadhta laguma engejin karo  
salsiyuu u esidjin riyaan.

Sataydhyada biraha caanka ah.

Si low si yow magney, salfaydhyada biruhu waxa  
si jyadha jyo birta la isku gubo. Tusaale  
si ay ee maysantaa marka salfar  
si ay ee qofka jyadha jyo birta la isku gubo.



Saltaydhada biruhu waxa kale oo ay samaysmaan marka niteenka caabooinka ay ka mid yihii salfaytyada, naytareyntada iyo teloraydhada bitrahans la dhex marsto neef ah hay-drojjiin saltaydh. Salfaydhadaas riushi ahaan ayay milanka uga aqo loxaan. Isle'egyada heos ku qoran ayaana falgalka dhuuqayaa, fima tusaya.



ay badankoodu leeyi-  
salfaydhada kubram,  
arintantu waxa ay  
salfaydha

iyoo sink salfaydhku waa baroer iyo caddaan sida ay u kala horreeyaan.

Ruushiyada salfayadha ahi waxa ay ku kala samaysmaan xaalado kala duwan. Tusaale ahaan, salfaydhada sinka iyo xidiidku waxa ay samaysmaan marka haydarojiin salfaydh la dhex marsho milan dhexdhexaadi ah oo ah cusbooyinka birahaas. Hase yeeshi salfaydhada balambaita, istaanasta, kubramta, meerkuriga iyo arjantamtu waxa ay dhashaan oo qura marka milanka cusbooyinkooda ay ku jirto woxoogay asiidh ilhi (HCl).

#### *Hubsashada haydarojiin salfaydhta:*

Raadka ay ku lcedahay haydarojiin salfaydhtu milannada cusbooyinka biraha aya laga faa'iideystaa si loo garto neeftaas.

Haddii miirto la soo dhex geliyey milan balambam naytareyt ah la hor qabto dhuun ay ka soo baxayso haydarojiin salfaydh, miirtadu markiiba way madoobaanaysaa. Falgal-kaas ayaana lagu hubsadaa haydarojiin salfaydhta. Balambam naytareytkii miirtada ka qoyanaa aya haydarojiin salfaydhta u beddelaysaa balambam salfaydh. Balambam salfaydhka midabkiisu waa madow.



#### *Ogsaydhada salfarta:*

Salfartu waxa ay la falgashaa ogsijiinta, waxana ka dhaasha iskudhisyo ay wejiga oggidheynta ee salfartu tahay  $4^+$  iyo  $6^+$ . Sidaa darteed salfartu waxa ay samayn kartaa laba ogsaaydhyo; salfar laba-ogsaydh ( $\text{SO}_2$ ) iyo salfar saddex-ogsaydh ( $\text{SO}_3$ ).

*Salfar laba-ogsaydh:*

*Jiritaanka salfar laba-ogsaydhta.*

Salafr laba-ogsaydhtu caadi ahaan uguma jirto hawada, hase yeeshie siyaabo badan ayey u geli kartaa. Neefaha ka soo baxa meelaha fulkaano ka qarxo waxa badanaa ku jira woxoogay salfar laba-ogsaydh ah.


Kowlka (dhuxusha dhulka laga qodo) waxa ku dhex jira woxoogay salfar ah, marka la gubona waxa ka soo baxa neefta la yiraahdo salfar laba-ogsaydh. Biraha ceeriin waxa ay badanaa yihin salfaydhada biraha, marka salfaydhadaas la shiliyana, si loogu beddelo biro, waxa ka soo baxa salfar laba-ogsaydh.

*Diyaarinta salfar laba-ogsaydhta:*

Salfar laba ogsaydhta waxa loo diyaarin karaa siyaabo badan, waxana ka mid ah dariiqooyinka soo socda:



(i) *Gubashada salfarta:*

Marka salfar lagu gubo hawada, waxa soo baxa salfar laba-ogsaydh. Dariiqadani waa ta ugu fudud ee salfar laba-ogsaydhta lagu diyaarin karo. Hase yeeshie salfar laba-ogsaydhta sidaas lagu helo waxa ku dhex jirta naytarojiin.



(ii) *Shiilidda salfaydhada:*

Xaddi badan oo salfar laba-ogsaydh ah ayaa soo baxa marka salfaydhada biraha lagu gubo marraaqyada, heerkul-kana sare loo qaado. Salfar laba-ogsaydhtaasi warqash ahaan ayuu u soo baxaa, waayo ujeeddada falgalladaasi waa sidii loo heli lahaa biraha ay salfaydhadu ka kooban yihin. Tusaalena waxa aynu u qaadan karraa sink salfaydhta.



*Shay-baar kudiyaarinta salfar laba-ogsaydhta.*

b) *Falgalka ka dhex dhaca salfaytyada iyo asiidh badhax ah:*  
 Salfaytyadu waa cusbooyinka asiidha daciifka ah ee la yiraahdo salfiyuuras asiidh ee leh naanays-molikiyuulka ah  $\text{H}_2\text{SO}_3$  (isu eeg kaarboonik asiidhta.  $\text{H}_2\text{CO}_3$ ). Mirkka uu salfaytku la falgalo asiidh xoogganna sida salfiyuurik ama haydarokolorik asiidhta, waxa samaysmaya dheelitiranka soo socda:






Salfiyuuras asiidhtu waa asiidh daciif ah. Sidaa darteedna cheelitiranka isle'egtu waxa uu u badan yahay dhinaca midgta. Taas oo ah in ayoonnada ah salfaytka iyo haydarojiintu isu tegayaan si ay u sameeyaan salfiyuuras asiidh. Sida kaarboonik asiidhta ayaa salfiyuuras asiidhtuna ay u tahay iskudhis aan degganayn; waxa ayna u kala baxdaa salfar laba-ogsaydh iyo biyo. Hase yeesh ee salfar laba-ogsaydhta milanka lagama helo ilaa milanka la kululeeyo moojiye; waayo salfar laba-ogsaydhtu haddii kale waxaa ay ku milmaysaa biyaha.

*Tijaabo 2.18*

Woxoogay wiriqo naatriyam salfayt ah ku rid dhalo, dabadeedna u meenar saabaanka tijaabada sida aad jaantuska 2.14 ku aragtid. Haydarokolorik asiidh rib ah kaga soo shub dhalada, masafka. Dabadeed dhalada iyo waxa ku jiraba aad u kululce. Falgal ayaa ka dhacaya dhalada, waxana soo baxaya neef aan midab lahayn oo miirto la soo dhex geshay

milan kaaliyam laba-koromeyt u rogtu cagaar. Neeftaasna waxa la yiraahdaa salfar laba-ogsaydh, waxana lagu uruuri-ya habka hoos-ka-barabixinta hawada.


Falgalku laba heer (ama jarjanjaro) ayuu soo maraa. Sidii aynu kor ugu soo sharaxnay, marka hore waxa samaysma salfiyuuras asiidh. Dabadeedna salfiyuuras asiidh oo ah isku-dhis aan degganeyn ayaa marka la kululeeyo. u kala baxda salfar laba-ogsaydhta iyo biyo. Haddii loo baahdo, salfar laba-ogsaydhta waxa lagu engejiyaa salfiyuurik asiidh rib ah, hal-kaas oo la sii dhex marsho dhalo ay salfiyuurik asiidh rib ahi ku jirto inta aan salfar laba-ogsaydhta la uruurin.



J.T. 2.14

t) *Yaraynta salfiyuurik asilin* :

Shay-baarka waxa saltar karaa, haddii salfiyuurik asiidhto la fageestey. Diboygaan Marka salfiyuurik asiidh nub ah ayd waaqooyi isku kululeeyo, waxa ee baxda sidaas. Sidaas kale iyakuna sidaas oo aha aya, salfiyuurik asid ugu yareeyaan salfar laba-ogsaydha. Habka loo tundhiraas oo saabaanka lagu diyaarinayaan waxa qayla badan kala lijaabada 2.18. Falgalka dhacaynaa waxa qayla qof kala.



i.w.m.

Salfar laba-ogsaydhta dariiqadaas iyo celiyey. So ma aha, waxana ku jiri karta haydarojin labayon. Sicau awgeed dariiqada (b) ayaa kaga habboox nizumu kya sareen laba-ogsaydhta.

*Astaamaha salfar laba-ogsaydha*

*Astaamaha duleed:*

Salfar laba-ogsaydhu waa neef sidaas. Sidaas aan lahayn midab. Waxa syna leedahay. Sidaas Salfar laba-ogsaydhi u ad ayay bihi. Sidaas sidaa darteedna laguma ururin karo biyanaa dusuqada. Hase yeeshay waxa ay ka cufan tahay hawada laba jecel sidaa darteedna waxa lagu ururyaa habka hoos la arabka la sawaata.

### *Astaamaha kimikaad*

*Asiidh nimada salfar laba-oqsaydha.*

Tijjaabo 2.19


Koonbo ay ka buuxdo salfar laba-ogsaydh biyo ku shub oo aad u rux. Dabadeed warqad litmas buluug ah ku dhex rid. Maxaa ku dhacay midabkii litmaska? Wuxuu aad arki litmaskii buluugga ahaa oo isu geddiyey caddaan. Halqaasna waxa aynu ka garan karraa in salfar laba-ogsaydhu tahay cgsaydh asiidh ah Sida isleegta hoose muujinaysora, salfar laba-ogsaydhu waxa ay samaysaa asiidhta la yiraahdo salfiyuuras asiidh marka biyo lagu daro.



Salfiyuuras asiidhta oo ah asiidh daciif ahi in yar ayay ayonowdaa; waxana soo baxa ayoonno haydarojiin ah iyo ayoonno salfayt ah.




Mar haddii halkii mool ee salfayuuras asiidhta ahi ay bixinayso laba mool oo ayoonno haydarojiin ah, salfiyuuras asiidhtu waa asiidh laba borootoonle ah. Sidaa darteedna waxa ay samayn kartaa cusbo caadi ah iyo cusbo asiidh ah marka ay la falgasho alkaliyada. Falgallada ka dhex dhici kara salfiyuuras asiidhta iyo alkaliyadana waxa loo gori karaa:



Si aynu u aragno astaamaha yaraynta ee salfar laba-ogsaydhta iyo waxa ay kaga duwan tahay ta haydarojiin sal-taydhta, bal hadda aynu fiirsanno tijaabooyinka iyo tusaalooyinka soo socda:

Tijaabo 2.20

b) Maayad salfar laba-ogsaydh ah dhex mari naytarik asiidh rib ah oo ku jirta dhuun-hubsasho. Maxaad aragtay? Waxa aad arki qaac baroor ah oo naytarojiin laba-ogsaydh ee oo ka soo baxaya dhuunta-hubsasho. Halkaasna waxa aynu ka garan karnaa in naytarik asiidhtii ribta ahayd loo yareeyey naytarojiin laba-ogsaydh. Marka qaaca baroorka ahi joogsdona, milanka in ka mid ah ku dar milan beeriyam koloraydh ah oo ay ku jirto woxoogay haydarokolorik asiidh ihi. Maxaa ku dhacay milankii? Waxa aad arki ruushi cad oo markiiba samaysmay. Ruushigaasina waa beeriyam salfeyt. Halkaasina waxa aynu ka dareemeynnaa in ayoonno salfeyt ihi ( $\text{SO}_4^{2-}$ ) ay ka sameysmeen falgalkii ka dhex dhacay salfar laba-ogsaydhta iyc naytarik asiidhta. Halkaasi waxa innooga cad in salfar laba-ogsaydhtii ay naytarik asiidhtii ribta ahayd u ogsidhaysay ayoonno salfeyt ah. Falgallada dhacayana waxa loo qori karaa:



t) Mar labaad maayad salfar laba-ogsaydh ah dhex mari milan feerik salfeyt ah. Midabka milanka feerik salfeytku waa baroor sida milanka cusbooyinka kale ee ay sameeyaan aycoonnada ah  $\text{Fe}^{3+}$ . Waxa aad arki milankii baroorka ahaa oo isu geddiyey cagaar, taas oo muujinaysa in ayoonnadii  $\text{Fe}^{3+}$  ahaa loo geddiyey  $\text{Fe}^{3+}$ . Halkaasna waxa aynu ka aragnaa in feerik salfeytkii ay salfar laba-ogsaydhtii u yaraysay feeras salfeyt sida isle'egta hoose muujinayso.



j) Dhix mari neef ah salfar laba-ogsaydh milan ah kaaliyam laba-koromeyt oo ay in yar oo salfiyuurik asiidh ihi ku jirto. Midabka milanku waa liin. U fiirso waxa ku dhaca midabka liinta ah ee milanka. Waxa aad arki midabkii milanka oo isu geddiyey cagaar, taas oo ay ugu wacan tahay sa-lanka oo isu geddiyey cagaar, taas oo ay ugu wacan tahay sa-maysanka ay samaysmeen ayoonnada koromiyam ee ah Cr<sup>3+</sup>. Isla markaas haddii milanka cagaarka ah in ka mid ah lagu daro milan beeriyam koloraydh ah, waxa markiiba too laxaya ruushi cad oo beeriyam salfayt ah. Halkaasna waxa aynu ka arki karraa in kaaliyam laba-koromeytkii ay salfar laba-cgsaydhtii u yaraysay koromiyam salfayt sida isle'egta hoeqe inna tu-sayso.



Sidaas oc kale ayaa salfar laba-cgsaydhtu u yaraysaa kaaliyam beermaanganeytka marka la dhix marsho. Midabka milanka kaaliyam beermaanganeytka wuu baaba'aa.



Falgallada aynu kor ku soo sheegnay oo dhan waxa lagu isticmaali karaa hubsashada salfar laba-ogsaydhta. Hase yecshee waxa badanaa la isticmaalaa, marka la hubsanayo salfar laba-ogsaydhta, falgalka yaraynta ee kaaliyam laba-koromeytkii.

Neesta keli ah ee iyana sidaas u yarayn karta iskudhisyaad'a aynu kor ku soo sheegnay waa haydarojiin saltaydh. Hase yeeshee falgallada yaraynta ee haydarojiin saltaydhta iyo saltar laba-ogsaydhtu aad ayay u kala duwan yihiin. Marka haydarojiin saltaydhtu ay yarayso iskudhisyada aynu kor ku soo sheegnay, waxa soo baxa oo milannada ku dhix samaysma saxarro salfar ah. Laakiin marka saltar laba-ogsaydhtu ay wax yarayso, waxa samaysma ayocnno salseyt ah oc marka lagu daro milan beeriyam koloraydh ali sameeya ruushi cad.

*Astaamaha ogsidhaynta ee salfar laba-ogsaydhta:*

In kasta oo ay salfar laba-ogsaydhtu ahay yareeye xoggan, baddana waxa ay marnar u dhaqantaa sida ogsidiyeeyalka. Falgallada iyo tijaalteyinka soc socda ayaana arrintaa innoo muujin doona.

*Tijaabo 2.21*

b) Daliig magniisiyam ah oc baxayaa ku rid koenbo ay ku jirto salfar laba-ogsaydh. Maxaa dhacay? Waxa aad arki magniisiyamkii oo ku sii gubanaysa koentada dhixdeeda. Isla markaas waxa aad arki saxarro wocb ah (hurui) oo salfar ah oo ku sumaysmay koentada gudaheeda, iyo dambas cad oc magniisiyam ogsaydh ah. Taasi waxa ay innoo muujinaysaa in saltar laba-ogsaydhtii ay u ogsidhaysay magniisiyamtii magniisiyam ogsaydh. Isla markaas salfar laba-ogsaydhta waxa loo yarecyey salfar.



Sida isle'egta sare inna tusayso, magniisiyamtii baxaysay waxa kulka ay bixinaysay uu u kala bixiyay salfar laba-ogsaydhtii curiyeyaashii ay ka kocbnayd. Dabadeedna ogsijiintii ka dhalatay kala baxaas aaya la falgashay magniisiyamta. Guur alaan curiyeyaalka marka ay gubanayaan bixiya ku ba-

dan ee kala bixin kara salfar laba-ogsaydhta sidaas oo kale ayay ula falgalaan neeftaas. Curiyeysaasha waxaa ka mid ah naatriyam, kaaliyam iyo fosfoor.

t) Koobno ay ka buuxdo salfar laba-ogsaydh oo woxoogay biyo ahi ku jiraan ku af gembii koombo kale oo ay ku jirto haydarojiin salfaydh. Waxa aad arki saxarro saliar ah oo ku samaysmay koonbooyinka gudahocda. Taasi waxa ay inna tusaysaa in labadii neefood ee ku kala jiray koonbooyinka ay isu geddiyaan salfar sida isle'egta hoos ku taal innoo muujinayso.




Sida isle'egta elektaroonikaad ee sare inna tusayso, salfar laba-ogsaydhtii waxa ay haydarojiin salfaydhtii u yaraysay salfar. Isla markaas haydarojiin salfaydhtii waxa loo ogsidheeyey salfar.

#### *Astaanta midab tirka ee salfar laba-ogsaydhta:*

Salfar laba-ogsaydhtu marka ay biyo ku jirto waxa ay tus-taa astaanta midab tirka. Taas waxa aynu arki karraa haddii aynu ubax qoyan koonbo ay ka buuxdo salfar laba-ogsaydh ku dhex ridno. Waxa aad arki midabkii ubaxa oo baaba'ay oo isu geddiyey caddaan.

Sida ay salfar laba-ogsaydhtu walxaha u midab tirtaa way ka duwan tahay sida ay koloriinta iyo halojiinnada kaleba walxa u midab tiraan. Marka ay salfar laba-ogsaydhtu walax midab tirayso falgalka dhacayaa waa falgal yarayn ah. Salfiyuu-ras asiidha samaysanta marka salfar laba-ogsaydhta biyo lagu daro ayaa ogsijiin ka qaadata walaxda midabka ieh, waxaanay

isu geddidaa salfiyuurik asiidh. Qaadashadaa ubaxa ama walaxda kale ee midabka leh laga qaataay ogsijiinta ayaa daba-deed midab tirta walaxdaas. Falgalka dhacayana waxa loo qaan-dan karaa in uu yahay:




Walxihi midabka lahaa +  $\text{H}_2\text{SO}_3 \longrightarrow \text{H}_2\text{SO}_4$  + walxihi midabka lahaa - O) midab beel.


Midabbeeliddaa ay keento salfar laba-ogsaydhtu ma aha mid waare ah, waayo waxa dhacda in ogsijiinta hawadu ay ogsidhayso walaxdii midabka beeshay ee salfar laba-ogsaydhtu yaraysay. Dadabeedna ay sideedii hore ku noqoto.

#### *Salfaytyada:*

Sidii aynu hore u soo sheegnay salfar laba-ogsaydhtu marka ay biyaha ku milanto waxa samaysma asiidh dacif ah oo la yiraahdo salfiyuuras asiidh. Salfiyuuras asiidhtu waa asiidh laba-borootonle ah. Waxa ayna la falgashaa alkaliyada hal-kaas oo ay samayso laba nooc oo cusbooyin ah. Cusbo caadi ah iyo cusbo asiidh ah. Cusbooyinka caadiga ahi waxa ay samaysmaan marka ay ifsasaqaan alkaliyada iyo salfiyuuras asiidhtu ee aan midna milanka dheeraad ahaan ugu jiriin. Cusbada asiidhta ahise waxa ay samaysantaa marka salfiyuuras asiidhtu ka badan tahay alkaliga ay la falgelayo oo ayoono haydarojiin ihi dheeraad ahaan ugu soo hadhaan milanka. Arrintaasna waxa si fiican innoogu muujinaya falgallada soo socda :






Labada falgaleyaal niidna dheeraad ahaan uguma soo badhin milanka.




Salfiyuuras asiidhta ayaa ka badan naatriyam haydaroogsaydhta ay la fageleyso, ayoonno haydarojiin ahina dheeraad ahaan ayay ugu soo hadhayaan milanka.

Salfaytyada biraha caanka ah oo dhammi waa ma-milmeaal marka laga reebo kuwa naatriyamta, kaaliyamka, ammoco-niyamta iyo kaalsiyamta oo ah milmeyaal xooggan. Salfaytada oo dhan ha ahaadeen salfaytyada caadiga ah ama salfaytyada asiidhta ahee, waxa ay bixiyaan saltar laba-ogsaydh marka lagu daro asiidh xooggn.



#### *Hubsashada salfaytyada:*

Salfaytyada waxa lagu hubsan karaa marka milankooda lagu daro milan beeriyam koloraydh ah. Markiiba waxa soo baxaya ruushi cad. Haddii haydarokolorik asiidh badhax ah lagu kordhiyona, ruushigu wuu baaba'ayaa, waxana soo baxaysa saflar laba-ogsaydh. Falgallada dhacayana waxa loo qori karaa :



### *Waxtarka salfar laba-ogsaydhta:*

- 1) Salfar laba-ogsaydhta waxa laga sameeyaa asiidhta muhiimka ah ee la yiraahdo salfiyuurik asiidh.
- 2) Khudaarta qaarkood ayaa lagu buufiyaa si aanay u qudhmin.
- 3) Salfar laba-ogsaydhta waxa laga sameeyaa salfaytyada oo dhan. Taasina waxa ay dhacdaa marka salfar laba-cgsaydhtu la falgasho alkaliyda.
- 4) Salfar laba-ogsaydhta waxa la isticmaalaa marka la docnayo in walxo midab leh la midab tiro. Isla markaasna laga ilaaliyo in aan midab-tiriddaasi wax yeeleyso abuurta walaaxdaas.


Waraaqaha marka la samaynayo, waxa la isticmaalaa salfar laba-ogsaydh.

### *Salfar saddex-ogsaydhta:*

Salfar saddex-ogsaydhtu waa adke sayexe ah, waxa ayna sameysantaa marka salfar laba-ogsaydh iyo ogsi iin saafi ah la isku gubo, kalkaaliyaha balaatinamna la isticmaalo. Marka heerkulku gaaro  $450^{\circ} - 500^{\circ}\text{C}$  ayaana falgalku dhacaa.




Salfar saddex-ogsaydhtu waa ogsaydh asiidh ah; waxa ayna si xocggan ugu darsantaa biyaha, haakaasna waxa ka samaysma asiidhta la yiraahdo salfiyuurik asiidh.



### *Salfiyuurik asiidh :*

Salfiyuurik asiidhtu waxa ay ka mid tahay iskudhisyada ugu muhiimsan ee aad loo isticmaalo, muddo dheerna waa la

yiqiinnay. Beryihii hore waxa laga diyaarin jirey macdanta la yiraahdo feeras salfeyt ( $FeSO_4$ ). Marka feeras salfeytka iyo silikoon laba-ogsaydhta ( $SiO_2$ ) la isku kululeeyo ayaa waxa soo baxa salfiyuurik asiidh.




Hase yeeshi waxa beryo danbe, markii ay aqoonta kimistarigu korodhay, la hindisay habab iyo dariiqooyin kale oo ka habboon tii beryihii hore la isticmaali jirey oo lagu diyaarin karo asiidhta. Waxana iminka jira laba hab oo kala duwan. Waxana la kala yiraahdaa habka kulanka iyo habka qolka ballambamta. Hase yeeshi habka kulana ayaa ka fiican ka kale, waxana lagu diyaarin karaa asiidh sooc ah oo ribnimadeedu tahay ugu yaraan 98%. Habka kalese waxa uu soc saari karaa asiidh ay ribnimadeedu ugu badnaan tahay 70% – 80%.

b) *Habka kulanka.*

Marka hore salfarta ayaa lagu gubaa marraaq, salfar laba-ogsaydhta soo baxdana waxa la dhex marshaq qol safeeye ah. Safeeyuhu waxa uu ka kooban yahay qol uu ku jiro taar aad u danabaysani. Danabkaa taarka ayaa soo jiita kana reeba saxarrada ciidda ah iyo wixii kale ee wasakh ah ee ku khal-danaa salfar laba-ogsaydhta.

Dabadeed salfar laba-ogsaydhta ayaa waxa lagu daraa og-sijiin sooc ah oo ka soo baxaysa neefeeye. Iskujirkaa labada neefood ka koobnaa waxa la sii dhex marshaq qol ay salfiyuurik asiidh rib ahi ku soo da'aysó. Halkaasna iskujirka lagu engejiyaa (eeg jaantuska 2.15). Dabadeedna neefahaa engegsan ayaa la dhex marshaq qol wax ku kululeeya habka kul-isdhaf-sadka, halkaas oo heerkulkoodu gaaro ilaa 220°C; kaddib waxa la dhex marshaq qol uu ku jiro kalkaaliye  $V_2O_5$  ahi. Faneedi-


yam shan-ogsaydhku waxa uu ku resaysan yahay sixniyo dal-dalolo leh oo is dul saaran, halkaas oo ay soo dhex maraan neefta salfar laba-ogsaydhta iyo ogsijiinta ku khaldaniba. Ku-lanka ay salfar laba-ogsaydhta la kulmayso kalkaaliyaha ayaana habkan loogu magac daray. Marka ay salfar laba-ogsaydhta iyo ogsijiinta ku khaldaniba ay ku kulmaan oogada kalkaaliyaha ayay isla falgalaan, waxana ka dhasha salfar saddex-ogsaydh.



Salfar saddex-ogsaydhta soo baxdaa aad ayay u kulushay, taas oo ay ugu wacan tahay falgalka ka dhex dhacaya salfar laba-ogsaydhta iyo ogsijiinta oo ah kul-bixiye. Neeftaas ( $\text{SO}_3$ ) kuliil ayaa dib loogu celiyaa qolkii habka kul-isdhaaaf-sadka wax ku kululaynayey, halkaas oo ay ku qabowdo. Kulka uu qolkaasi ka qaato salfar saddex-ogsaydhta kuluina waxa uu mar labaad ku kululeeyaa neefaha ah salfar laba-ogsaydhta iyo ogjisiinta ee qolka soo dhex maraya.

Salfar saddex-ogsaydhta si dhakhso ah biyaha sooca ah uguma milanto, sidaa darteedna waxa la sii dhex marshaan qol ay ku jirto salfiyuurik asiidh ribnimadeedu tahay 97%, halkaas oo ay si degdeg ah ugu milanto. Salfar saddex-ogsaydhta waxa ay ku darsantaa 3% biyaha ah ee ku jira salfiyuurik asiidhta ribta ah, waxana soo baxa salfiyuurik asiidh ay ribnimadeedu tahay 100%.

Salfiyuurik asiidhtaa ribta ah qayb ka mid ah ayaa la badhxaa oo loo ceshaa ribnimo ah 97%, waxana lagu isticmaala sidii ay salfar saddex-ogsaydh kale u mili lahayd ee ay ugu rogi lahayd salfiyuurik asiidh. Qaybta kalena waxa loo isticmaalaan ganacsii ahaan.



21.15 Habka Kulanka

### t) Habka qolka balambamta.

Habkan marka lagu diyaarinayo asiidhta waxa la isticmaala dhalo weyn oo muggeedu yahay ilaa 2 litir. Dhalada ayaa marka hore biyo lagu dhaqdhaqaa si ay u qoydo dhalada gu-daheeda. Dabadeedna waxa laga buuxshaa naytarojiin laba-ogsaydh, taas oo ka imanaysa milan balambam naytareyt ah oo aad loo kululeeyey. Marka naytareykaas la kululeeyo waxa soo baxaya naytarojiin laba-ogsaydh iyo ogsijiin, sidaa darteedna waxa dhalada ku jira oo kale ogsijiin. Dabadeed waxa dha-


lada lagu soo daayaa salfar laba-ogsaydh (eeg jaantuska 2.16), la soo dhex mariyey dhalo kale oo ay ku jirto salfiyuurik asiidh rib ahi, taas oo hakinaya ~~dhakhsaha~~ ay salfar laba-ogsaydhtu ku soo geleyso dhalada. Dhalada falgalku ka dhacayana waxa lagu qaboojaa biyo aad u qabow. Muddo yar kaddibna wiriqo cad cad ayaa ku samaysmaya dhalada gudaheeda, wiriqahaasina si dhakhso ah ayay ugu faafaan dhalada oo dhan, qaacii baroorka ahaa ee naytarojiin laba-ogsaydhtuna wuu baaba'aa. Wiriqahaas waxa la yiraahdaa wiriqaha qolka balambamka ama naytarooosoo-salfiyuurik asiidh, waxa ayna leeyihii naanays-molikiyuulka ah  $H_2SO_4$ .NO. Iskudhiskaasi aad ayuu ugu nugul yahay kulka, mana deggana, sidaa awgeedna uumiga soo gelaya dhalada ayaa u kala bixiya salfiyuurik asiidh iyo naytarik ogsaydh. Salfiyuurik asiidhtu dhalada gunteeda ayay ku ururtaa, naytarik ogsaydhtuna waxa ay ku darsantaa ogsijiinta dhalada ku jirta. Halkaasna waxa dib ugu samaysanta naytarojiin laba-ogsaydhtii.

Habka ay wax u dhacayaan iyo falgallada la xidhiidha wa-xa loo qaadan karaa sidan:


Biyaha dhalada ku jira ayaa la falgala salfar laba-ogsaydh ta soo geleysa, waxana samaysma salfiyuuras asiidh ( $H_2SO_4$ ). Sidaa darteedna falgalka ugu muhiimsan waxa loo qaadan karaa in uu yahay ogsidhaynta ay naytarojiin laba-ogsaydhtu u ogsidhaynayo ayoonnada salfaytka ah ( $SO_4^{2-}$ ) ayoonno salfeyt ah ( $SO_4^{2-}$ ).



Dabadeedna ayoonka salfeytka ah ayaa sameeya naytaroo-soo-salfiyuurik asiidhta. Halkaas ayaana qaacii baroorka ahaa ku baaba'aa. Naytarik ogsaydhtii ka dhalatay falgalkuna waxa ay ku darsantaa ogsijiinta dhalada ku jirta, waxana mar labaad samaysma oo soo baxa qaacii baroorka ahaa ee naytarojiin laba-ogsaydhta. Falgallada dhacayana waxa loo qori karaa;



Waxa loo qaadan karaa in ay naytarojiin laba-ogsaydhu qabato laba shaqo. Ta hore, waxa ay salifiuuras asiidhta u ogaidhaysaa salifiuurik astiidh. Ta labaadna waxa ay u dha-qantaa sida kalkaaliiyeeyasha, mar haddii aan naytarojiin laba-ogsaydhta wax isbeddel ihi ku dhacayn falgalka dhammaad-kiisa. Habkan ugu horreyn waxa lagu isticmaali jirey qolal balambam ah, halkaas ayaana magaca habku ka yimid.



JT. 2:16

### *Astaamaha salfiyuurik astidha:*

Salfiyuurik astidhta ribta ahi waa hoor saliid oo kale ah oo adag. Wuxuu ayna kartaa oo u kala baxdaa salfar saddex-ogsaydh iyo biyo marka heerkulka la gaarsiyo 330°C. Wuxuu ayna leedahay cufnaan sare oo ah 1.84 g/sm<sup>3</sup>.



Kimika ahaan salfiyuurik astidhta ribta shi, marka la soo dhaafo astaanta asidhnimada, wuxuu ay u dhaqantaa ogsidheeye ahaanba. Astaamahaas kala duwan wuxuu aynu ku arki doon-naa casharkan.

### *Astidhnimada salfiyuurik astidha:*

Salfiyuurik asiidhtu marka ay badhhan tahay waa asiidh xooggan; dhammaanna way ayonowdaa, waana asiidh laba bor-toonie ah sida isle'egta hoose inna tusayso.




Sidaa darteedna wuxuu ay samaysaa marka ay la falgasho alkaliyada laba nooc oo cusbooyin ah - cusbo caadi ah iyo cusbo asiidh ah. Taasna wuxuu aynu ku arki karraa falgallada ka dhex dhaca naatryam haydarogsaydhta iyo salfiyuurik asiidhta.




Falgalka isfasaqa ah ka sokow, salfiyuurik asiidhtu wuxuu kale oo ay tustaa astaamaha asiidhada oo dhan. Tusaale ahaan wuxuu ay u beddeshaa litmaska buluugga ah casaan; wuxuu ayna ja falgashaa kaarbooneytyada iyo biraha qaarkood, halkaasna

waxa ka soo baxakaarboon laba-ogsaydh iyo haydarojiin sida ay u kala horreeyaan.




Astaamaha ogsidhaynta ee salfiyuurik asiidha:


Salfiyuurik asiidha ribta ah ee kululi waxa ay la falgashaa biraha oo dhan marka laga reebo dahabka iyo balaatinamta, waxana soo baxda salfar laba-ogsaydh sida isle'egyada hoose muujinayaan, falgalku waa ogidhayn.



Halkan asiidhtii waxa ay qaadatay elektaroonno (waa la yareeyey), elektaroonnadaasina waxa ay ka yimaaddeen biraha ay la falgeleyso ee ay ka mid yihiin kubramta iyo sinku.




Falgalka oo dhanna waxa loo qori karaa:



Falgalladan waxa laga faa'iideystaa marka shay-baarka lagu diyaarinayo salfar laba-ogsaydhta.

Sida biraha oo kale, ayaa bir-ma-aheyaashana ay salfiyuurik asiidhta ribta ah ee kululi u ogsidhaysaa, waxana samaysma ogsaydhadooda.



Sidaaad isle'egyada tusaya falgalka ka dhex dhaca biraha iyo salfiyuurik asiidhta ribta ah ku aragtii, biruhu haydarojiin kama saaraan salfiyuurik asiidhta ribta ah.

#### *Astaanta oomanaynta ee salfiyuurik asiidhta:*


Salfiyuurik asiidhta ribta ahi xiiso dheeraad ah ayay u leedahay biyaha. Taasna waxa loo qaadan karin ay ugu wacan tahay xoog badnida asiidhta iyo dhakhsaha ama awoodda ay ku ayonowdoba. Xiisaha dheeraadka ah ee ay u hayso biyaha awgeed, ayaa salfiyuurik asiidhta loo isticmaalaa oo maneeeye. Halkaas oo ay walxaha lagu daro ay ka bixiso curiyeasha ay biyuhu ka kooban yihiin ( $\text{H} + \text{O}$ ). Tusaaloo yinka iyo tijaabooyinka soo socda ayaana arrintaas si fiican innoogu muujin doona.

#### *Tijaabo 2.22*


- b) Si miyir leh salfiyuurik asiidh rib ah ugu dar ilaa 100  $\text{sm}^3$  oo biyo ah oo bakeeri ku jira, marka aad ku daraysidna joogto u walaaq milanka. Heerkulbeeg dhex geli milanka. Maxaad aragtay? Waxa aad arki heerkulkii milanka oo kor u kacay. Taasina waxa ay inna tusaysaa falgalka ka dhex dhaca biyaha iyo salfiyuurik asiidhta ribta ahi in uu yahay ku'bixiye.

t) Bakeeri kala badh oo badh ka buuxi salfiyuurik asiidh rib ah, dabadeedna dhig meel aamin ah oo ka mid ah qolka shay-baarka. Halkaasna muddo ilaa laba maalmood ah ku dhaaf. Wuxuu aad arki heerkii asiidhta ku jirtay bakeeriga oo korodhtay. Taasina waxa ay ku dhacday asiidhtii oo seo nuug-tey biyaha hawada ku jira. Sidaa darteedna salfiyuurik asiidhta ribta ahi waa sayaxe.

j) Woxoogay salfiyuurik asiidh rib ah ku dul shub wiriqo kubnam salfeyt ah oo ku jira dhuun-hubsasho. Waxa aad arki wiriqihii buluugga ahaa oo isu geddiyey caddaan. Haddii wiri-qahaa caddaaday lagu daro woxoogay biyo ahna, waxa ay mar labaad noqdaan buluug. Halqaasina waxa aynu ka arki kar-raa in midab beelidda ay wiriqaha kubram salfeytka ahi midab beelayaan ay ugu wacan tahay ka saaridda ay salfiyuurik asiidhta ribta ahi ka saarayso molikiyuullada biyaha ah ee ku lifaaqan molikiyuulka kubram salfeytka ah. Arrintaasna waxa aynu ku muujin karraa isle'egta soo socota:




x) Woxoogay salfiyuurik asiidh rib ah ku dar woxoogay sonkor ah oo ku jirta seesar. Waxa aad arki sonkortii oo mar-kiiba inta ay soo foocdo dhuxulowda. Waxana seesarka gudi-hilsa ku samaysmaya dhuxul. Taasina waxa ay dhacaysaa marka salfiyuurik asiidhtu ka bixiso sonkorta curiyeyaasha bi-yaha ee ah H iyo O ee ku jiray iskudhiska. Halqaasna waxa ku soo hadhaya oo qudha kaarboon madow sida isle'egta hoose muujineyso.





Sidaas oo kale ayay salfiyuurik asiidhta ribta ah u gubtaa dharka iyo jidhkaba. Salfiyuurik asiidhta ribta ahi waxa kale oo ay leedahay astaan u gaara, taas oo ah iyada oo asiidhada bida ka saarto cusbooyinkooda. Tusaale ahaan marka salfiyuurik asiidh rib ah lagu daro woxoogay naatriyam koloraydh ah oo la isku kululeeyo, waxa soo baxda neef litmaska buluugga ah u beddesha casaan. Neeftaas soo baxaysa marka lagu daro dhibco ammooniyaa ahna, waxa soo baxa qaac cad oo ammooniyam koloraydh ah. Halkaasna waxa aynu ka garan karraa in neeftaasi tahay haydarojiin koloraydh. Haydarojiin koloraydhtaa soo baxaysana ayaa la falgasha ammooniyada, waxana samysma qaac cad oo ammooniyam koloraydh ah.

Falgallada dhacayana wxa loo qori karaa:



Sidaas oo kale ayaa salfiyuurik asiidhta ribta ahi uga saartaa naytarik asiidhta cusbooyinka naytareytyada ah marka la isku kululeeyo. Marka kaaliyam naytareyt iyo woxoogay salfiyuurik asiidh rib ah la isku kululeeyo waxa soo baxa uumi naytarik asiidha, oo isu geddiya hoor marka la qaboojiyo. Uumi-gaasi waxa uu yeelan karaa midab baroor khafiif ah. Taasna waxa ugu wacan woxoogay naytarojiin laba-ogsaydh ah oo ku khaldan oo ka dhalata kala baxa naytarik aslidhta. Naytarik asiidhtu waxa ay ku kartaa oo ku kala baxdaa marka Heer-kulka la gaarsiiyo ilaa 85°C. Falgallada dhacayana waxa loo qori karaa:




Fal gallada aynu kor ku soo sheegnay ee ka dhex dhaca koloraydhada iyo salfiyuurik asiidhta ribta ah waxa laga faa' iidaystaa marka la doonayo in shay-baarka lagu diyaariyo hay-darokolorik asiidhta.

Sidaas oo kale ayaa naytarik asiidhta looga diyaariyaa fal-galka ka dhex dhaca naytareytyada iyo salfiyuurik asiidhta ribta ah.

#### *Wartarka salfiyuurik asiidhta:*

1. Samaynta barwaqeeeyayaasha: Iskudhisika ah kaalsiyam fosfeyt waa ma-milme. Hase yeeshi marka lagu daro salfiyuurik asiidh waxa soo baxa iskudhisika la yiraahdo kaalsiyam laba haydarojiin fosfeyt oo milme ah oo si fudud u dhex-gala carrada. Halkaasna waxa nafaqaysata dhirta.



Sidaas oo kale ayaa salfiyuurik asiidhtu u samaysaa bar-waaqceyaha ah ammoniyam salfeytka, oo samaysma marka ammoniyam haydarogsaydh la falgasho salfiyuurik asiidhta.




2. Samaynta dunta xariirta: Selyulooska ayaa waxa lagu milaa milan naatriyam haydarogsaydh ah oo ay ku jirto woxoogay kaarboon laba-ogsaydh ahi. Dabadeedna waxa lagu rusheeyaa salfiyuurik asiidh. Waxa markiiba ruushi ahaan u soo baxaya dun xariir ah oo la yiraahdo raayon.

3. Salfiyuurik asiidhta waxa kale oo la isticmaalaa marka biraha la soo saarayo.
4. Salfaytyada oo dhan waxa laga sameeyaa salfiyuurik asiidhta.
5. Midabbada, daroogada iyo alaabooyinka qaraxaba marka la samaynayo waxa la isticmaalaa salfiyuurik asiidhta.
6. Beytariyada waaweyn ee ay ka mid yihiin kuwa baabuurtu waxa ku jira salfiyuurik asiidh.

*Salfeytyada:*

Salfiyuurik asiidhtu waa asiidh xooggan oo laba borootonle ah. Sidaa darteedna waxa ay samaysaa, marka ay alkaliyada la falgsho, laba nooc oo cusbooyin ah. Cusbo caadi ah oo samaysanta marka ay alkaliga iyo asiidhtu ifsasaqaan iyo cusbo asiidh ah oo samaysanta marka asiidh dheeraad ahi la falgasho alkaliga.

Arrintaasna waxa inna tusaysa falgallada hoos ku qoran.






Inkasta oo salfeytyada sida aynu kor ku soo sheegnay loo diyaarin karo, haddana waxa jira dariiqooyin kale oo lagu diyaarin karo.


*Dariiqooyinka lagu diyaariyo salfeytyada:*

1. Salfeytyada milmeyaasha ah ee biraha caanka ah marka laga reebo kuwa ururka kowaad iyo kuwa ururka labaad, waxa lugu diyaarin karaa falgalka ka dhex dhaca bira-haas iyo salf.yurik asiidh badhxan. Hase yeeshee biraha ka hooseeya haydarejiinta taxa firfircoonaanta lama falgalaan

asiidhta badhxan. Laakiin falgalku waxa uu dhacaa marka asiidhtu rib tahay la iskuna kululeeyo.



2. Waxa kale oo salfeytyada milmeyaasha ah la helaa marka ogsaydhada ama kaarbooneytyada birahaas lagu daro salfiyuurik asiidh.



3. Salfeytyada ma-milmeyaasha ah ee ay ka mid yihiin salfeytyada beeriym iyo balambam waxa lagu diyaarshaa habka ruushiyeynta. Tusaale ahaan marka milan balambam naytareyt ah lagu daro milan salfeyt ah, waxa soo baxa ruushi cad oo balambam salfeyt ah oo laga miiri karo milanka intiisa kale. Sidaas oo kale ayaa ruushi cad oo beeriym salfeyt ihi u soo baxaa marka milan beeriym koloraydh ah lagu daro milan salfeyt ah. Falgallada dhacayana waxa loo qori karaa:



Samaysankaa uu samaysmayo ruushi cad oo beeriyam salfeyt (BaSO<sub>4</sub>) ihi, marka milan beeriyam koloraydh (BaCl<sub>2</sub>) ah lagu daro milan ay ayoonno salfeyt ihi ku jiraan ayaa lagu hubiyaa salfetyada. Ruushigaa soo baxayna kuma milmo haydarokolorik aslidha.

### LAYLIS 2.2

1. Qor ratibaadda elektaroonikaad ee salfarta iyo ogsijiinta; dabadeedna sharax waxa ay labadaasi curiye u leeyihiin kimika ahaan astaamo isku dhow.
2. Sheeg sida ay salfarta u samayn karto iskudhisyo elektaroon-wadaag ah iyo kuwo ayoonno ka samaysmaba.
3. Sheeg siyaabaha ay salfartu ugu jirto dhulka; waxa aad sharaxdaana habka faraash ee salfartaasi lagu soo saari karo.
4. Sharax sida aad u diyaarin lahayd (b) salfar qardhaasle ah (t) salfar salaxaale ah iyo (j) salfar caag ah.
5. Waxa aad sharaxdaa waxyaabaha loo qaadan karo in ay u sabab yihiin jiritaanka jinsiyadaha faraha badan ee salfarta.
6. Sharax astaanta la yaabka leh ee salfartu tusto marka heerkulkeeda la dhaafiyo heerkulka ay ku dhalaasho.
7. Sheeg saddex faa'iido oo ay leedahay salfartu.
8. Sidee iyo xaaladahee ayaa salfartu ula falgashaa (b) haydarojiinta (t) ogsijiinta (j) salfiyuurik asiidhta iyo (x) xadiidka.
9. Ogsijiintu waxa ay samaysaa ayoonno taban oo keli ah, halka ay salfartu ka samayn karto ayoonno taban iyo kuwa toganba. Sharax taasi waxa ay ku dhacdo.

10. Maxaa heerkulka ah 96°C loogu bixiyey heerkulka kalaguurka ee salfarta?
11. Sharax shay-baar kudiyaarinta haydarojiin salfaydhta. Sheegna sida qalabka kib uu u shaqeeyo iyo waxa loo isticmaaloba.
12. Sharax sida aad u tusi lahayd in haydarojiin salfaydhtu tahay (b) yareeye iyo (t) iskudhis ka kooban salfar iyo haydarojiin keli ah.
13. Sheeg siyaabaha ay haydarojiin salfaydhtu ku geli karto hawada.
14. In kasta oo salfiyuurik asiidhta ribta ah la isticmaalo marka la engejinayo neefaha, haddana haydarojiin salfaydhta laguma engejin karo salfiyuurik asiidhta ribta ah. Sheeg sababta.
15. Sharax laba siyaabood oo salfaydhada biraha caanka ah lagu diyaarin karō. Sheegna sida haydarojiin salfaydhta loo hubsan karo.
16. Salfar laba-ogsaydhtu caadi ahaan uguma jirto hawada. Sharax taasi sida ay ku dhacday.
17. Adiga oo ka bilaabaya salfar budo ah, sheeg sida aad uga diyaarin lahayd (b) haydarojiin salfaydh (t) salfar laba-ogsaydh iyo (j) salfar saddex-ogsaydh.
18. Wuxuu aad isu eegtaa astaamaha yaraynta ee salfar laba-ogsaydhta iyo haydarojiin salfaydhta.
19. Sheeg siyaabaha kala duwan ee salfar laba-ogsaydhta lagu heli karo.
20. Sharax gubashada haydarojiin salfaydhta iyo maxsuullada ku samaysmi kara xaalandaha kala duwan.
21. Haydarojiin salfaydhtu waa asiidh dacii ah oo lababorootonle ah marka ay biyaha ku milanto. Sharax micnaha weedhaasi.

22. Salfar laba-ogsaydhtu waxa ay u dhaqmi kartaa sida yareeyeyaasha iyo ogsidheeyeyaashaba. Tus arrintaas.
23. Sidee ayaad u caddaynaysaa in salfar laba-ogsaydhtu ka kooban tahay salfar iyo ogsijiin keli ah?
24. Qor saddex faa'iido oo ay salfartu leedahay.
25. Sharax waxa ay ku kala duwan yihiin siyaabaha ay koloriinta iyo salfar laba-ogsaydhtu u midabtiraan walxaha midabka leh.
26. Qor raadka ay ku leeyihiin asiidhada (b) Salfayt-yada iyo (t) Salfaydhada.
27. Sharax sida salfiyuurik asiidhta loogu diyaarin karo habka kullanka.
28. Sheeg qaybaha ay ka qaadato naytarojiin laba-ogsaydhtu marka salfiyuurik asiidhta lagu diyaarinayo habka qolka balambamta.
29. Sharax tijaabooyin muujinaya in salfiyuurik asiidhta ribta ahi tahay (b) asiidh (t) oomaneeye (j) ogsidheeye iyo (x) sayaxe.
30. Sharax tijaabooyin aad ku hubsan karaysid in ay hoor tahay salfiyuurik asiidh iyo in kale.
31. Sheeg dariiqooyinka lagu diyaarin karo salfeytyada biraha caanka ah.
32. Qor afar faa'iido oo ay salfiyuurik asiidhtu leedahay.
33. Sharax siyaabaha kala duwan ee ay salfiyuurik asiidhta ribta ahi wax u oomanayso.
34. Sheeg sida aad u kala garan lahayd (b) naatriyam salfayt iyo (t) naatriyam salfeyt.